

**SAXAABADA**  
**RASUULKA SCW**  
**KHULUFAAU RAASHIDIIN**

**CUMAR**  
**IBN AL-KHATTAAB**

Cumar Bin Al-Khaddaab

عمر ابن الخطاب

Khulufaa'u Raashidiin

Khulafada Rasuulka Muxammad (scw)

“Amiirul Mu'miniin”

( Abu Xafsa ) Cumar Ibn Al-Khaddaab

Cumar bin Al-Khaddaab

عمر ابن الخط اب

Taariikh Nololeedka

Saxaabada Suubanaha Rasuulka [csw]

Abuu Xafsah Cumar bin Al Khaddaab, waa

mid kamid ah saxaabadii suubaneyd ee

udgoon badane xabiibkeenii Muxammed

(scw). Waxuu ahaa mid kamid ah raggii

Rasuulka (scw) ka ag dhawaa, waa mid

kamid ah tobankii Jannada loogu  
bishaareeyay iyagoo dunida guudkeeda  
saaran, iyo weliba amiirkii ugu horeeyay ee  
Mu'miniinta oo idil amiir u noqdaa. Waxuu  
ahaa khaliifkii labaad ee khulufaa'u  
Rashidiinka, iyo qofkii ugu horeeyay ee  
salaadda taraawiixda jideeyo in halmeel lagu  
tukado, iyo qofkii ugu horeeyay ee amray  
taariikhda hijriyada in la qoro.

Afartii Khaliif ee ugu horeysay Islaamka:

1. Abuu Bakar As-Siddiiq
2. Cumar Ibn Al-Khattaab
3. Cuthman Ibn Cafaan
4. Cali Ibn Abii Daalib

Inaayadiisu waxay ahayd sidan: Cumar bin  
Al Khaddaab bin Nufeyl bin Cabdulcuza bin  
Rayaax bin Cabdillaahi bin Quraddi bin  
Razaax bin Caddiyi bin Kacab bin Lu'ay bin  
Qaalib bin Fihir (Qureysh) bin Maalik bin  
Nadar Al Qurashi Al Cadawi. Waxuu ka  
dhashay qoomyowga Qureeshta gaar ahaan  
jilibka banii Caddiyi bin Kacab oo Qureeshta  
u qaabilsanaa dhanka garsoorka iyo kala  
xukmidda dadka is qab qabsada. Aabahii  
waxuu ahaa mid kamid ahaa saadaaddii  
banii Cadiyi iyo odayaashii Qureeshta ugu  
caansanaa, isaguna Cumar waxuu kamid

ahaaa raggii ugu muuqdat ashraafta  
Qureesheed, weliba kuwii ugu caansanaa ee  
geesinnimada lagu yaqiinay.

Hooyadii waxaa la oran jiray Xantamah bint  
Hishaam bin Muqiirah bin Cabdillaahi bin  
Camr bin Makhzuum Al Qurashiyah Al  
Makhzuumiyah. Waxay la dhalatay Abuu  
Jahal bin Hishaam, sidaa darteedna Abuu  
Jahal waxuu Cumar u ahaa abti. Cumar reer  
abtiyaashii waxay ahaayeen jilibkii  
Qureeshta u qaabilsanaa arrimaha dagaalka  
iyo hoggaamintiisa. Sidaa darteed waxuu  
Cumar ka dhashay laba jilib oo kamid ah  
kuwii ugu cad caddaa Qureeshta dhexdeeda  
oo ugu dhex muuqday. Waxuu Cumar ahaa  
waqtigii jaahiliyada mid wax waliba kusoo  
dhacsada xoogiisa iyo karti uu Illaah siiyey,  
waxuuna ahaa mid dabci adag oo aan waxbo  
laga duudsan karin laguna dhici kareyn.

Waxuu ahaa geesi aan gambasho aqoon oo  
Makka iyo hareeraheeduba caan ka ahaa. Oo  
waxuuna ahaa mid aan Islaamka iyo  
waqtigii Jaahiligaba aanan laga adkaan.

Cumar bin Al Khaddaab waxuu caan ku  
ahaa xoog iyo geesinnimo, waxuuna u ahaa  
Qureeshta safir ay u dirsan jireen arrimaha  
ay ku dhici waayaan. Mathalan markii ay



isku dhacaan Qureeshta iyo qola kale oo ay ku haggagi waayaan inay ergay u dirsadaan iyagoo ka cabsi qabo in ergeygaasi laga dilo, bay diri jireen Cumar bin Khaddaab oo Carab idil ay ka haybeysan jirtay.

Waxuu dhashay Cumar kadib dhacdadii Caamul Fiil (Sanadkii maroodiga) muddo laga jooga 13 sanadood, oo ku beegan afartan (40) sano kahor taariikhda hijriga (kuna beegan markay taariikhda miilaadigu ahayd 584). Markii Rasuulka (scw) lasoo dirayey waxuu Cumar jiray 26 ama 27 sano. Waxuuna islaamka la colleytamayey muddo lix sanadood ah, waxuuna Muslimay isagoo 32 ama 33 jir iyo dhowr bilood ah. Waxuu Cumar ku dhashay magaalada Makka oo uu ku barbaaray, waxuuna kamid ahaa raggii ugu ad adkaanta badnaa oo ka hor yimid dacwada diinta Islaamka.

Waxuu Cumar bin Al Khaddaab aad ugu dheгнаa diintii aabayaashiis oo uu aaminsanaa inay iyadu tahay tan ugu tubta toosan ee degtay qalbigiisa, saaqdayna luddiisa iyo laftiisa, waxuuna Rasuulka (scw) iyo asxaabtiisii qiimaha badneyd u muujiyey cadaawad aad u fog markii lasoo

diray, oo waxuu caddibi jiray qaar kamid ah dadkii Mustadcafiinta ahaa ee iyagu Islaamka goor hore galay. Waxuu Cumar si daran u ciqaabi jiray gabadh la oran jiray Samiirah oo markii dambe xitaa indha beeshay siduu u ciqaabi jiray darteed si ay uga noqota diintan samawiga ah ee ay qaadatay.

Cumar bin Al Khaddaab waxuu ahaa mid kamid ah fardooleydii iyo raggii ugu akhyaarsanaa Qureesh iyo Carabta dhexdeeda waqtigii Jaahiliga, oo waxuu ahaa mid laga wada cabsado.

Islaamiddiisii &

Mowqifkiisii Hore

Xilli Muslimiintii ciriiri iyo dulmi lagu hayo, oo xaaladdu ay darantahay ayuu Illaahay nuur usoo saaray Muslimiintii oo waxaa Islaamay Cumar bin Khadaab. Rasuulka (scw) ayaana taa Rabbigiis ka baryey.

Cabdullaahi ibnu Mascuud waxaa laga soo weriyey inuu Rasuulka (scw) yiri: Alloow Islaamka ku adkeey labo nin midkood, Cumar bin Khaddaab ama Abuu Jahal.

Ducadaasi iyada ahina Alle waa uu aqbalay oo waxuu ku sharfay Cumar bin Khaddaab kadib markii uu muddo 6 sanadood la

colleytamayey Islaamka iyo ehelkiisa,  
waxuuna taa ka hor Cumar taagnaa  
mowqifka abtigiis Abuu jahal, oo maysan  
jirin cid is lahayd ama ku fakereysay Cumar  
wuu Islaami doonaa, laakiin cidduu Alle  
hanuuniya cidi hor istaagi kari meyso, iyada  
ayunbaana noqon ta hanuunsan, oo Alle  
wax waliba isagu wuu awoodaa waana  
qaadir fal san.

Cumar bin Al Khaddaab waxuu ahaa mid  
qalbigiisu adag yahay, oo dabeecad kulul iyo  
awood badanna leh, Muslimiintuna in badan  
bay dhibaatooyin kala kulmi jireen. Waxuu  
Cumar ku fekeri jiray arrimo is khilaafsan  
oo mar waxaa ku weyneed diintii  
aabayaashiis, marna hawadiisii iyo  
macmaansigii nolasha dhalin yarannimada  
ee uu markaa dhex dabaalanayey, waxuuna  
ahaa nin cabbo khamriga, jecelna cayaaraha  
iwm ee ay markaasi bulshadii jaahiliga ku  
dhex jirtay, dhanka kalena waxuu la  
yaabayey oo fajaciso ku ahayd ad adkaanta  
Muslimiinta iyo siday ugu dul qaadanayaan  
dhib waliba oo ku yimaado oo aysan marna  
uga laabaten nuurka iimaanka ee  
qalbiyadooda degay. Tanina waxay ku  
reebtay qalbigii Cumar raad lama illaawaan

ah.

Iyadooy sidaa tahay haddana Cumar waxuu ka fuqi waayey mowqifkii uu abtigiis Abuu Jahal mataanka kala ahaa ee ahaa sanam caabudka iyo la dagaallanka Islaamka. In badan kama soo wareegin markay qaar kamid ah Muslimiintii u alaab xir xirteen inay dhulka Alle u qaxaan oo meel ay dagaan oo Rabbigooda ku caabbudaan ka raadsadaan, kadib markii lagu jarribay baladkoodii oo ay sokeeyahoodii iyo xulufadoodii saareen, Cumarna waxuu kamid ahaa dadkii usababta ahaa qaxaasi iyo qaharkaas ku yimid Muslimiinta ee ay u hijroodeen dhul aysan aqoon dadkiisa, dabcigiisa iyo nolashiisa, dhankaa iyo dhulka Xabashida.

Umu Cabdillaahi Leyla bint Abii Xathmata iyo Seygeeda Caamir bin Rabiica waxay xufulo la ahaayeen reer banii Cadiyi bin Kacab gaar ahaanna qoyska reer Khaddaab bin Nufeyl Al Cadawi ee uu ka dhashay Cumar bin Khaddaab. Waxay kamid ahaayeen dadkii ugu horeeyay ee islaamay, waxayna Cumar kala kulmi jireen ad adkaan iyo kadeed badan iyo ciqaab si uu uga hor istaago diinta Islaamka. Maalin maalmaha

kamid ayuu Cumar jidka kula kulmay Umu Cabdillaahi bint Abii Xathmah iyagoo u haajirayo dhulka Xabashida waqtigii hijradii Abasiinya.

Markaa buu Cumar su'aalay Umu Cabdillaahi halka ay u socdaan goor uu ninkeedii Caamir bin Rabiica uu howla gaar ahaa ugu maqnaa, waxayna ku tiri:" Dhulka Illaahay ayaanu meel ka raadsaneynaa, waad na dhibteen oo aad na jarribteen"..

Markaasuu Cumar si murugo leh u eegay oo sagootiyey oo iskaaga laabtay. Markii uu Caamir yimid ayay Leyla u sheegtay arrintii dhex martay iyada iyo Cumar, oo misna waxay usheegtay dabacsanaantiisii iyo hadalkiisii dhimrisanaa ee aysan horey uga baran ee ay maanta ka aragtay kana maqashay, iyo weliba inuu aad uga murugeysnaa bixiddooda.

Markaa buu Caamir su'aalay xaaskiisii Umu Cabdillaahi Leyla bint Abii Xathmata:" Ma waxaad damacsantahay inuu Cumar Islaamo? Markaasay tiri:" Haah! Markaasuu yiri:" Islaami mahayo, kii (Cumarkii) aan arkay, jeer ay Islaamaan dameeraha Khaddaab. Halkan waxaanu ka fahameynaa in aysan jirin cid ku fakereysay inuu Cumar



islaamo ad adkaantii looga bartay iyo la colleytankii uu diinta Islaamka la colleytamayey darteed.

Habeen habeennada kamid ah ayuu Cumar kudhaxay meel aan aqalkiisu ahayn (golo ay ku sheekeysan jireen oo ay lahaayeen reer abtiyaashiis banii Makhzuum), dabeetana waxuu yimid kacbaddii goor mugdi ah, durtaba waxuu arkay Nebiga (scw) oo salaad u taagan, markaasuu daaha ku dhakaday oo damcay bal inuu dhageysto waxa uu Rasuulka (scw) akhrinayo. Wuxuu markaasi Nebigu (scw) akhrinayey suuradda Al Xaaqah Saa Cumar wuxuu is yiri:- Malaha kani waa sidii ay Qureeshtu sheegeysay oo waa gabyaa?

Faadimah bint Khaddaab iyo seygeeda Saciid ibnu Zeyd, waxay Islaameen caaraddii hore ee Islaamku, waxayna Islaannimadooda ka qarinayeen Cumar si uusan ciqaab xanuun badan u marsiin, sidaa si lamid ahna waxaa Islaamay Nucaym bin Cabdillaahi Al Cadawi (Al Naxaam) oo kamid ahaa rag karmeedyadii Qureeshta gaar ahaan banii Cadiyi, isaguna Islaamiisu waa uu ka qarinjiray Cumar, . Ad adkaantii Cumar waxay gaartay heer uu

maalintii dambe seefta u siibta inuu soo dilo Rasuulkii Alle (scw), dabeeta waxaa la kulmay Nucaym bin Cabdillaahi oo weydiiyey halka uu kusocdo? Waxuuna ku jawaabay:” Waxaan doonayaa inaan soo dilo Muxammed ((scw)), kan kala geeyay arrinkii Qureeshta oo duray ra’ yigoodii, oo wax ka sheegay diintayadii ee caayay Ilaahyadannada”.

Waxuu yiri:” Haddaba sideed uga nabad heli doontaa banii Haashim iyo banii Zuhrah (Waa labada reer ee uu Nebigu (scw) kadhashay), haddii aad disho Muxammed? Markaasuu Cumar yiri:” Malaha adiguna sidaan kaa arko diintaadii ayaad ka baxday? Waxuu yiri:” Ma ku tusiyaa Cumarroow! arrin taa ka daran? Walaashaa Faadimah iyo seedigaa Saciid way ka baxeen diinta aad adigu haysatid”.

Markaa buu Cumar xaggoodii aaday si bal uu marka hore iyagu meel u saaro oo wax uga qabto, waxaana markaa qoyskaasi la joogay Khabaab bin Arat oo Quraanka bari jirey, markay maqleen shanqadha Cumar ayuu Khabaab dhuuntay. Faadimana waxay qarisay warqaddii Quraanka ku qornaa, markaasuu yiri:” Waa maxay gunu’gunida

aan maqlayey? Markaa bay ku yiraahdeen:  
Waxbo ma jiro”. Markaasuu yiri:” Haaheey!  
waan maqlay inaad diinta Muxammed  
raacdeen, dabeetana seedigii Saciid ayuu ka  
dul dhacay oo si daran ugu istaagay.  
Faadimah ayaa damacday inay ka qabato  
iyadoo qaylineyso, saa iyadiina waa uu kala  
tuuray oo dakhar buu gaarsiiyey.  
Markaasay iyadoo careysan oo dhiiguna  
madaxeedu ka da’ayo tiri:” Waxaan qirayaa  
Inuusan jirin Alle la caabbudo oo aan Allaah  
ka ahayn Muxammedna (scw) uu yahay  
Rasuulkii Alle. Markaa buu Cumar u diir  
naxay walaashii markii uu arkay dhiigga ka  
hoorayo madaxeeda oo ka kacay seedigii,  
dabeetana waxuu weydiiyey inay u dhiibto  
waxii ay akhrinayeen bal si uu u eego, hase  
ahaatee waxay walaashii ku tiri:”  
Adigu waxaad tahay fadaro najaas ah,  
mana taabato Quraankan cidaan daahir  
ahayn ee kacoo soo maydho, markaasuu  
kacay oo soo mayrtay, dabeetana warqaddii  
ayuu ka qaaday oo inta kala bixiyey  
akhriyey waxii ku qornaa. Cumar waxuu  
ahaa mid wax qora waxna akhriya, taas  
ayaa ka haqab tirtay in loo akhriyo, isagii  
ayaana akhristay, waxaana ku qornaa

awaa'ilka suuradda Daha, waxuuna akhriyey Suuraddii illaa uu ka gaaray aayaddan: Anigu waxaan ahay Allaah, Illaah kalena majiro, oo aan anigu ka ahayn ee i caabbudo aniga oo kaliya, salaadduna u ooga xusiddeyda.

Markaasuu yiri:" Oo maxaa ka wanaag badan oo ka sharaf badan hadalkan? Bal Muxammed itusiya. Dabeeto Khabaab oo dacal aqalka kamid ah isku qariday ayaa soo booday oo banaanka yimid, waxuuna yiri:" Abshir Cumarow! waxaan ku rajo weynahay inuu Allaah aqbalay ducadii Rasuulkiisa (scw), waxaan maqlay isagoo oranaya:" Alloow! diinta ku adkeey Cumar bin Khaddaab ama Abuu jahal. Kadib Cumar waxuu soo aaday dhankii daarta Arqam bin Abul Arqam oo ay usoo tilmaameen inuu Rasuulka (scw) jooga, si uu ula kulmo.

Saxaabadii qaar kamid ah ayaa ka arkay ducyar isagoo seeftiisa sito oo usoo socda dhanka daarta, markaasay Rasuulka (scw) usheegeen, waxaana daarta joogay rag ay kamid ahaayeen Xamzah oo isagu maalintaa ka hor saddex casho soo islaamay, Cali bin Abii Dhaalib, Abuu Bakar Sidiq iyo rag



kaloo kamid ah kuwii aysan usuuroobin inay u qaxaaan dhulka xabashida, Xamzah ayaa yiri markaa:” Bal ka leexdo oo albaabka ka furo, haddii uu wanaag rabo waanu siineynaaye, hadduuse shar u yimidna seeftiisaanu ku dili doonnaa”.

Cumar waxuu soo hor fadhiistay Rasuulka (scw) , markasuu Nebiguna (scw) weydiyey waxa xilligan keenay, markaasuu yiri :”

Waxaa i keenay inaan Alle iyo Rasuulkiisa iyo waxa uu xagga Rabbigiis ka keenay rumeeyo, waxaana qirayaa inuusan Alle kale jirin illaah mooyaan, adiguna aad tahay Rasuulkii Alle, sidaa buuna u islaamay.

Cumar markuu islaamay Ilaahay wuxuu Muslimiintii siiyey Cissi iyo xoog, xaaladdii Makkana way is baddeshay.

Cumar isla markiiba wuxuu qaadey tallaabooyin, wuxuu yiri:” Waxaan is weydiyey ninka dadka ugu necbaan og Islaamka markaasaan xasuustay inuu Abuu jahal yahay, saan gurigiisii ugu tegey oo aan irrida ku garaacay, markasuu iga furay oo i soo dhoweeyey iguna yiri ” Maxaa dan oo aad u timid? waxaan ku iri:” Waxaan kuugu imid inaan ku ogeysiiyo inaan islaamay oo aan rumeeyey Alle iyo Rasuulkiisa (scw),

waxii aan haysan jirneyna oo sanam caabbud ahaana aan beeniyey” Abaa jahal intuu aad u argagaxay buu yiri “waxaad la timid baa baas lahaaday”. Oo gurigii ayuu dalaq yiri oo ku cararay.

Dhanka kale waxuu yiri ” Waxaan is weydiyey yaa ugu warqaad badan reer Makka oo dadka oo dhan hadalka gaarsiin kara? Saa waxaan xasuustay inuu yahay Suneym ibnu Camar al- Jumuxi, markaas baan u tegay oo ku iri:” Waan islaamay”. Suu qeyliyey isagoo oranaya:” Cumar bin Khadaab waa iishay”. Cumar-na wuu ka daba hadlayey isagoo leh:- Ma iilan ee waan Islaamay. Waxaa kale oo Cumar uu sameeyey markuu Islaamay ayuu Rasuulka (scw) ku yiri:” Rasuulkii allow! sow inagu xaq kuma taagnin? Haddaba aynu baxna oo dhammaanteen aan kacbada ku soo tukanno”.

Rasuulkuna (scw) inkastoo uu u ogaa in Muslimiintu ay yaryahiin hadana kama uusan diidin Cumar in ay Kacbadda kusoo tukadaan, waayo waxuu ogaa Rasuulku (scw) in Islaamku iyo Muslimiintuba ay gunnimo ka baxeen mar haddii uu Islaamay Cumar ibnu Khadaab, oo sidaa darteed wuu

ka yeelay hintisihiisii. Markaa baa waxaa soo baxay asxaabtii oo laba saf ah, oo safi Cumar ku jiro safka kalena uu Xamsa kujiro.

Qureysh talo ayaa ku caddaatay waxayna ka caroodeen waxyaalaha uu Cumar sameeyey, waxay markaa ku tashadeen ineyba dilaan hase yeeshee waxaa arrintaa is hor taagay Al Caas bin Waa'il As Sahmi oo magan geliyey, waxayna ahaayeen xulufu isaga iyo reer Khaddaab. Markii ay Qureeshti damacday inay dilaan Cumar buu isaguna intuu Cutbah bin Rabiica qabtay hoosta gishtay oo jukeeyay, waxuu yiri :” Dayn maayo jeer aad ideysaan”.

Markii uu Cumar Islaamay dadkii sartaa kujiray oo idil baa farxad darteed mar qura la wada takbiirsaday takbiir laga maqlay Kacbada (Allaahu Akbar),

Rasuulku (scw) aad ayuu ugu farxay Islaamiddii Cumar.

Cabdullaahi Ibnu Mascuud waxuu yiri:” Kacbadda agteeda horey ugumaan tukan illaa uu Cumar Islaamay”.

Suheib bin Sinaan waxuu yiri:” Markuu Cumar Islaamay diintii Islaamku way adkaatay oo si cad baa loo faafiyey, oo

kacbadda agteedaanu fadhiisannay, oo ku dawaafnay, ciddii wax na yeeshana aan iska dhicinnay oo aan ka aargudannay.

Maalintaa iyada ahi ee uu Cumar Islaamay, Muslimiintiina uu u sababay inay galaan Kacbadda oo ku tukadaan, ayaa loo baxshay Al Faaruuq ( Kii xaq iyo baadilka kala geeyay ). Sowda bint Samcah waxay jirtay dhulka Xabashida oo ay u hijrootay, markay maqashay Islaamidda Cumar ayay timid magaallada Makka.

Cumar markii uu Muslimay waxuu Islaamkii Alle u siyaadiyey cizi iyo quwad oo, ducfigii iyo gunnimadii ayuu ka saaray, markaa ayayna Qureeshtu garowsadeen inay diintani sare mari doonta oo ay awood buuxda yeelan doonta.. Cumar waxuu ku sugnaa magaalada Makka tan waqtigii Hijriyada, waxuuna ahaa nin laga wada cabsado, oo Islaamkuna tiir adag u ahaa, cid ku dhici jirtay ama haweysan jirtay oo wax ka sheegi kartayna ma aysan jirin, intaa dabadeedna waxuu u hijrooday magaaladii Madiina, isagoo safarkiisii hijrada kula rafiigay Cayaash bin Abii Rabiica iyo Hishaam bin Al Caas.

Hishaam isagu waalaga war helay oo waala



xabbisay. Cumar iyo Cayaashna waa ay is raaceen, hase ahaatee Cayaash isaguna waala soo celiyey kadib markay qayaameen Abuu Jahal iyo Al Xaarith bin Hishaam oo hadal been ah usheegay inay hooyadii nidar ku gashay ineysan timaha shanlaysan oo aysan qorraxda ka harsan jeer ay aragto. Al Muhiim: Taasi waa qiso dheer uu u baahan in laga akhristo kutubta siirada Nebiga (scw), Cumarna isagu waa uu hijrooday, Cayaashna waa la celiyey . Markiina uu tegay Cumar magaaladii Madiina waxuu Rasuulka (scw) la walaaleeyay Citbaan bin Maalik. Qaar Kamid Ah Fadliga Cumar Cumar bin Khaddaab waxuu lahaa fadli aad u tiro badan, oo aan runtii lasoo koobi karin, waxuuna ahaa saxaabiga labaad ee ku xigay Abuu Bakar Sidiiq Allaha ka raalli noqdee, Cumar bin Khadaab, waxaan ku xasuusannaa inuu ahaa mid kamid ah 10-kii jannada loogu bishaareeyay iyagoo dunidan guudkeeda saaran, Alla maxaa ka nasiib badan qof isagoo dunida saaran loogu bishaareeyay oo lagu yiri Janno ayaad galeysaa? May wallaahi ma jirto fadli ka weyn iyo bishaaro ka qiimo badan.

Waxuu Cumar ahaa mid kamid ah saxaabadii waa weyneed iyo culimadii caabidiinta ahayd ee ka saahidday dunida iyo dhaldhalaalkeeda kuna beddashay raalli ahaanshaha Allaah Sarreeye. Waxuu ku lahaa mawaaqif dhowr ah kitaabka Allaah SW, iyo ra'yi kasoo fulay Cumar oo Alle ku caddeeyay Quraanka, waana halka uu imaam Cali ka leeyahay:" Waxaanu u arkay Quraanka inay kujiraan kalmado kamid ah kalmada Cumar (kasoo fulay) ama ra'yi kamid ah ra'yigii Cumar". Waana sida uu Cabdullaahi ibnu Cumar ka yiri:" Ma kusoo degin dadka arrin ay si uyiraahdeen, oo Cumarna si kale u yiri, illaa Alle waxuu soo dajiyey Quraan uu ku waafaqaya maqaallada Cumar ibnu Khaddaab.

Taasina waxaa marag ma doonta u ah, dhacdadii Bader markay dhacday waata keentay in maxaabiis badan oo Qureeshta kamid ah lasoo qafaashay, oo dabadeedna raggii saxaabada ay shir u fadhiisteen, shirkaasoo uu guddoominayey Rasuulka (scw), nin walibana sidii laga yeeli lahaa maxaabiistaas ayuu sheegay oo siduu ra'yi ahaan u arkayay ayuu ka dhawaajiyey. Maalintaa iyada ahi Abuu Bakar waxuu soo

jeediyey in madax furasho laga qaato oo la iska sii daayo, Cumarna waxuu ra'yi ahaan soo jeediyey in qof waliba xigtadiisa loo dhiibo oo uu kurka ka jaro, waxuuna dalbaday mid isaga tolkiisa ahaa oo ku jiray maxaabiista in gacanta loosoo geliyo oo uu unuunka u dheereeyo, Calina loo dhiibo walaalkiis Caqiil, Xamzana loo dhiibo walaalkiis Al Cabbaas, waxuuna soo jeediyey in ninba ninka xigo uu kurka kajarro si aysan meeshu dakano u soo galin, oo Allena u ogaado buu yiri: inaysan wax gacaltooya innaga iyo kuwaasi na dhex oolin.

Haddaba Rasuulku (scw) waxuu doorbiday ra'yigii Abuu oo isagii ayuu dadkii ku xukmiyey. Isla habeenkaasina waxuu Alle toddobada samo dushooda kasoo dejiyey aayado u muuqday canaan iyo inay yahiin kuwa sabab u noqon lahaa inay ciqaab iyo carro Alle soo degto, haddaysan jiri lahayd qowl horey Rabbi uga dhacay oo ahaa : Intaa kadib u falo axsaan ama ka qaato madax furasho. (Suuratu Muxammed aayadda 4aad). Aayadii kusoo dagay shirkaas isaga ah ee Cumar ra'yigiisa ayidayey waxay ahaayeen kuwan:

Qoraalka aayaddani lagu xusay ee aan horey u xusnay isagu waxuu caddeynayaa inay banaantahay madax furashada oo aad sii dayn karto maxbuuska intaad madax furasho ka qaadato, laakiin sida kamuuqato aayadda waa in ay habbooneyd in la edbiyo gaalada oo aan laga qaadan wax madax furasho ah , waxayna ayideysaa qowlkii iyo ra'yigii Cumar.

Ad- adkaantii uu diinta Islaamka Cumar ku ad adkaa heer waxay gaadhay inuu maalintii Bader markuu arkay Suhayl bin Camr oo ku jiro maxaabiista oo afhayeenna u ahaa Qureeshata ayuu yiri:” Rasuulkii Alloow! dhoolasha ka siib hasoo dhaco carrabkuye si uusan mar dambe khudbo kaasoo hor jeeddo meel uga soo jeedinin. Rasuulku (scw) waxuu u tilmaamay inuu iska daayo, waxuuna u sheegay in laga yaabo in Suheyl uu maalin uun ka istaago meel la mahadsho Islaamka, oo taasina way dhacday markii uu Rasuulka (scw) geeriyooday oo ay reer Makka damceen inay riddoobaan ayuu Suheyl u khudbeeyay oo ku yiri:” Ma adinkoo dadka ugu Islaannimo dambeeyay baad iminka uga hor baxaysaan? Islaamkii ayayna ku sugnaadeen.



Abuu Hureerah waxuu yiri:” Rasuulka (scw) waxuu yiri:” Ummadihii idinka horeeyay waxaa ku jiri jiray qof la ilhaamiyo, oo wax loo sheego (aanan Nebina ahayn) haddii uu ummadeydan ku jirana waa Cumar.

Abuu Dar Al Qafaari waxaa laga soo weriyey inuu yiri:” Waxaan maqlay Rasuulka Alle (scw) oo leh: Alle waxuu xaqu yeelay carrabka Cumar. Abuu Hureerana waxuu yiri:” Rasuulkii Alle (scw) waxuu yiri:” Alle waxuu xaqu yeelay carrabka iyo qalbiga Cumar”.

Cabdullahi ibnu Mascuud waxuu yiri:” Cizzi kamaanan suulin taniyo markuu Islaamay Cumar.

Ibnu Isxaaq waxuu Ibrahiim bin Muhaajir kasoo weriyey isaguna uu Mujaahid kasoo weriyey inuu yiri:” Haddii uu Cumar ra’yi keeno, Quraan baa soo degi jirey”.

Ibnu Mascuud waxuu yiri:” Islaannimadii Cumar waxay ahayd guul iyo nasri, imaaradiisina yacni xukunkiisii waxuu ahaa dhul furasho”.

Mucaad bin Jabal waxuu yiri:” Cumar waxuu geli jannada, oo Rasuulka Alle (scw) waxuu yiri:” Goor aan Jannadu dhex joogo

ayaan arkay daar ku dhex taallo, markaasan ku iri:” Oo yaa leh daartaan? Saa la igu yiri:” Cumar”.

Sidaa si lamid ahina waxaa soo weriyey Anas oo yiri:” Nebigu (scw) waxuu yiri:” Jannada ayaan dhex galay, markaasaa waxaan is arkay anigoo ku sugan qasri dahab ka sameysan, saa waxaan iri:” Oo yaa iska leh? Markaasaa la igu yiri:” Waxaa leh Shaab (yacni nin dhalinyaro ah) oo Qureesheed ah’, markaasaan aniga isku maleeyay, markaasan ku iri:” Oo waayo? Markaasay igu yiraahdeen:” Waa Cumar”.

Abaa Hureerana waxaa laga soo weriyey oo uu isaguna kasoo weriyey in Nebigu (scw) yiri:” Jannada ayaan dhex galay, markaasaan kula kulmay qasri dahab ah, oo i cajib geliyey quruxdiisa, markaasaan su’aalay:” Oo yaa iska leh? Markaasaa laygu yiri:” Cumar”. Iima aysan diidin inaan galo, ogaanshaha aan ogaa maseyrkaada mooyaan Abaa Xafsoow!.

Markaasuu Cumar ooyey oo yiri:” Ma adigaan kaa maseyri Rasuulkii Alloow? Sidaa si lamid ahina waxaa soo weriyey Jaabir. Werin kalena waxaa ku sugneed in daarta ama qasrigu ay ag joogeen labo

dumar ah, oo markay Rasuulka (scw) u sheegeen in uu Cumar gurigaasi leeyahay uu ka tegay ogaansho uu ogaa maseyrka Cumar darteed, markaasuu Cumar ooyey oo yiri:” Ma adigaan kaa maseyri Rasuulkii Alloow?

Cabdullaahi ibnu BureyDAH waxuu aabahiis ka soo weriyey inuu Rasuulku (scw) yiri:” Waxaan xisaaban inuu sheydaanku ka leexdo Cumar”.

Muxammed ibnu Sacad waxuu aabahiis kasoo weriyey inuu Rasuulka Alle (scw) yiri:” Illaah baan ku dhaartaye waddo maad martid, illaa sheydaanku waxuu maraa waddo kale (Wuxuu la hadlayey Cumar)”.

Cumar ayaa Rasuulka (scw) idin weydiistay inuu usoo galo, goor ay dumar Qureesheed agjoogeen oo ay codkooduna sare ugu qaadayeen Rasuulka (scw). Markii ay maqleen idin dalbashada Cumar ayay wada aamuseen oo ay is wada qariyeen. Markii uu Cumar soo galay ayuu arkay Rasuulka (scw) oo qoslahayo, markaasuu Cumar yiri:”

Dhooshaadu Allaaha ka qosliyo Rasuulkii Alloow!. Markaasuu Nebigu (scw) yiri:”

Waxaan la yaabay dumarka kan ee markay codkaadu maqleen xijaabka kuwada orday”.

Waxuu yiri Cumar:” Adigaa mudan Rasuulkii Alloow! inay iga kaa haybeystaan. Markaasuu dhankoodii u jeestay oo uu ku yiri:” Kuwii nafahooda cadawga u ahaayoow, ma anigaad iga haybaysaneysaan oo Rasuulkii Allana ma haybeysaneysaan? Markaasay yiraahdeen:” Haah! maxaa yeelay adigu waad ka ad adagtahay oo aad ka qallafsan tahay Rasuulka Alle (scw)”. Markaasuu Nebigu (scw) yiri :” Ina Khaddaaboow! Sheydaan kugulama kulmo jid illaa waxuu qaaddaa dhabo kale oo aan taada ahayn”. Rasuulka (scw) waxuu yiri:” Waxaan leeyahay labo waziir oo samada ah iyo labo waziir oo dhulka ah. Labada samada ahi waa Jabriil iyo Miikaa’iil, labada dhulka ahina waa Abuu Bakar iyo Cumar”. Waxaanu horey usoo xusnay qisadii Abuu Bakar markaynu ka hadleynay xadiiskii beerta ee uu Abuu Muusal Ashcariyu soo werinayey, kaasoo uu Rasuulka (scw) janno ugu bishaareynayey raggii u yimid oo uu ku jiray Cumar, markuu lahaa ka fur uguna bishaaree Janno”. Cumar Ibnu Khaddaab waxuu ahaa shaqsi aan fadligiisa lasoo koobi karin , waxii uu



Rasuulka (scw) ka yiri iyo waxii ay saxaabada iyo a'immada saalixiintu ka yiraahdeen, waana runtii mid aad u badan oo aynu soo koobi kareyn. Waxaana xusid mudan in waqtigiisii la furtay dhul aad ubadan, uuna noqday khaliifkii ugu fatuuxaadka badnaa Khulafaa'u Raashidiinka, saddarrada dambe ayaanna ku falageyn doonnaa hadduu Alle Sarreeyo idmo intaa ayaana uga baxayna fadligii Cumar.

Dumarkiisii & Carruurtiisii Cumar waxuu dhalay Cabdullaahi, Xafsah iyo Cabdiraxmaan, waxaana u dhashay Zeynabah bint Madcuun bin Xabiib bin Wahab bin Xudaaf bin Jumux Al Qurashiyah Al Jumuxiyah. Waxaa carruurtiisaasi abtiyaal u ahaa saxaabada kala ah Cuthman bin Madcuun, Qudaamah bin Madcuun iyo Cabdillaahi ibnu Madcuun. Waxuu kaloo dhalay Zeyd Al Akbar iyo Ruqayah, waxaana u dhashay Umu Kalthuum bint Cali ibnu Abii Dhaalib, waxaana Zeyd iyo Ruqayah ayeeyo u ahayd Fadimah az-Zahraa bint Xabiibullaah Muxammed (scw).

Waxuu kaloo dhalay Zeyd Al Asqar iyo

Cubeydullaah (Cubeydullaah waxaa lagu diley dagaalkii Safiin asagoo la safan dhanka Mucaawiyah) Waxaa labadi udhashay Umu Kalthuum bint Jarwal bin Maalik bin Al Musayd bin Rabiicah bin Al Asram bin Dhubeyys bin Xaraam bin Xabshiyah bin Salool bin Kacab bin Camr oo ka dhalatay Khuzaaciyiinta. Markii uu Islaamka yimid ayuu furay Cumar Umu Kalthuum bint Jarwal oo Islaamka ayaa kala geeyay.

Misna waxaa kaloo uu dhalay, Caasim oo ay udhashay Jamiilah bint Thaabit bin Abii Aqlac (Magaca Aqlac-na ama waxaa kaloo lagu sheegaa Aflax- ee waa Qays) bin Cismata bin Maalik bin Ammah ibnu Dhubeycah bin Zeyd, oo kasoo jeeddo Ansaarta reer Madiina gaar ahaan Aws. Waxaa kaloo uu dhalay Cabduraxmaan Al Awsadh oo ku caan ahaa Abul Mujbar, waxaana u dhashay Luheycah oo Umu Walad ah.

Waxaa kaloo uu dhalay Cabduraxmaan Al Asqar, waxaana udhashay haweeney Umu Walad ah.

Waxuu kaloo dhalay Faadimah oo ay udhashay, Umu Xakiim bint Al Xaarith bin

Hishaam bin Muqiirah, waxaa Umu Xakiim dhalay Cumar abtigiis.

Waxuu kaloo dhalay Zeynaba oo carruurtiisa ugu yar, waxaana udhashay Fukeyha oo Umu walad ahayd.

Waxuu kaloo dhalay Cayaad oo ay udhashay, Caatikah bint Zeyd bin Camr ibnu Nufeyl Al Cadawiyah. Waxay Caatikah la dhalatay Saciid ibnu Camr bin Nufeyl oo kamid ahaa tobankii Jannada loogu bishaareeyay.

Qaabkuu Dumarka u Guursaday Waxay Ahayd Sidan Cumar wuxuu guursaday Islaamka ka hor Qureybah bint Abii Umayah oo dhanka aabaha walaal kala ahayd hooyadii Mu'miniinta ee Umu Salamah bint Abii Umayah. Wuxuu Cumar uga soo tegay magaalada Makka markii uu haajirayey, waxayna sababtu ahayd iyadoo ku baaqi noqotay diintii tolkeeda ee sanam caabbudka ahayd, markiina uu Alle soo dajiyey aayadahii uu ku xarrimayey calaaqaadka Muslimiinta iyo kufaarta.

Kadib heshiiskii Xudeybiyah ayuu Cumar furay, waxaana markaa guursaday Mucaawiyah ibnu Abii Sufyaan oo isagu

markaa lamid ahaa iyada oo mushrik ahaa. Kadib waxay Islaamtay furashadii Makka waxaana guursaday Cabdiraxmaan bin Abii Bakar kadib markuu furay Mucaawiyah, waxayna udhashay Cabdullaahi, Umu Xakiim iyo Xafsah. Cumar-na waxbo uma aysan dhalin.

Waxuu misna guursaday Umu Kaltuum, Culimadu qaarkoodna waxay sheegaan in magaceeda saxda ahi uu ahaa Muleykah bint Jarwal Al Khuzaaciyah, waxuu guursaday waqtigii Jaahiliyada, waxuuna furay Xudeybiyah kadib iyadoo gaalo ah, waxaana guursaday markii uu furay Abii Jaham bin Xudeyfah oo qowmkeeda ka mid ah, oo markaa iyadoo kale ahaa mushrik.

Waxuu misna guursaday Zeynabah bint Madcuun Al Jumuxiyah, waxay ahayd afadii saddexaad ee Cumar, waxuu ku guursaday magaallada Makka waqtigii Jaahiliga.

Markii lasoo diray Rasuulkuna (scw) waa ay rumeysay oo ay la Islaamtay zowjkeeda Cumar, waxayna u hijrootay magaalladii Madiina ayada iyo carruurteeda, waxay Zeynaba bint Madcuun ahayd sodahdii Rasuulka (scw) illeen waxuu Nebigu (scw) qabay gabadheeda Xafsa.



Kadib waxuu guursaday sanadkii 7aad ee hijriyada Jamiilah bint Thaabit oo u dhashay Caasim, kadibna wuu furay waxaana guursaday Zeyd bin Xaarith oo ay udhashay Cabduraxmaan bin Zeyd.

Kadib waxuu guursaday Caatikah bint Zeyd, waxay ahayd mid qurux iyo akhlaaq ku sifoowday, waxuu guursaday sanadkii 12aad ee hijriyada.

Kadib waxuu guursaday dumarkii aynu soo xusnay. Waxuuna dhalay dhowr carruur ah oo iskugu jiray wiilal iyo gabdho, wiilashiisu waxay kala ahaayeen: C/llaahi, Cabdiraxmaan Al Akbar, Cabdiraxmaan Al Awsadh, Cabdiraxmaan Al Asqar, Zeyd Al Akbar, Zeyd Al Asqar, Cubeydullaah, Caasim iyo Cayaad. Gabdhahiisuna waxay kala ahaayeen Xafsah, Faadimah Ruqayah iyo Zeynaba.

Nolashiisii Madiina

Cumar bin Al Khaddaab markii la yimid Madiina, waxuu laasimay la joogidda iyo ka ag dhawaanshaha Rasuulka (scw). Waxuu kala qeyb qaatay duullaamadii uu qaaday oo idil, Bader, Uxud, Khandaq, iwm. Waxuu sidoo kale hoggaamiyey qaar kamid ah wardoonno ama sirriyaad. Maalinti Bader

waxuu dilay abtigiis Al Caas bin Hishaam. Maalintii Uxud waxuu kamid ahaa raggii ugu horeeyay ee durbo soo laabtay kadib markay Muslimiintii jabeen, waxuuna kamid ahaa raggii difaacayey Rasuulka (scw).

Waxaynu xasuusannaa inuu ahaa Cumar ninkii ujawaabayey maalintaa (Uxud) Abuu Sufyaan, markii uu lahaa:” Muxammed ma idinku jiraa?, (Looma jawaabin), Ina Abii Quxaafah (yacnii Abuu Bakar) ma idinku jiraa? Cumar ibnu Khaddaab ma idinku jiraa? Markii loo jawaabi waayey ayuu yiri:” Waala idinka kaafiyey kuwas.

Xaqiiqdii Abuu Sufyaan waxuu ogaa inay saddexduba (Rasuulka (scw) , Abuu Bakar iyo Cumar) ay ahaayeen horwadeennadii Islaamka, waxuuna yaqiinsanaa inay taasi hadday dhacdo oo saddexdooduba la dili lahaa ay jab weyn ku noqon lahayd Islaamka iyo Muslimiintuba. Haddaba markaas ayuu Rasuulka (scw) amray inuu Cumar ujawaab celiyo, markaasuu ujawaab celiyey oo usheegay inay saddexdooduba nool yahiin.

Cumar ibnul Khaddaab mar waliba waxuu taagnaa dhinaca Rasuulka (scw), oo dhammaan dhaqdhaqayadii oo idil waa uu

ka qayb qaatay. Markii uu Rasuulka (scw) geeriyooday Cumar waa uu ku qanciyeey waayey taas, miirkiisii ayaana tegay, oo waxuu yiri:” Ruuxii yiraahdo Rasuulka (scw) wuu dhintay unuunka ayaan udheereyn”. Waxuu ku andacoonayey Cumar inuusan Rasuulka (scw) dhiban, bal ee uu iman doono oo gacmo badan oo munaafiqiintana uu goyn doona. Cumar waxuu raad weyn ku lahaa doorashadii Abuu Bakar, waxuuna aaminsanaa inaysan jirin cid ka hor mari karto Abuu Bakar Sidiiq. Markii uu Abuu Bakar Ansaarta la hadlayey si khilaafada ay u qabato cid Qureeshta ka dhalatay, waata uu yiri:” Labadan nin midkii aad ka raalli tahiin doorto (yacnii Cumar iyo Abaa Cubeyda bin Al jarraax). Cumar waxuu oran jiray:” In dembi la’aan kurka la iga jaro ayaan ka jeclaa inaan madax u noqda dad uu Abuu Bakar kujiro”. Sidaa darteed marka ma uusan jeclaan in uu qabto khilaafada ka hor Abii Bakar Siddiiq. Waxuu Cumar ahaa qofkii ugu horeeyay ee gacanta Abuu Bakar qaada oo la baayactamo, markaasay dadkii meesha joogayna la mubaayacodeen.

Cumar Ibnul Khaddaab waxuu la shaqeynayey khaliifadii Rasuulka (scw) ee Abuu Bakar Sidiq, isagoo markaana garab buuxo u ahaa oo howlaha la kala waday. Ka ag dhawaanshahii Cumar uu ka ag dhawaa Abuu Bakar iyo sidii uu welibo howlaha ula waday, waxay gaartay heer Dhalxa bin Cubeydillaah uu u tegay Abuu Bakar oo uu ku yiri:” Abuu Bakarow! ma adigaa madax noo ah ama Cumar? Runtii Cumar waxuu ahaa nin karmeed aad iyo aad loo qadariyo, oo misna go’aan adag leh, waxuuna ahaa mid aan ka ag faaruqi jirin muddadii adkeyd ee xaaladdu qaraarka ahayd.

Doorashadii Cumar

& Dhul Furashooyinkiisii

Markii uu geeriyooday Abuu Bakar, khilaafadii waxuu uga tegay Cumar (oo lala mubaayacooday maalintii labaad ee geerida Abuu Bakar, 22 Jamaadul Aakhir 13

Hijriyada oo ku beegneyd Augosta 632 miilaadiga), kadib markuu Abuu Bakar kala tashaday saxaabadii Rasuulka (scw) oo dhammaantoodi ay isku raaceen in uu Cumar uga tego khilaafa Dhalxa mooyaan oo isagu ka sheeganayey ad adkaantii Cumar. Haddaba markii uu Cumar



khilaafada qabtay oo lala mubaayacooday waxuu halkii kasii waday howshii uu Abuu Bakar ka tegay. Aynu ka billawna sanadkuu xilka khilaafada qabtay.

Sanadkii | 13aad

Sanadkan runtii wuxuu ahaa sanadkii ugu horeeyay ee uu Cumar khilaafada qabtay, waxaana usoo qaadan doonnaa khilaafadiisii sanad sanad, innagoo tixraaceyna nidaamka iyo dhacdooyinkii dhacay waqtigiisa oo isugu jiro dhul furashooyin iyo dhacdooyin kale oo lama huraan ah in iyaguna la sheego. Dhulalka Ciraaq iyo Shaam waxaa ka socday dagaallo waqtigii Cumar, waxaana soo qaadan doonnaa sanad waliba dagaalladii ka socoday labada dhinac innagoo marba qaadaa dhigi doonna dhinac kamid ah labada dhinac, intuu Rabbi inoo sahlo.

Howshii Ugu

Horreysay ee Cumar

Tani waxay ahayd howshii ugu horreysay ee uu Cumar ku dhaqaaqo, markii uu khilaafada qabtay kadib.

Waxaanu horey u ogeyn ama aan soo xusnay in Muthana bin Xaaritha uu yimid Madiina isagoo gurmada ka dalbanayey Abuu

Bakar, Siddiiq markaasina waxay ahayd goor uu Abuu Bakar hayey xanuunkii uu dunida kaga faaruqay. Markii uu Abuu Bakar arkay Muthana oo dul taagan ayuu Cumar ku yiri:” Markaan dhinto yaadan galabeysan jeer aad dagaalka Ciraaq ku boorido dadka, oo Muthanna aad ciidan ku darto, haddii uu Alle idiin furo Shaamna, ciidankii Khaalid ku celi Ciraaq”.

Markii uu Abuu Bakar geeriyooday, ayuu Cumar warqad u diray dhanka Shaam iyo ciidamadii ka dagaallamayey Yarmuuk, warqaddaasina waxay ahayd tii caddeyneysay casiliddii Khaalid, iyo geeridii ku timid Khaliifadii Rasuulka Alle (scw) ee Abuu Bakar Siddiiq, waxaana warqaddaasi siday Manjimah bin Zaniim, goor lagu jiray dagaalkii Yarmuuk ayayna gaadhay, markaasuu Khaalid Muslimiintii ka qariyey geerida ku timid, Khaliifadii Rasuulka (scw) ee Abuu Bakar si aysan u niyad jabin ciidanku.

Kadib maalintii labaad ee laga soo wareegay geeridii Abuu Bakar buu Cumar ka dhex istaagay masjidkii oo dadkii u khudbeyay kuna booriyey dagaallada Ciraaq kasocda, hase ahaatee cidi umaysan kicin, ogaansho

ay dadku ogaayeen darteed in la dagaallanka reer Furus uu yahay mid lagu hoogga oo ka daran kana kulul kan lShaam ka socoda.

Misna maalintii labaad oo ah maalintii 3aad ee laga soo wareega geeridii Abuu Bakar ayuu Cumar kacay oo dadkii u khubeyay oo ku booriyey jihaadka iyo dagaallada ka socona dhulka Ciraaq, waxuuna ugu bishaareyey waxa sawaab iyo ajar uu Illaahay meeshaas oo kale dhex yeelay, hase ahaatee cidi umaysan kicin sidii maalintii hore, misna maalintii saddexaad ayuu sidii si lamid ah falay.

Kadib waxaa kacay Muthana bin Xaarith Ash Sheybaani oo dadka xasuusiyey wixii guulo iyo nasri ee uu illaahay ku siiyey gacanta Khaalid markuu halkaasi (Ciraaq) joogay, hase ahaatee sidii si lamid ah cidi maysan kicin, mana ajiibin dhawaqa jihaadka. Kadib maalintii afraad ayuu Cumar sidii si lamid ah dadkii u khudbeeyay oo ku booriyey jihaadka, markaa baa waxaa kacay Abuu Cubeydah bin Mascuud Ath-Thaqafi, oo nin dhalin yaro ah, dabeetana dadkii baa iska daba kac kacay jeer la helay ciidan, markaasuu Cumarna masuul uga

dhigay Abaa Cubeydah bin Mascuud, oo markaa aan ahayn saxaabi, raggii saxaabada baa Cumar weydiiyeen:” Oo maad u magacawda ciidanka nin saxaabadii Rasuulka (scw) kamid ah? Markaasuu Cumar yiri:” Waxaan uun magacaawi kii ugu horeeyay ee ajiibay dhawaqa jihaadka, adinkuna waxaad tahiin kuwa ku hor maray gargaarka diinta Islaamka (yacni gelideedda). Kadib Cumar waxuu u dardaarmay ciidankii guud ahaan , gaar ahaanna Abuu Cubeydah bin Mascuud cabsida Allaah iyo inuu la tashado ragga saxaabada Rasuulka (scw) ee la socda isaga, gaar ahaanna waxuu amray inuu la tashado Suliidh bin Qeys Al Ansaari, waxuuna Cumar yiri:” Waa nin aad arrimaha dagaalka u yaqaanno”. Kadib ciidamadii Muslimiinta way dhaqaaqeen oo waxay abbaareen dhankii Ciraaq iyagoo tiradoodu ay markaasi tahay 7 000. Markaa buu Cumarna warqad u diray dhanka Shaam iyo masuulkii halkaasi ku sugnaa ee Abuu Cubeydah bin Al jarraax, taasoo uu kaga dalbanayo in ciidamadii Khaalid bin Waliid ee kasoo dagaallamay dhulka Ciraaq uu dib ugu



celiyo, bacadamaa Yarmuuk lagu guuleystay. Dabeeto Abuu Cubeydah bin Al Jarraax waxuu diyaariyey ciidan culus oo uu u diro dhanka Ciraaq isagoo fulinayo amarka amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab, waxuuna diyaariyey 10 000 oo ciidan ah oo uu madax uga dhigay Haashim bin Cutbah bin Abii Waqaas Az Zuhri. Cumar ibnu Al Khaddaabna waxuu soo diray ciidan kaloo gurmada ah oo u badan reer Bujeylah oo uu hoggaaminayo Jariir bin Cabdillaahi Al Bujali. Ciidamadii Abuu Cubeydah bin Mascuud markay gaareen dhulka Ciraaq, waxay la kulmeen iyadoo Faarisiintii ay xaaladi ka dhex aloolsantahay oo ay ku xad gudbeen boqorkoodii ayna dileen, waxayna ka fursan waayeen inay madax ka dhigtaan gabar la oran jiray Buuraan bint Kisraa (Barwiiz/ Abarwiiz), kadib markay dileen mid iyada ka horreysay oo la oran jiray Aazarmiidakhat bint Abarwiiz. Buuraan waxay heshiis la gashay nin la oran jiray Rustum bin Farakhzaad si haddii uu is hor taago dagaallada iyo weerarada ay Muslimiinta dhulka Firus kusoo qaadeen uu markaa qabanayo xilka boqornimada muddo

10 sanadood ah, kadibna uu usoo celin doona reer Kisraa, arrintaasina waa uu ku qancay Rustum. Waxuu Rustum ahaa mid xiddigaha wax ka sheeg sheego oo waxuu ahaa Saaxibun Najam, isagoo hadal hayo in ay muddada 10 kaasi sano u buuxsami doonin ayay dadkiisii weydiiyeey:” Maxaa haddaba kugu xambaarayo inaad sidaa fasho? Yacni waxay ula jeedaan in aad heshiis noocaas gasho adigoo aaminsan inaysanba kuu buuxsameyn oo aadanna hor istaagi karin ciidamadan Muslimiinta? Markaasuu yiri:” Waa uun iga damac iyo sadano doon yacni sharaf doon”.

Dhacdadii Numaariq

Markaa buu Rustum soo diray ciidan uu hoggaaminayo amiir la oran jiray Jaabaa, ciidankiisu labada dhinacna waxaa kala hoggaaminayey labo nin oo midi la oran jiray Jashnash Maah, kan kalena waxaa la oran jiray Mardaan Shaah. Waxay is heleen ciidankii Abaa Cubeydah bin Mascuud oo ay isku heleen goob la yiraahdo Numaariq oo u dhaxayso Xiirah iyo Qaadisiyah.

Fardooleyda Muslimiintuna waxaa hoggaaminayey Muthanna bin Xaarith, ciidanka bidixdana waxaa hoggaaminayey

Camr bin Al Heytham.

Kadib waxaa halkaa ku dhex maray dagaal aad iyo aad u daran oo lagu jebiyey Faarisiintii, laguna soo qafaashay Mardaan Shaah iyo Jaabaaan. Ammaa Jaabaaan waxaa dilay ninkii soo qafaashay, Mardaan Shaahse isagu waxuu qayaamay ninkii soo qafaashay markaasuu iska sii daayey, haddana mar kale waxaa soo qabtay ciidankii Muslimiinta, waxayna ula yimideen amiirkii ciidanka ee Abuu Cubeydah bin Mascuud waxayna ku yiraahdeen:” Waa amiirkii ciidanka Furuse ee dil”.

Isagiina Abuu Cubeydah waxuu yiri:” Haddii uuba amiirkii ciidanka yahay anigaa dilaya”. Unuunka ayuuna u dheereeyay.

Waxaa kaloo la sheegaa in uu nin Muslimiinta kamid ah magan geliyey. Dabeeta Abuu Cubeydah waxuu daba kacay raadka kuwii jabay oo uu wax badan ka laayey, maal badanna ka ritay, siduu u eryanayey ayayna ka dul dhaceen magaallada Kaskar oo uu madax ka ahaa wiil uu dhalay boqorkii hore ee Kisraa abtigiis, kaasoo la oran jiray Narsii.

Kadib Narsii waxuu soo saaray reer Furus isagoo ku boorinayo la dagaallanka ciidanka

Abuu Cubeydah bin Mascuud, waxaana dhex maray dagaal uu Alle ku jebiyey cadawgii Muslimiinta ee reer Furus, waxayna halkaas Muslimiintii ka qaniimeysteen qaniimo tiro badan, falillaahil Xamdu.

Khumuskii qaniimada iyo hantidii halkaa laga helay ayuu Abuu Cubeydah u diray dhankii amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab.

Kadib waxay isku heleen ciidamadii Muslimiinta iyo kuwii Narsii meel u dhaxayso Kaskar iyo Safaadhiyah, iyadoo ciidamada midigta iyo bidixda ee Narsii ay kala hoggaaminayaan labo nin oo uu dhalay abtigiis oo la kala oran jiray Bandaweyhi bin Nadhaam (ama bin Nasdhaam) iyo walaalkiis Beyraweyhi bin Nadhaam.

Rustumna wuxuu diyaariyey ciidan kale oo uu madax uga dhigay nin la oran jiray Jaalinuus, si uu dhanka Narsii ugu soo diro gurmada ahaan.

Haddaba markii uu Abuu Cubeydah arrintaa ka war helay ayuu ku deg degay inuu weerar culus ku qaado Narsii ka hor intuuusan soo gaarin ciidanka Jaalinuus. Markaasuu weeraray, waxaana dhex maray dagaal



culus oo lagu jebiyey ciidankii Narsi,  
kadibna Abuu Cubeydah iyo Jaalinuus baa  
waxay isku heleen goob la yiraahdo  
Baaruusimaa, waxaana ku dhex maray  
dagaal durtaba lagu jebiyey Jaalinuus iyo  
ciidamadiisii oo uu weliba la socday Narsii,  
markaasay orad ku galeen magaalladoodii  
Madaa'in.

Kadib Abaa Cubeydah bin Mascuud wuxuu  
diray Muthanna bin Xaarith iyo sirriyaad  
(wardoonno) kale oo uu dhan waliba u diray.  
Xoog iyo heshiis ayayna ku kala furteen  
hareerahooda. Kadib khumuskaa qaniimada  
ayuu Abuu Cubeydah u diray dhankii  
Madiina iyo amiirkii Mu'miniinta ee Cumar  
bin Al Khaddaab.

Kadibna waxaa isla dhulka Firus ka  
dhacay..

Dhacdadii Jasar

Markii uu Jaalinuus ka dul dhacay  
boqortooyadoodii ayay Faarisiintii is  
dhaarsadeen oo ay soo direen ciidan culus oo  
uu hoggaaminayo Bahmas Jaadaueyhi,  
waxuuna Rustum usoo dhiibay calanka lagu  
magacaabo Darfash Kabayaan. Misna waxaa  
kaloo uu u dhiibay raayad yacni calan kale  
oo uu lahaa boqorkii hore ee Kisraa kana

sameysneed maro xariir ah oo lagu qurxiyey yaaquut iyo murjaan, waxayna ahayd siddeed dhudhun dhererka iyo ballac.

Waxay markaa kadib Faarisiintii udhaqaaqeen dhankii Muslimiinta iyo ciidamadii Abaa Cubeydah, waxaana labada qola kala dhex galay webiga Furaat, markaasay Faarisiintii soo cid dirsadeen iyagoo leh:” Inoo soo gudba ama aanu idiin soo gudubna? Markaasay Muslimiintii amiirkoodii ku yiraahdeen:” Amar ha inoosoo gudbaane”. Waxuuse ugu jawaabay:” Nagama jeclo geerida, innaga ayaana u gudbeyna”.

Kadib way u gudbeen, waxayna isku heleen goob ciriiri ah, oo dagaal darani ku dhex maray, kaasoo horey aysan Muslimiinta isagoo kale ugu tashan una arag.

Muslimiintu waxay maalintaa ahaayeen kudhawaad 10 000, gaaladuse way ka tira badnaayeen, waxayna wateen reer Furus maroodiyaan tiro badan oo ay ku argagax gelinayeen fardaha Muslimiinta. Mar alliyooy weerar qaadaan fardooleyda Muslimiinta dib bay u soo noqonayeen fardaha oo sina uma galeyn goobta dagaalka iyagoo ka argagaxaya maroodiyaasha ay

maalintaa Faarisiinta lasoo dagaal tegeen.  
Faarisiintii waxay maalintaa Muslimiinta  
oodda uga qaadeen gamuun oo ay halkaas  
kaga laayeen tiro badan, markaasuu amiirkii  
ciidankaasi Muslimiinta ee Abuu Cubeydah  
amray in marka hore la laayo  
maroodiyaasha, markaasay laayeen isaga  
iyo halyeeyadii Muslimiinta, waxaana jirey  
maroodi weyn oo cad kaasoo  
hoggaaminayey maroodiyaasha, kii ayaana  
soo haray markaasuu Abuu Cubeydah  
dhankiisii u dhaqaaqay si uu maroodiganna  
u dilo, markaasuu kharduumka seyf ku  
dhuftay oo xanuunjiyey, markaasuu  
maroodigii xanuunsaday oo qayliyey, suu  
Abuu Cubeyda ku istaagay oo dilay, halkaas  
ayuuuna ku shahiiday amiirkii ciidankaas  
Muslimiinta.

Kadib waxaa hoggaankii ciidanka qabtay  
amiirkii uu horey Abuu Cubeydah ugu dar  
daarmay inuu qabto haddii isaga la dilo,  
kadib buu weeraray qaaday jeer isagiina la  
dilay, misna waxaa qaaday amiir labaad oo  
Abuu Cubeydah u dardaarmay, kiina waala  
dilay, mid kale ayaa qaaday isagiina la dil,  
jeer ay halkaas ku shahiideen 7 amiir oo  
iskaga kala dambaysay hoggaanka

kuwaasoo uu Abuu Cubeydah horey usii magacaabay haddii midi la dilo inuu midka kale hoggaanka qabto. Kadib waxaa qabtay amiirkii siddeedaad ee uu Abuu Cubeydah u dardaarmay, waxuuna ahaa Muthanna bin Xaarith bin Salamata As Sheybaani.

Waxaa la sheegaa in ay Doomah haweeneydii Abuu Cubeydah bin Mascuud ay ku riyootay riyo ah in ay dhacdadu ku noqon doonta mid bar bar dhac ah, markay arrintaas Muslimiintii maqleen bay daciifeen oo itaal darreeyeen, waxayna ku rajo weynayeen markii hore guul furasho iyo inay si ba'an u layaan cadawga, hase ahaatee niyad jabkoodii waxuu dhalay inay in badan oo kamid ah jabaan, in kaloo badanna ay webigii ku hafteen , dar kalena uu cadawgii laayey. Waxaa la sheegaa in maalintaas ay webiga ku hafteen ku dhawaad 4000 oo Muslimiin ah. Fa innaa lillaahi Wa innaa illeyhi Raajicuun.

Waxaa la sheegaa qofkii ugu dambeeyay ee Muslimiinta maalintaa iyada ah laga dila ama ka shahiida inuu ahaa Suliidh bin Qeys bin Camr bin Cubeydullaah bin Maalik bin Cadiyi bin Caamir bin Qanam bin Najaar Al Najjaari. Waxaa abti u ahaa Ascad bin



Zaraarah, hooyadiina waxaa la oran jiray Ragheybah bint Zaraarah bin Sacad bin Cubeydullaah.

Dhanka kale Muslimiintu maalintaa waxay iyaguna cadawgu ka dileen tiro badan oo waxay goobtaa dhigeen 6000. Markii uu jabka soo gaaray ciidamadii Muslimiinta bay buundadii isku cidhiidhiyeen, deetana ay jabtay, taasina waa tii dhashay inay in badan webigii ku hafteen. Kadib buu Muthanna daraf kamid ah buundadii istaagay oo cod aad u dheer ku qayliyey isagoo Muslimiintii la hadlayo, waxuuna amray inay tartiibsadaan jeer uu buundadu uga hagaajiyo, kadibana isaga iyo qaar kamid ah halyeeyadii Muslimiinta ayaa buundadii hagaajiyey oo dabeetana si fudud bay ku mareen.

Ciidamadii Muslimiinta intii sugnaatay maahe, kuwii kale waxay u qayb sameen kuwa iyagu jiha ay u socdaan garan waayey iyo kuwa toos u abbaaray dhankii Madiina iyo Amiirkii Mu'miniinta.

Warka dhacdadan waxaa magaallada Madiina geeyay oo ugu horeeyay Cabdullaahi bin Zeyd bin Caasim Al Maaziniyu oo isagu masjidka soo galay goor

uu Cumar mimbarka fuushanyahay oo uu dadka u khudbeynayey. Waxuu yiri:” Maxaa ku keenay Cabdullaahi ibnu Zeydoow!!? Waxuu yiri:” Amiirkii Mu’miniintoow! waxaa kuu yimid war dhab ah”. kadibna mimbarkii buu ugu korey oo si hoos ah warkii ugu sheegay.

Waxaa kaloo la yiraahdaa waxuu ahaa ninkii warka magaallada Madiina gaarsiiyey Cabdullaahi bin Yaziid bin Al Xuseyn Al Xadhmiyu, wallaahu Aclam.

Cumar bin Al Khaddaab ma uusan canaanan kuwii iyagu jabay ee ka dul dhacay Madiina, bal ee waxuuba ku qaabilay waji sami iyo soo dhaweyn isagoo yiri:” Waa aniga kan aad xaggiisa soo ciirsateen, Majuustiina Alle arrinkoodii waa ka shuqliyey”. Waxuu ula jeeday Furus oo ku xad gudubtay boqorkoodii Rustum oo misna mar kale soo celsheen oo ku lifaaqeen Al Feyruzaan, iyagiina ay u qabysameen labo qaybood.

Kuwii ka jabay Jassar iyagu waxay u baxsadeen dhankii Al Madaa’in, markaasuu Muthanna sii raacdeystay, kadib baa waxaa usoo baxay labo amiir oo kamid ah Faarisiinta iyo ciidan ay siteen, kadibna waa lasoo qafaashay labadoodiiba iyo dad badan

oo kamid kuwii ay wateen,  
dhammaantooduna kurka in laga ayuu  
Muthanna amray.

Kadib waxuu warqad u diray madaxdii  
Muslimiinta ee ku sugneed Ciraaq sida  
Bashiir bin Khassaasiyah iyo kuwa kale si  
ay gurmada ugu soo diraan, iyagiina way  
usoo direen, waxaa misna soo gaaray  
ciidankii uu Cumar bin Khaddaab horey ugu  
soo diray dhanka Abuu Cubeydah bin  
Mascuud oo uu hoggaaminayey Jariir bin  
Cabdullaahi Al Bujali oo ay la socdeen  
saadaaddii Muslimiinta iyo rag akhyaar  
ahaa.

Halkaa ayuu ciidan aruursi ka waday  
Muthanna jeer uu markii dambe helay ciidan  
culus.

Seyf bin Cumar waxuu yiri:” Dhacdadani  
waxay dhacday bishii Shacbaan, goor laga  
jooga dagaalkii Yarmuuk 40 casho,  
sanadkan dhexdiisa, yacni sanadka 13aad ee  
Hijriga.

Dhacdadii Buweyb

Madaxdii Furus ayaa waxay maqleen ciidan  
aruursiga Muthanna bin Xarith markaasay  
soo direen ciidan uu hoggaaminayo amiir la  
oran jiray Mahraan, waxayna isku heleen

labada ciidan goob la yiraahdo Buweyb una dhaw halka ay maanta tahay magaallada Kuufa, waxaana u dhaxeeyo kaliya webiga Furaat.

Kadib waxay yiraahdeen Faarisiintii:” Ama inoosoo gudba ama aanu idiin soo gudubno? Muslimiintii oo dhegahoodu ay ka guuxayaan waxii ku qabsaday dhacdadii Jassar ayaa waxay ku yiraahdeen:” Mayee idinku inoosoo gudbo”, markaasay soo gudbeen.

Ammintu waxay ahayd bishii Ramadaan ee sanadkan, markaas buu Muthanna amray ciidamadii Muslimiinta inay affuraan si ay ugu ad adkaadaan cadawga. Waxuuna dhisay ciidankiisii oo raayad raayad u xidhay isagoo qolo waliba raayad qaas ah u dhiibay, kadibna inta uu dhex qaaday ayuu koox waliba u dar daarmay oo ku booriyey jihaadka iyo sabar iyo sugnaan iyo inay ku dadaalaan aamusnaanta. Qowmku waxaa ku jiray rag halyeeya ah oo ay kamid ahaayeen Jariir bin Cabdillaahi Al Bujali iyo saadaaddii Muslimiinta.

Markaa buu Muthanna ciidankii la hadlay oo ku yiri:” Anigu waxaan takbiirsan doonaa (yacni oron doonaa Allahu Akbar!) saddex



goor ee diyaar garooba, marka afraad-na weerarka ku qaada”. Muslimiintiina waxay hadalkii Muthanna ku qaabileen maqal iyo adeecid. Markii uu Muthanna takbiirsaday takbiirtii kowaad bay Faarisiintii weerar culus soo qaadeen, waxaana dhex maray dagaal aad u kulul, markiina uu arkay Muthanna safalkii Muslimiinta oo dabcaya ayuu soo diray nin cod dheer ku qaylinaya oo dadkii ku booriyey jihaadka.

Markii ay muddadii dagaalku dheeraatay ayaa isaga Muthanna iyo asxaabtiisii waxay Alle ka baryeen inuu lib iyo guul ka siiyo cadaawgooda oo uga gargaaro. Kadib wuxuu Muthanna kaxaystay rag kamid ah halyeeyadii Muslimiinta oo weerar darani ku qaaday dhankii Mahraan oo durkiyey ciidankii midigta ee Furus, waxaana Mahraan dilay wiil kamid ah Carabtii Nasaareyda kana dhashay banii Taqlab, oo faraskiisiina ka furtay. Sidaa waxaa xusay Seyf bin Cumar.

Ibnu Isxaaq waxuu isaguna leeyahay:” Waxuu ahaa ninkii Mahraan dilay Al Mundir bin Xassaan bin Diraar Al Dhabyu, kaasoo waran la riday, kadibna Jariir bin Cabdullaahi Al Bujali baa madaxa ka

gooyey, markaasay isku qabsadeen hubkiisii, waxaase markii dambe qaatay Jariir bin Cabdullaahi Al Bujali.

Majuustii waa ay jabeen, markaasay Muslimiintiina firxadkoodii raacdeysteen oo ay laayeen, Muthanna bin Xaarithana wuxuu uga hor maray buundadii si aysan u gudbin oo Muslimiintu u laayaan. Maalintaa iyada ah iyo habeenkeedii ayay Muslimiintu raacdeysanayeen fiigoodii oo waxay helaanba laynayeen.

Waxaa la yiraahdaa:” Dhacdadaasi wixii ay dileen Muslimiinta iyo kuwii webiga ku qarqaday isku dar waxay noqdeen 100 000 (boqol kun) Falillaahil Xamdu.. Halkan waxay Muslimiintii ka qaniimeysteen qaniimo aad u tiro badan oo aan la soo koobi karin, kadibna bishaaradii iyo khumuskaa qaniimada ayaa waxaa loo diray dhanka amiirkii Mu’miniinta ee Cumar bin Khaddaab.

Dhanka kale Muslimiinta waxaa looga dilay dhacdadaan tiro badan, waxayna dhacdadani ahayd mid loogu gogol xarayo in laga takhalluso boqortooyadii Furas ee boqollaalka sano dunida ka talineysay. Muslimiintii waxay tamkiiniyeen dhul aad

istaraatiiji u ah oo ah nawaaxiga labada  
webi ee Dajlah iyo Furaat. Dhacdadan  
Buweyb ee iyadu ka dhacday dhulka Ciraaq  
waxay u dhigmataa dhacdadii Yarmuuk ee  
ka dhacday dhulka Shaam.

Furus oo Boqortay

Yazdajrid

Boqorkii hore ee Sheyriin ayaa reer Kisraa  
inta isku soo aruuriyey qol ku xiray  
dabeetana wada laayey raggoodii oo daayey  
dumarkoodii. Yazdajrid hooyadiis waxay  
kamid ahayd dadyowgaasi la soo qab qabtay  
ee iyagu la doonayey in wiilashooda iyo  
raggoodu la laayo, waxayna markaa  
wadatay wiilkeeda Yazdajrid oo markaasi  
kuray yar ahaa. Kadib bay si hoos ah  
abtiyaashii ugu yeeratay oo ka dalbatay inay  
wiilkeeda u qariyaan, iyagiina intay qaadeen  
bay deegaankooda la aadeen.

Markii ay dhaceen wixii dhacay ee aanu soo  
tilmaannay sida dhacdooyinkii Jassar,  
Buweyb iyo dhacdooyinkii lamidka ahaa, la  
dilayna wixii la dilay ee madaxdii Furus  
kamidka ahaa, iyo in weliba firxadkoodii  
raacdo lagu hayo oo dhul badan oo  
istaraatiiji ahina laga qabsaday ayay  
arrintaasi baaseysteen reer Furus. Waxay

garan waayeen halka ay cilidi ka jirto, goor ay sidaa yahiin ayay maqleen in uu Cumar soo diray Sacad bin Abii Waqaas iyo ciidama uu hoggaaminayo.

Markaasay madaxdoodii shir u fadhiisteen, waxayna keeneen labadii ugu sarreysay hoggaanka Furus ee kala ahayd Rustum iyo Feyruzaan, kadibna waxay ku dul akhriyeen dar daaran iyo goodis isku dhafan, waxayna ku yiraahdeen:” Haddaydaan u istaagin dagaalladani waanu idin dileynaa labadiinnuba”. Kadib qeyb kamid ah madaxda ayaa waxay keenen ra’yi ah in dumarkii reer Kisraa meel waliba la isaga yeero oo la weydiiyo tii hayso wiil reer Kisraa ah”.

Mid waliboo kamid ah dumarkii reer kisraa marka la weydiiyo inay dhashay wiil, way inkireysay iyadoo u baqayso in laga dilo. Sidaasi kama aysan suulin jeer markii dambe ay keeneen Ummu Yazdajrid iyo wiilkeedii Yazdajrid, markaasay wiilkeedii Yazdajrid boqreen isagoo 21 jir ah, waana wiilkii uu dhalay boqorkii hore ee Kisraa (boqor Shahrayaar), waxayna casileen Bowraan bint Kisraa, taasoo iyadu hoggaanka kula heshiisay markii hore



Rustum.

Reer Furus aad bay ugu farxeen boqrida  
Yazdajrid waxayna la hor istaageen hiil iyo  
hoo aan lala dhicin, waxayna madaxdii  
Furus warqado u dirsadeen goballadii  
dhulkooda si ay u maqlaan una adeecaan  
boqorka cusub, iyagiina raynrayn iyo  
riyaaqid ayay ku qaabileen. In badan oo  
dadkaasi kamid ah baana ballamahii ay  
horey Muslimiinta ula galeen ka baxay,  
iyagoo aaminsan inay awooddii Furus  
imminka soo laabatay, maadaama reer  
Kisraa dib loosoo celiyey. Tanina waxay  
noqotay mid ay ku kedsoomeen sidaynuba  
arki doonna hadduu Alle idmo.

Muslimiintii goobahaa kusugnayd baa dib  
loosoo riixay, markaasay iyagiina warqad u  
dirsadeen dhankii amiirkii Mu'miniinta ee  
Cumar bin Khaddaab iyagoo ogeysiinayo  
xaaladda sida ay tahay. waqtigaasi wuxuu  
ahaa dhammadkii sanadkan yacnii 13-kii  
Hijriga Bishii Dul Qacdah, markaasoo uu  
Cumar soo amray inay ku sugnaadaan  
darfaha dhulka Furus.

Sida dhabta ahi ee ay badi culimaayi Siirah  
qabaan, waxay tahay inuu Cumar diray  
Sacad sanadkii 14aad ee hijriyada, sida

aynu arki doonno Alle idinkii.

Imminkuna aanu u weecanno dhankaa iyo dhul furashadii Shaam, dhacdooyinkii sanadkan 13aad ee Hijriga.

Furashadii Dimashiq

Markii ay ciidamadii Muslimiinta furteen

Yarmuuk, kadib buu Khaalid ku dul

akhriyey ciidankii warqaddii ka timid

Madiina iyo dhankii Cumar, taasoo

caddeyneysay geeridii ku timid khaliifadii

Rasuulka (scw) ee Abuu Bakar iyo in uu

khilaafadii qabtay Cumar bin Al Khaddaab

iyo in weliba imaaradda Shaam masuul

looga dhigay Abuu Cubeydah bin Al-

Jarraax, Khaalid-na uu ku xigeyn u noqdo.

Haddaba markaas bay dhaqaaqeen Abuu

Cubeydah iyo Khaalid iyo ciidamadoodii oo

ay Maraj Sufur aadeen iyagoo qorashahoodu

ahaa in ay go'doomin ku sameeyaan

Dimishiq, Yarmuuk-na waxaa lagu dhaafay

fardooley uu hoggaaminayo Busheyr bin

Kacab, Goor ay ciidamadii Muslimiinta ku

suganyahiin goobta Maraj Sufur ayaa

waxaa u yimid khabar ah in uu cadawga

gurmad uga yimid dhanka Ximsa iyo in koox

tiro badan oo Ruumaan ahna ay iskugu

tegeen Fixli oo ka mid ah dhulka Falastiin

(goobta Ardul Ghowr). Waxuu markaasi Abuu Cubeydah kala garan waayey tii uu ka billaabi lahaa Dimishiq ama Fixli.

Markaas ayuu warqad u diray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab, taasoo uu kala tashanayo tii uu ku hor mari lahaa. Haddaba markaa ayaa waxaa timid jawaabtii Cumar oo uu soo amray in ay ka billaabaan Dimishiq, waayo waa xaruntii Ruumaanka iyo gurigii boqortooyadooda, waxuuna amray in uu Fixil u diro koox fardooley ah oo sii mashquuliso waxuuna yiri:" Haddii uu Alle idiin furo Fixli kahor intaan Dimishiq la furan, waa sidaanu jecleyn, haddiise Dimishiq aad hor furataan, uga teg Dimishiq masuul oo adiga iyo ciidankaada ku dhaqaaqa dhanka Fixil. Haddii aad Fixil furataanna adiga iyp Khaalid aada dhanka Ximsa, Camr iyo Shuraxbiilna ku dhaaf Urdun".

Seyf bin Cumar waxuu leeyahay:" Wuxuu Fixil u diray ciidan uu hoggaaminayo Camaarah bin Makhshiyi, waxuuna ka diray goobta Maraj Sufur, markaasay is heleen koox fardooley ah oo Ruumaan ah oo tiradoodu tahay 80000 ( siddeetan kun), dabeeto way furteen ka hor intaysan

Dimishiq furan. Gadaal ayaanse ka xusi doonnaa dhacdadii Fixli iyo ciddii hoggaaminaysay sida ay Mu'arrakheenta qaarkood kayiraahdeen, hadduu Alle idmo. Kadib Abuu Cubeydah waxuu diray ciidan uu madax uga dhigay Dil-Kulaac, waxuuna u diray inta u dhaxayso Dimishiq iyo Ximsa, si aysan wax gurmada ah u soo gaarin reer Dimishiq, misna waxuu diray ciidan kale oo uu u diray Falastiin iyo Dimishiq dhexdooda si ay iyana wax gurmada ah usoo gaarin reer Dimishiq. Dabadeedna waxuu ka dhaqaaqay Maraj As- Sufur isagoo kusii jeedo dhanka Dimishiq si uu go'doomin adag ugu qabto, waxuuna dhisay ciidankiisii isagoo dhaxda madax uga dhigay Khaalid bin Waliid, Camar ibnul Caasna labada dhinac mid kamid ah ayuu u dhiibay.

Ciidanka Farooleyda waxuu madax uga dhigay Cayaad bin Qanam Al Fihri, kuwa lugtana waxuu u dhiibay Shuraxbiil ibnu Xasana isaguna Abaa Cubeydah waxuu hoggaaminayey labada dhinac mid kamid ah. Kadib way dhaqaaqeen, oo dul degeen Dimishiq oo go'doomin daran ay kuqabteen, waxaana markaa Dimishiq madax ka ahaa boqor la oran jiray Nasdhaas bin Nasdhuus.



Ciidankii Khaalid waxay degeen dhanka bariga albaabka Keysaan, Abuu Cubeydana waxuu degay dhanka albaabka Jaabiyatul-Kabiir, Yaziid bin Abii Sufyaan iyo ciidan uu hoggaaminayeyna waxay degeen dhanka albaabka Jaabiyatus-Saqiir, Camr ibnu Al Caas iyo Shuraxbiil-na waxay degeen albaabadii kalee magaallada.

Waxay Maalintaa ciidamada Muslimiinta xireen manjaniiq oo ay rideen dabaabaat, waxayna go'doomiyeen go'doomin tii u darneyd, waxaana lasheegaa inay go'doomintaasi ku hayeen muddo 70 casho, waxaa kaloo la yiri muddo 4 bilood, mise 6 bilood ama waxaa kaloo la yiri 14 bilood, wallaahu aclam.

Reer Dimishiq way diideen inay soo baxaan, waxayna u gurmada dirsadeen boqorkoodii Hiriqal, si uu ugu soo gar gaaro ciidamo gurmada ah, hase ahaatee ciidamadii gurmada ahaa ee uu soo diray ma aysan soo gaarin, oo waxay soo dhaafi waayeen kuwii uu Abuu Cubeydah dhexda dhigay ee Dil Kulaac.

Markii ay reer Dimishiq yaqiinsadeen inuusan gurmada soo gaari karin, bay xaaladdu aad ugu darraatay, oo ay

daciifeen, Muslimiintiina go'doomintii bay sii  
adkeeyeen, waxana la galay waqtigii  
Jiilaalka oo qabow darani yimid, xaaladdiina  
ay Muslimiintii ku adkaatay, markaasuu  
Illaahay qadaray in wiil loo dhalo boqorkii  
magaalada, markaasuu xaflad heer sara ah  
sameeyay oo khamri la wada cabbay,  
markaasay wada daateen dadkii iyagoo  
wada sakraansan oo ay wada seexdeen.  
Amiirka ciidamadii fadhiyey albaabka  
Keysaan ee Khaalid bin Al Waliid wuxuu  
ahaa mid aanan seexan oo aan la seexinin,  
waxuu ahaa halyeey habeenada dagaalka  
soo jeedo. Waxuu dareemay daganaashaha  
caawo ka muuqda dhanka cadawga iyo  
shanqadh la aanta xaggooda, markaasuu  
damcay inuu war jeefo, hase ahaatee waxaa  
u dhaxeeyay gidaar aad u weyn iyo god  
meesha ka qodnaa oo biyo ah.  
Khaalid waxuu soo kaxaystay qaar kamid ah  
sanaadiidii iyo halyeeyadii ciidanka oo ay  
kamid ahaayeen Al qacqaac bin Camr iyo Al  
Macduur bin Cadiyi iyo qeyrkooda, waxayna  
soo dhex jibaaxeen toggii oo ay dabaal  
kusoo gudbeen, markiina ay soo gaareen  
gidaarkii, ayaa waxay tuurteen xargo oo ay  
ku qabsadeen biro meesha gidaarka ku

yaallay, markaasay ku koreen jeer ay dhinaca kale uga degeen.

Markaasay laayeen waardiyaashii goobtaa joogay iyo wixii meesha ka dhawaa oo dad ah, dabeetana albaabkii bay fureen, markaasay ku dhawaaqeen takbiir (Allaahu akbar) dabeetana waxaa yimid ciidankii Khaalid ee albaabka Keysaan fadhiyey markii ay soo galeen bay laayeen, wixii ay arkaanba oo magaaladi dhan dhex qaadeen.

Dadkii magaallada markay maqleen takbiirtii Muslimiinta ayay iyagoon waxba garaneynin u kala ordeen albaabadii, koox kastoo albaabkii Keysaan xaggiisa u oradaana ma aysan sii noolaan, oo waxaa la dilay dil kii u darnaan, waxaana ka shaqeeyay ciidamadii Khaalid bin Waliid, kuwii kalena ee dadkaasi meeshaa deganaa waxay u carareen dhankii albaabadii kale, markaasay Abuu Cubeyda iyo amaraa'di kale ka fureen oo ay heshiis ka dalbadeen, markaasay magaalladii heshiis kusoo galeen.

Waxayna bartama magaallada ku kulmeen Khaalid oo dhankiisa xoog kusoo furtay, markaasay ku yiraahdeen:” Raggu waanu la heshiinnay”. Markaasuu isagiina yiri:”

Aniguna xoog ayaan kusoo furtay oo wax

heshiis ahna ma ina dhex marin”. Halkii ayuuna kur goyntii cadawga kasii waday. Abuu Cubeydah ayaa la hadlay Khaalid oo u tilmaamay inuu dagaalka joojiyo maadama uu la heshiiyey dadka, Khaalidna waa uu maqlay oo adeecay. Madaxdii ciidamada Muslimiinta waxay ku kulmeen meel ay ku taallay kaniisad la oran jiray Al Maqsilaadh. Magaallada Dimishiq culimadu way isku khilaafaan, ma heshiis baa lagu furtay ama xoog? Waxaysa badankoodu ku kulmiyaan in Dimishiq lagu furtay bar heshiis, barka kalena xoog, waana sida ay badi qabaan culimada taariikhda wax ka qorta. Waxaa lagu xukmiyaa in barka Khaalid bin Waliid lagu furtay xoog, barka kalee madaxdii kalena lagu furtay heshiis. Haddaba sidaa iyada ahi magaallada waxaa ku yaallay 15 kaniisadood, oo ay ugu weyneed kaniisad la oran jiray Yuuxannah, labo qaybood ayaana loo qeybiyey Kaniisaddaasi Yuuxannah oo bar kamid ah waxaa laga dhigay masjid, barka kalena kaniisadnimadeedii ayay ku baaqi noqotay. Sidii kaniisadda loo kala qaybiyey ayaana magaalladii loogu xukmay in barkeeda lagu furtay heshiis barka kalena xoog iyo seyf.



U Diriddii Khaalid ee  
Dhanka Al Buqaac  
Kadib baa Abuu Cubeydah waxuu Al  
Buqaac u diray Khaalid, markaasuu seyf ku  
furtay. misna waxay goobta Ceynu Meysuun  
isku heleen ciidamo Ruumaan ah oo uu  
hoggaaminayo nin la oran jiray Sinaan oo  
waxaana dhex maray dagaal, halkaanna  
waxaa Muslimiinta uga shahiiday jamaaco  
badan, sidaa baana meeshaa mardambe  
loogu baxshay Caynush-Shuhadaa.  
Kadibana waa ay jabeen cadawgii  
Ruumaanka.

Waxuu Khaalid halkaa kula heshiiyey reer  
Baclabak.

Kadib Abuu Cubeydah waxuu magaalladii  
Dimashiq uga tegay Yaziid bin Abii  
Sufyaan, kaasoo isagu markii hore ku  
wajahnaa jihadeeda. Yaziid-na waxuu diray  
sirriyad ama wardoon uu hoggaaminayo  
Dixyah bin Khaliifah Al Kalbi oo uu u diray  
dhanka Tadammur si uu arrinkeeda dhan  
ugu tuuro, waxuu kaloo misna diray Abuu  
Zahraa Al Qusheyriyu oo uu udiray dhanka  
Bathaniyah iyo Xowraan, waxuuna ku  
furtay heshiis. Qaryooyinkii ku teedsanaa  
Dimishiq oo idil waxaa badi lagu furtay

heshiis, gacanta Yaziid bin Abuu Sufyaan. Khaliifah bin Khayaad wuxuu ka soo weriyey Cabdullaahi ibnu Muqiirah oo isaguna aabahiis kasoo weriyey inuu yiri:” Dhulka Urdun Shuraxbiil baa xoog ku furtay marka laga reebo Dabariyah oo uu ehelkeedii kula heshiiyey”.

Ibnu Isxaaq waxuu xusay in Baclabak iyo Ximsa la furtay sanadkii 14aad ee Hijriga bishii Dulqacda, laguna furtay gacanta Abuu Cubeydah bin Jarraax heshiis ahaan. Dhacdadii Fixli

Culimo badan oo kamid ah Culamaayi Siirah waxay xuseen in Fixil la furtay ka hor Dimishiq sidaynu soo tilmaannay, waxaase qabo inay Fixil ka dambaysay Furushadii Dimishiq Al imaam Abuu jacfar Ibnu Jariir Ad Dhabari, sidaana waxaa ku raacay Seyf bin Cumar Al Tamiimi sida ku sugan siyaaqadiisa oo ay kasoo weriyeen Abii Cuthmaan Yaziid bin Useyd Al Ghasaani.

Waxay soo min guuriyeen in markii la furtay Dimishiq lagu dhaafay Yaziid bin Abii Sufyaan, ciidankii kalena ay aadeen dhanka Fixil, waxaana ciidankan Fixil u baxay hoggaaminayey Shuraxbiil bin Xasana, ciidanka hore waxaa madax looga dhigay oo

hoggaaminayey Khaalid bin Waliid, kuwa midigtana waxaa hoggaaminayey Abuu Cubeydah bin Al Jarraax, dhanka bidixdana waxaa loo dhiibay Camr bin Al Caas, fardooleyduna Diraar bin Al Azwar (waxaa kaloo la sheegaa inuu Diraar kushahiiday dagaalladi aynu soo xusnay midkood). Ciidamada lugta waxaa hoggaaminayey Cayaad bin Qanam Al Fihri, guud ahaan ciidankaas oo idilna waxaa madax u ahaa Shuraxbiil bin Xasanah. Way dhaqaaqeen ciidamadan, waxayna abbaareen dhanka Fixli.

Markii ay Muslimiintii gaareen goobtaasi Fixli ee Ardul Qowr ayay Ruumaankii waxay isugu tegeen Beysaan, dabeetana waxay soo deeyeen biyahii dhulkaas oo iyagii iyo Muslimiintii kala dhex galay dhulkiina ka dhigay dhul dhiiqo badan oo cagtu qaban karin (waxaaba la sheegaa in sababtaasi darteed dhulkaas loogu baxshay Ardul Qowr, magacaasoo dhulkaasi markii dambe loogu yeeri jiray). Sidaynu soo xusnay guud ahaan ciidamada Muslimiinta waxaa madax u ahaa Shuraxbiil bin Xasana, gaalada Ruumaankuna waxaa hoggaaminayey Saqlaab bin Makhraaq,

markaa bay Muslimiintii degeen, waxay dhowraanna waa sidii ay arrini ku dambeyn lahayd oo Rabbi ayay talo saarteen.

Amiirkii ciidamadaasi Muslimiintuna waxuu ahaa mid digtoonni xad dhaaf ah qabay oo xitaa hurdadiisu ay yareeyd, sidaa si lamid ahina ciidamadii Muslimiintoo dhami iyaguna xadrigoodu taam buu ahaa.

Haddaba goor habeen ah bay Ruumaankii u maleeyeen inay Muslimiintu wada hurdaan, waxayna damceen inay soo dooxateeyaan oo wada laayaan, hase ahaatee waxay

Muslimiintii u wada boodeen mar qura sidii boodidda uu mar kaliya boodo nin. waxaana dhex maray dagaal aad u kulul oo ilaa subaxii socday, misna subaxaas illaa uu gabalkii ka dhacay ayuu sii socday, markiina uu dhulkii madoobaaday gudcurkii habeennaad dartii bay Ruumaankii jabeen oo amiirkoodii Saqlaabna laga dilay.

Muslimiintiina firxadkoodii bay sii eryadeen oo sii laynayeen jeer ay ka dul dhaceen biyahii ay markii hore iyagu soo daayeen, oo ay in badan oo kamidi ku harqadeen, darkaloo badan oo lagu qayaasay 80 000 ( Siddeetan kunna ) Muslimiintii baa laysay, Waxaa kaloo la sheegaa markii horeba inay



tiradoodu ahayd 80 000, waxaana yaraa intii ka bad baadday, halkaasina waxay Muslimiintii ka heleen qaniimo fara badan iyo maal cusul.

Abaa Cubeydah iyo Khaalid iyo intii la socotay baa markaa waxay u boqaalleen dhankii Ximsa siduuba amiirkii Mu'miniinta horey usoo amray, waxuuna Abuu Cubeydah Urdun masuul uga dhigay Shuraxbiil ibnu Xasana oo uu la socda Camr bin Al Caas. Kadib waxay go'doomin ku qabteen Beysaan jeer ay markii dambe dadkii deganaa u soo baxeen, waxaana dhex maray dagaal aad u weyn oo durtaba ay markii dambe heshiis dalbadeen, markaasuu kula heshiiyey mid lamida heshiiskii reer Dimishiq. Sidaa si lamid ahina Abul Acwar Al Sulami ayaa reer Dhabariyah kula heshiiyey.

Sanadkii | 14aad

Bilashadii sanadkani howlihii sidii hore waa ay ka fududaadeen, waxaanna soo qaadan doonnaa waxyaabahihii dhacay inagoo marba qaadaa dhigi doonno dagaalladii kasocday labada dhinac (Furus iyo Ruum). Si ay markaasi inoogu fududaato inaanu fahamno qaabkii dhacdooyinka, anagoo

marka mid qaadan doonno ayaa waxaan hadda ku hor mari doonnaa dagaalladii iyo dhacdooyinkii ka socday dhanka Furus oo sanadkii hore inoogu joogay ”BOQRIDDII YAZDAJRID”.

Billogii sanadkan ayay ahayd markii uu amiirkii Mu’miniinta ee Cumar bin Khaddaab uu dadka ka dhex istaagay isagoo ku boorinayo jihaadka iyo dagaallada ka soconaya dhulka Ciraaq. Taasina waxay ahayd ka gadaal markii laga soo guddoomay muwaasimtii xajka ee sanadkii 13aad iyo kadib markuu maqlay wixii ciidamadii Muslimiinta kusoo gaaray dagaalkii Jassar iyo dilkii amiirkii ciidamadaas ee Abuu Cubeydah bin Mascuud Illaahay ha u naxariistee, iyo in waliba madaxdii Ciraaq badidoodii laga soo saaray goobahii ay horey u qabsadeen,

In badan oo kamid ah dadkii jizyada dhiibayay ee horey Muslimiinta heshiiska ula galayna ay ballamahii ka baxeen, iyagoo ku kadsoomay boqorkii cusubaa ee ay Furus caleema saaratay, sidii isagoo usoo celin doono saldanadoodii iyo awooddoodii hore, oo uu hor istaagi karo huganka iyo guuxa Islaamka iyo ehelkiisa.

Waasidaase waxay markaasi madaxdii Muslimiinta ee dhulkaasi ku sugneeyd warqad u dirsadeen dhanka amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab sidaynuba soo xusnay, taasoo ay ku ogeysiinayeen xaalladu sida ay tahay iyo in dhulal badan laga soo saaray, waxayna ka dalbadeen inuu gurmada culus u soo diro. Sababihii dhaliyey inuu Cumar horaantii sanadkan dadka ku booriyo jihaadka dhulka Ciraaq ayaa waxay ahaayeen kuwaas aanu soo xusnay.

Markaa iyada ah buuna la dhaqaaqay ciidan culus oo uu isla isagu naf ahaantiisu hoggaaminayo. Ammintu waxay ahayd maalintii kowaad ee bishii Muxarram ee isla sanadkan, waxuu magaalladii Madiina kala dhaqaaqay ciidan culus oo uu isagu hoggaanka u hayo, magaaladii Madiinana waxuu ku dhaafay Cali bin Abii Dhaalib, waxuuna la dhaqaaqay ciidankiisii jeer uu gaaray goob la yiraahdo Suraar oo ah meel biyo leh, halkaas ayuuna dejiyey ciidamadiisii.

Waxaa la socday ciidankaas halyeeyadii iyo culimadii saxaabada oo ay kamid ahaayeen Cuthmaan bin Cafaan, Sacad bin Abii

Waqaas, C/Raxmaan bin Cowf iyo kuwa kale. Cumar waxuu amray in la addimo salaadda oo jamaaco lagu tukado, kadib buuna dadkii ogeysiiyey shir loo wada dhan yahay oo uu kala tashanayo inuu baxo iyo in kale, magaalladii Madiinana waa uu u cid diray si Cali loogu yeero oo uu showrada uga qayb qaato.

Markii uu Cali yimid showradiina la billaabay badi saxaabadii waxay ku taliyeen in la baxo oo amiirka Mu'miniintuna uu ciidanka hoggaamiyo, raggii ra'yigaasi sida weyn ugu dheгнаa waxaa kamid ahaa Cuthmaan ibnu Cafaan iyo qaar kamid ah odayaashii saxaabada, hase ahaatee C/Raxmaan bin Cowf baa isagu taa caksigeeda la yimid, waxuuna isagu ra'yi ahaan qabay in amiirka Mu'miniinta uusan bixin oo uu booskiisa cid kale diro, waxuuna yiri:

Anigu waxaan arkaa (amiirkii Mu'miniintoow!) haddii lagu jebiyo, iney jab ku tahay oo ay taasi daciifin doonta Muslimiinta dunida oo idil, haddaba dir booskaada nin kale oo adigana iskaga laabo magaallada Madiina". Cumar bin Khaddaab ra'yigaas buu qaatay, markaa bay dadkii lideen ra'yigii C/Raxmaan bin Cowf oo ku



tilmaameen mid sahiifnimo ah.

Waxuu yiri Cumar (isagoo ibnu Cowf la hadlayo):” Oo yaay kula tahay inaan dhulka Ciraaq u dirno?

Waxuu yiri:” Waad heshay?

Waxuu yiri:” Oo waayo?

Waxuu yiri:” Asad fii Baraathinih Sacad bin Maalik (Sacad bin Abii Waqaas).

Kadib waxuu Cumar qaatay ra’yigii iyo fikirkii C/Raxmaan bin Cowf, ciidamadiina waxuu u dhiibay Sacad bin Abii Waqaas oo uu u dardaarmay. Waxaa kamid ahaa dardaarankiisii :

Sacad ibnu Uheyboow!! (Uheyb bin Cabdimanaaf waa awoowga Sacad bin Abii Waqaas iyo adeerka Aamina bint Wahab bin Cabdimanaaf- Nebiga (scw) hooyadiis) yaysan ku kedin in lagu yiraahdo waa abtigii Rasuulka (scw) iyo saaxiibkiis, Illaahayna xumo kuma tir tiro xumo kale, ee waxuu ku tir tiraa xumuhu wanaagga, Majirto qof isago iyo Alle Sarreeye uu ka dhaxeeyo wax xiriir ah, oo aan ka ahayd mid ku sugan daacadda Alle, dadka kooda shariifka iyo kooda daciifka ahba daatada Alle waa ay u siman yahiin, Allaah waa Rabbigooda, iyaguna waa addoomadiisa.

Amarka eeg Sacadoow! kii aad ka aragtay Rasuulkii Alle (scw) tan markii lasoo diray jeer uu naga faaruqay, oo laasim markaa amarku waa isagee, tani waa waanadeydii aan kuu dardaarmayey oo haddii aad ka weecato oo ka dacal dhacdo, markaa waxaa burayo camalkaadii oo waxaadna noqoneysaa mid khasaaray”.

Markii uu damcay Sacad inuu dhaqaaqo ayuu misna Cumar yiri :” Sacadoow! waxaad u tegi doontaa arrin kulul (dagaal ) ee ku sabir oo hakugu kulanto cabsida Allaah. Ogoow cabsida Allaah waxay kulmisatay laba arrimood (oo kala ah) ku sugnaashaha daacaddiisa iyo ka fogaanshaha macsidiisa. Daacaddiisu waa in loo carooda yacni la naco adduunyada oo la jeclaado aakhiro. Caasinnimaduna waa in la jeclaado adduunyada oo loo carooda aakhiro, yacni la naco.

Sacad wuu dhaqaaqay waxuuna abbaaray dhankii Ciraaq isagoo ay la socdaan duulkiisii, markiina uu gaaray goobta Nahru Zaruud oo uu ku dhawyahay inuu la kulmo Al Muthanna bin Xaaritha oo midiba midka kale uu u xiisho qabo, buu Muthanna geeriyooday, waxuuna u geeriyooday

dhaawac kasoo gaaray dagaalkii Jassar ee uu ku geeriyooday Abuu Cubeydah bin Mascuud Al Thaqafi.

Waxuu Muthanna ciidamadii Ciraaq usii dardaarmay inuu masuul u noqda Bashiir bin Khasaasiyah. Markii ay Sacad gaadhay geerida Muthanna buu u raxmad dalbay oo u duceeyay, waxuuna guursaday haweeneydiisii uu ka tegay oo la oran jiray Salmaa.

Sacad markii uu tegay Ciraaq amiir kastoo kamid ah amiiradii ciidamada Muslimiinta ee dhulkaasi ku sugneyd waxay wada hoos yimaadeen xukunkii Sacad oo geyigaas Ciraaq oo idil isaga ayaa amiir ka noqday, siduuba Abaa Cubeydah bin Al Jarraax oo isaguna tobankii jannada loogu bishaareyay kamid ahaaba uu masuul uga ahaa Shaam oo idil. Intaa Dabadeed waxuu Cumar sacad u soo diray ciidamada gurmada ah, waxuuna markii dambe la kulmay ciidamadii Furuus maalintii Qaadiisiyah isagoo amiir u ah 30 000 ama 36 000 dagaalyahanno ah.

Cumar waxuu yiri:” Illaah baan ku dhaartaye waxaan isku dhufan doonaa boqorrada Cajamta (Furus) iyo boqorrada Carabta”. Kadibna waxuu Cumar soo amray

Sacad qaabkii uu sacad u dhisi lahaa ciidanka weerari lahaa Faarisiinta, waxuuna amray in qabiilo waliba oo kamid ah ciidamada Muslimiinta laga xulo rag aqoon dheer u leh tolkooda oo markaas koox waliba la hubiyo tabtooda, kadibna la aado Qaadisiyah.

Sacad sidii buu yeelay waxuuna dhisay ciidamadiisii isagoo ku dhisay amarka amiirkii Mu'miniinta midig, bidax gaadada dambe, ciidamada lugta iyo kuwa fardooleyda iyo kowa horeba. Waxuu Cumar usoo doortay qaadinnimada ciidankaas Cabduraxmaan bin Rabiicah Al Baahili oo loo yaqiinnay Dun-Nuun, isaga ayaana loosoo xil saaray qaybinta qaniimada iyo fayga. Daaciga ciidanka iyo kii wacdinayey mar walibana waxaa loo xilsaaray Salmaan Al Faarisi. Qoridda ciidanka iyo qaniimooyinkana waxaa loo xilsaaray Ziyaad bin Abii Sufyaan.

Ciidankan waxaa ku jiray 300 iyo dhowr iyo toban saxaabi, 70 iyo dhowr kamid ahi waxay ahaayeen asxaabtii ka qayb gashay dagaalkii Bader, waxaa kaloona la socday 700 oo kamid ah dhashii saxaabada.

Kadib Cumar waxuu soo amray inuu Sacad



ku dhaqaaqo Qaadisiya, waxuuna amray inuu qaado jidka oo wixii uu helaana uusan u gaban oo aysan cabsi gelin tira badni kastoo ay cadawgu ku suganyahiin. Misna waxuu usoo diray warqad kaloo uu ugu dardaarmayo ciidamada Muslimiinta iyo amiirkooda Sacad, waxuuna u tilmaamay inuu sabro sabar baliq ah oo uu Alle hiil iyo gargaarba weydiisto iyo in uu badiyo qowlka laa xowla walaa quwati illaa Bil-laah. iyo in uu mar waliba warqad usoo diro isagoo ka codsaday inay warqaddaasi noqota mid u hadleyso sida isagoo ( Cumar ) uuba u jeedo ama ay muuqdaan ciidamada dhulka Ciraaq, waxuu Cumar ka codsaday Sacad inuu u sifeeyo halka ay Muslimiintu marayaan iyo halka ay dagayaan intuba oo maalin waliba iisoo dir warqad ayuu yiri. Markaa buu Sacad u diray amiirkii Mu'miniinta warqad uu uga warramayo halka ay kusuganyahiin isaga iyo ciidamadiisii iyo in ay is heli doonaan Rustum arrinkuna uu Alle ogaal badan yahay sida uu xaal ku dambeyn. Cumar ibnu Al Khaddaab markay u tegtay warqaddii Sacad ee ka warrameysay xaaladdii Muslimiinta ayuu u duceeyay

ciidanka si guud, gaar ahaanna Sacad buu u duceynayey har iyo habeenba isagoo Alle uga baryayey inuu nasri iyo guul ka siiyo cadawga. Sacad horey buu u socday isagoo ku jira dalabka Qaadisiya.

Markiina uu marayey meesha la yiraahdo Al Cudeyb baa Muslimiintii waxaa ku soo baxay jamac Faarisiin ah oo uu hoggaaminayo Sheyrizaad bin Ardaaweyh, halkaas bayna Muslimiintii ku jibiyeen cadawgii Majuusta oo ay ka qaniimeysteen qaniimo badan, kadibna qaniimadii buu Sacad intuu qeybiyey ayuu khumuskiina u diray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar ibnu Al Khaddaab. Muslimiintii aad bay ugu farxeen guushaas ay gaareen, waxayna u noqotay rayn rayn iyo farxad iyo niyad dhis.

Kadib waxuu diray siriyad yacni wardoon uu madax uga dhigay Qaalib bin Cabdullaahi Al-Leythi.

Dagaalkii Qaadisiyah

Kadib Sacad wuu dhaqaaqay waxuuna degay Qaadisiyah oo uu diray siriyaad iyo wardoonna, waxuuna halkaas ku sugnaa bil uusanna cidi la kulmin kamid ah Faarisiinta, markaa buu Sacad warqad u diray amiirkii Mu'miniinta Cumar bin Khaddaab taasoo uu

ku ogeysiinayo xaaladda. Reer miyigii iyo ari raacyadii Furus dhulkoodii bay u yaabeen markay arkeen wardoonnadan galab iyo subax dul heebaabayo deegaannadii ay xoolahooda ku raacan jireen, markaa bay u tegeen boqorkii Yazdajrid oo ay ku yiraahdeen:” Haddaydaan naga kaafinin kuwan (Muslimiinta) oo aydan inooga fillaanin waxaan u dhiibeynaa waxa gacmahayaga ku jiroo idil, qalcadahana waan ugacan gelineynaa”.

Kadib Faarisiintii shir bay u fadhiisteen, waxayna isku raaceen in la diro Rustum iyo ciidan uu hoggaaminayo, markaa buu boqorkii Yazdajrid u cid diray Rustum si uu ugu yimaado, markiina uu u yimid waxuu amray inuu ciidanka hoggaamiyo oo Muslimiinta uu ka hor tego hase ahaatee Rustum waa uu ka cududaartay arrintaas mana ahayn ra’yigiisa ra’yi dagaal waxuuna yiri :” Arrinkaan aad waddaan maaha ra’yi dagaal, in Carabta ciidama la iskaga daba diraayi waxaa uga adag in hal mar loo diro ciidan culus oo mar qura jebiyo”.

Boqor Yazdajrid wuu diiday waxaan ka ahayn ra’yigiisii ahaa in uu ciidankaasi

hoggaamiyo Rustum, markaa buu Rustum isku diyaariyey bixid iyo inuu aado dhankii Muslimiinta. Sacadna waxuu diray wardoonno uu u diray magaallada Xiirah, wardoonnadii waxay usoo tebiyeen in boqorkii Furus ee Yazdajrid uu amray ciidan culus si ay hal mar u jebiyaan Muslimiinta iyo inuu weliba ciidankaas madax uga dhigay Rustum bin Farakhzaad Al Armani oo uu misna u diyaariyey ciidama kale oo gurmada ah.

Markaa buu Sacad warqad u diray amiirkii mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab uu ku ogeysiinayo arrintaas, markaa buu Cumarna soo diray warqad kale oo uu leeyahay:

Yaaysan ku kurbo iyo cabsi gelin waxa kaaga imanayo xaggooda (cadawga) ee Alle kaalmo weydiiso oo isaga talo saaro, una dir xaggiisa (Rustum) nin (ciidamada Muslimiinta kamid) ah oo indheer garad ah oo ra'yi u saaxiib ah, si uu xagga Alle ugu yeero, Alle baana yeelaya yeeriddiina aad u yeereysaan mid itaal darri ku riddo (iyaga Furus) oo dufeyso, maalin walibana iisoo qor warqad".

Rustum wuu soo dhawaaday waxuuna ciidankiisii dejiyey goob la yiraahdo



Saabaadh, markaa buu Sacad warqad u diray amiirkii mu'miniinta Cumar bin Khaddaab uu ku leeyahay:" Rustum waxuu soo degay Saabaadh isagoo la yimid fardo iyo maroodiyaal uu nagu gilgilayo, waxbase xaggayaga oo aan u aragno majirto, aan ka ahayn inaan jeclaaday inaan mar waliba kula socdsiiyo xaaladda".

Rustum waxuu dhisay ciidamadiisii isagoo ciidankiisa hore oo 40 000 ah madax uga dhigay Jaalinuus, ciidanka midigtana waxuu madax uga dhigay Hurmuzaan, ciidanka bidixdana Mihraan bin Bahraan waxayna ahaayeen 60 000, ciidanka dambena waxuu madax uga dhigay Bandaraan waxayna ahaayeen 20 000. Seyf bin Cumar waxuu leeyahay:" Ciidamadiisoo idilba waxay ahaayeen 80 000.

Werin kalena waxaa kusugan inuu Rustum la yimid maalintaa 120 000 ciidan ah oo ay raacsanaayeen 80 000 gurmada ah (waa sida ay culimada mu'arrakhiintu badidoodu rajaxeen) oo uu sitay 33 maroodiyaal ah, waxaa kamid ahaa maroodiyaashaasi mid cad oo uu lahaa Saabuur, waxuu ahaa maroodigii ugu weynaa maroodiyaasha oo hor kacayey ama hoggaaminayey.

Kadib Sacad waxuu diray jamaaco kamid ah saadaaddii Muslimiinta oo ay kamid ahaayeen: An Nucmaan bin Muqarrin , Furaat bin Xayaan, Xandhalah bin Rabiic At Tamiimi, Cudhaarid bin Xaajib, Al Ashcat bin Qeys Al Kindi, Muqiirah bin Shucbah Ath Thaqafi, iyo Camr bin Macdiyakrib Az Zubeydi. Raggani waxay ahaayeen rag karmeedyadii ciidankaa Muslimiinta, waxaa loo diray si ay Rustum ugu yeeraan xagga Allaah Sarreeyo iyo Islaamka.

Markay utageen Rustum baa waxuu ku yiri:” Oo maxaa idin keenay? Waxay yiraahdeen:” Waxaanu u nimmid ballantii uu Allaah inooga kiin qaaday ee ah qaadashada dhulkiinna, iyo inaan qafaallano dumarkiina iyo carruurtiinaba oo aan weliba qaadanno maalkiina, arrintaasina innagu si dhab ah baanu u hubnaa”. markaas ka hor buuna Rustum riyo arkay , taasoo ahayd : Malag Samada kasoo degay oo aruurshay hubkii Furus oo u wada dhiibay Muxammed ( (scw) ) oo Muxammadna uu ku wareejiyey Cumar bin Khadaab.

Sida uu xusay Seyf bin Cumar, Rustum wuu ka warwareegayay inuu la kulma Sacad bin

Abuu Waqaas iyo Ciidanka muslimiinta , waxayna noqotay markii uu Rustum kasoo baxay caasimadiisii Al Madaa'in illaa iyo intii ay isku heleen muslimiinta goobta Qaadisiya muddo afar bilood ah. intaasna wuu diidanaa dagaal uu la galo muslimiinta, habeen walibana intii muddadaas lagu jiray, marna wuu u goodin muslimiinta, marna wuu sasabi oo waxuu lahaa wax baan idin siin waan idin arrad tiri, midkiin walibaana daraahiim ( lacag ) baan siini sanadka markii la gaarana intaas in la mid inoogu imaada , iyo eraya kaloo lamid ah isagoo raba inay ka laabtaan dhulka Furus.

Markii ciidanka isku soo dhawaaday ayuu Sacad diray nin kamid ah ciidamada fardooleyda ee muslimiinta si uu akhbaar uga keeno nimanka majuusta ah , waxuuna ahaa ninkaas uu diray Dhuleyxa bin Khuweylid Al Asdi, kaasoo ahaa ninkii Nebinimada sheegtay hadana toobad keenay oo wanaagsanaaday. Waxuuna Dhuleyxa raad weyn ku lahaa furashooyinkii Dhulalka Furus. Dhuleyxa waxuu soo qabtay nin kamid ah majuusta oo uu u keenay Sacad ninkii markuu arkay geesinimada Dhuleyxa

iyo ciidankii uu kasoo dhex qabtay intuu dhamaa, ayuu islaamay markii dambe.

Waxuu ninkaas markii su'aal la weydiiyaba ku mashquulsanaa oo uu ka sheekeynayay geesinimadii Dhuleyxa bin Khuweylid iyo tirada ciidanka uu kasoo dhex qabtay intuu la ekaa. Markaasuu Sacad ku yiri:” War inaga daa taase inooga warran Rustum a, markaasuu yiri:” Waxuu sitaa 120 000 in lamid ah oo gurmada waa u diyaar, Intaas kadib ayuu Rustum soo cid dirsaday isagoo ku leh Sacad: ii soo dir nin caqli leh oo wax yaqaan, si uu ula naqaasho yacni uu la dooda, markaa bay ahayd markuu Sacad u diray Muqiirah bin Shucbah.

Markii uu Muqiirah u tegay, ayaa waxuu Rustum guda galay inuu yiraahdo:” Waxaad tahiiin deriskayaga waana idin wanaajin jiray oo wax xumaan ah idima soo gaarsiin jirin ee haddaba ku laabto dhulkiinnii, una diidi mahayno tijaaradiinna inay dhulka yaga timaaddo.

Waxuu Muqiirah ugu jawaabay:” Ma nihiinagu kuwa raadinayo adduun, kaliya hammiga nagu iyo dalabkeennu waa aakhiro, Illaah baa waxuu inoo soo diray Rasuul uu ku yiri: Waxaan kooxdan



(Muslimiinta ahi) ku salliday cid kastoon diinteydan diin ka dhiganin, iyaga ayaana uga cad goosanaya, guul ayaanna dushooda yeeli doonaa intay kusugan yahiin (Muslimiinta) diintan. Waa diinta xaq ah oo aysan jirin cid ka leexato illaa Alle wuu dulleeyaa, ciddii qabsataana Alle wuu cizeeya”.

Markaa buu Rustum yiri:” Oo maxay tahay diintu?

Waxuu Muqiirah yiri:” Amaa tiirka aysan ka ansaxmeyn la’ aantiisu waa qiridda inuusan jirin Alle la caabbudo oo aan ka ahayn Alle kaliya, Muxammedna ( (scw) ) uu yahay Rasuulkii Alle (scw), iyo in lagu qanco waxii uu xag Alle kala yimid”. Waxuu yiri

Rustum:” Oo maxaa ka wanaag badan? Oo maxaa kaloo xiga hadana? Waxuu yiri:” Iyo in laga saaro is addoonsiga ay addoomadu is addoonsadaan oo addoonnimadu ay u ahaato Alle oo kaliya ( macnaha isaga oo kali addooma loo noqda oo la caabbudo ) ”.

Waxuu yiri:” Oo tanna waa wax wanaagsan, maxaa xigga haddana? Waxuu yiri:” Dadku waa ilmo Aadam iyo Xawaa, waana walaalo dhanka aabaha iyo hooyaduba”. Waxuu yiri:” Tanna waa mid wanaagsan”.

Kadib waxuu Rustum yiri:” Bal ka warrama haddii aan diintiina soo galno maka laabaneysaan dhulkayaga? Waxuu Muqiirah yiri:” Haa Wallaahi, una iman mayno wax aan ganacsi ama dan kale ka ahayn dhulkiinna”. Waxuu yiri Rustum:” Tanina waa mid wanaagsan”.

Markii uu Muqiirah tegay buu Rustum uga sheekeeyay dadkii madaxda tolkiisa wanaagga Islaamka uu leeyahay iyo waxii dood isaga iyo Muqiirah dhex martay, hase ahaatee waxay ku qaabileen diidmo daran inay qaataan Islaamka. Kadib Rustum waxuu dalbaday in nin kale loosoo dira Markaa buu Sacad waxuu soo diray nin kale si uu ula soo dooda Rustum, waxuuna ahaa ninkaasi halyeygii weynaa ee Ribciy bin Caamir bin Khaalid bin Camr oo kamid ahaa halyeeyadii Muslimiinta. ( Cumar bin Khaddaab baa gurmada ahaan ugu soo diray Muthanna bin Xaarith markuu dhulka Ciraaq masuulka ka ahaa ).

Goobtii uu Rustum fadhiisan jirey waxa lagu qurxiyey xariir, diibaaj, iyo murjaan iyo waxyaaba kaloo lamid ah, isagiina waxay u dhigeen sariir dahab ah oo ay ku qurxiyeen wiqyado iyo noocya badan oo kamid ah

alaabaha quruxda, Rustumna waxuu ku fadhiistay sariirtii dahabka si uu u qaabilo waftiga kaga imanayo dhanka Muslimiinta. Ribciyi waxuu ku lebbisan yahay dhar suuf ah oo aan qurxaneyn, waa dharkii reer Xijaas lagu yaqiinnay, waxuu kaloo wataa seyf iyo waran iyo faraskiisa oo kaliya ( faras gaaban ).

Kamuunan suulin inuu faraskiisa saarnaa jeer uu yimid daraf kamid ah gogashii weyneed ee jidkiisa loogu goglay, ula jeedaduna waxay ahayd in Muslimiinta la indho sarcaadiyo markay dhaldhalaalkaas arkaan oo inta wax yar la siiyo ay sidaa dhulkoodii ugu laabtaan, maxaase dhacay? Ribciyi wuu ka degay faraskii oo waxyaabahii la goglay mid kamid ah ayuuba faraskiisii ku xirtay, kadibna hubkiisii ( warankii iyo seeftii ) buu lasoo galay isagoo ku jeex jeexayo katiifadihii xariirta ee ay wareen reer Furus.

Faarisiintii baa ka dalbatay inuu dhigo hubka, waxuuse ugu jawaabay:” Anigu idiinma iman oo idinma soo raadsanin ee waxaan imid markaad ii yeerateen, haddaba igu daayo sideydaan ( anigoo hubkeyga sita ) ama aan iska laabto”. Rustum baa

markaa yiri:” Daayo ha ii yimaadee”. Markaa buu soo galay isagoo warankii ku mud mudayo xariirtii la goglay, illaa uu kasoo gaaray golahii uu Rustum fadhiyey. Rustum baa hadalkii billaabay oo waxuu yiri:” Maxaa idin keenay ? Waxuu Ribciyi ku jawaabay:” Waxaan u nimid inaan ka saarno ciddii doonta is addoonsiga ay addoomadu is addoonsanayaan oo aan addoonnimada u saarno Alle xaggiisa, iyo inaan ciriiriga dunida ka saarno oo aan u saarno ballarkeeda, iyo inaan ka saarno diimanka farada badan oo aan u saarno cadaaladda Islaamka, Ruuxii taa naga yeelo waan ka yeeleynaa oo waanna ka laabaneynaa, ruuxiise diida waanu la dagaallameynaa jeer ay ka fusho ballantii Alle naga qaaday?

Waxuu yiri Rustum:” Oo waa maxay ballanta Alle? Waxuu yiri:” Waa inuu galayo Janno ruuxii ku dhinta dagaalka lala galay kuwa diiday diinta Islaamka ee ka hor yimid, iyo guul kuwii haray”. Waxuu yiri Rustum:” Runtii hadalkiinnu waan dhageystay ee dib manoogu dhigeysaan arrinkaan jeer aan eegno xaalku oo aad idinkuna eegtaan?



Waxuu yiri Ribciy:” Haah! immisa ayaad dooneysaa (inaan dib kuugu dhigo si aad uga soo fiirsataan) maalin ama labo maalin?

Waxuu yiri:” Mayee!! illaa aan u cid dirsanno dadkayagii ra’yiga u saaxiibka ahaa iyo madaxdii tolkayaga”.

Waxuu yiri Ribciyi:” Nooma jideynin Rasuulkii Alle (scw) inaan u sugno cadawgayaga kadib markaan la kulunno wax ka badan saddex casho, ee fiiri arrinkaaga iyo arrinka qowmkaaga, oo kala dooro mid kamid ah saddexdii:

1. Jizyo,
2. Islaannimada ama
3. dagaal

Markay kuu dhammaado muddada (saddexda casho ah.

Waxuu yiri Rustum:” Oo ma seydkoodii (Muslimiinta) baad tahay? Waxuu yiri:”

Maya, laakiin Muslimiintu waa sida jir qura kooda ugu hooseeya ayaana magan gelin kara kooda ugu sarreeyo”.

Rustum hareeradiisa waxaa markaa isugu yimid madaxdii reer Furus ee lasocotay, markaasuu ku yiri:” Oo waligiin ma aragteen qof ka hadal qurxoon oo ka cizi iyo sharaf badan ninkan (Ribciyi) ? Waxay ku

yiraahdeen:” Alleynu ka magan galnay inaad u iilato waxa kan aad u jeeddo oo aad diintaada uga tegto, oo ma waadan arkeynin dharka uu sito? Markaasuu Rustum yiri:”

Hoog idinku dhacyee ha eegina dharkiisa ee fiiriyo ra’yigiisa, hadalkiisa iyo hab dhaqankiisa, sideeduna Carabtu maba daneeyaan dhar iyo cunto toona”.

Maalintii labaad ayuu Rustum soo cid dirsaday si nin kale loogu soo diro, markaa buu Sacad u diray Xudeyfah bin Muxsin oo sidii Ribciyi oo kale ula soo hadlay. Maalintii saddexaadna waxaa loo diray Muqiirah bin Shucbah oo siduu ula hadlayey ku xeel dheeraaday hadalka waqti dheer bayna wada hadlayeen oo ay wada doodayeen, waxaana kamid ahaa hadalladii dhex maray sidan:

Rustum ayaa Muqiirah ku yiri:” Miithaalka loosoo qaadan kara soo gallida aad dhulkayaga soo gasheen waa sida duqsi arkay malab oo yiri: Yaa i gaarsiiya malabkaas oo markaa heli doono 2 Dirham? Markii uu ku dhex dhacay oo uu ku maanshoobay ayuu damcay inuu ka baxo, markaasuu awoodi waayey oo misna yiri: Yaa iga saaro oo heli doona 4 Dirham?

Sidoo kale miithaalkiinnu waa sida dawaco itaal daran oo ku jirta god ku yaal beer, markii uu arkay ninkii beerta lahaa itaal darrideeda buu u naxariistay oo iskaga tegay.

Markii ay cayishay bay wax badan ka fasaadisay (xoolo iyo beerta iwm bay ka cuntay) Markaa buu la yimid ciidankiisii oo soo kaxaystay wiilashiisii si uu uga saaro, hase yeeshee way awoodi waysay cayil dartii markaa buu dilay, haddaba sidaa oo kale ayaad uga bixi doontaan dhulkayaga”.

Kadibna caro darteed buu Rustum la sii jeestay oo cadceeddii intuu ku dhaartay buu yiri:” Berritoole baanu idin layn doonnaa”.

Waxuu Muqiirah yiri:” Waad ogaan doontaa”.

Markaasuu Rustum yiri:” Waxaan amray in la idin arrat tiro oo dhar la idiin siiyo, amiirkiinuna sidoo kale ayaan amray iyo in lasiiyo 1000 Diinnaar iyo dhar iyo gaadiid, ee innaga noqdo”. Markaasuu Muqiirah yiri:” Oo ma kadib markii aan itaal darreysiinnay boqortooyadiinnii baa oo aan weliba daciifinnay awooddiinnii? Muddo ayaanu joogi doonnaa dhulkiinna oo aan idinka qaadi doonnaa jizyo idinkoo

dulleysan, waxaadna inoo noqon doontaan addoomo”. Markaa buu misna Rustum markale caro darteen la sii jeestay. Taa ka hor intuusan dagaalku dhicin waxuu Sacad diray rag kamid ah ciidankii Muslimiinta, kuwaasoo uu u diray dhanka boqorkii Furus boqor Yazdajrid si ay xagga Alle iyo diinta Islaamka ugu yeeraan. Markay u tegeen boqorkii bay ka idin dalbadeen inay u galaan, markaasuu isagiina u idmay inay soo galaan. Boqorku waxuu ahaa mid aan akhlaaq suubban lahayn, edabtiisu aad bay yareed, tiyooy udheereed dhallinyarannimo. Waxuu wax ka weydiiyey dharkooda kan ee ay sitaan magaciisa, kabahooda iwm ee ay siteen. Kol Alliooy uga jawaabaan buu ku jees jeesayey oo uu wax ka sheegayey. Dadkii Madaa’in deganaa waa ay soo baxeen si ay u eegaan dadka ay boqortooyadii Furus ka fadhin weyday. Waxay arkeen rag dhar suuf ah kulebbisan iyo kabo aan indhuhu soo jiidaneyn, waxay arkeen diifta ka muuqata misna waxay eegeen waxay gaadiid ahaan u siteen oo fardo iyo awr weyti ah, waxayna is weydiinayeen su’aalo dhowr ah oo ay kamid tahay:” Sidey dadka sidan uyaal ay dhulka



Furus ula wareegeen oo ay  
boqortooyadeenna dusheedda u soo degeen?  
Markii dambe boqor Yazdajrid waxuu  
su'aalay raggii:” Maxaa halkan idin keenay?  
Ma waxaad u maleyseen markii aan  
dhexdayada isku mashquulnay inaad naga  
faa’ideysan kartaan? Nucmaan bin Muqarrin  
baa u jawaabay oo hadalka si fiican u  
dhigay, waxaana kamid ahaa kalmadahisii  
sidan: ” Alle baa inoo naxariistay oo inoo  
soo diray Rasuul na tusiyo wanaagga oo na  
amaro inaan falno, oo na baro sharta (iyo  
asbaabteeda) nagana reebay, waxuuna  
nalagu ballamay ajiibidda kheyirku inuu  
yahay wanaag adduun iyo mid aakhiro”.  
Kadib markuu ka sheekeeyey Nucmaan  
marxaladihii ay diinta Islaamka soo martay  
iyo halka ay cizi iyo sharaf maanta ka  
joogto, ayuu u bandhigay boqorkii inuu soo  
galo diinta Islaamka ama jizyo ama dagaal,  
waxuu ku yiri:” Waxuu Rasuulkayaga (scw)  
na amray inaan ka billawno umadaha  
noosoo xiga oo aan ugu yeerno inay nala soo  
saftaan. Annagu waxaan idinkugu  
yeereynaa diintayada, waana diinta  
Islaamka, waxay wanaajisaa kii wanaagsan  
(oo ay wanaag iyo sharaf u siyaadisaa),

waxayna dulleysaa midkastoo dulli ah.  
Haddii aad diiddaan, arrin tan ugu  
sharbadan oo ka fudud tan ugu dambeeyso  
(dagaalka) ee ugu sharta badan waa jizyo,  
haddii aad diiddaanna waa dagaal. Haddii  
aad yeeshaan diintayada, waxaan idiin  
reebeynaa kitaabka Allaah oo aan idiinku  
qumineynaa inaad isku xukuntaad  
axkaamtiisa, idinka howlahiinna iyo  
dhulkiinnuba waanu idinka laabaneynaa.  
Haddii aad na siisaan jizyo, waanu idinka  
guddoomeynaa waana idin illaalineynaa,  
haddiisa aad diiddaan waa dagaal”.  
Waxuu yiri boqorkii:” Yazdajrid ha idin  
laayo.. Waxaanan garaneynin dhul ay umadi  
ku sugantahay oo ka xun kana daran weji  
xumi oo weliba ka tiro yar idinka. Waxaanu  
idiin wakiilan jirnay qaryooyinka Dawaxiga  
(Carabtii tabaca u ahayd) oo iyaga ayaa  
inooga kiin filnaa, mana aydan damaacin  
jirin inaad kusoo duushaan dhulka Furus”.  
Waxuu kula hadlay erayo kul kulul, markaa  
bay raggii wada aamuseen.  
Muqiirah bin Shucbah baa istaagay oo  
hadlay, waxuuna yiri:” Boqoryahoow! kuwa  
kani waa madaxdii Carabta iyo kuwii hor  
kacayey, waa ashraaf wayna ka xishoodaan

dadka ashraafta ah, kuwa sharafta leh  
ayunbaana sharfo kuwa kalee sharafta leh,  
xaquuqda kuwa sharafta lehna waxaa  
yaqaan oo kaliya kuwa iyagu sharafta leh.  
Ammaa xaaladda xun ee aad nagu sheegtay,  
maba jirin cid naga xaalad xumeed, ammaa  
gaajadayaduna waxaanba cuni jirnay  
(waxyaaba aan cunno ahayn bahallada,  
caleemaha dhirta iwm) waxaanna u arki  
jirnay inay tahay cunto, ammaa  
deegaankayaguna waa uun iska dhulka  
guudkiisa, dharkayaguna waxuu ahaa waxa  
aan ka sameysanno dhogorta geela iyo  
ariga.

Diintayadu waxay ahayd inuu barkayo barka  
kale laayo oo darkeen darka kale ku  
xadgudbo, waxaaba dhici jirtay inuu  
midkayo gabadhiisu noolasha ku aaso isagoo  
nacayo inay raashiinkiisa wax ka cunto.  
Xaalkayagu waxuu ahaa kahor sida aan  
maantadan ku sugannahay sida aan kuu  
sheegay, markaa buu Alle inoo soo diray nin  
macruuf ah oo aan garaneyno nasabkiisa,  
wajigiisa iyo dhalashadiisa, dhulkiisu waa  
kan ugu kheyr badan dhulkayaga,  
xasabkiisu waa kan ugu kheyr badan  
axsaabtayada, aqalkiisuna waa kan ugu

kheyr badan aqallayada, tolkiisu waa kan ugu kheyr badan tolkayaga, isaguna naf ahaan waa kaayaga inoogu kheyr badan. Waxuu inoogu yeeray arrinka (diinta) markaasay cidina ajiibin.

Qofkii ugu horreeyay ee raaco waxuu ahaa khaliifadii isaga ka dambeeyey (Abuu Bakar). Waxaanu niri been baad sheegtay, suu yiri run baad sheegtay, saan wax ka naaqusinnay markaasuu isaguna u siyaadiyey. Markaa buu Alle markii dambe quluubtayada ku tuuray rumeynta iyo raaciddiisa, markaa buu dhex qaaday annaga iyo Rabbiga uunka dhexdeenna, wax waliboo uu nagu yiraahdo, waa qowlka Allaah, amarkastoo uu na amrana waa amarka Allaah. Waxuu inagu yiri (Nebigu (scw)):" Rabbigiin waxuu idin leeyahay: Anigu waxaan ahay keli, mana jiraan wax la ila wadaajiyo, waxaan jiray goor aysan waxbo jirin, shey kastaana wuu hallaagsami doonaa marka laga reebo wejigeyga. Aniga ayaa abuuray shey walibo, oo xaggeyga ayay u ahaan doonaa wax walibo, raxmaddeydu way idin haleeshay, waxaana idiin soo diray ninka kan (Muxammed (scw)) si uu idiin tusiyo jidkii aan idinkaga



badbaadin lahaa geeri dabadeed  
cadaabteyda oo aan idinkugu xalaaleeyo  
daarteeyda Daarus- Salaam.

Haddaba waxaanu qireynaa inuu  
(Muxammed (scw)) la yimid xaq uuna kala  
yimid xaq agtiis, waxuuna yiri:” Ruuxii  
idinku raaco arrinkan (diinta Islaamka)  
waxuu leeyahay waxii aad idinku leedihiin,  
waxaana dushiisa ahaaday waxa dushiina  
ah, kiise diida u bandhigo jizyo , (hadduu  
yeelana) ka ilaaliyo waxa aad nafahiina ka  
ilaalisaan, hadday diidaan la dagaallama  
waa aniga kan dhexdiina xakamka ka ah ee  
kala xukmin, kiinnii idinka mid ah ee la dilo  
waxaan gelin doonaa Jannadeyda, kiinnii  
haraana waxaan ka yeeli doonaa ciribtiisa  
guul”.

Waxuu yiri Muqiirah isagoo boqorka  
dhankiisa markaa hadalka u tuurayo:”

Haddaba dooro jizyo adigoo dulleysan, ama  
haddii aad doonto seef ama Islaam oo bad  
baadi naftaada?

Waxuu yiri Yazdajrid:” War ma waxaan oo  
kale baad iila imanaysaa? Waxuu yiri  
Muqiirah:” Ma ahan wax aan ula tegay qof  
aan ila hadlin, haddii uu qof kale oo aan  
adiga ahayn ila hadli lahaana waan ula tegi

lahaa”. Markaa buu Yazdajrid yiri:”

Haddaysan dembi ahaan lahayn in ergada la dilo, waan idin layn lahaa, wax agteyda idiin yaalla majirto”.

Waxuu markaa Yazdajrid la hadlay dadkiisii oo uu ka codsaday inay u keenaan juuni weyn si uu carro ugu buuxiyo oo uu qoorta u saaro shariifka kuwan (muslimiinta ah).

Markii loo keenay carradii buu yiri:” Waa kuma shariifkiinna? Markaa bay qowmkii wada aamuseen. Caasim bin Camr baa markaa yiri isagoo doonayo inuu qowmka furto oo uu isagu carrada qaado:” Waa aniga shariifkooda, aniga ayaa ah ugaaska kuwan ee ii saari carrada”. Waxuu yiri Yazdajrid:” Oo masidaa baa? Waxay yiraahdeen:” Haah!.

Markaa buu Yazdajrid dusha u saariyey dabeetana uu amray inuu la dhaqaaqo.

Caasim raggiisii kale waalaga hor diray oo intuu carradii qaaday buu la socday isagoo dhex qaadaya deyrarkii Madaa’in jeer uu u tegay rakuubkiisii markaa buuna dul saartay oo uu dhaqaaqay.

Asxaabtiisii kale iyana way soo dhaqaaqeen, Caasim ayaana kaga hor maray amiirka ciidanka. Markii uu Caasim marayey meesha

la yiraahdo Baabu Qudeys oo ah dacal kamid ah Qaadisiyah buu yiri:” Ugu bishaareeyo amiirka lib iyo guul, waanu ka guuleysan doonnaa Inshaa-Allaah”. Kadib wuu sii socday waxuuna galay qolkiisii oo uu carradii dhigtay, markaasuu soo laabtay oo uu utegay Sacad oo uu arrintii uga warramay.

Saxaabadu aad bay ugu farxeen arrintaas waxayna u fasirteen inay tahay qaadashada dhulka Furus oo dhan, maalinba maalinta ka dambeysaana sharaf iyo kor ahaansho iyo cissi ayaa u sii siyaadaysay, halka Majuustu dulli iyo dib udhac iyo dar xumo hor leh iyo wahnii iyo dhaciifnimo ay la kulmayeen.

Rustum waa uu dhaqaaqay waxuuna aaday boqorkii si uu usoo weydiiyo waxii uu kala kulmay Muslimiinta iyo weliba ra’yigoodii, markaa buu Yazdajridna si cad ugu bayaaniyey xadrigii jawaabahoodii iyo hadalladoodii faseexadda iyo caqligoodii saafiga ahaa. Waxuu misna u sheegay inay aaminsanyahiin guul goor iyo goob welibo. Guud ahaan Yazdajrid waxuu Rustum u dul maray waxii isaga iyo raggii Muslimiinta ee ergada ahaa dhex maray oo hadal iyo dood ahaa, waxuuna xusay falkiisii doqonnimada

ahaa ee uu carrada madaxa u saaray Caasim bin Camr, taasoo uu isagu u arkayey inuu wax haggaajiyey hase ahaatee ku noqotay: maxaa iigeeyey? Rustum markii uu dhageystay hadalkii Yazdajrid iyo carradii uu Caasim madaxa u saariyey buu yiri:”

Ninku (Caasim) ma uusan ahayn axmaq mana ahayd shariifkooda, waxuu doonayey oo kaliya inuu qowmkiisa furto oo uu isagu carradu qaado, hase ahaatee Illaah baan ku dhaartaye waxay la tegeen furayaashii dhulkayaga”. Rustum waxuu ahaa Munjim yacni mid xiddigaha wax ka sheego sidaynu soo xusnayba.

Markaa buu diray nin kamid ah Majuusta si uu uga daba tego haddii uu gaarana uu kasoo celiyo carrada haddii uu gaari waayo oo carradu ay utegto amiirka ciidanka

Muslimiinta ee Sacad bin Abii Waqaas taa waxay lamid tahay buu yiri inay dhulkayaga nooga adkaadeen. Ninkii wuu daba galay isagoo doonayo inuu carradu soo celiyo hase ahaatee waa goorma? Waa goor ay carradii u tegtay Sacad bin Abii Waqaas

Muslimiintiina ay ku farxeen, Faarisiintiina aad bay uga xumaadeen arrintaas oo waxay caroodeen caro kulul, ra’yigii boqorkuna



waxay ku tilmaameen mid iska waalan.

Dagaalkii Iyo Siduu

Ku Billawday

Dhacdadan Qaadisiyah waxay ahayd dhacdo  
tii ugu weyneyd ee ka dhacdo dhulka Ciraaq,  
waxayna ahayd mid aad iyo aad u cajiib

badan. Markiina ay labadii qolo is wajaheen,  
waxay ahayd goor uu Sacad xanuunsanaa  
oo ay ku dhacday xanuun la yiraahdo

Carqun-Nassaa, waxuuna awoodi waayey  
fuulidda gaadiidka (rakuubka ama faraska),  
markaa baa loo dhisay qasri oo loo goglay  
labada dhinacna loo geliyey barkimo si uu  
halkaa kala socda dagaalka. Dagaal gelinta  
ciidanka waxuu u xilsaaray Khaalid bin  
Curfudhah, ciidanka midigta waxuu madax  
uga dhigay Jariir bin C/llaahi Al Bujali,  
ciidanka bidixdana waxuu u dhiibay Qeys  
bin Makshuux.

Qeys bin Makshuux, Muqiirah bin Shucbah,  
Al qacqaac bin Camr iyo Haashim bin  
Cutbah iyo rag kaloo halyeeyo ah waxay  
ahaayeen raggii ku yimid gurmada ee uu  
soo diray Abuu Cubeydah bin Al Jarraax  
kadib markuu dhacay dagaalkii Yarmuuk.  
Ciidanka Muslimiintu waxaa lagu sheegaa  
inay ahaayeen 30 000 ama 32 000 ama 36

000, sidaa si aan ahayna waala sheegaa, calanka ciidanka waxaa dalbaday inuu qaado Cabdullaahi bin Ummu Maktuum, kadib markii laga fursan wayey ayaa loo dhiibay.

Sacad dadkii buu tujiyey salaaddii duhur oo uu waaniyey oo ku booriyey (dagaalka) waxuuna akhriyey qowlka Alle Sarreeye:”

Dhab ahaan baanu ugu qornay Zabuur kadib sheegid (horey loogu sheegay looxul maxfuudka) in dhulku ay dhaxli doonaan addoomayda suubban”. Suuratul Ambiyaa, aayadda 105aad. Raggii qurraada ahaa ee ciidanka la socdayna waxay akhrinayeen aayadahii jihaadka.

Kadib Sacad wuu takbiirsaday 4 jeer , takbiirtii afraad kadib bay ahayd markii ay weerarka kulul qaadeen ciidamadii

Muslimiinta, markaana waxaa dhex maray dagaal kulul oo soconayey illaa habeenkii, meydka labada dhinacna waxuu ahaa mid aad u batay. markaa bay kala hoydeen, subixii dambana way isku soo jarmaadeen oo dagaalkii ayaa weji cusub ku bilawday sidii lamid ah buuna usocday meytida labada dhinacna waxay ahayd sidii hore oo kale, markii ay subixii saddexaad isku soo

jarmaadeen buu dagaalkii halkiisii kasii  
socday weji kii hore lamid ah buuna ku  
socday jeer gabbalkii dhacay markaa bayna  
kala hoydeen, habeenkaasina waxuu ahaa  
habeenkii loogu magac daray Leylatu Al  
Hariir.

Markii la waabariistay subaxii afraad,  
waxay ahayd markii ugu darneyd ee uu sida  
kulul u dhacay dagaalka. Majuustu waxay  
maalintaas lasoo dagaal tegeen maroodiyaal  
sidaynu soo xusnay ay ku argagax  
gelinayeen fardaha Muslimiinta, oo mar  
waliba laf dhuun gashay bay ku ahaayeen,  
waana taas tii u diidday weerarro badan oo  
ay ku qaadeen fardooleydii Muslimiinta si ay  
si munaasib ah u dhex galaan ciidanka  
Faarisiinta.

Qaar kamid ah halyeeyadii Muslimiinta baa  
markaa laysay maroodiyaashii iyo waxii  
saarnaaba iyagoo markii hore indhaha  
gamuunno uga riday. Rag kamid ah  
Jamaacadii Muslimiinta baa maalintaas  
dhigay wacdaro aad loola yaabay, waxaana  
raggaasi kamid ahaa Dhuleyxah bin  
Khuweylid, Al qacqaac bin Camr, Camr bin  
Macdiyakrib, Jariir bin C/llaahi Al Bujali,  
Diraar bin Al Khaddaab iyo Khaalid bin

Carfudhah iyo qeyrkood.

Markii la gaaray bartamahii maalintan afraad (waa maalinta loo yaqaan Yowmu Qaadiisiiyah) oo ahayd maalin Isniin ah bishii Muxarram ee sanadkan yacni 14kii Hijriyada sida uu xusay Imam Seyf bin Cumar baa waxaa kacday dabayl qaadday teendhooyinkii Furus oo tuurtay sariirtii Rustum, markaa buu Rustum cararay oo uu fuulay bakhashiisii dabeetana jaanta rogtagay Muslimiintii baa inta ka daba tegay dishay, waxaa dilay Rustum nin kamid ah Muslimiinta oo la oran jiray Hilaal bin Calqamah, waran buu intuu ku tuuray lugta kala helay, markaasuu utegay oo uu madaxa ka gooyey.

Waxaa kaloo la sheegaa markuu dhawaacu soo gaaray buu dalbaday in loogu yeero nin halyeeyada Muslimiinta kamid ah si uu u dilo intuu nin ciidanka kamid ah dili lahaa, waxuuna taas u fisirtay inay isagu sharaf utahay, markaa baa loogu yeeray Al qacqaac bin Camr oo kurka ka jaray.

Jaalinuus isagu wuu cararay oo firxadkii buu dhexda ka galay. Jabkii kuwii cararay bay Muslimiintu raacdeysanayeen oo ay laynayeen jeer ay cadawgii degeen meel oo



ay cabbeen khamri markaa bay seexdeen  
kadib markay sakraameen.

Muslimiintii baa goor aysan ka filaneynin  
soo kadiyeen oo wada laayeen, Jaalinuusna  
waala dilay waxaana dilay Zuhrah bin  
Xawiyah At Tamiimi. Markay jabeen oo ay  
Muslimiintii ka daba tegeen , waxay ka  
laayeen 30 000, macrikada dhexdeedana  
waxay uga laayeen 10 000, maalmahii ka  
horeyeyna intaas in kudhaw bay ka laayeen.  
Dhanka Muslimiintuna waxaa ka shahiiday  
maalintaas iyo maalmahii ka horreeyayba  
2500 Raximahumul-Laah.

Taa ka hor dagaalka intuu socday waa qolka  
Sacad kula jiray nin maxbuus ahaa oo  
Muslimiinta kamid ah, ninkaasi waxuu ahaa  
Abuu Mixjan At-Thaqafi (Camr ama Maalik  
bin Xabiib bin Cumeyr bin Cowf) oo markaa  
khamri cabbay, markaa baa la xabbisay  
laguna xiray qasrigii Sacad, markaa ka  
horna 7 jeer baa laga oofiyey xadka cabbida  
khamriga. Abuu Mixjan waxuu kamid ahaa  
raggii caanka ahaa ee kamidka ahaa  
geesiyaashii Muslimiinta.

Markii uu dagaalku kululaaday baa waxuu  
Abuu Mijxan arkay fardooleydii cadawga oo  
ku gaaf wareegayo halka qasrigii uu ku

sugnaa amiirkii ciidanka ee Sacad bin Abii Waqaas, markaa buu is ciil baday Abaa Mijxan bal haddii uusan xirnaan lahayn fiicnaan lahaydaa. Halkaas waxuu ka tiriyey tixgabay uu ku tilmaamayo halka uu reerkiisii iyo hantidiisii uga soo tegay isagoo jecel inuu jidka Alle ku jihaado iyo weliba isagoo muujinayo inay murug ugu filantahay maanta isagoo arkayo fardahii cadawga oo gaaf wareegayo qasrigii amiirka ciidamada Muslimiinta iyo isagii oo taa oo idil ka xiran oo aanan waxba ka awoodi karin.

Waxuu Abuu Mixjan la hadlay Zubraa oo ahayd Ummu walad u joogtay Sacad bin Abii Waqaas, waxuu ka dalbaday in ay sii deyso oo ay xarigga ka furto oo ayna u keento faraskii Sacad si uu ugu dagaal galo, waa haddii uu gelinka dambe isagoo bed qabo kasoo laabtee waxuu ballan kula galay oo uu ugu dhaartay inuu halkiisa kusoo laaban doono oo markaa ay xiri doonto. Zubraa way deysay markaa buu faraskii fuulay oo uu dagaallamay dagaal daran, Sacadna wuxuu arkayey faraskiisa iyo nin dul saaran, waxuu ninka dul saarani ula muuqanayay inuu yahay Abuu Mixjan Al Thaqafi, haddana waxaa taas ka shaki

tireysay inuu qasriga ku xirnaa oo uu maxbuus ahaa.

Goortaa iyada ah ee uu dagaalku kululi dhacayey bay haweeneydii Sacad Salmaa bint Khasfa tii uu horey kaga geeriyooday Muthanna bin Xaaritha ay aragtay fardahii cadawga oo qasriga kusoo dhawaaday Sacadna uu markaa xanuunsanaa oo uusan dagaalku kujirin. Markaa bay Salmaa afka furay kadib markay aragtay qaar kamid ah fardooleydii Muslimiintu oo cararay oo ay ku dhawaaqday:” Waa Muthanniyaaah!! Muthanna beelay maantuye!”.

Sacad bin Abii Waqaas baa markaa inta ka carooday dharbaaxo wejiga ku dhuftay, Salma bint Khasfa waxay runtii dhibsatay Sacad oo qasriga fadhiyo oo aan dagaalku ku jirin xilli Muslimiinta ay dhowr goor sibibaxdeen, waxay Muthanna ugu barooratay in ay maseyr geliso Sacad oo uu markaa kaco oo uu dagaalku galo, waxayna xasuusineysay geesinnimadii Muthanna iyo inuusan ahayn nin u seexan jirey cadawga, hase ahaate dar kale Sacad waxuu ahaa geesi aan gorada laalaadinin, oo ganidda gamuunka tab heer sare ah u yaqiinay, sidaa si lamid ahina waxuuba lahaa cududdaar oo

waa usuuroobi weyday inuu dagaallamo,  
hase ahaatee goobjoog buu ahaa dagaalka  
xaaladdiisa oo idilna wuu lasocday, waxaana  
u diiday inuu ka qaybqaato xanuunkii  
markaa hayey oo uu la fuuli waayey faraska  
ama gaadiidka.

Markii uu Abuu Mixjan kasoo laabtay  
dagaalka gelinka dambe buu halkiisii kusoo  
laabtay oo ballantii oofiyey, markaa bay  
haweeneydii Sacadna halkii ku xirtay.

Markii uu dagaalku dhammaaday baa Sacad  
loo sheegay arrintii Abaa Mixjan markaa  
buu isagiina iska sii daayey oo wuu cafiyey.

Wuxuuna u ballan qaaday inuu mar dambe  
jeedali doonin. Asaguna Abuu Muxjin  
wuxuu ballan ku galay inuusan dib dambe u  
cabbin khamri.

Sacad bin Abii Waqaas ciidankii ayuu usoo  
baxay kadib markuu dagaalka dhammaaday  
oo u cududdaartay iyana way u  
cududdaareen.

Muslimiintii waxay Qaadisiyah ka  
qaniimeysteen maal tiro badan iyo hub aan  
lasoo koobi karin kadib markay ka  
guuleysteen cadawgoodii, waxuu ahaa maal  
aysan horey mid lamid ah u helin ciidamadii  
Muslimiinta ee geyigaas ku sungaa ama



guud ahaan kuwii xitaa dhanka Shaam joogay. Kadib markii qaniimadii laga saaray khumuskii buu Sacad u qeybiyey Muslimiinta, khumuskiina u diray dhankii amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab.

Halkaas bay ku jabeen cadawgii Islaamka ee majuustii Furus, waana halkii lagu boqno gooyey boqortooyadiidii boqolleyda ahayd oo muddo dunida ka talin jirtay. Waxaa guuleystay xisbigii Raxmaanka iyo ciidamaddii Allaah.

Waa goor warka Qaadisiyah Muslimiintu meel kasta ay joogaanba ay dhowrayaan, Cumar bin Al Khaddaab laftiisu waqti harsiimo ah oo hanfi kulul dhacaya buu maalmahaas caadeystay inuu khabarka Qaadisiyah doon doono oo uu waddada Ciraaq afka saari jirey bal si uu ula kulmo qof ka yimid dhanka Ciraaq oo uu wax ka weydiiyo Qaadisiyah. Goor uu Cumar waddada Ciraaq hayo isagoo doon doonayo warka Qaadisiyah baa waxuu arkay qof meel fog kasoo muuqanayo, markaa buu ka hor tegay oo wax ka weydiiyey.

Ninkii waxuu u sheegay in Qaadisiya la furtay oo ay Muslimiintii ku guuleysteen

ayna ka qaniimeysteen maal iyo hub tiro badan, oo Majuustiina ay ku jabeen. Cumar bin Khaddaab ninkii buu la sheekeysanayey iyadoo ninku uu saarnaa daabaddiisa (awrka ama faraska uu sitay) halka Cumarna uu lugeynayey. Markii magaalladii Madiina ay soo galeen baa ninkii waxuu arkay dadkii oo Cumar kala hadlayo arrimahii dowladda arrimahii bulshada, markaa buu ninku gartay qofka uu lasocday inuu yahay amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab, markaa buu ku yiri:" Oo maxaad iigu sheegi weyday amiirkii Mu'miniintow!! inaad tahayd Cumar? Waxuu Cumar yiri:" Wax dhiba malaha walaalkayow".

Sacad bin Abii Waqaas waxuu warqad u diray dhankii Madiina iyo amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab, waxayna warqaddaasi caddeyneysay guushii Muslimiinta iyo tiradii ka shahiiday iyo weliba inta cadawga laga laayey. Waxuu Sacad warqaddaasi u dhiibay Cumeylah Al Fazaariyu. Cumar bin Al Khaddaab warqaddii guusha iyo bishaarada buu ka dul akhriyey mimbarka dushiisa, waxuuna saxaabadii u sheegay dadkii caanka ahaa ee kaga shahiiday Qaadisiyah oo uu u horeeyay

Sacad bin Cubeyd Al Qaari. Khumuskaa qaniimadana waxuu gaaray magaalladii Madiina.

Dhacdooyin Kale

Sanadkan dhexdiisa buu Cumar ku kulmiyey dadkii reer Madiina in la tukado salaadda Taraawixda bisha Ramadaan, isagoo amray inuu dadka tujiyo Ubay bin Kacab, waxayna ahayd markaa bishii Ramadaan ee sanadkan, goballadiina warqado ayuu u diray isagoo amrayo in la oogo salaadda Taraawiixda bisha Ramadaan laguna tukado jamaaco.

Isla sanadkan buu diray Cumar bin Khaddaab Cutbah bin Qazwaan isagoo masuul uga dhigayo magaallada Basrah isagoo amray inuu dego halkaas oo ciidamada Muslimiintuna ay la dagaan xarunna uu kadhigto.

Seyf bin Cumar waxuu qabaa inay markaa ahayd sanadkii 16aad ee hijriyada Cutbana uu ka baxay magaallada Madaa'in oo uu ka aaday Basrah kadib markii la furtay Madaa'in waqtigaa iyada ahina ay ahayd bishii Rabiicul Awal ama Rabiicuth-Thaani ee sanadkii 16aad ee Hijriyada. Qaar kalena waxay qabaan in ay ahayd sanadkan markii

uu Cumar diray Cutbah bin Qazwaan.

Wallaahu aclam.

Abuu Mikhnaf waxuu soo weriyey in Cutbah bin Qazwaan loo diray Basra isagoo wato 300 iyo dhowr ciidan ah, markaa buu xaggeedii ku dhaqaaqay isagoo sii maraya acraabtii dhexda deganeyd illaa ay ciidamadiisii noqdeen 500, waxay markaa amintu ahayd buu yiri bishii Rabiicul Awal ee sanadkan, waxaana markaa dhulka Basra loo yaqaanay Ardul Hindi. Waxay ahayd dhul leh dhagaxyo cad cad.

Markii uu tegay Cutbah halkaa baa waxaa kusoo baxay Saaxibu Furaat (ninkii halkaasi masuulka ka ahaa) oo hoggaaminaya 4000 oo ciidan ah, markaa bay is heleen, durtaba wuu ka adkaaday ninkii ciidamadaa sitayna wuu soo qafaashay, markaa buu Cutbah kadhex istaagay dadkii isagoo u khudbeeyay xasuusiyeyna fadaa'isha iyo wanaagga islaamka iyo in lagu dhego.

Waxa lasoo wariyaa in uu Cumar warqad u qoray Cutbah bin Qazwaan markuu u dirayey Basra, waxuuna ku yiri:” Cutboow! waxaan kuu wakiishay dhulka Ardul Hindi (Basra) , waana xawma kamid ah xowmoyinka cadawga, waxaana rajeynayaa



inuu Alle kaaga fillaado waxa hareeraheeda ah oo uu kaaga gargaaro dusheeda. Waxaan warqad u qoray Al Calaa bin Xadrami si uu kuugu soo gurmado Curfajah bin Harthama. Markuu kuu yimaado soo dhaweey oo la tasho, uguna yeer (cadawga) xagga Alle, kii kaa yeelana ka yeel kii diidana ka qaad jizyo, hadday taa dhicinna waa seyf (yacni la dagaallan).

Ugu Cabso Allaah wixii lagu wakiishay, waxaana kaaga digayaa inay naftaadu kuu saarto isla weyni oo markaa aakhiradaadu ay kaa fasahaadiso. Waxaad runtii la saaxiibtay Rasuulkii Alle (scw) markaa baad cizoowday dullinnimo dabadeed, oo aad quwad yeelatay itaal darri dabadeed jeer aad markii dambe noqotay amiir musallad ah iyo boqor la adeeco. Wax baad oran, markaa baalagu dhageysan, amar baadna bixin markaa baa la yeeli oo lagu adeeci”. Way dheereed warqaddii dardaaranka iyo wilaayada ee uu Cumar u diray Cutbah Illaahay haka raalli noqdee, balse intaasi waxay ahayd nas kamid ah.

Cutbah waxuu tegay Basra oo uu degay. Bishii Rajab ama Shacbaan ee sanadkan ayuuna furtay Ublah. Markii uu geeriyooday

Cutbah, waxuu Cumar masuul uga dhigay magaalladii Basra Al Muqiirah bin Shucbah. Sanadkan dhexdiisa ayuu Cumar bin Al Khaddaab jeedalay wiilkiisii Cubeydillaah iyo jameeca kale oo uu ka oofinayey xadka cabbidda khamriga. Abuu Mixjan Al Thaqafi iyo Rabiica bin Umayah bin Khalaf ayaa kamid ahaa iyana dadkii xadka cabbidda khamriga laga oofiyey sanadkan. Waxaa kaloo la sheegaa in sanadkii hore laga oofiyey Abuu Mixjan ee aanan sanadkan laga oofin.

Dhanka kale xajka waxaa dadka xajiyey sanadkan Cumar bin Al Khaddaab.

Masuuliyiintiisii goballada waxay ahaayeen sidan:

Shaam waxaa masuul uga ahaa Abuu Cubeydah, Ciraaqna Sacad bin Abii

Waqas, Baxreen waxaa masuul uga ahaa Cuthmaan bin Abil Caas ama Al Calaa bin Xadrami, Cummaanna waxaa masuul uga ahaa Xudeyfah bin Muxsin.

Sanadkii | 15aad

Maadama aanan sanadkii hore ku xusin wax dhacdooyin ah oo ka dhacay dhulka Shaam, baan door bidnay inaan hadda ku hor marno dhanka Shaam. Waana in ay culimo badan

badi ku sheegeen dhacdooyinkan aan  
immika soo min guurineyno ama aan  
xusayno inay dhaceen sanadkan 15aad ee  
Hijriyada, waana sida aan inaguna ku  
raacnay maadama ay jamhuurkoodu qabaan  
inay dhaceen sanadkii 15aad.

Dhacdadii Maraj Al Ruum

Sanadkan bay dhacday dhacdadani sida uu  
Ibnu jariir xusay. Waxay sababteedu ahayd  
kadib markii ay Abuu Cubeydah iyo Khaalid  
kasoo laabteen Fixil bay u qasdeen dhanka  
Ximsa iyagoo fulinayo amarkii amiirkii  
Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab,  
waqtigaasina waxuu ahaa waqti qabooba ah,  
markaa baa Abaa Cubeyda waxaa u  
muuqatay inuu aado Maraj Ar-Ruum. Boqor  
Hiriqal baa waxuu soo diray ciidama  
Ruumaan ah oo uu madax uga soo dhigay  
Towdar.

Waxuu Towdar ciidamadiisii dejiyey  
galbeedka Dimishiq, markaana waxay ahayd  
waqti qabooba ah, waana markii Abuu  
Cubeyda ay u muuqatay in uu aado Maraj  
Ar-Ruum. Misna waxaa kaloo uu Hiriqal soo  
diray ciidan kale oo culus oo uu madax uga  
soo dhigay nin la oran jiray Shannas.  
Ciidamadii Shannas waxay dul degeen Abuu

Cubeydah oo ay kala dhex galeen isaga iyo ciidamadii Towdar, markaa buuna Towdar u dhaqaaqay dhanka Dimishiq si uu uga saaro Yaziid bin Abii Sufyaan.

Khaalid bin Waliid baa daba kacay raadkii Towdar, Yaziidna markuu ka war helay inuu Towdar xaggiisa kusoo wajahanyahay buu magaalladii kasoo baxay isaga iyo ciidankiisii, waxayna is heleen Towdar, halkaa waxaa ku dhex maray dagaal labadii qolo ciidankii Yaziid iyo kuwii Towdar.

Dagaalku wuu socday waxuuna ahaa dagaal kulul, Yaziidna horey ayuu ka dagaallamayey goor uu dagaalkii socday buuna Khaalid yimid isagoo gadaal ka laynayey ciidamadii Towdar ee uu markii horeba ku raad joogay.

Halkaa buu Khaalid ku dilay Towdar ciidamadiisi si daran u laayey, waxaana yaraa intii ka bad baadday. Muslimiintii waxay halkaa kaga qaniimeysteen Ruumaankii maal tiro badan, kadib markii la qeybiyey buuna Yaziid magaalladiisii Dimishiq ku laabtay, Khaalidna dhankii Abii Cubeydah buu u boqaallay.

Waxuu Khaalid u tegay goor Abuu Cubeydah iyo Shannas uu dagaal kulul dhex

maray, halkaasoo goobta Maraj Ar- Ruum  
uu Abuu Cubeydah ku dilay Shannas kana  
laayey maqtala badan ciidamadu wataa,  
heer maydkoodii uu dhulka camiray.

Firxadii kuwii jabay buu Abuu Cubeydah  
eryanayey illaa ay galeen magaalladii  
Ximsa. Markaa buu go'doomin ku qabtay.

Furashadii Koowaad ee Ximis

Markii uu Abuu Cubeydah gaaray  
magaalladii Ximsa siduu u eryanayey kuwii  
jabay buu dul degay oo uu go'doomin ku  
qabtay, Khaalidna wuu ka daba yimid oo  
go'doomintii buu wax ka qabtay. Waxay ku  
qabteen xisaar aad u daran, waqtigaana  
waxuu ahaa waqti qabooba ah, dadkii  
baladkuna way sabreen iyagoo ku rajo  
weynaa inay (Muslimiintu) ka laaban  
doonaan waqtiga uu qaboowgu darraado.  
Saxaabadii oo iyagu ka sabar iyo adkeysii  
badnaa dadka baladka ayaa waxay  
muujiyeen sabar aad u sarreyo, halka  
Ruumaanku gommaduhu daldallaciyey  
qaboowgii jiray iyagoo weliba sitay quf  
lugaha ay qabowga kaga asturtaan, haddana  
dhanka kale saxaabadu iyagu waxay wateen  
oo qura kabahooda oo wax kale kumaysan  
sidan lugaha, sidooy tahayna wax daldallaac



ama wax lamid ah makasoo gaarin qaboowgii jirey, waxayna muujiyeen adkeysii badan.

Markii uu waqtigii qaboobaha dhammaaday bay Muslimiintii sii adkeeyeen go'doomintii ay Ximsa ku hayeen, markaa bay odayaashii reer Ximsa u bandhigeen dadkoodii inay la heshiiyaan Muslimiinta hase ahaatee way diideen, waxayna yiraahdeen:" Ma waxaan la heshiinnaa iyadoo boqortooyadii ay inoo dhow dahay? Waxaa la yiraahdaa

Muslimiintii baa maalin maalmaha kamid ah takbiirsadeen mar qura takbiir ay magaalladii la gilgilatay oo qaar kamid ah derbiyadiina ay daldallaaceen, markaa bay misna markale takbiirsadeen takbiir ay guryaha qaar kamid ah la dumeen.

Markaa bay caamaddoodii u tegeen culimadoodii iyo madaxdooda oo ay ku yiraahdeen:" Ma waydaan u jeedin waxa inagu dul degay iyo waxa aan ku sugannahay, ma waydaan qowmku heshiis nooga gunteynin? Markaa bay Muslimiintii kula heshiiyeen heshiis lamid ah kii ay la galeen reer Dimishiq, waxuuna Abuu Cubeydah ku waajibiyey inay bixiyaan jizyo qoor kasto hodan iyo faqiirba oo ay ku hoos

noolaadaan dowladda Islaamka.

Intaa kadibna khumuskaa qaniimada iyo bishaaradii ayuu Abuu Cubeydah u diray dhankii amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab isagoo horey ugu sii dhiibay C/llaahi bin Mascuud Al Hudali, isagiina Abuu Cubeydah waxuu degay magaalladii Ximsa oo uu markii hore dhankeeda kusoo wajahnaa.

Waxaa markaa lasocday ciidan culus oo ay ku jireen rag halyeeyadii Islaamka ah oo ay kamid ahaayeen Bilaal bin Rabaax iyo Al Miqdaad bin Camr. Kadib Abuu Cubeydah waxuu warqad u qoray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab taasoo uu ku ogeysiinayo in Hiriqal uu gooyey biyahii Jaziiradda oo uu marna soo baxo marna uu dhakado. Waxaa timid warqaddii jawaabta ee Cumar bin Khaddaab, taasoo uu ku amrayo inuu Abuu Cubeydah dego magaallada Ximsa oo uu xarun ka dhigta.

Dhacdadii Qinnasriin

Markii uu furtay Abuu Cubeydah magaalladii Ximsa ayuu Khaalid bin Waliid u diray dhankii Qinnasriin. Markii uu Khaalid yimid Qinnasriin baa waxaa kusoo baxay dadkeedii Ruumaankii iyo Carabtii

Nasaareyda, waxaana dhex maray iyaga iyo Khaalid dagaal aad u daran, waxuuna ka laayey khalqi badan.

Ammaa Ruumaankii halkaa ahaa wuu laayey, amiirkoodii Meytaas-na wuu dilay. Carabtii Nasaareyduna iyagu way cududdaarteen in dagaalkan uusan markii hore ahayn ra'yigooda, markaa buu Khaalid ka yeelay oo iska daayey, kadib waxuu galay baladkii oo markaa ay dadkeedi ku aruureen qalcadaha, markaa buu u yeeray inay usoo dagaan, kadibna wuu furtay Khaalid dhulkaas

Cumar bin Khaddaab markay gaartay sancadii Khaalid bin Waliid ee dhacdadan buu yiri:” Allaha u naxariisto Abuu Bakar waxuu ahaa mid ragga iiga ogaal badan, Illaah baan ku dhaartaye ugamaanan cazilin Khaalid raayadda (masuuliyadda Shaam) waxaan ka ahayn in aan ka yaabay inay isagu dadka tala saartaan”.

Guuriddii Boqorkii

Ruumaaanka Ee Hiraqal

Sanadkan dhexdiisa ayaa boqorkii Hiriqal looga adkaaday dhulkii Shaam oo uu guud ahaan ka guuray, isagoo u guuray dhulka Ruum. Sidaa waxaa xusay Ibnu Jariir,

Maxamed bin Isxaaq iyo culimo kale, Seyf bin Cumarse waxuu yiri:” Waxay ahayd markaa sanadkii 16aad ee Hijriyada.

Annagoo tixraaceyna qowlka Jamhuurka oo ay badi qabaan Culamaayi Siirah ayaan raaceynaa qowlka Ibnu jariir iyo Ibnu Isxaaq.

Waxay ahayd in Boqorkii Ruum ee Hiriqal mar waliboo uu xaj ahaan u yimaado dhulka Beytul Maqdis uu ku oran jiray markuu ka tegayo:” Sallaamun Caleyka Suuriyaay!! salaam sagootin, waaan kuusoo laaban doonaa”.

Markii uu sanadkan goostay safarka iyo inuu ka baxo dhulka Shaam oo uu marka hore u gaaray goob la yiraahdo Ruhaa buu ehelkiisii ka dalbaday inay safarkiisa dhulka Ruum ay kula rafiqaan, hase ahaatee waxay u sheegeen inay doonayaan inay ku haraan dhulka Shaam, markaa buuna isaga tegay. Markii uu gaaray Shamshaan buu istaagay oo jalleecay dhanka Beytul Maqdis, markaasuu yiri:” Nabadi ha ahaato dushaado Suuriyaay! nabad gelyo iyo sagootin oo aan soo noqod lahayn illaa aan Islaamo, dib dambena kuugu soo laaban maayo qof Ruumi ah isagoo cabsanayo

mooyaan, hoogeygee!! Maxaan u dhashay? Kadib wuu sii socday Hiriqal illaa uu ka gaaray magaalladii Qusdhandhiin, halkaasoo uu boqortooyadiisii dejiyey.

Waxuu wax ka weydiiyey nin markaa ka hor ay Muslimiinti horey u qafaasheen, waxuu ku yiri:” Waxaad iiga warrantaa qowmka kan (ee Muslimiinta ah)”. Waxuu ninkii yiri:” Waxaan kaaga warramayaa sida adigoo u jeeddid, waxay maalintii fuushan yahiin fardo, habeenkiina salaad bay u taaganyahiin, ma galaan (guryaha) salaaan la’aan”. Hiriqal waxuu si wacan u dhageystay dhowr sifooyin oo uu ninkii ka bixyey Muslimiinta markaa buuna Hiriqal yiri:” Haddii aad iiga run sheegtay (xaggooda) waxay mulkin doonaan halkatan ee ay gomadahaygu saaran yahiin”. Xadiith Saxiixeynka ku sugan oo laga soo weriyey Abuu Hureyrah ayaa waxuu yiri:” Rasuulka Alle (scw) waxuu yiri:” Haddii uu halaagsamo (yacni dhinta) Kisraa (boqorkii Furus) ma jiri doono Kisraa kaloo ka dambeyn doono, haddii uu halaagsamo Qeyсар (boqorka Ruum) ma jiri doono Qeyсар kaloo ka dambeyn doono. kan ay nafteydu awooddiisa ku jirta (yacni Allaah)



baan ku dhaartaye waxaad kunuuztooda (yacni keydadkooda) u isticmaali doontaan jidka Alle”.

Runtii run buu sheegay xabiibkeenna udgoon badane (scw), markii uu yiri jiri maayo Qeyсар dambe ama Kisra dambe oo markaa ka dambeyn doono kuwii xilligaa jiray, kuwaasoo dhulalka Shaam iyo Furus si guud u maamuli doono. Siduu Rasuulka (scw) sheegay muddo gaaban bay ahayd markii ay Saxaabadii kaga takhalluseen boqortooyadoodii. Dib dambeysanna uguma soo laabanin tan dahrigan aakhirkiisa.

Wax waliboo uu Rasuulkeenna (scw) sii sheegayna waa wax dhacay ama dhici doono idinka Alle.

Dhacdadii Qeysaariyah

Sanadkan dhexdiisa ayuu amiirkii

Mu’miniinta ee Cumar bin Khaddaab amray

Mucaawiyah bin Abii Sufyaan inuu aado

dhanka Qeysaariyah, warqad ayuuna usoo

qoray isagoo ku leh:” Waxaan kuusoo

wakiishay Qeysaariyah ee aad xaggeeda

Allana uga gargaar dalbo dushooda, oo badi

qowlka Laa xowla walaa quwati Illaah

bilaahil-caliyul cadiim”.

Mucaawiyah xaggii Qeysaariyah buu aaday

oo uu go'doomin ku qabtay, markaa bay dadkeedii kusoo baxeen dhowr mar, markii ugu dambeysayna waa markuu dhacay dagaalkii ugu darnaa oo uu Mucaawiya cadawgu kaga laayey tiro aad u badan oo dad ah, dagaalka ayuu Mucaawiya ku xeel dheeraaday illaa uu furtay, furashaduna maysan iman jeer uu marka hore ka laayey 80 000, boqolkii kunna waxuu ku buuxiyey firxadkii ka cararay macrikada ee ay sii laynayeen ciidamadii Muslimiinta.

Bishaaradii guusha iyo khumuskaa qaniimada ayuu Mucaawiyah u diray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab.

Sanadkan dhexdiisa buu Cumar warqad u qoray Camr bin Al Caas, taasoo uu ku amrayo inuu aado Iiliyaa. Camr bin Al Caas wuu dhaqaaqay dariiqa intuu hayey bay ciidama Ruuman ah kusoo baxeen Ramalla agteeda, waxayna ahayd:

Dhacdadii Ajnaadeen

Markaasina waxay ahayd inuu Camr bin Al Caas ku dhaqaaqay halkaas iyadoo ciidamadiisa midigtu uu madax uga dhigay wiilkiisa C/llaahi bin Camr bin Al Caas kuwa bidixdana Junaadah bin Tamiim Al Maaliki oo ka dhashay banii Maalik bin

Kinaanah waxaana la socday Shuraxbiil bin Xasana, Urdunna waxuu ku dhaafay Abul Acwar As- Sulami. Markii uu Camr bin Al Caas gaaray magaalladii Ramallah halkaa waxuu kula kulmay jamac Ruumaan ah oo uu madax uyahay Ardhaabuun oo isagu ahaa kii ugu caqliga badnaa Ruum uguna shirqool iyo sir badnaa.

Ardhaabuun waxuu magaallada Ramallah dhigay ciidan culus, sidaa si lamid ahna magaalladii Iiliyaa waxuu dhigay ciidan kale oo culus, markaa buu Camr bin Al Caas warqad u qoray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab isagoo ku war gelinayo arrintaas. Markii ay warqaddii Camr gaartay Cumar bin Khaddaab buu Cumar yiri:” Waxaan isku dhufannay Ardhaabuunkii Ruum iyo Ardhaabuunkii Carabta”.

Kadib Camr bin Al Caas waxuu diray Calqamah bin Xakiim Al Fazaari iyo Masruuq bin Bilaal Al Caki oo uu diray la dagaallanka reer Iiliyaa, misna waxuu kaloo diray Abuu Ayuub Al Maaliki oo uu u diray Ramallah oo uu markaa madax ka ahaa Tadaariq. Sababta ugu weyn ee labadaa ciidan uu u diray Camr bin Al Caas waxay

ahayd inay ka mashquuliyaan labadaa  
magaallo inay ciidamo gurmada ah uga  
yimaadaann Ardhaabuun ama si aysan kaga  
imaan ciidamo dhabar jab kusameeyo  
Muslimiinta.

Markastoo uu Camar bin Al Caas gurmada  
uu uga yimaado dhanka Cumar, waxuu u  
kala diraayey gurmadaas labadii jiho yacnii  
Iiliyaa iyo Ramallah, isagiina waxuu dul  
degay Ajnaadeyn oo ay Ardhaabuun isku  
hor fadhiyeen. In badan oo uu ergo dirsaday  
Camar bin Al Caas kuwaasoo uu u diray  
dhanka Ardhaabuun si ay xagga Alle ugu  
yeeraan una gaarsiyaan waxa uu rabo bay  
war shaafiyo kaga keeni waayeen.

Taasina waxay dhashay inuu isagu laf  
ahaantiisa aado isagoo lamoodo inuu yahay  
ergay waana siduu isagu laf ahaantiisa  
muujisanayey, waxuu u galay Ardhaabuun  
oo uu la hadlay gaarsiyeyna dantiisii,  
markiina uu Ardhaabuun dhageystay  
hadalladii Camar bin Al Caas fahmayna  
ulajeeddadiisa buu dareemay inuu ninka la  
hadlayo yahay Camar, waxuu Ardhaabuun oo  
isla hadlayo is yiri:”

Illaah baan ku dhaartaye kani waa Camar  
ama waa midkii uu Cumar qaadan lahaa

ra'yigiisa, mana jirto arrin kaloo aan qowmka (Muslimiinta ah) ku asiibi karo oo aan ka ahayn inaan isagu dilo” Markaa buu Ardhaabuun u yeeray nin kamid ah ilaaladiisii oo uu arrin ku sirreeystay isagoo ku yiri:” Orodoo isaag meesha sidaa iyo sidaa oo markuu kusoo maro dil.” Camr bin Al Caas oo runtii ahaa nin digtoonidiisu ay aad u nooleyd baa dareemay inuu Ardhaabuun ninka kula faqay shirqool, markaasuu ku yiri:”

Amiiryahow! Waan dhageeystay hadalkaadii adiguna waad dhageysatay hadalkeygii, aniguna waxaan ahay 10 nin midkoodii, kuwaasoo uu Cumar u soo diray dhulkan si ay masuul uga ahaadaan, waxaan jecleystay inaan kuu keeno dhammaantood si ay u dhageeystaan hadalkaada oo ay arkaan waxii aan arkay”. Ardhaabuun oo runtii arrintaa aad ugu farxay waxuu is yiri malaha 10 isagoo kalaa kuu iman doonto saa waad dili doontaa idilkooda. Waxuu yiri:” Haaheey! orodoo ii keen idil”.

Kadib waxuu u yeeray nin kale oo uu ku sirreeystay isagoo ku amrayo inuu ninkii hore soo celiyo ayaa waxuu ku yiri:” Orodoo aad hebal oo soo celi” Markaa buu kacay Camr



bin Al Caas oo uu ciidankiisii aaday, markiina uu Ardhaabuun yaqiinsaday inuu ninku ahaa Camr bin Al Caas buu yiri:”

Ninku wuu i qayaanay, Illaah baan ku dhaartaye kani waa kii Carab ugu caqliga badnaa”.

Warkaa isaga ah baa gaaray Cumar bin Al Khaddaab markaasuu yiri:” Allaha dhowro Camr”.

Kadib Camr bin Al Caas ciidamadiisii ayuu dhisay oo dagaal daran baa ku dhex maray isaga iyo Ardhaabuun goobtii Ajnaadeyn, dagaalkaasoo ahaa mid kulul oo lamid ahaa kii Yarmuuk illaa ay meytidii labada dhinac badatay, Kadib bay ciidamadii kale u yimideen Camr bin Al Caas kadib markii ay kunoogeen reer Iiliyaa oo markaa qalcaddo adag kaga jiray. Ciidamadii Camr bin Al Caas markaa bay bateen oo dagaalkii ayaa sii socday, markaa buu Ardhaabuun warqad usoo qoray Camr bin Al Caas uu ku leeyahay:”

Adigu waxaad tahay saaxiibkey iyo mid iidhigmo, qowmkaaga dhexdooda waxaad ku tahay sida aan anigu qowmkeeyga dhexdooda ku ahay. Illaah baan ku dhaartaye dhulka Falastiin ka furan

meysaan wax dambe oo aan ka ahayn  
Ajnaadeyn ee isaga laabto oo yaydaan ku  
kadsoomin dabeeto ay idinku dhacdo waxii  
ku dhacay kuwii idinka horreeyay oo jab  
ah”.

Camr bin Al Caas waxuu u yeeray nin ku  
hadlo luuqadda Ruumiyada waxuuna u diray  
dhankii Ardhaabuun isagoo ku yiri uteg oo  
soo dhageyso waxa uu leeyahay kadiba iisoo  
laabo oo iiwarran. Horey ayuu Camr bin Al  
Caas warqad ugu dhiibay ninkaa isaga ah si  
uu ugu geeyo Ardhaabuun, warqaddaasi  
hadalladii ku qornaa waxaa kamid ah sida  
tan: Waxaad ogtahay anigu inaan ahay  
ninkii furan lahaa dhulka kan, ku dul akhri  
warqaddeydan intaad soo kulmiso  
asxaabtaada iyo waziiradaada.

Markii ay warqaddii gaartay Ardhaabuun  
buu isu soo aruuriyey asxaabtiisii iyo  
waziiradiisii oo ku dul akhriyey warqaddii,  
markaa bay waziiradiisii ku yiraahdeen :”  
Oo xaggee baad ka ogaatay inuusan ahayn  
ninkii furan lahaa dhulkan? Waxuu yiri:”

Ninkii furan lahaa dhulkan waa nin uu  
magaciisu ka koobanyahay saddex xaraf”.  
Ergeygii wuu soo laabtay oo Camr bin Al  
Caas ayuu uga warramay waxii dhex maray

Ardhaabuun iyo waziiradiisii.

Kadib buu Camr bin Al Caas warqad u qoray amiirkii Mu'miniinta isagoo ka dalbanayo inuu gurmada usoo diro, waqtigaasina waxay ahayd markii uu Cumar isku diyaarinayey inuu galo dhulka Shaam magaallada Beytul Maqdis si uu u furto.

Kadib Ajnaadeyn waala furtay oo Illaahay Muslimiintii ayuu guul iyo lib ku siiyey, halka cadawgiina ay kujabeen. Muslimiinta waxaa dagaalkan kaga shahiiday khalqi

badan oo ay kamid yahiin saxaabadii

Rasuulka (scw), waxaa kamid ahaa

saxaabadii ku shahiidday C/llaahi bin

Zubeyr bin C/Mudalib oo ay Nebigu (scw)

ilmo adeer ahaayeen, Hubbaar bin Al

Aswad, Dhuleyb bin Cumeyr bin Wahab bin

Kathiir bin Hind (Cabdi) bin Qusay Al

Qurashi Al Cabadiyu oo ay dhashay Nebiga

(scw) eeddadiis Arwaa bint C/Mudalib,

Diraar bin Al Azwar Al Asdi, Salama bin

Hishaam bin Muqiirah oo la dhashay Abuu

Jahal bin Hishaam, Nuceym bin Cabdillaahi

Al Cadawiyu (Al Naxaam), waxaa kaloo la

sheegaa inuu Nucaym ku shahiiday

dagaalkii Yarmuuk.

Abaan bin Saciid bin Al Caas Al Umawi

(sidoo kale waxaa la sheegaa inuu Abaanna ku shahiiday dagaalkii Yarmuuk), Hubbaar bin Sufyaan bin Cabdu Al Asad Al Makhzuumi, iyo saxaabo kaloo badan Illaahay haka raalli noqdee. Waxaa la sheegaa inuu Cikramah ku shahiiday dagaalkan Ajnaadeyn qaar kalena waxay yiraahdaan Yarmuuk Wallaahu Aclam.

Furashadii Beytul Maqdis Cumar bin Al Khaddaab waxuu dhulka Shaam galay afar jeer sida uu Seyf bin Cumar kasoo wariyey shuyuukhdiisa. Mar waxay ahayd inuu ku galay faras waana markii la furanayey Beytul Maqdis oo ahayd markii ugu horreysay ee uu galo Shaam isagoo amiir ah. Marka labaad waxay ahayd inuu galay isagoo saaran awr, marka saddexaadna waxay ahayd inuu galay oo uu gaaray Surac kadibna uu soo laabtay xanuunkii ka dhacay halkaas darteed, marka afraadna waa inuu galay isagoo saaran dameer, siduuba soo min guuriyey ibnu Jariir.

Sida uu soo min guuriyey Ibnu Jariir Ad-Dhabari, sanadkan baa la furtay Beytul Maqdis, sababtuna waxay ahayd markii uu Abuu Cubeydah ka faaruqay Dimashiq buu

warqad u diray reer Iiliyaa isagoo ugu yeeraya xagga Allaah iyo Islaamka, haddii ay diidaanna u bandhigaya jizyo, hadday diidaanna dagaal. Way diideen reer Iiliyaa wixii uu ugu yeerayey Abuu Cubeyda oo aan ka ahayn dagaal, markaa buu ciidamaddiisii la dhaqaaqay.

Dimashiqna waxuu ku dhaafay Saciid bin Zeyd bin Camr Al Cadawi, markaa buu Abuu Cubeydah Beytul Maqdis go'doomin ku qabtay jeer ay dalbadeen heshiis hase ahaatee ay ku shardiyeen in uu u yimaado amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab. Markaa buu Abaa Cubeydah warqad u qoray Cumar bin Khaddaab isagoo arrintaa ku ogeysiinay, Cumarna dadkii reer Madiina iyo saxaabaddii buu kala tashaday inuu baxo iyo inuu joogo.

Cuthmaan bin Cafaan oo kamid ahaa dadkii uu la tashanayey isaguu waxuu soo jeediyey inuusan bixin oo isku mashquulin kuwaas isagoo markaa xaqirayey sheegayna inay yahiin kuwa aan habbooneyn inuu Amiirka Mu'miniinta isku mashquuliyo. Cali bin Abii Daalib oo isaguna kamid ahaa raggii ahlu shuurada waxuu keenay ama soojeediyey inuu Cumar baxo oo uu Muslimiinta howsha



go'doominta usoo dhib fududeeyo uuna soo booqdo si ay taasi niyad dhisugu noqoto. Runtii Cumar fikirkii Cali buu doorbiday oo uu qaatay.

Markaa buu ciidamadiisii la dhaqaaqay isagoo magaalladii Madiinana ku dhaafay Cali bin Abuu Daalib, ciidamadiisa hore waxuu madax uga dhigay Al Cabbaas bin C/Mudhalib, waxuuna qaatay faras si uu u deg dego, waxuuna gaaray goobta Jaabiyah halkaasoo uu ciidamadiisii dejiyey kuna khudbeeyey khudbadiisii caanka ahayd ee uu ku waaninayey.

Kadib waxuu la heshiiyey reer Jaabiyah, kadiba waxuu uguuray Beytul Maqdis, madaxdii goballaduna warqado ayuu uqoray si ay usoo wafdiyaan maalin heblo Jaabiyah oo uu ula kulmo, Markii ay ugu imanayeen halkii uu kula ballamay maalintuu laballamay, Yaziid bin Abii Sufyaan ayuu ahaa qofkii ugu horeeyay ee madaxdaasi kamid ah ee uu Cumar lakulmay, kadibna Abuu Cubeydah ayuu la kulmay, kadibna waxuu arkay Khaalid oo fardooleydii Muslimiinta ku dhex jira.

Markii uu Abuu Cubeydah arkay Cumar buu usoo socday dhankiisa Cumarna uu usoo

dhaqaaqay dhankii Abuu Cubeydah iyagoo  
midiba midka kale u hilloowsanyahay oo uu  
u xiiso qabo, markaa buu Abuu Cubeydah  
damcay inuu dhunkado gacmaha Cumar,  
Cumar baa markaa fahmay oo inta iska  
qabtay damcay inuu dhunkado lugaha Abuu  
Cubeydah, markaa buu Abuu Cubeydana  
fahmay oo uu iska qabtay. Taasi waxay  
muujineysaa sidii ay iskugu hillooween  
raggaa walaalada ah oo kala maqnaa muddo  
afar sano ah Radiyallaahu Canhumaa.  
Madaxdii oo idil way kulmeen kadib markay  
soo boggeen howlahoodii marka laga reebo  
Camr bin Al Caas iyo Shuraxbiil bin  
Xasana, iyagu markaa waxay  
hortaagnaayeen Ardhaabuun oo waxay  
ahayd markii ay socotay carcartankii  
Ajnaadeen. Goor uu Cumar kula  
suganyahay madaxdii goobta Jaabiyah baa  
waxaa yimideen guuto Ruumaan ah oo  
wadato seefo galku ka baxsanyahay,  
markaa

markaa bay Muslimiintii oo hubkooda sita la aadeen dhankoodii markaa buu Cumar ku yiri:" Kuwan waa dad dalbanayo magangalyo". Markaa bay dhankoodii aadeen oo waaba ciidama kayimid dhanka Beytul Maqdis kana dalbanayaan heshiis iyo magan galyo amiirkii Mu'miniinta kadib markay maqleen soo galootigiisa. Markaa buu Cumar kaga jawaabay wixii ay weydiiyeen una qoryay warqad heshiis ah iyo magan galyo, waxuuna kuwaajibiyey jizyo, isagoo kula sharatamay jizyo.

Warqaddii uu Cumar u qoray waxaa goob joog ahaa rag kamid ah madaxdii ciidamada Muslimiinta oo uu kamid ahaa Khaalid bin Waliid, waxaa kaloo joogay C/Raxmaan bin Cowf oo isagu Cumar lasocday, Mucaawiya bin Abii Sufyaan oo isaguna kamid ahaa madaxdii gobalka Shaam, isaga ayaana warqadda qorayey.

Kadib reer Ludd buu warqad kale u qoray isagoo ku waajibiyey inay bixiyaan jizyo kulana heshiiyey mid lamid ah heshiiskii reer Iiliyaa.

Dhanka kale Ardhaabuun waalaga

adkaaday waxuuna u cararay Masar oo halkaa ayuuna ku guuleystay Camr bin Al Caas sidaynu soo xusnay. Markiina uu la heshiiyey reer Ramallah iyo hareerahii dhulkaas buu soo aaday dhankii Cumar bin Al Khaddaab, isaga oo uu lasocda Shuraxbiil bin Xasana, waxayna ugu yimideen Jaabiyah. Waxay utegeen goor uu Cumar faraskiisa saaranyahay, markaa buu usoo degay, markuu arkay oo macaanaqeeyay yacni xabadka xabadka u saaray oo dhunkaday labaduba.

Kadib Cumar waxuu ka dhaqaaqay Jaabiyah isagoo ku jeedo Beytul Maqdis, kadibna wuu galay isagoo Ruumaankiina u qabtay muddo 3 casho ah. Kadib waxuu galay masjidkii isagoo ka galay albaabkii uu Rasuulka SCW ka galay habeenkii dheelmitaanka. Waxaa la sheegaa inuu salaamay masjidka markii uu galay oo uu tukaday labo rakcaddood oo taxiyatul masjid ah isagoo ku tukaday Mixraabu-Daa'uud CS. Salaaddii subax ayuu Muslimiintii halkaa ku tujiyey isagoo akhriyey rakcada koowaad suuradda Saad kuna sujuuday sujuudda dhexdeeda ah, rakcaddii labaadna waxuu akhriyey

suuradda banii israa'iil ( israa ).

Kadib markuu la heshiiyey kulana heshiiyey bixinta jizyo oo Beytul Maqdis, Lud iyo Jaabiyah uu furtay, oo uu madaxdii iyo ciidamadii Muslimiinta la kulmay, muddo dhowr casho ahina uu lajoogay ayuu magaalladiisii Madiina ku laabtay, isagoo Ruumaankii oo idil rucbi iyo argagax ku riday kadib markii ay maqleen soo galootiga uu dhulka Shaam soo galay.

Aan immika uweecanno dhankaa iyo dhacdooyinkii Furus ee sanadkan.

Baabil & Kowthi

Sida uu xusay Ibnu Jariir sanadkan 15aad dhexdiisa bay Muslimiintii iyo Faarisiintii dhex mareen dhacdooyin badan, in kastoo dhacdooyinkaas ay mu'arrakheenta sida Ibnu Isxaaq iyo Seyf bin Cumar iyo Al Waaqidi ay kusheegeen sanadkii 16aad ee Hijriyada. Sida mash-huurka ah oo Ibnu Jariir uu qabo ayaa waxay tahay in markii uu Sacad Qaadisiyah ka faaruqay buu Cumar warqad u qoray dhankii Sacad,



taasoo uu ku amrayo inuu aado Madaa'in oo ahayd xaruntii boqortooyadii Furus, dumarka iyo carruurtana uu ka tego. Markaa buu Sacad ciidamadiisii diyaarsaday, markaa buuna hortiisa diray ciidamadiisii hore oo uu madax uga dhigay Zuhrah bin Xawiyah. Kadib madaxdii baa mid mid isaga daba baxday, dabeetana ciidamadii guud ee uu Sacad hoggaaminayey ayaa dhaaqaaqeen, iyadoo markaa ay ciidamadaasi siteen fardo iyo hub aad u tiro badan. Dagaalkii Qaadisiyah waxaa u xil saarnaa dagaal gelinta ciidanka Khaalid bin Curfadhah, halkii booskiisa buu Sacad ka qaaday oo uu u dhiibay wiilkii walaalkiis ee Haashim bin Cutbah bin Abii Waqaas, Khaalidna waxuu udhiibay ciidamadii dambe. Markaa buu Sacad dhaqaaqay isagoo wata hub iyo fardo tiro badan, markaana waxay ahayd iyadoo maalmo ay ka dhimantahay bishii Shawaal ee sanadkan. Waxay degeen ciidamadii halka ay maanta tahay magaallada Kuufa, markaa buu Zuhrah bin Xawiyah hortooda guuray isagoo ku sii jeedo magaalladii Madaa'in ee xaruntii boqortooyadii Furus. Waxuu Zuhrah dhaxda kula kulmay Busbuhri oo

hoggaaminayo ciidamo Faarisiin ah kadibna wuu jebiyey. Jabkii Faarisiinta ee ka cararay Zuhrah baa waxay orad ku galeen Baabil, halkaana waxaa ku sugnaa kuwii kasoo jabay maalintii Qaadisiyah. Markaa bay madax ka dhigteen Feyruzaan.

Markaa buu Zuhrah warqad u diray dhankii Sacad bin Abii Waqaas, taasoo uu ku ogeysiinayo in Baabil ay isugu tegeen jamac kuwii Qaadisiya kasoo jabay iyo weliba kuwo uu isagu jebiyey, oo ay weliba madax kadhigteen Feyruzaan . Markaa buuna Sacad ciidamadiisii lasoo dhaqaaqay isagoo ku jeedo dhankii Baabil, halkaa ayayna Sacad iyo Feyruzaan isku heleen oo uu ku jebiyey. Jabkii kuwii cararay ee Majuusta baa waxay uqeybsameen labo qeybood, qeybiyadu u carartay dhankii Madaa'in iyo qeyb kaloo u carartay dhanka Nahaawunda. Sacad maalmo ayuu kusii nagaan Baabil, kadib buuna ka dhaqaaqay isagoo u boqaallay dhankii Madaa'in. Dhexda ayuu kula kulmay koox kaloo Faarisiin ah, waxaana dhex maray dagaal aad u kulul. Markaa buu amiirkii ciidamadaas oo la oran jiray Shahryaar mubaarizo soo baxay,

markaa baa waxaa u baxay nin kamid ah ciidamadii Muslimiinta oo la oran jiray Abuu Nabaatah Naa'il bin Jushcum Al Acraji muddo bay is laaclaaceen iyagoo fardahooda dul saaran, markaa bay markii dambe qoorta isla galeen, dabeetana ay dhulka Iskula dhaceen, Shahrayaar baa waxuu kudul dhacay xabadka Abuu Nabaatah dabeetana jeebta ayuu gacanta geliyey si uu ula soo baxo mindi qinjir ah oo uu doonayey inuu ku qalo, hase ahaatee Abuu Nabaatah Naa'il bin Jucshum baa waxuu afka la helay fartii Shahrayaar oo uu qaniinyo dhab siiyey illaa uu nafsaddiisii u mashquuliyey markaa buu kaga itaal roonaaday inuu qinjirkii ka qaado dabeeto buu darsiiyey oo uu ka tallaabsaday waxuuna ka furtay wixii hub iyo salab ahaa ee uu sitay iyo faraskiisii. Sacad bin Abii Waqaas waxuu u jideeyey inuu qaato wax alliyo wixii uu ka furtay oo hub iyo faras iyo hanti, waxuuna Sacad amray inuu Abuu Nabaatah ku dagaal galo faraskii uu kafurtay Shahrayaar, markaa buu isagiina Abuu Nabaatah fuulay faraskii oo uu ku dagaallamayey. Goobtu waxay ahayd Kowthi, markaa buu Sacad booqday halkii lagu xabbisay Nebiyullaahi Ibraahiim Al

Khaliil CS, waxuuna markaa Sacad  
akhriyey qowlka Alle Sarreeye ee ah:  
Waana sidaas (adduunyadu) waa maalmo oo  
waxaanu ku kala wareejinnaa dadka  
dhexdiisa. Suuradda Aali Cimraan aayadda  
140aad.

Nahar-Sheer (Bahuraasiir)

Mucjamul Bildanka waxaa kusugan magaca  
ah Buhuraasiir sidaa si lamid ahna Taariikh  
Ad Dabaqaat waxaa ku qoran Bahurasiir,  
qaar kalena waxay yiraahdaan sida kusugan  
Al Bidaaya wan Nihaaya: Nahar-Sheer.

Magaalladan Bahurasiir ama Nahar-Sheer  
waxay ahayd mid kamid ah magaallooyinkii  
la isku oran Jiray Al Madaa'in.

Sababta dhacdadani waxay ahayd Sacad  
baa wuxuu diray Zuhrah bin Xawiyah  
hortiisa isagoo u diray dhanka Bahuraasiir  
ama Nahar-sheer. Markaa bay ku kulmeen  
Shayrizaad goobta Saabaadh, halkaasoo uu  
kula heshiiyay inay bixiyaan Jizyo. Kadib  
buu Zuhrah u diray dhanka Sacad heshiiskii  
iyo jisyadii uu ka guntay Shayrizaad.

Markaa buu Sacad ciidamadiisii soo dhaqaajiyey illaa uu soo gaaray meel la yiraahdo Mudlem Saabaadh, halkaasina waxaa kusugnaa jamac Faarisiin ah, waxaayna dariiqa Muslimiinta dhigeen libaax weyn oo uu lahaa boqorkii Kisraa, waxaana libaaxaasi la oran jiray Muqarridh. Markaa buu Sacad dhankii libaaxa u diray wiilkii walaalkiis, Haashim bin Cutbah ibnu Abii Waqaas oo dilay libaaxii dadkii oo eegayo, maalintaa baana seyftiisii loogu magac daray Seyful Matiin, markaa buuna Sacad dhunkaday madaxa Haashim, Haashimna waxuu dhunkaday lugaha Sacad.

Kadib Haashim baa weerar ku qaaday Faarisiintii illaa uu durkiyey isagoo akhrinayo qowlka Alle Sarreeye:" Oo maweydaan ahayn kuwii horey ku dhaartay inayan idiin sugnaan wax tegid ah". Suuradda Ibraahiim aayadda 44aad.

Markii habeenkii la gaaray bay Muslimiintii rarteen oo ay dul degeen Bahuraasiir (Nahar-Sheer), markastooy guuto kamid ah ciidamada Muslimiinta gaaraan halkaas way



takbiirsanayeen, illaa markii dambe uu yimid ciidankii weynaa ee Sacad, halkii bayna dul degeen oo ay go'doomin ku qabteen.

Sanadkan waxaa dadka xajiyey Cumar bin Al Khaddaab, masuuliyiinta goballaduna waxay ahaayeen: Shaam Abaa Cubeydah, Ciraaqna Sacad bin Abii Waqaas, Dhaa'if waxaa masuul uga ahaa Yaclaa bin

Umayah, Baxreen iyo Yamaama-na waxaa masuul uga ahaa Cuthmaan bin Abil Caas Al Thaqafi, Cummaanna waxaa masuul uga ahaa Xudeyfah bin Muxsin. Sidaa waxaa qabo Ibnu Jariir.

## SANADKII 16AAD

Bilashadii sanadkan howlahii sidii hore waa ay ka fududaadeen, Sacad-na waxuu dul degnaa Buhurasiir oo kamid ahayd magaallooyinkii laysku oran jiray Madaa'in, waxay magaalladani daanta galbeed ka xigtay webiga Furaat. Waqtiguu Sacad halkaa tegay waxay ahayd bishii Dil Xijjah ee sanadkii 15aad, oo sanadkan howshii way u fududaatay iyadii ayuuna dul daganaa.

Sacad intuu halkaa joogay waxuu diray fardooley wardoon ah, hase ahaatee cidi maysan soo helin aan ka ahayn inay soo qabqabteen 100 000 oo qotidii reer Furus. Markaa buuna Sacad warqad u diray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab, taasoo uu kala tashanayo siduu ka yeeli lahaa. Markaa buu Cumar soo amray in haddaysan la dagaallamin uu iska sii daayo, oo uu u bandhigo marka hore inay islaamka qaataan. Sacad Islaamkii buu ubandhigay oo xagga Alle buu ugu yeeray, wayse ka diideen waxayna doorteen inay bixiyaan jizyo, kadibna wuu iska sii daayey.

Majirin beeraley kunooled dhul kamid ah wixii galbeedka ka jiray webiga Dajlah ee xigay dhulka Carabta illaa waxay hoos imanayeen dowladdii Islaamka iyo inay bixiayan jizyo. Magaalladii Bahurasiir waxay diidday Sacad diidis tii ugu darneed inuu haweysto. Markaa buu u diray Salmaan Al Faarisi si uu xagga Alle ugu yeero, suu xagga Alle ugu yeeray, ama jizyo ama dagaal. Hase ahaatee way diideen wixii uu ugu yeeray oo aan ka ka ahayn dagaal iyo

caasin. Markaa bay xireen manjaaniiq iyo dabaabaat. Markaa buuna Sacad amray ciidamadii Muslimiinta in la sameeyo manjaaniiq, waxaana la sameeyay 20 manjaaniiq oo lagu dul xiray magaalladii Bahurasiir, go'doomintiina way ku adkeeyeen. Reer Buhurasiir (Nahar-Sheer) waxay ahaayeen kuwa mararka qaar soo baxa oo dagaallamo, waxayna ku dhaaranayeen inaysan carareynin abad, hase ahaatee Alle baa beeniyey dhaartoodii kadib markii uu jebiyey Zuhrah bin Xawiyah oo uu ka laayey tiro aad u badan oo Faarisiin ah, markaa bay hortiisii carareen oo magaalladii galeen.

Muslimiintii go'doomintii ayay ku qabteen oo weliba kusii adkeeyeen, heer dadkii baladka qaajo daran qabatay oo ay bahallada cuneen. Nin iyagii kamid ah baa Muslimiinta uyimid oo ku yiri:- Boqorku waxuu idin leeyahay Ma dooneysaan inaad inalagu heshiisaan inaan yeelanno waxiiwebiga Dajlah xagga buurtayada ka xigo, oo aad idinna yeelataan waxii webiga Dajla xagga buurtiina ka xigo? Oo ma ku dheregteen, Alle calooshiinnu ma dherjiyee?

Markaa baa waxaa dadkii kasoo dhex booday nin la oran jiray Abaa Muqarrin (ama Abuu Mufarriz) Al Aswad bin Qudhbah oo Alle baa ka hadashiiyey isagoon ogeyn waxuu ku hadaaqay. Ninkii Faarisiga ahaa wuu laabtay, markaa bay Muslimiintii arkeen Faarisiintii oo ka guureyso magaalladii Bahurasiir una guureyso Madaa'intii weyneed. Markaa bay dadkii Abuu Mufarriz ku yiraahdeen:- Oo maxaad ku tiri (waa iyaga guuraye)? Markaasuu ku yiri:- Kan Muxammed SCW xaq kusoo diray baan ku dhaartaye garan maayo waxii aan ku iri, kaliya (waxaan ogahay) inay sakiinad igu soo degtay, waxaana rajeyn inuu noqdo waxii aan ku hadaaqay waxa ugu wanaagsan. Dadkii baa waxay gudo galeen inay arrintaa wax ka weydiiyaan, waxaana kamid ahaa dadkii su'aalayey Sacad bin Abii Waqaas oo isagu halkuu degnaa ugu tegay markaasuu ku yiri:" Maxaad ku tiri? Illaah baan ku dhaartaye waa iyaga cararay.

Markaa buu Abaa Mufarriz ugu dhaartay inuusan garaneynin waxii uu yiri.

Sacad bin Abii Waqaas dadkii buu ka dhex

dhawaaqay isagoo ku amrayo in manjaaniqa lagu gano magaallada. Dabeeto nin baa ka dhex qayliyey kamid ah dadkii baladka oo dalbanayo magangalyo, markaa bay magan geliyeen. Waxuu ninkii yiri:" Illaah baan ku dhaartaye cidi kuma sugno baladkan".

Muslimiintii markii ay soo galeen waxay yimideen magaalladii oo cidlo ah oo aysan qofna kula kulmin, idil waxay u carareen Madaa'intii weyneed.

Wagtigaas waxuu ahaa bishii Safar ee sanadkan. Muslimiintii markii ay soo galeen magaalladii Bahurasiir waxay doon dooneen qasrigii caddaa ee Madaa'in. Waa qasrigii boqorka ee uu horey u xusay Rasuulka SCW inay furan doonaan umaddiisa.

Markaasi waxay ahayd goor waa bari ah, waxaana u hor arkay Diraar bin Khaddaab markaasuu yiri:" Allaahu akbar ( Qasrigii ) caddaa ee Kisraa, waxa kani waa waxii ay inoo yabooheen Allaah iyo Rasuulkiisa SCW". Markaa bay Muslimiintii dhankiisii wada eegeen, dabeetana ay takbiir kuwada qaabileen illaa uu ooggu ka baryay.



## Furashadii Madaa'in

Markii uu Sacad furtay Bahurasiir oo uu dajiyey, sifadii uu markaa ku galayna waxay ahayd iyadoo cidlo ah waxbana uusan ka helin, bal ee gedigood Faarisiintii waxay u wareegeen Madaa'intii weyneed iyagoo webiga Dajlah ku gooshay doonyo, wixii hanti ahaana rarteen. Sacad bin Abii Waqaas ma uusan haysan wax doonyo ah oo uu ciidamadiisa ku raro si uu uga daba tego cadawga. Webigii Dajla wuu kacay oo mowjadaha hirka waxay ahaayeen kuwa aad u waaweyn. Markaa baa waxaa soo gaaray Sacad war ah in boqorkii Kisraa ee Yazdajrid uu doonayo inuu ka guuro magaallada Madaa'in oo uu u wareego Xulwaan, isagoo waxii hanti uu lahaa oo idilba aruursaday, haddiisanna uu Sacad ka gaarin muddo saddex casho gudahooda ah inuu ka tegi doono oo uusan gaariyenin bay usoo tabiyeen wardoonnada. Markaa bay arrini Sacad ku caddaatay, dabeetana ciidamadii buu ka dhex kacay oo Alle mahadiyey oo amaanay kadib buu u khudbeeyay isagoo usheegay in cadawgu uu

ka maciinsaday baddan (Webiga Dajlah oo kacay), waxuuna Sacad isoo webiga dul taagan usheegay ciidamadiisii inay isagu ka go'antahay inuu galo webiga oo uu dhex goosha illaa uu dhanke kale tego oo uu markaana cadawga la kulmo. Ciidamadii oo idil waa ay ku raaceen inay iyaguna la galaan biyaha, waxayna yiraahdeen:" Alle baa innaga iyo adigaba inoo gooyay falka kiisa toosan".

Sacad waxuu ciidamadii ka soo dhex saaray kudhawaad 600 si ay iyagu marka hore u galaan oo ay utamkiiniyaan dhanka kalee webiga, waxuuna madax uga dhigay Caasim bin Camr.

Caasim baa ciidamadii lixda boqol ahaa ka kaxaystay 60 fardooleydii geesiyaasha ee farakutiriska kamid ahayd si ay marka hore iyagu u galaan. Markaa bay 60-kii fardooleyda ahayd wada galeen biyahii, waxayna ukala qeybsameen labo qeybood, qeyb kuwii fardaha labka sitay iyo qeybta kaloo ahayd kuwii fardaha dheddiga sitay. Faarisiintii markii ay arkeen iyagoo dul socda biyaha bay yiraahdeen:" Diiwana!

Diiwaana! oo ay ula jeedaan Majaaniin!  
Majaaniin! oo lamacno ah waa kuwo  
waalan''.

Waxay yiraahdeen:" Ma la dagaallameysaan  
dad bal ee waxaad la dagaallameysaan  
jinni''. Kadib waxay Faarisiintii soo direen  
fardooley iyaga kamid ah si ay Muslimiinta  
ugu diidaan inay biyaha kasoo baxaan,  
markaa buuna Caasim asxaabtiisii amray  
inay ay gammuunka iyo waramada lasoo  
baxaan oo ay indhaha ka tuuraan. Markiina  
ay usoo dhawaadeen birrigii bay waramada  
kaga shaqeeyeen oo ay fardahoodii indhaha  
ka tuureen, kadibna Faarisiintii dib bay  
ulaabteen iyagoo awoodi kari waayey inay  
Muslimiintu hor istaagaan ilaa ay markii  
dambe ka baxeen biyahii. Markaa buu  
Caasim raacdeystay illaa uu ka eryay  
dhankii kale.

Intii kalee ka hartay asxaabtii Caasim ee  
lixda boqol ayaa iyana soo galeen, waxayna  
utageen asxaabtoodii kale ee dhanka kale  
joogtay oo ay lajirkooda la dagaal galeen  
illamaa ay dhankaas ka eryeen Faarisiintii  
oo ay tamkiiniyeen.

Guutada hore ee ciidamadaas waxaa lagu magacaabi jiray Katiibatu Al Ahwaal, waxaana madax u ahaa Caasim bin Camr sidaynu soo xusnayba. Guutada labaadna waxaa la oran jiray Katiibatu Al Kharsaa waxaana madax u ahaa Al qacqaac bin Camr. Sidaa ayada ah guud ahaan ciidamadii kale ee Sacad waxay daawanayeen sida ay fardooleyda Muslimiinta ugalayaan majuusta Faarisiinta, Sacadna waxuu taagnaa webiga jinkiisa.

Ciidamadii kale ee haray ayaa iyaguna dhammaantood soo galeen, waxayna markaa ahayd markii ay arkeen in fardooleydii Muslimiinta ay haggajiyeen dhankii kale oo ay Faarisiintii ka eryeen. Waxuu Sacad amray markii ciidamadu Muslimiinta ay galayeen biyaha inay yiraahdaan:" Nastaciinu Billaah, wanatawakalu caleeyhi, Xasbunallaah wanicmal wakiil, walaa xowla walaa quwati illaa Billaahil Caliyul caziim". Kadib faraskiisii buu la galay, Muslimiintii oo idilna way lasoo galeen oo cidi kamaysan harin. Markaa bay biyahii ku dul socdeen

sida ay dhulka ugu socdaan oo kale,  
waxayna buuxiyeen labadii dhinac ee  
webiga. Biyaha ayay ku dul  
sheekeysanayeen sida ay dhulka ugu  
sheekeystaan oo kale, mana jirin wax biyo  
ah oo soo gaarayey alaabtooda iyo heeryada  
fardaha toona. Taasi waxay timid kadib  
markii ay dejisay xasilooni oo kalsooni  
dhammeys ah ay qaateen iyagoo ku rajo  
weynaa yabooha iyo gargaarka Alle, tiiyoo  
uu ciidamadaasi amiir u ahaa Sacad bin Abii  
Waqas oo kamid ahaa 10kii jannada loogu  
bishaareeyay uuna Rasuulka SCW  
geeriyooday isagoo ka raalli ah oo weliba u  
duceeyay isagoo leh:" Alloow!! ajiib  
ducadiisa oo ganiddiisuna sug".

Ulajeeddadu waxay tahay Sacad wuxuu  
ahaa amiirkii ciidamadaasi Muslimiinta ee  
maalintaa iyada ah, uuna ciidamada u  
duceeyey isagoo Rabbiga Sarreeye ka  
baryey guul iyo badbaado. Gamuun buu  
Sacad ku ganay hirkii biyaha, markaa buuna  
Alle u adkeeyay oo ku nabad yeelay, mana  
jirin cid Muslimiinta kaga hafatay biyaha  
ama ay wax kusoo gaareen, marka laga  
reebo nin isago faraskiisa ka sibiqaday



durbana waxaa qabtay Al qacqaac bin Camr oo kamid ahaa geesiyaashii Muslimiinta. Markaa buu ku toosiyey reeryadii faraska illaa uu si saani ah ugu fadhiisiyey. Ninkaa isaga ah waxaa la oran jiray Qurqadah Al Baaruqiyu. Waxuu yiri:" Haweeni way ka caajistay inay dhasho Al qacqaac bin Camr oo kale".

Sidoo kale majirin hanti kaga fakatay Muslimiinta biyahaas, marka laga reebo weel ka sameysnaa geed oo uu lahaa nin la oran jiray Maalik bin Caamir, isagiina Alle ayaa usoo celiyey kadib markii uu ka baryay inuu usoo celiyo weelkiisii. Mowjadahii hirka baa soo celiyey oo keenay dhankii ciidamadu Muslimiintu ay marayeen, markaa bay inta soo qabteen u dhiibeen ninkii lahaa. Maalintaa iyada ah waxay ahayd maalin weyn oo mucjiso weyn ay dhacday, waxayna ahayd mucjiso kamid ah mucjisooyinkii uu Rabbi SW usoo dejiyey addoomadiiisa. Tanoo kale ayaanan horey uga dhicin dhulka Furus iyo dhulalkii kaleba, marka laga reebo qadiyaddii Al-Calaa bin Xadramiy ee ka dhacday dhulka Baxreyn, hase ahaatee tan ayaa ahayd mid ka weyn kana mucjiso

ballaaran, waayo ciidamadani way ka badnaayeen ciidamadii Al Calaa oo wayba ku dhowr jibbaarmayeen.

Wuxuu Sacad maalintaa yiri:" Kan nagu filan waa Allaah, isaga ayaana unicmo badan wax la talo saarto. Illaah baan ku dhaartaye wuu u gargaari doonaa Alle weligiisa, wuuna dahirin doonaa diintiisa oo wuuna jibin doonaa cadowgiisa, hadduusan ciidanku kujirin mid baqyi ah ama aysan jirin dunuub ka adkaan karto xasaanaadka".

Salmaan Al Faarisi oo Sacad la socday ayaa isaguna waxuu yiri:" Islaamku waa jadiid, oo Illaah baan ku dhaartaye Alle baa u jeexay badda siduuba ugu jeexay berriga (yacni dariiq buu uga sameeyay). Kan (Allaaha) ay nafta Salmaan gacantiisa (awooddiisa) kujirto baan ku dhaartaye waxay (Muslimiintu) uga bixi doonaan (biyaha) koox koox siday markii horeba kusoo galeen koox koox".

Markii ay Muslimiintii ka baxeen biyahii bay galeen magaalladii Madaa'in oo ay horey

Faarisiintii uga baxeen, cidina kulmaysan kulmin Muslimiintu magaallada, oo boqor Yazdajridna wixii uu hantidiisa ka qaadan karayey iyo ehelkiisii ayuu ka qaatay oo uu aaday dhanka Jolowlaa. Wuxuu Yazdajrid ka tegay hanti badan oo tabar uu ku qaado u waayey, sabab la xiriirta isagoo naftiisa la cararayey darteed, waxaana la sheegaa keydkii Kisra inay maalintaa kujirtay 1000 000 000 000 Diinaar, intay awoodi kareen ayayna ka qaateen intii kalena waa ay ka tegeen, waxaana lagu qayaasaa hantiday ka tegeen nus kamid ah keydkii Kisraa oo aan runtii lasoo koobi karin tira badnida uu qabay.

Markii ugu horeeysay waxaa galay magaallada guutadii la oran jiray Katiibatu Al-Ahwaal, kadibna waxaa galay guutadii labaad ee iyana la oran jiray Katiibatu Al-Kharsaa.

Sacad bin Abii Waqaas iyo ciidamadiisii ayaa misna soo galeen magaalladii, waxuuna arkhinayey Sacad markuu soo galayey qowlka Alle Sarreeye:" Oo immisay ka tageen beero iyo dur durro, iyo tallaalo iyo

meelo sharaf leh, iyo nicmooyin ay ku raaxeysan jireen? Xaalku waa sidaas, oo waxaanu dhaxalsiinnay qowm kale (oo Muslimiin ah)". Suuratu Dukhaan aayadaha 25aad illaa 28aad.

Waxuuna Sacad tukaday markuu soo galay 8 rakcadood oo ah salaadda furasha. Seyf bin Cumar siduu xusay waxuu leeyahay:" Sacad waxuu tukaday siddeeda rakcadood isagoo mar qura salaamo noqdsaday". Kadib waxuu ciidamadii Muslimiinta tujiyey salaaddii jumcaha ee ugu horeysay, taasoo ahayd tii ugu horeysay ee dhulka Ciraaq lagu tukado, sababtuna waxay ahayd inuu Sacad niyooday inuu kusii naqaado Madaa'in.

Kadib wuxuu diray Sacad sirriyaad uu ku diray raadkii kuwii jabay iyo Yazdajrid. Waxay sirriyadaasi is heleen koox Faarisiin ah oo ay diriri dhex martay, dabeetana ay jebiyeen kana soo furteen hanti badan oo kamid ah wixii ay Madaa'in kala carareen oo u badnaa dhar, gaar ahaan lebbiskii boqor Yazdajrid, taajkiisii iyo xuliyad badan oo la isku qurxiyo. Sacad bin Abii Waqaas waxuu

amray in la isku soo aruuriyo hantidii laga soo furtay kuwii jabay iyo tii weliba laga qaniimeystay Madaa'in.

Markuu Sacad furtay magaalladii Madaa'in oo uu degay qasrigii caddaa ayuu arkay sanamyo dhowr ah oo midi uu gacanta ku ishaarayo meel, halkii buu markaa Sacad amray in la qodo. Dabeeto waala qoday waxaana laga soo saaray hanti aad u tiro badan oo ah keydkii boqorradii hora ee Kisraa. Muslimiintii waxay halkaa ka qaniimeysteen hanti aysan cidi horey ugu arag dunida wax ka cajiibsanaa, waxaana kamid ahaa hantidaas taajkii weynaa ee Kisraa, kaasoo ka sameysnaa jowharad indhuhu soo jiidanayso. Waxaa kaloo kamid ahaa seyftii boqorka iyo hanti kaloo badan oo u badneyd dahab, lu'lu, fiddo iyo jowhar faro badan. Waxaa kalooy ka heleen maab fidsan oo aad weyn oo ka sameysnaa dahab iyo jowharad, waxaana ku sawirnaa dhammaan goballada dhulka Furus iyo weliba inta dhul hoos timaaddo boqortooyada Faaris. Boqorka ayaa ka eegan jiray dhulalka uu utaliyo, iyo webiyadiisa iyo dhulbeereedka dhulka hoos



yimaado isaga.

Taajku wuxuu ahaa mid weyn, oo markuu boqorku ku fadhiisto kursiga boqortooyada ayaa kor looga keenayey taajka oo ay ku xiranyahiin silsilado waaweyn oo ka sameysan dahab, kuwaasoo kor u celinayo, waayo taajka ayaa waxuu ahaa mid culus oo uusan boqorku awoodin inuu madaxa ku haayo, sidaa darteed isaga madax ayunbuu la galayey oo silsiladaha dahabka ah ayaa kor uga haaynayey. Markuu fadhiisto oo xijaabka laga qaado bay madaxdiisa iyo dadkiisa sujuud ula dhici jireen. Kadib markuu isku soo aruuriyey Sacad xoolahii Aqbaadhka ( qaniimadii inta aan la qeybinin ) buu u madax uga dhigay Camr bin Camr bin Muqarrin, hantidii ugu horeeysay ee uu isku soo aruuriyana waxay ahayd tii uu ka helay qasrigii caddaa.

Runtii waxay ahayd hanti aanan lasoo koobi karin tiro badni awgeed iyo kala nooc nooc ay qabtay darteed, wuxuuna intaa dabadeed Sacad u xil saaray qaybinta qaniimada Salmaan Al Faarisi kadib markuu ka saaray khumuskii, markaa buu qofkii faras watay

helay 12 000. Ciidankoo idilna waxay ahaayeen fardooleey.

maabkii qariidada iyo dharkii Yazdajrid wuxuu Sacad kudaray khumuskaa qaniimada, waxuuna udiray dhankii Cumar iyo Muslimiintii Madiina si ay u eegaan oo ay ula yaabaan. Wuxuuna u dhiibay Bashiir bin Khasaasiyah. Bishaaradii guushana waxuu u dhiibay Xuleys bin Filaan Al Asadi. Markii uu Cumar arkay hantidaas waxuu: "Qowmka keenay hantidan waa aaminiin". Markaa buu Cali yiri: "Adiga ayaa dhowrsanaatay, markaa bayna raciyadaadii dhowrsanaatay, saa haddii aad daaqi lahayd iyana way daaqi lahaayeen". Dabadeed Cumar hantidii buu dadkii u qeybiyey Calina waxuu saami u helay gobal kamid ah maabkii qariidada, markaasuu ku iibiyey 20 000.

Cumar bin Khaddaab markii loo keenay waxyaabahii uu Kisraa isku qurxin jiray ee xuliyadka ahaa ayuu jinjimahii Kisraa ee dahabka ahaa u dhiibay Suraqa bin Maalik bin Jucshum. Suraqa horey buu Rasuulka SCW ugu ballan qaaday inuu heli doono

jinjimaha Kisraa. Markiina uu Cumar u gelinayey Suraqa jinjimaha ayuu ku yiri:" Dheh Allaahu akbar". Markaasuu yiri:" Allaahu akbar". Waxuu yiri Cumar:" Dheh mahad waxaa iska leh Allahii kasoo qaaday Kisraa bin Hurmuz ee u geliyey Suraqa bin Maalik acraabigii reer banii Mudlaj". Markaa buu Suraqana sidaa yiri, markaasuu Cumarna yiri kadib markuu arkay jinjamahii oo kujiro gacantii Suraqa:" Mahad waxaa iska leh Allahii kasoo qaaday Kisraa oo u geliyey Suraqa bin Maalik acraabigii reer banii Mudlaj".

Kadib Cumar waxuu yiri:" Alloow! adiga ayaa u diiday hantidan Rasuulkaadii iyo Nebigaadii SCW, waxuuna ahaa mid aad iga jeceshahay oo agtaadana iiga sharaf badan. waxaadna u diiday Abuu Bakar oo ahaa mid aad iga jeceshay, agtaaduna iiga sharaf badan. Markaa baad aniga isiisay, waxaan kaa magan galayaa inay noqoto siismo aad igu dhagreyso". Kadibna si aad buu u ooyey. Kadib C/Raxmaan bin Cowf ayaa u tilmaamay inuu qeybiyo, sidii buuna Cumar sameeyey oo sidii hantidii iyo qaniimadii Qaadiyiya oo kale ayuu u qeybiyey.

Cumar bin Khaddaab markii loo keenay waxyaabahii uu Kisraa isku qurxin jiray ee xuliyadka ahaa ayuu jinjimahii Kisraa ee dahabka ahaa u dhiibay Suraqa bin Maalik bin Jushum. Suraqa horey buu Rasuulka SCW ugu ballan qaaday inuu heli doono jinjimaha Kisraa ee dahabka ahi. Markiina uu Cumar u gelinayey Suraqa jinjimaha ayuu ku yiri: "Dheh Allaahu akbar".

Markaasuu yiri: "Allaahu akbar".

Waxuu yiri Cumar: "Dheh mahad waxaa iska leh Allahii kasoo qaaday Kisraa bin Hurmuz ee u geliyey Suraqa bin Maalik acraabigii reer banii Mudlaj". Markaa buu Suraqana sidaa yiri, markaasuu Cumarna yiri kadib markuu arkay jinjamahii oo kujiro gacantii Suraqa: "Mahad waxaa iska leh Allahii kasoo qaaday Kisraa oo u geliyey Suraqa bin Maalik acraabigii reer banii Mudlaj".

Kadib Cumar waxuu yiri: "Allahu! adiga ayaa u diiday hantidan Rasuulkaadii iyo nebigaadii SCW, waxuuna ahaa mid aad iga

jeceshahay oo agtaadana iiga sharaf badan. waxaadna u diidday Abuu Bakar oo ahaa mid aad iiga jeceshay, agtaaduna iiga sharaf badan. Markaa baad aniga isiisay, waxaan kaa magan galayaa inay noqoto siismo aad igu dhagreyso''. Kadibna si aad buu u ooyey. Kadiba C/Raxmaan bin Cowf ayaa u tilmaamay inuu qeybiyo, sidii buuna Cumar sameeyey oo sidii hantidii Qaadisiya oo kale ayuu u qeybiyey.

## Dhacdadii Jalowlaa

Markuu ka dhaqaaqay Kisraa Yazdajrid bin Shahryaar magaalladii Madaa'in isagoo u cararayo Jalowlaa buu dhexda sii dhigay ciidamo cawaantii reer Furus ah oo tiro badan, waxuuna madax uga dhigay amiir la oran jiray Mihraan isagiina Kisraa waxuu usii gudbay Xulwaan. Ciidamadii uu u diyaariyey inay isaga iyo Muslimiinta kala dhex galaanna waxuu uga tegay Jalowlaa, iyadoo ay ka qoteen god aad u weyn hareeraheeda, halkaasoo ay la yimideen cudud iyo cadad iyo qalab tiro badan.

Markaa buu Sacad warqad u diray amiirkii



Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab isagoo kula socod siinayo xaaladdu siday tahay.

Cumar ibnu Al-Khaddaab waxuu soo qoray in uu Sacad dego magaallada Madaa'in oo uu xurun ka dhigto, iyo in uu madax uga dhigo wiilkii walaalkiis ee Haashim bin Cutbah ciidamo uu kudirayo raadkii Kisraa Yazdajrid, iyo in ciidanka hore ee ciidamadaas madax looga dhigo Al qacqaac bin Camr, midigtana masuul looga Sacad bin Maalik, iyo in dhanka bidixdana loo dhiibo walaalkiis Cumar bin Maalik, halka uu soo amray in ciidamada dambena madax looga dhigo Camr bin Murrah Al Juhani. Sacad bin Abuu Waqaas sidii uu amiirkii Mu'miniinta soo amray ayuu sameeyay waxuuna diray wiilkii walaalkiis Haashim Cutbah bin Abii Waqaas iyo ciidamo culus oo uu hoggaaminayo oo kudhaw 12 000, waxaana kujiray ciidankaas saadaaddii Muslimiinta iyo horwadeennaddii Muhaajiriin iyo Ansaar iyo madaxdii Carabta. Markaasina waxay ahayd bishii Safar ee sanaddan dhexdeeda goor laga faaruqay howshii Madaa'in. Ciidamadii Muslimiinta waa ay dhaqaaqeen oo way

socdeen jeer ay dul degeen majuustii oo god  
ka qodatay Jalowlaa, markaa buuna  
Haashim go'doomin ku qabtay, waxaana  
dhacaysay inay dhowr jeer soo baxeen  
Majuusta oo ay dagaallameen dagaallo aan  
horey looga baran lana maqal. Boqorkii  
Kisraa ee Yazdajrid waxuu gudo galay inuu  
gurmad iska soo dabo diro, sidaa si lamid  
ahna Sacad bin Abii Waqaas wiilkii  
walaalkiis buu isaguna gurmad usoo dirayey  
marba marka ka dambeyso. Waxaa  
kululaaday dagaalkii iyadoo gurmadkuna uu  
labada dhinac iska soo daba dhacayo, oo  
intaa ka gadaal waxaa huray dabkii  
dagaalka, markaas buu Haashim bin Cutbah  
ciidanka ka dhex kacay oo u khudbeyay oo  
dadka ku booriyay dagaalka, oo uu Alle-na  
tala saartay. Faarisiintii waxay isku  
dhaarsadeen oo ay kuballameen iyagoo  
kudhaaranayo dabka inaysan dib dambe  
cararin jeer ay Muslimiinta tiiriyaan.

Maalintii dambe ee ugu darneyn, waa  
maalintii loo yaqaannay "Yowmul Furqaan"  
ama sidoo kale loo yaqaannay "Yowmul  
Fasli", waxay isku waafaqen inaysan  
cararin majuusta , waana maaalintii ugu

darreyd dagaalka. Waxaana muslimiintii lagu gaaray salaaddi duhurka oo ay tukadeen. Dabeeto buu Al qacqaac dadkii ka dhex kacay oo guubaabiyey kheyr iyo guulona uu ugu bishaareyay.

Intaas kadib buu intuu Al qacqaac kaxaystay koox kamid ah halyeeyadii Muslimiinta oo geesiyaal ah ayuu habeenkii markii la gaaray ku dhuuntay mugdiga oo uu abbaaray dhankii ciidanka Faarisiinta oo uu dabadeedna uu socday ilaa uu ka gaaray albaabkii khandaq ( godka ). Lama dareemin oo lama ogaan Al Qacqaac illaa uu isagu ku qeyliyey " Muslimiintiyeey waa kan amiirkiinni oo taagan albaabkooda". Markaas bay Faarisiintii isku dhex yaaceen, Muslimiintiina waxay usoo dhaqaaqeen dhankii Al Qacqaac. Markaas bay Faarisiintiina kala firxadeen intooda ordi kareysay oo Muslimiintiina jiha waliba ka dooxateeyeen, oo dhufeys walbana u galeen. Halkaasna waxaa looga dilay 100 kun oo meydhoodii baa meel waliba daadsanaa.

Markaas bay muslimiintii qaniimeysteen maal badan , hub, dahab, iyo fida, maalkaas

oo kudhaw maalkii iyo qaniimadii laga helay Madaa'in.

Markii ay Majuustii jabeen buu Haashim bin Cutbah firxadkoodii kadaba diray Al qacqaac bin Camr. Markaasuu Al qac qaac bursaday firxadka kuwii jabay oo uu sii laaynayey, waxuuna dilay Mihraan.

Feyruzaanna waxuu daa'imaay inuu jabka kuwii cararay uu dhexda ka galo. Waxuu Al qac qaac ka furtay dumar iyo carruur iyo hanti tiro badan, iyo daabbadooyin aad u badan, dhammaanna waxuu u diray Haashim bin Cutbah. Haashimna waxuu u sii diray Sacad, markaasuu intuu khumuskaa ka bixiyey u wada qeybiyey ciidankii Muslimiinta oo idil.

Qaniimada Jalowlaa waxay ahayd 30 000 000 sida uu xusay Shicbi, khumuskaa kaliya ayaa waxuu noqday 6 000 000. Qof kastoo faras watay maalinta ciidamada Muslimiinta waxuu helay saami lamid ah intii uu ka helay Madaa'in oo lamid ah 12 000 iyo 9 daabadood. Waxaa loo xilsaaray qeybinta qaniimadaas Salmaan Al Faarisi. Kadib khumuskaa qaniimada iyo daabadahii baa loo

dhiibay Ziyaad bin Abii Sufyaan iyo Qudaaci bin Camr iyo Abuu Maqrin Al Aswad si ay magaalladii Madiina u geeyaan. Markii Cumar loo geeyay dhammaan hantidii qaniimada iyo daabadihii buu weydiyey sida dagaalladaasi ay u dhaceen, markaasuu Ziyaad bin Abii Sufyaan si cad ugu sheegay dhacdooyinkii iyo siday udhaceenba. Cumar markuu maqlay faseexada Ziyaad buu ka codsaday inuu mimbarka ka khudbeeyo oo uu ka sheego dhacdooyinkii iyo siday u dhaceen isagoo ay dadku wada maqlayaan. Markaa buu Ziyaad mimbarka fuulay oo si cad u waadixiyey siday dhacdadu u dhacday iyo inta Muslimiinta kaga shahiiday iyo intay gaallada ka dileen iyo inta hanti ee ay qaniimeysteen.

## Dhacdadii Xulwaan

Markii uu Haashim bin Cutbah ka faaruqay Jolowlaa buu ku degay amarkii amiirka Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab isagoo xarun ka dhiganayo, waxuuna Xulwaan u diray Al qac qaac bin Camr oo uu iyana kudiray amarkii amiirka mu'miniinta. Taasoo uu horey warqad ugu soo qoray



markii uu Sacad kala hadlayey qaddiyadii  
Yazdajrid, waxuuna amray inuu Sacad dego  
Madaa'in, oo uu diro Jolowlaa Haashim bin  
Cutbah, markiina Haashim uu furtay  
Jolowlaa buu Cumar amray inuu dego  
Jolowlaa oo uu Xulwaan udiro Al qacqaac  
bin Camr.

Waa sidaase Al qac qaac bin Camr waxuu  
daba kacay firxadkii kuwii jabay isagoo  
layenayey waxii uu helo, waxuuna dilay oo  
kamid Mihraan oo ahaa amiirkii dhacdada  
Jolowlaa hoggaaminayey Faarisiinta.

Fayruzaan isagu waxuu dhexda ka galay  
jabkii majuusta illaa ay ka dul dhaceen  
boqorkoodii Yazdajrid oo kusugnaa  
Xulwaan, waxayna u sheegeen waxii

Jolowlaa ku qabsaday oo jab ahaa iyo inta  
qof ee laga dilay iyo weliba in amiirkoodii  
laga daba yimid oo qudha laga jaray, oo weli  
taa looga harine firxadkoodii la daba joogo.  
Markaa buu Yazdajrid kasii cararay  
Xulwaan oo uu u wareegay magaallada  
Rayi. Xulwaanna waxuu kusii dhaafay  
ciidan uu madax uga dhigay nin la oran  
jiray Khushru washanuum. Markii uu Al qac  
qaac gaaray magaalladii Xulwaan ayaa

waxaa kusoo baxay Khushru washanuum oo ay ku kulmeen meel ka soo baxsan magaallada, halkaasoo ay ku dhex martay dirir aad u kulul oo Alle durtaba ku jebiyey cadawgii, Muslimiintiina lib iyo guul kusiiyey. Markaa buuna Al qac qaac galay magaalladii Xulwaan oo aysan jirin cidi ka hor taagan, Muslimiintiina way soo galeen oo ay qaniimeysteen, dumar iyo carruur badanna qafaasheen. Waxayna ku dhaqeen islaamka. Dadkii deganaa hareerahaas iyo goballada ka dhaw dhawna jisyo buu Al qac qaac ku waajibiyey iyo inay Islaamka hoos yimaadaan kadib markii uu u bandigay Islaamka oo ay diideen waxaanan ka ahayn inay bixiyaan jisyo.

Al qacqaac bin Camr halkaa ayuu ku sugnaa illaa uu Sacad bin Abuu Waqaas markii dambe ka wareegay magaalladii Madaa'in isagoo u guuray Kuufa, markaa buuna Alqac qaac dhankii Sacad aaday oo uu Kuufa degay sida inoo iman doonto hadduu Alle idmo.

Furashadaii Takriid & Muusal

Markii uu Sacad furtay Madaa'in baa waxaa soo gaartay in reer Muusal ay isugu tegeen Takriid oo ay madax ka dhigteen nin gaal ahaa oo la oran jiray Al Andhaaq. Markaa bayna ahayd markii uu Sacad warqadda u qorayey dhanka amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab, warqaddaasoo ka hadleysay qaddiyadii Jolowlaa. Horey wuxuu usoo amray Cumar in Jolowlaa loo diro Haashim bin Cutbah, waxaana dhacay waxii dhacay ee aan soo xusnay oo ah dhacdooyinkii Jolowlaa iyo Xulwaan. Sidoo kale warqaddaasi waxay markaasi ka hadleysay oo ku xusnaa qaddiyadii reer Muusal. Isla warqaddii uu Cumar jawaab ahaanta ugu diray dhanka Sacad ayaa waxuu sidoo kale kaga soo hadlay qaddiyadda reer Muusal, waxuuna soo amray Sacad inuu u diyaariyo ciidan la dagaallankooda (reer Muusal) iyo in ciidamadaas uu madax uga dhigo C/llaahi bin Al Mactam iyo in ciidankiisa hore uu madax uga dhigo Ribciy bin Al Afkal Al Canazi. Ciidamada midigta waxuu soo amray in madax looga dhigo Al Xaarith bin Xassaan Al Duhali. Ciidamada bidixdana waxuu soo amray in madax looga dhigo

Furaat bin Xayaan Al Cajali, ciidamada dambe waxuu u dhiibay Hannaay bin Qeys, kuwa fardooleyduna waxuu u xil saaray Curfajah bin Harthamah.

Markaa buu C/llaahi bin Mactam kala dhaqaaqay 5000 oo ciidan ah magaalladii Madaa'in isagoo kusii jeedo dhanka Takriit iyo gaalkii Al Andhaaq. Waxuu socday afar casho dabeetana waxuu dul degay Takriit. Al Andhaaq waxuu isu soo aruuriyey jamac Ruumaan ah iyo Carabtii Nasaareyda ee halkaas daganayd oo ay kamid ahaayeen banii Taqlab, Iyaad iyo Nimar, iyagoo hareeraha magaallada ka qotay god weyn oo dhufeys ah. Markii uu C/llaahi bin Mactam soo gaaray buu go'doomin ku qabtay, waxuuna ku haayey 40 casho oo labaatan iyo afar kamid ahi ay gaaladu usoo baxeen (si ay Muslimiinta ula dagaallamaan), iyadoo mar waliba laga adkaanayey 24kaas casho oo mar waliba waalaga guuleysanayey, jamacooduna wuu jabayey oo wax aanan daciifnimo iyo itaal darri ahaynna kamaysan qaadeyn. Markaa bay Ruumaankii damceen inay doomankooda kula baxsadaan waxii hanti ay lahaayeen iyo

nafahooda. Markaa buu Cabdullaahi bin Mactam u cid diray Carabtii Nasaareyda ee halkaa kusugneyd isagoo ugu yeerayo inay ka qayb qaataan difaaca iyo guusha dhulka. Markaa bay iyagiina ka yeeleen oo ay usoo cid direen. Misna mar kale buu u cid diray isagoo ku oranayo:" Hadday taasi run idinka tahay, qira inuusan jirin Alle (la caabbudo) oo aan ka ahayn Allah, iyo inuu Muxammedna SCW yahay Rasuulkii Alle, oo kuna raalli noqda waxa uu Alle agtiisa kalayimid". Markaa bay iyana taasi usoo cid direen iyagoo wada Islaamay. Dabeeta mar kale buu u cid diray isagoo ku oranayo:" Hadday taasi run idinka tahay marka aanu takbiirsanno oo aan caawo weerarka ku qaadno inoo qabto albaabada doomaha". Markaa bay C/llaahi bin Muctam iyo asxaabtiisi soo dhaqaaqeen oo ay takbiirsadeen sida takbiir nin qura uu mar takbiirsado, saa ay weerar culus qaadeen. Carabtiina dhanka kale ayay ka takbiirsadeen mar qura. Markaa bay Ruumaankii u carareen dhanka albaabadii webiga si ay doomanka ugu baxsadaan, hase ahaatee banii Iyaad, Taqlab iyo Nimar baa si daran u gummaadeen oo laayeen layn



aad u daran. C/llaahi bin Muctam iyo ciidamadiisii dhanka kale ayay ka soo galeen oo ay laynayeen waxii ay arkaanba, cid ka badbaaddayna ma jirin marka laga reebo banii Iyaad, Taqlab iyo Nimar oo iyagu Muslimay. Intaa kadib Muslimiintii ayaa furteen Takriid, kadib markay jabeen cadawgii. Cumar bin Khaddaab waxuu horey warqaddiisa ugu soo amray in haddii la furto Takriid, loo diro Ribciyi bin Afkal dhanka Xasaneyn oo kamid ah Muusal. Markaasuu xaggeeda kudhaqaaqay siduu amiirkii Mu'miniinta soo amray, isagoo hoggaaminayo sirriyad ay la socdaan halyeeyadii ciidankii Muslimiinta ee Takriid furtay. Markiina uu dul degay Al Xasaneyn bay dadkeedii ka dalbadeen heshiis, markaasuu isaguna ku waajibiyey inay bixiyaan jizyo iyagoo dulleaysan. Intaa dabadeed waxaa la qeybiyey maalkii iyo qaniimadii laga helay Takriid kadib markii khumuskaa laga saaray, waxuuna ninkii faras watay helay 3000, halka kii lugtana uu ka helay 1000.

Khumuskii qaniimada ayaa waxaa loo dhiibay Furaat bin Xayaan, bishaaradii

guushana waxaa loo dhiibay Al Xaarith bin Xassaan si ay magaallada Madiina u geeyaan, imaaraddii dhulka Muusalna waxay hoostimid Ribciyi bin Afkal iyo Curfajata bin Harthama.

## Furashadii Maasabadaan

Maasabadaan waxay ahayd magaallo weyn oo kamid ahayd magaallooyinkii dhulka Furus. Markii hore magaceedu waxuu ahaa ama la oran jiray Maah Sabadaan.

Markii uu Haashim bin Cutbah kasoo laabtay Jolowlaa, baa waxaa Sacad soo gaartay in Adhiin bin Hurmuzaan uu aruuriyey ciidamo Faarisiin ah si uu Muslimiinta ula dagaallamo. Markaa buu Sacad warqad u qoray Cumar bin Khaddaab isagoo arrintaas la socodsiinayo. Suu Cumar soo amray in loo diro ciidan uu madax uyahay Diraar bin Khaddaab.

Markaas buu Diraar magaalladii Madaa'in ka dhaqaaqay isaga iyo ciidankiisii oo qeybtiisa hore uu madax uyahay Ibnu Huzayl Al Uzdi.

Ibnu Huzayl baa ka hor dhaqaaqay  
ciidamada guud, Saa waxay kulmeen  
ciidankii Adhiin bin Hurmuzaan ka hor  
intaysan soo gaarin ciidamadii Diraar,  
waxaana dhex maray dagaal culus oo durbo  
lagu jebiyey Adhiin iyo ciidamadiisii,  
isagiina lagu soo qabtay qafaal ahaan.  
Markaa buu Ibnu Huzayl amray in hortiisa  
unuunka loogu dheereeyo, saa kurka laga  
jaray. Kadib Diraar bin Khaddaab iyo  
ciidamadiisii waxay sii raacdeysteen  
firxadka kuwii jabay illaa ay magaalladii  
Maasabadaan oo ahayd magaalo wayn ay  
galeen oo ay xoog ku furteen, dadkeediina  
buuraha iyo keymaha ayay ku kala rooreen.  
Markaa buu Diraar u yeeray oo ay soo  
laabteen, suu jizyo kuwaajibiyey kuwoodii  
aanan Islaamin, isagiina halkii buu masuul  
ka noqday oo uu kusii sugnaa jeer uu Sacad  
ka wareegay magaallada Madaa'in oo uu  
uguuray Kuufa sida inoo iman doonto  
idanka Alle.

Furashadii Qirqiisiyah iyo Hayt

Markii uu iyana Haashim bin Cutbah kasoo  
faaruqay Jolowlaa, baa waxay dadkii

Jaziiradda u gurmadeen reer Ximsa si ay ula dagaallamaan Abuu Cubeydah iyo Khaalid, markaasina boqorkooda Hirigal waxuu kusugnaa magaallada Qinnasriin ama Andaakiyah.

Waa sidaase markaa bay dadkii Jaziiradda isugu tegeen magaallada Hayt. Markaa buu Sacad warqad u qoray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab asagoo xaalladaasi la socodsiinayo. Markaa buu Cumarna waxuu soo amray in loo diro ciidan uu madax uyahay Cumar bin Maalik bin Cutbah bin Nowfal bin C/manaaf Al Qurashi. Markaa buu Cumar bin Maalik la dhaqaaqay ciidamadiisii oo uu abbaaray dhanka Hayt, waxuuna tegay iyadoo ay cadawga dhufeys ka qoteen magaalladaasi, markaasuu go'doomin ku sameeyay. Mana uusan furan ee waxuu kaxaystay qayb kamid ah ciidankiisii oo dhaqaaqay. Go'doomintii Hayt-na waxuu kusii dhaafay Al Xaarith bin Yaziid, Asagiina Cumar bin Maalik waxuu aaday dhanka Qarqiisiyaa oo uu xoog ku furtay, waxayna ka dalbadeen inay bixiyaan jizyo. Markaa buu ka aqbalay. Dabeeto buu warqad u qoray masuulkiisii magaallada

Hayt, isagoo ku amrayo in haddii aysan la heshiinin uu godkooda ka dul qodo god kale oo uu albaabo ugu yeelo dhankooda.

Markay taasi gaartay reer Hayt bay dalbadeen heshiis iyo inay bixiyaan jizyo.

Sidii ayaana lagu furtay halkaas.

Sanadkan dhexdiisa buu Cumar jideeyay in la qoro taariikhda Hijriyda oo laga billaabo hijradii Rasuulka SCW. Masuuliyiintiisii goballaduna waxay ahaayeen sidan: Shaam oo idil waxaa masuul uga ahaa Abuu Cubeydah bin Jarraax, Ciraaq oo dhammina waxaa masuul uga ahaa Sacad bin Abuu Waqaas, Dhaa'ifna waxaa masuul uga ahaa Cuthmaan bin Abul Caas, Yemanna waxaa masuul uga ahaa Yaclaa bin Umayah, Yamaamah iyo Baxreynna Al Calaa bin Xadramiyu, Cumaanna waxaa masuul uga ahaa Xudeyfah bin Muxsin, Basrana waxaa masuul uga ahaa Muqiirah bin Shucbah, Muusalna waxaa masuul uga ahaa Ribciyi bin Afkal, halka Jaziiradduna uu masuul uga ahaa Cayaad bin Qanam.

Sanadkan waxaa dadka xajiyey Cumar bin Khaddaab magaalladii Madiinana waxuu



kusii dhaafay Zayd bin Thaabit.

## SANADKII 17AAD

Sanadkan Billaawgiisii bishii Muxarram ayuu Sacad bin Abii Waqaas ka wareegay magaalladii Madaa'in isagoo uguuray Kuufa. Waxaanse ku xusi doonnaa sadarrada dambe marka aynu ka hadlayno dhacdooyinkii dhulka Furus ee sanadkan hadduu Alle idmo.

Immikuna aan u weecanno...

Dhacdooyinkii Dhulka Shaam Ee Sanadkan

Sanadkan dhexdiisa dhacdooyin dhowr ah ayaa dhulka Shaam ka dhacay, waxaana ka mid ahaa

Go'doomintay Ruumaanku Ku Sameeyeen Ximsa

Sababtu waxay ahayd in jamac Ruumaan ah ay goosteen inay weerar ku qaadaan Ximsa

oo ay ku go'doomiyaan Abuu Cubaydah.  
Markaa bayna ka ciidan dalbadeen  
Ruumaanku dadkii jaziiradda iyo khalqigii  
agagaarkaas daganaa oo ay dabeetana soo  
aadeen dhankii Abuu Cubaydah. Markaa  
buu Abuu Cubaydah u cid diray Khaalid bin  
Waliid oo kusugnaa Qinnasriin si uu  
uyimaado, saa isagiina wuu yimid.

Intaa kadib waxuu Abuu Cubaydah warqad  
u qoray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin  
Khaddaab isagoo xaallada kula  
socodsiinayo. Abuu Cubaydah markaas buu  
ciidamadii Muslimiinta kala tashaday in uu  
cadawga u baxo oo uu debadda kula dagaal  
galo, mise inuu magaallada dhufeys ka galo  
jeer uu uga yimaado amarka Cumar.  
Markaasay dhammaan ciidankii u  
tilmaameen inuu magaallada dhufeys ka  
galo, Khaalid mooyaan oo isagu u  
tilmaamay in cadawga loo baxo oo banaanka  
magaallada lagula dagaal galo. Abuu  
Cubaydah wuu isaga tegay ra'yigii Khaalid,  
waxuuna qaatay ra'yigii Muslimiinta kale oo  
magaalladii ayuu dhufeys ka galay.  
Ruumaankii way yimideen markaasay  
go'doomin ku qabteen magaalladii Ximsa.

Qolo kastoo kamid ah ciidamadii Muslimiinta ee kusugneyd dhulka Shaamna dhankeeda ayay u mashquulsaneed, oo haddii ay kasoo tagi lahaayeen si ay walaaladood reer Ximsa go'doominta uga qaadaan, waxaa meesha ka bixi lahaa nidaamkaa iyo dantii laga lahaa in lawada furto dhulka Shaam oo idil oo halkooda ayaa loo daba mari lahaa.

Sidaa darteed buu Cumar warqad ugu diray amiirkii ciidamada Muslimiinta ee dhulka Ciraaq - Sacad bin Abii Waqaas, isagoo ka dalbanayo in isla maalinta ay utegto warqaddaas uu dadka ku booriyo dagaalka, oo uu Al qacqaac bin Camr ku daro ciidamo kuwajahan dhanka Ximsa, si ay Abuu Cubaydah go'doominta uga saaraan.

Waxuu kaloo Cumar uqoray Sacad in uu ciidan kale diyaariyo oo uu madaxa uga dhigo Cayaad bin Qanam, dabeetana uu u diro dhanka Jaziiradda kuwii iyagu usoo gurmaday Ruumaanka. Markaa bayna labadaasi ciidamo ka baxeen magaalladii Kuufa. Al qacqaac bin Camr oo hoggaaminayo 4 000 oo ciidanna waxuu abbaaray dhankii Ximsa, halka uu Cayaadna

aaday dhankii Jaziiradda. Cumar bin Khaddaab qudhiisu magaalladii Madiina ayuu ka soo baxay si uu ugu gargaaro Abuu Cubaydah, waxuuna soo gaaray Jaabiyah, waxaa kaloo la sheegaa inuu gaaray Sarghi. Sidaa waxaa yiri Ibnu Isxaaq, wallaahu aclam.

Markii uu gaaray dadkii Jaziiradda ee Ruumaanka la socday in dhulkoodii ciidamo u daba mareen, bay dib ulaabteen oo ay Ruumaankii ka hareen. Dhanka kale Ruumaankiina waxay maqleen in Cumar bin Khaddaab uu soo galooti yahay oo uu uyimid inuu u gargaaro masuulkiisa Abuu Cubaydah. Waxaa kalooy maqleen in ciidamo gurmada ahna ay ka soo socdaan dhanka Ciraaq, markaa bay daciifeen oo itaal darri kudhacday. Markaa buu Khaalid u tilmaamay Abuu Cubaydah inuu weerar ku qaado, maadama ay daciifeen, saa weerar buu ku qaaday oo uu yeelay siduu Khaalid u ishaaray. Markaa buu Alle u furay Muslimiintii oo guul iyo lib halkaa kusiiyay, Ruumaankiina way jabeen jab aad u weyn.

Markaasi waxuu ahaa goor aysan ciidamadii

gurmada ee Kuufa ka soo baxay soo gaarin  
kahor saddex casho, Markaa buu Abuu  
warqad u qoray Cumar oo Jaabiyah ama  
Sarghi kusugan isagoo su'aalayo inay  
ciidamadii gurmada kuyimid la wadaagaan  
wixii hanti ahaa ee cadawga laga ritay  
( qaniimada ). Cumarna waxuu soo amray  
in lala wadaajiyo, waayo cadawgu waxuu ku  
jabay markay maqleen gurmada soo  
galootigiisa. intaa kadib Cumar waxuu  
amaanay reer Kuufa isagoo kheyрна ugu  
duceeyay. Isagiina waxuu kulaabtay  
magaalladii Madiina.

## Furashadii Jaziiradda

Sidaynu soo xusnay waata Jaziiradda loo  
diray Cayaad bin Qanam markii Al qacqaac  
loo dirayey dhanka Ximsa.

Sidaa darteed Cayaad bin Qanam iyo  
ciidamadiisii ayaa waxay ku dhaqaaqeen  
dhankii Jaziiradda isagoo ay la socdaan  
Abuu Muusa Al Ashcari, Cumar bin Sacad  
bin Abii Waqaas oo inan dhalinyaro oo aan  
howsha waxba kulahayn ah, iyo Cuthmaan  
bin Abul Caas. Markaa buu Cayaad



dhaqaaqay oo uu sii maray Al Ruhaa, isagoo halkaa kula heshiiyey dadkii daganaa inay bixiyaan jizyo. Sidoo kale reer Xaraanna sidaa si lamid ayuu kula heshiiyey. Markaa buu Abuu Muusal Ashcari u diray dhanka Nusaybiin, Cumar bin Sacadna waxuu u diray dhanka Ra'sul Cayn, isagiina Cayaad waxuu aaday dhanka Daaraa, markaa baa dhulalkaasi oo idil lafurtay. Waxuu markaa diray Cuthmaan bin Abul Caas oo uu udiray dhanka Armeeniya, halkaasoo uu ka dhacay dagaal uu kugeeriyooday Safwaan bin Mucaddal isagoo shahiid ah. Kadib buu Cuthmaan halkaa kula heshiiyey dadkii daganaa inay bixiyaan jizyo ahlu beyd kastaaba inuu bixiyo hal Diinaar.

Sanadkan dhexdiisa ayaa Khaalid bin Waliid laga casilay magaallada Qinnasriin, kadib markii uu Ashcat bin Qeys kusiiyey 10 000 oo Dirham gabay uu utiriyey darteed.

Waxaa maxkamad lagu saaray masjidka iyadoo ay dadkii buuxaan, waxaana casiliddiisa u geeyay Bilaal bin Rabaax oo membarka masjidka Ximsa dadkii ugu khudbeeyay. Markaa buu Khaalid

cududaartay, kadibna waxuu aaday magaalladii Qinnasriin oo uu uu dadkii daganaa u khudbeeyay oo sagootiyey. Markaasuu ehelkiisii la aaday dhanka Ximsa, oo uu dadkii daganaa u khudbeeyay kuna sagootiyey. Kadibna waxuu aaday magaalladii Madiina oo uu degay.

Markii uu Khaalid tegay Madiina, Cumar bin Khaddaab wuu soo dhaweeyay waxuuna ku yiri:" Illaah baan kudhaartaye agteyda waxaad ka tahay mid sharaf leh, oo waxaad agteyda ka tahay mid laga jecelyahay, hase ahaatee maanta dabadeed howl iima qabanaysid". Goballadiina waxuu udiray warqad isagoo ku oranayo:" Ugamaanan casilin Khaalid xukunka khiyaano uu sameeyay iyo howl gaabin darteed tooni, hase ahaate waxaan ka yaabay inay dadku ku fidnoobaan, waxaana jecleystay inay (dadku) ogaadaan inuu Alle yahay ka isagu sidaa sameynayo (yacni guulaha badan waa Allaah kan sababay). Khaalid magaalladii Madiina ayuu degay jeer uu 20kii hijriyada firaashkiisii ku geeriyooday. Waxaa kaloo lasheegaa inuu kugeeriyooday magaallada Ximsa, wallaahu aclam.

Dhacdooyinkii Dhulka Furus ee Sanadkan

Horraantii sanadkan bishiisii Muxarram ayuu Sacad bin Abii Waqaas ka guurey magaalladii Madaa'in isagoo uguuray Kuufa oo iyadu sanadkan la aas-aasay. Sababtuna waxay ahayd saxaabadii baa ku xanuunsadeen Madaa'in oo midibadoodi ku baddalmeen oo jirkoodiina kudaciifay dhulkeeda oo dixsi iyo boor badnaa darteed. Markaa buu Sacad warqad u qoray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab isagoo xaalladaasi kula socodsiinayo.

Cumarna waxuu soo amray in Muslimiinta loo sahmiyo dhul ay dagaan oo ka wanaagsan cimillada Madaa'in. Markaasuu Sacad diray Xudayfah iyo Salmaan bin Yaziid si ay Muslimiinta ugu sahmiyaan dhul ay dagaan. Markaasay dhaqaaqeen oo ay soo mareen dhulka Kuufa oo ahaa meel carro cas oo aad usoo jiidatay, jawigeeduna uu yahay mid aad uwanaagsan. Halkaasi waxay ka heleen saddex deyr oo kala ahaa Dayr Xarqah bint An Nucmaan, Dayr Ummu Camr iyo Dayr Salsalah. Waxaana dhexdooda ahaa guryo yar yar oo cush iyo

qoryo kasameysnaa. Halkii midba dhan uduceystay isagoo Alle ka baryayo kheyarka dhulkaas iyo kheyarka uu yeelan doono iyo isagoo ka nabad galayo sharta dhulkaas iyo sharta uu yeelan doono. Kadib way laabteen oo khabarkii bay Sacad ugeeyeen. Markaa bay soo guuray horraantii Sanadkan isaga iyo Muslimiintii halkaa joogtayba. Markii Sacad yimid Kuufa waxii ugu horreeyay ee uu dhiso waxuu ahaa Masjidka, kadibna waxuu mixraabka agtiisa kadhisey daar laga maamulo imaaradda iyo beytul maalka. Dabeeto waxuu uyeeray nin kudheereeyo gannida gamuunka oo uu ka dalbaday in afarta jiho ee masjidka uu gamuunkiisa u gamo. Halka uu kudhaco ayuuna amray inay dadku ka dhistaan guryahooda. Markii ugu horreysay waxay guryaha kadhisteen qasab iyo geedo. Markaa bay magaalladii gubatay sanadkan dhexiida, kadibna waxay kadhisteen lebin iyo dhagax kadib markuu Cumar sidaa soo amray. Intaa kadib Kuufa waxay noqotay Xaruntii laga xukumayey dhulka Furus oo idil oo uu daganaa amiirkii ciidamada Muslimiinta ee dhulka Ciraaq, sidayba Ximsa xaruntii iyana laga xukumay dhulka Shaam oo idil oo saldhig u ahayd

amiirkii ciidamada Muslimiinta ee dhulka Shaam oo idil.

Furashadii Ahwaas, Manaadir iyo Nahruteer

Hurmuzaan oo kamid ahaa Faarisiintii kasoo jabtay maalintii dagaalka Qaadisiyah ayaa gobalka Ahwaas iyo magaalooyinka hoos yimaado oo idilba ku yeeshay awood aad uweyn. Markaa baa laga soodiray labo ciidamo oo Muslimiin ah magaallooyinka Basra iyo Kuufa. Markaasay dhulkiisii ku ciriiriyeen isaga, oo ay ka qabsadeen Dajlah iyo Dujeyl inta udhaxayso, oo ay hanti badan ka qaniimeysteen, intii ay doonaan oo ciidamadiisii kamid ahna laayeen, wixii ay doonaan oo ay awood uyeeshaanna ay kafurteen kadib markay ka dileen cadad badan oo Majuus ah Falillaahil xamdu walmannaa.

Kadib Hurmuzaan ciidamadii Muslimiinta wuxuu ka dalbaday in inta ka hartay dhulkiisa ay kula heshiiyaan, markaasay Muslimiintii warqad u qoreen dhanka Cutbah bin Qazwaan oo isagu markii hore



ciidamada Muslimiinta soo diray. Markaasuu Cutbah ka aqbalay oo la heshiiyey oo khumuskii qaniimada iyo bishaaradii guushana u diray dhankii Madiina iyo Cumar bin Al Khaddaab isagoo horey ugu siidhiibay Axnaf bin Qeys. Markii Axnaf uu khumuskii u geeyay Cumar, buu Cumar kartidiisa iyo caqligiisa, markaasuu warqad u diray Cutbah bin Qazwaan isagoo ku amrayo inuu Axnaf bin Qeys kaashado oo uu talo ka qaato oo ra'yigiisuna uu qiimeeyo.

Kadib Hurmuzaan mar kale buu ballantii buriyey oo heshiiskiina jebiyey. Waxuuna soo kaalmeystay koox Kurdi ah oo naftiisii kedisay, sheydaanna camalkiisaasi foosha xun buu uqurxiyey. Markaas bay Muslimiintii kubaxeen xaggiisa oo ay ka guuleysteen mar kale oo ay ka laayeey khalqi tiro badan. Waxayna ka qabsadeen dhulal aad ubadan, kadibna way sii raacdeysteen jeer uu galay magaalladii Tastur oo uu dhufeys ka galay. Markaasay Muslimiintii arrintaa warqad ugu direen Cumar iyagoo la socodsiinayo sida uu Hurmuzaan falay.

# Furashadii Koowaad Ee Tustar Heshiis Ahaan

Markii la furtay suuqii weynaa ee gobalka Ahwaas oo uu furtay Xurquus bin Zuhayr buu Hurmuzaan cararay, markaasuu Xurquusna ka daba diray Jaz'a bin Mucaawiyah, amarkaasina amiirkii Mu'miniinta baa horey usoo amray. Markaa buu Jaz'a bin Mucaawiyah sii bursaday firxadkii Hurmuzaan jeer uu dul degay Raamhurmuz, halkaasoo uu Hurmuzaan dhulkeeda dhufeys ka galay. Markii uu Jaz'a ku noogay daba oradkiisa ayuu u weecday goballadii kale ee dhulkaasi oo uu wada furtay kuna waajibiyey inay bixiyaan jizyo. Markii uu Hurmuzaan arkay ciriiriga dhulkiisa lagu hayo iyo rafaadka uu kujiro iyo in goballadiisii oo idil ay Islaamka hoostageen buu mar kale ka dalbaday heshiis. Markaa buu Jaz'a bin Mucaawiyah arrintaasi warqad ugu qorey Xurquus bin Zuhayr. Xurquusna Cutbah bin Qazwaan ayuu warqad ugu siiqoray, oo Cutbana Cumar ayuu warqad usii qoray. Kadibna waxaa timid jawaabtii Cumar oo uu kula

heshiinayo magaallooyinka Raamahurmuz, Tastur, Jundiisaabuur iyo magaallooyin kale. Waxuuna heshiiskaasi udhacay sidii uu amiirkii Mu'miniinta soo amray.

Duullaankii Dhulka Furus ee Dhanka Badda Taasu waxay ahayd Calaa bin Al Xadramiyu ayaa waxuu masuul ka ahaa dhulka Baxreen waqtigii khaliifadii Rasuulka SCW ee Siddiiq Allaha ka raalli noqdee. Cumar bin Al Khaddaab baa ka casilay oo masuul uga dhigay Qudaamah bin Madcuun Al Jumaxi. Dabeeto Qudaama buu ka casilay oo markale uu ku celiyey Calaa bin Al Xadramiyu mar kale.

Haddaba markii uu Sacad furtay Qaadiisiiyah oo jab weynna uu Faarisiinta soo gaarsiiyey buu Calaana jecleystay inuu Faarisiinta uga duulo dhanka badda oo uu kusameeyo siduu Sacad kusameeyay oo kale. Markaa buu dadkii ku booriyey ladagaallanka reer Furus, saa dadkii baladka oo idil wada ajiibeen. Ciidamadiisii ayuu dhisay isagoo dhowr qeybood uqeybiyey. Qeyb waxuu u dhiibay Jaaruud

bin Mucallaa si uu madax ugu noqdo, qeybna waxuu udhiibay Al Suwwaar bin Hammaam, qeybta kalena waxuu udhiibay Khuliid bin Mundir bin Saawi, dhammaanna ciidamadaasi oo idil waxuu madax guud uga dhigay Khuliid. Markaa bay ciidamadii Muslimiinta dhaqaaqeen oo baddii abbaareen iyagoo doonaya inay uga gooshaan dhanka Furus. Taasina wax idan ah oo ay amiirkii Mu'miniinta kaga haysteen ma aanay jirin. Dhanka Cumarna aad buu u karhayey arrintaas ah in badda lagu duulo, sidoo kale in ciidamo idin la'aan ay dhaqaaqaan buu iyana aad u dhibsan jiray, waayo Rasuulkii Alle SCW iyo Sidiiqba ma aysan sameynin falkaas iyo in ciidamada Muslimiintu ay badda kuduulaan.

Ciidamadan iyaga ahi waxay kagudbeen Baxreen oo ay ugudbeen dhulka Furus, waxayna ka baxeen magaallada Isdhaqar agteeda. Faarisiintii baa markaa daba martay oo kale dhex gashay iyaga iyo doomahoodii. Markaasuu Khuliid ka dhex istaagay ciidamadii Muslimiinta oo uu dagaalka ku booriyey kana codsaday inay Alle kaalmo weydiistaan oo ay dirirta ka run

sheegaan, waxuuna usheegay in doomaha iyo dhulkuba ay yeelan doonaan ciddii adkaato. Waxuuna u dardaarmay sabirka iyo salaadda inay kaalmeystaan, waayo waa labo shey oo kuweyn dadka markalaga reebo kuwa khushuuca. Dhammaan ciidamadii Muslimiinta waxay kuqaabileen waanooyinkii amiirkooda maqal iyo adeecid iyo dhega nuglaan. Markaa buu Khuliid ciidamadii tujiyey salaaddii Duhur. Kadibna waxaa billaawday dagaalkii oo ku dhexmaray goob layiraahdo Dhaawuus. Waxaa halkaasi kudhex maray dagaal aad ukulul, markaasuu Khuliid ciidamadiisii amray inay u jilba dhigaan oo ay dagaallamaan oo ay adkeystaan. Kadibna Alle baa guul ka siiyey cadawgoodii oo waxay ka laayeen tiro aad u badan oo aysan mid lamida horey uga dilin. Markaa bay ciidamadii Muslimiinta damceen inay aaddaan dhanka Basra, hase ahaatee cadawgii ayaa doomahii ka kharraabiyey, jid ay badda umaraanna way garan waayeen. Taa waxaa ka darneyd markii reer Isdhaqar ay dariiqii ka xireen oo ay dhanwalibana ciidamo isaga keeneen oo ay Muslimiintii go'doomin xun galeen. Markii ay arrintaasi



gaartay amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab, aad buu uga carooday, waxuuna u cid diray Calaa oo uu ku yiri:" U tag Sacad bin Abii Waqaas". Markaa buu Cumar warqad u qoray Cutbah bin Qazwaan isagoo la socodsiinayo xaalladaasi qallafsan iyo in ciidamo Muslimiin ahi oo Baxreen kayimid ay dagaallo galeen, misna ay go'doomin darani ku jiraan, waxuuna ka codsaday in uu dadka kubooriyo dagaalka oo uu xaggooda ciidan udiro. Markaasuu Cutbah ka dul istaagay dadkii oo ku dul akhriyey warqaddii amiirka Mu'miniinta. Markaasay iska daba kaceen qaar kamid ah halyeeyadii Muslimiinta oo ay kamid ahaayeen Haashim bin Cutbah bin Abii Waqaas, Caasim bin Camr (Al qacqaac walaalkiis), Curfajah bin Harthamah, Hodayfah bin Muxsin iyo Axnaf bin Qeys iyo rag kaloo aynigooda ah. Waxuu ciidankani ahaa 12 000, dhammaanna waxaa madax looga dhigay Abuu Sabrah bin Abii Raham (oo ay dhashay Nebigu SCW eeddadiis). Markaa bay ciidamadani dhaqaaqeen iyagoo wata baqlo aad utiro badan, si ay dhaqso u tagaan ama u gaaraan halka ay u socdaan. Waxayna qaadeen jidka

xeebta, iyagoo ciddii ay lakulmaanba laaynayey oo jebineyey jeer ay markii dambe gaareen goobtii uu dagaalku kudhex maray labada qolo, iyadoo Khuliid iyo ciidamadii Muslimiintu ay go'doomin darani kujiraan, cadawgiina dhan waliba isaga yimid oo ummadihii dhulalkaas oo idil ay ugu habar wacdeen. Gurmalkii cadawga wuu soo taam noqda markaa iyada ahi oo wax aan dagaal ahayni ma uusan dhinneyn. Kadib ciidamadii Abuu Sabrah iyo Faarisiintii baa is helay oo waxaa dhex maray dagaal aad u kulul oo lagu jebiyey Faarisiinta, lagagana dilay khalqi aad ufara badan, oo lagaga qaniimeystay hanti aad u culus mahadda Alle.

Kadib Abuu Sabrah iyo ciidamadiisii waxay u laabteen dhankii Cutbah bin Qazwaan.

Markii ay Cutbah u taam noqotay dhul furashooyinkii hareerahaasi, buu ka dalbaday amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab inuu xajka soo guto, markaasuu Cumarna u idmay. Saa Cutbah xajkii buu aaday oo uu mawaasimta kula kulmay Cumar. Waxuuna ka dalbaday inuu ka casilo howsha. Hase ahaatee Cumar waa uu

diiday. Markii Cutbah ka laabanayey xajka buu Alle baryay oo ka dalbaday inuu usoo dedejiyo la kulankiisa. Markii uu xajka kasoo guddoomay baa asagoo u socda magaalladiisii si uu u guto howshiisii ayuu ku geeriyooday bartama Nakhlah kadib markii uu kasoo laabtay xajka isagoo kusii jeedo dhulka Ciraaq. Markii Cumar ay gaartay geeridii Cutbah buu aad uga murugooday, oo uu kheyrr badanna ku amaanay. Kadib waxuu xilkii Basra udhiibay Al Muqiirah bin Shucbah, oo isaguna muddo yar kadib laga casilay sida inoo iman doonto. Muqiirah dabadiina waxuu Cumar Basra masuul uga dhigay Abuu Muusal Ashcari.

Furashadii Tustar Mar Kale iyo Raamhurmuz

Sababtu waxay ahayd Yazdajrid baa mar waliba ku boorinayey reer Furus inay Muslimiinta hor istaagaan oo ay la galaan dagaallo culculus. Markaasuu warqad u qoray reer Ahwaaz iyo reer Furus isagoo ku boorinayo la dagaallanka Muslimiinta.

Markaa bay dhaqdhaqaaq sameeyeen oo ay

iskula ballameen oo ay isku dhaarsadeen la dagaallanka Muslimiinta iyo inay marka hore aadaan Basra. Arrinta warkaas baa markaa gaartay Cumar bin Al Khaddaab, markaasuu warqad u qoray Sacad bin Abii Waqaas isagoo ku amrayo inuu gobalka Ahwaaz u diro ciidamo uu madax uyahay Nucmaan bin Muqarrin si dhaqso ah si loosoo qabto Hurmuzaan. Waxuu kaloo Cumar soo magacaabay qaar kamid ah halyeeyadii Muslimiinta ee ciidankaasi kamidka ahayd oo ay kamid ahaayeen: Jariir bin C/laahi Al Bujali, Jariir bin C/laahi Al Ximyari, Suweyd bin Muqarrin iyo C/laahi bin Diis-Sahmeyn. Ragganu waxay ahaayeen madaxdii ciidankan ee Cumar uu soo magacaabay, dhammaantooduna waxaa madax u ahaa Nucmaan bin Muqarrin.

Waxuu kaloo markaa Cumar warqad u qoray Abii Muusa Al Ashcari oo Basra masuul ka ahaa isagoo ku amrayo inuu Ahwaaz u diro ciidamo culus oo uu madax uga dhigo Suheyl bin Cadiyi, iyo in ay ciidamadaasi kamid noqdaan halyeeyada kale ah A Baraa bin Maalik, Caasim bin Camr, Majtha'ta bin Thowr, Kacab bin

Thowr, Curfajah bin Harthama, Xudeyfah bin Muxsin, C/raxmaan bin Sahal iyo Al Xusayn bin Macbad. Waxuu kaloo soo amray in ciidamada Kuufa kayimid ee uu Nucmaan hoggaaminaya iyo kuwa Basra ka imanaya ee Suhayl bin Cadiyi uu wato markay isu tegaan iyo wixii gurmada oo u yimaadaba uu madax u noqdo Abuu Sabrah bin Abii Raham. Markaa bay ciidamadii Kuufiyiinta ka ambabaxeen magaalladii Kuufa iyagoo kuwii Basriyiinta ahaa uga hor maray magaalladii Raamahurmuz oo uu markaa Hurmuzaan joogay. Markaa buu Hurmuzaan kusoo saaray ciidamadiisii isagoo mar kale jebiyey ballantii uu Musliiminta horey ula galay, waxuuna keenay ciidamo aad u tiro badan. Markaasuu lasoo dhaqaaqay isagoo damacsan in Muslimiinta uu kujebiyo ka hor intaysan soo gaarin ciidamada reer Basra. Isagii iyo Nucmaan baa markaasi kulmeen oo dagaal aad kulul dhex maray, dabeena wuu jabay Hurmuzaan kadib markii laga dilay khalqi aad utiro badan, waxuuna u gudbay magaalladii Tustar isagoo ka cararay Raamahurmuz. Waxay Raamahurmuz usoo gacan gashay Nucmaan bin Muqarrin,



kaasoo ahaa amiirkii hoggaaminayay ciidamada Kuufiyiinta, markaasi buuna aruurshay wixii uu ka helay oo hanti iyo hubbo ah.

Markii uu gaaray ciidamadii reer Basra warkaas iyo wixii ay Kuufiyiinta kusameeyeen Hurmuzaan iyo inuu u cararay magaallada Tustar bay iyagiina si toos ah u aadeen dhanka Tustar oo ay ka daba tegeen ciidamadii Kuufiyiinta ee iyagu raacdeysanayey Majuustii Hurmuzaan uu watay ee firxatay. Markii ay tageenna go'doomin bay kuwada qabteen, dhammaantooduna waxaa madax u noqday Abuu Sabrah bin Abii Raham siduuba amiirkii Mu'miniinta horey usoo amray.

Waxay magaalladii gaareen Hurmuzaan oo ciidamo aad u faro badan soo aruuriyey, markaasuu Abuu Sabrah warqad u qoray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab isagoo gurmada ka dalbanayo.

Markaasuu Cumar warqad u qoray Abuu Muusa Al Ashcari isagoo ku amrayo inuu naf ahaantiisa aado Tustar, suu xaggeedii aaday waxuuna madax u noqday dhammaan ciidamadii ka yimid Basra ee ahaa kuwii uu

horey u watay Suhayl bin Cadiyi iyo kuwa uu isagu gurmada ahaan u layimid, guud ahaanna ciidankoo dhami Abuu Sahbrah baa kor madax uga ahaa siduuba horey usoo amray Cumar. Go'doomin aad u adag ayay ku sameeyeen ciidamadii Muslimiinta magaalladaasi Tustar. Dhowr mar ayayna isu soo baxeen oo dagaallo aad u kululi ay dhex mareen.

Al Baraa bin Maalik dagaalkani wuxuu ku dilay 100 nin mubaarizo ah, sidoo kale waxaa dagaalkan 100 nin mubaarizo ku dilay Kacab bin Thowr, Majtha'ata bin Thowr iyo Abuu Yamaamah iyo rag kaloo lamid ah oo ka tirsan ciidamadii Basriyiinta ee Basra kayimid.

Sidoo kale waxaa dagaalladan iyana wacdaro muujiyey oo min boqol nin kudilay mubaarizo qaar kamid ah ciidamdii Kuufiyiinta ee Kuufa ka yimid sida Xabiib bin Qirrah, Ribciyu Ibnu Caamir iyo Caamir bin Cabdul-Aswad. Markii ay xaaladdii darraatay oo Muslimiintiina waqtigu ku dheeraaday bay utageen Al Baraa bin Maalik oo saxaabi Jaliil ah oo ducadiisu la

aqbalo ahaa, waxayna ku yiraahdeen:"  
Baraa'oow! inoo bari Rabbigaa si uu  
cadawgu inoogu jebiyo".

Markaasuu Al Baraa yiri:" Alloow!! jebi  
cadawga, oo (aniguna) shahaado igu sii".

Halkii bay Muslimiintii cadawgii ku jebiyeen  
Al Baraana uu ku shahiiday. Markii  
Muslimiintii ay jebiyeen Mushrikiinta bay  
orad ku galeen qalcadahoodii iyo  
dhufeysyadoodii, markaasay iyana ka daba  
tegeen oo ay ku laayeen. Markaa bay  
Mushrikiintii ku ciriiri noqotay magaalladii  
oo meel ay nafta la aadaan garan waayeen.  
Dabeeta nin kamid ah dadkii baladka baa  
Abuu Muusal Ashcari ka dalbaday magan  
galyo oo u yimid, suu isagiina magan  
galiyey. Ninkii waxuu ka codsaday Abuu  
Muusa Al Ashcari inuu ku daro rag aad  
uyaqaanno dabaasho oo maskax ficanna leh  
si uu u tusiyo jid ay uga gudbaan derbiga  
Tustar si ay magaallada ugalaan.  
Markaasuu Abuu Muusal Ashcari ku daray  
rag karmeedyo halyeeyo ah oo uu kamid  
ahaa Majtha'ta bin Thowr. Ninkii inta  
kaxeeyay raggii ayuu mariyey waddo hoos

marito dhulka oo tog biyo leh ah. Waqtiguna waxuu ahaa goor habeen ah, markaasay raggii Muslimiinta ahaa sidii ku goosheen biyahii iyagoo dabaal ku gudbayo, markaasay magaalladii galeen. Waxaa la yiraahdaa qofkii ugu horeeyay ee galo magaallada waxuu ahaa C/laahi bin Muqaffal dhanka Muslimiinta. Waxay yimideen albaabadii kadib markay toggii soo gudbeen, oo ay arkeen waardiyaashii oo ay laayeen, markaasay albaabadii fureen iyagoo takbiirsanayo yacni leh:- ALLAAHU AKBAR. Oo ay soo galeen. Ammintaasi iyada ah ee ay magaalladu galeen waxay ahayd goor salaaddii fajar ah, mana aysan tukan salaaddii fajar jeer ay cadceeddii kasoo baxday sida uu xusay iimaam Al Bukhaari oo uu kasoo weriyay Anas bin Maalik oo yiri:" Waxaan goob joog ahaa furashadii Tustar, waxayna ahayd goor salaaddii fajar ah. Markaasay dadkii ku mashquuleen furashada oo maysan tukan jeer ay cadceeddii kasoo baxday, mana ka jecli salaaddaas inay ii ahaadaan (baddalkeeda) geela kiisa cas cas".

Hurmuzaan markii laga furtay dhulkiisa

waxuu orad ku galay qalcaddiisii,  
markaasay sii raacdeysteen qaar kamid ah  
jamaacaddii iyo halyeeyadii geesiyaasha ee  
Muslimiinta. Markiina ay dul tegeen oo ay  
hor istaageen qalcaddiisii oo aysan u harin  
wax aanan ka ahayn in la is daro, buu  
Hurmuzaan yiri kadib markii uu dilay Al  
Baraa bin Maalik iyo Majtha'ata bin  
Thowr:" Waxaan haystaa jacobad ay ku  
jiraan boqol gamuun, mana jiro axad idinka  
mid ah oo xaggeyga usoo dhaqaaqi karo  
illaa hadday dhacdo waxaan ku gamayaa  
gamuun oo aan ku dilayaa. Mana iga  
dhacayo gammuun illaa waxuu ku dhacayaa  
qof idinkamid ah. Haddaba maxay markaa  
idiin tareysaa inaad i qafaalataan bacdamaa  
aan idinka dilay 100 nin? Waxay  
yiraahdeen:" Haddaba maxaad dooneysaa?

Waxuu yiri:" Waa inaad i magan gelisaan  
jeer aan gacanteyda idiin soo dhiibo,  
dabeetana waxaad ii direysaan Cumar bin  
Al Khaddaab si uu isaga iigu xukmiyo wixii  
uu doono".

Markaa bay saxaabadii ka yeeleen oo uu  
isagiina iska dhigay gamuunkii iyo qaansadii



oo ay qabteen qafaal ahaan. Dabeetana horey ayay usii kaxaysteen.

Waxay Muslimiintii dhulkani ka heleen hanti tiro badan iyo hub aad u culus. Markii khumuskaa laga saaray kadib ayaana Muslimiintii loo qeybiyey.

Qofkii faras watay waxuu helay 3 000, halka kii lugtana uu helay 1000.

Furashadii Suus & Jundiisaabuur

Kadib buu Abuu Sabrah bin Abii Raham kaxaystay qaar kamid ah ciidankii oo ay lasocdaan Abuu Muusal Ashcari iyo Nucmaan bin Muqarrin iyo qaar kamid ah madaxdii ciidanka. Hurmuzaanna horey ayay usii kaxaysteen waxayna daba galeen raadka Faarisiintii jabtay oo ay eryanayeen jeer ay dul dageen Suus oo ahayd magaallo ku taallay dhulka Khowzistaan oo ay isweeer ku sameeyeen. Markaa buu Abuu Sabrah warqad udiray dhankii Cumar asagoo la socodsiinaya arrinka, dabeetana waxaa timid jawaabtii Cumar uu ku amraya in Zir bin C/llaahi bin Kuleyb Al Fuqeyhiyu

(waxaa kaloo la yiraahdaa Al Caqiimiy) oo saxaabi jaliil ahaa loo diro dhanka Jundiisaabuur. Kadib Abuu Sabrah waxuu diray khumuskaa qaniimada iyo Hurmuzaan oo uu usii dhiibay Anas bin Maalik iyo Axnaf bin Qeys.

Markay u dhawaadeen magaalladii Madiina bay dajiyeen oo ay u xireen dharkiisii hore ee uu xiran jiray oo ka sameysnaa jowharad, diibaaj, yaaquut iyo dahab. Markaa bay galeen magaalladii oo ay ku hor mareen gurigii amiirka Mu'miniinta oo ay ahlu beydkiisa weydiiyeen. Waxaana loo sheegay inuu aaday masjidka sabab la xiriirta inuu ku qaabilo wafdi uga imanaya magaallada Kuufa. Markaasay aadeen Masjidkii hase aheetee cidna kamaysan helin. Dabeetana way soo laabteen, misna waxay arkeen carruur yaryar oo ku cayaareyso masjidka debeddiisa oo ay waydiiyeen Cumar. Waxay carruurtii usheegeen in Cumar uu jiifo masjidka isagoo huwan go'iisa. Markii ay masjidka soo galeen waxay arkeen isagoo jiifo oo huwan go'iisa. Hurmuzaan markii uu arkay ayuu dadkii su'aalay:" Oo meeyay Cumar?

Waxay ku yiraahdeen:" Waakan"

Dadkii baa markaa waxay gudo galeen inay codkooda hoos u dhigaan si aysan amiirka Mu'miniinta u toosinin.

Markaasuu Hurmuzaanna gudo galay inuu yiraahdo:" Oo aaway ilaaladiisii? Aaway waardiyaashiisi?

Waxay yiraahdeen:" Malahan wax ilaaliyaal ah iyo waardiyo toona, mana lahan wax kaatib iyo diiwaan ah toona".

Waxuu yiri:" Way usuurowdaa inuu noqda Nebi".

Waxay yiraahdeen:" Bal ee waxuu falaa camal Nebi".

Dadkii baa iska soo daba batay markaasuu Cumar toosay, oo uu si saani ah fadhiga u haggagaagsaday, dabeetana eegay dhanka Hurmuzaan. Markaasuu yiri:" Oo ma Hurmuzaan baa?

Waxay yiraahdeen:" Haa".

Markaasuu indhaha ka buuxsaday isaga iyo wixii dhar uu sitay, markaasuu yiri:"

Acuudu billaah.. Allaanu kamagan galayaa naar, oo Alle ayaan kaalmo weydiisanayaa".

Kadib waxuu yiri:" Mahad idilkeed waxaa iska leh Allihii Islaamka ku dulleeyay kan iyo wixii aynigiisa ah. Kulanka Muslimiintoow! qabsada diintan oo ka hanuun dalba hanuunkii Nebigiinna, oo yaysan idinla tegin adduunyo waa kado'e".

Wafdigii baa markaa waxay Cumar ku yiraahden:" Kani waa Hurmuzaan boqorkii Ahwaaz ee la hadal".

Waxuu yiri:" Mayo, jeer uu soo dhigo waxa xuliyad (dhar qurxan iyo dhaldhalal ah) ee dushiisa saaran".

Markaa bay kaxeeyeen oo ay kasoo dhigeen, waxayna usoo xireen dhar suuf ah.

Markaasuu Cumar yiri:" Sidee baad u aragtaa ballan ka bixii iyo ciribta amarka

Alle?

Waxuu yiri:" Cumarooow! berigii jaahilliyada Alle baa dhaxdayada isku keenna deyn jiray, markaasanu idinka adkaan jirnay markii uusan miciinna iyo maceennu toona ahayn. Markuu uu maciinna noqday baad naga adkaateen".

Waxuu Cumar yiri:" Waxaad nooga adkaan jirteen isu teggyadiinnii iyo kala tegsanaantayadii. Misna waxuu yiri:" Maxaad u haysataa oo cududdaar ah ballankabaxaadii mar iyo mar kadib ahaa?

Waxuu yiri:" Waxaan ka cabsanayaa inaad idisho ka hor intaanan kuu warramin".

Waxuu yiri:" Haka cabsan taasi".

Markaasuu dalbaday in biyo loo keeno, saa waxaa loogu keenay weel godan. Markaasuu yiri:" Haddii aan oon udhimanayana ma awoodo inaan kan wax ku cabbo". Misna weel kale oo uu ka raalli yahay ayaa loogu keenay. Markii uu biyihii qaatay bay gacmihii jareeyeen, waxuuna yiri:" Waxaan



ka cabsi qabaa in la idilo anigoo biyaha cabbayo''.

Waxuu Cumar yiri:" Waxbo dhiba dushaadu maanay ahaanin jeer aad ka cabto''.

Waxuu kaloo Cumar yiri:" Ugu soo celiyo biyaha oo ha isugu darina dil iyo oone''.

Waxuu yiri:" Wax dan oo aan biyo ka leeyahay majirto, kaliya waxaan doonayey inaan magan galo''.

Waxuu yiri:" Waan ku dili''.

Waxuu yiri:" Waad imagan gelisay''.

Waxuu yiri:" Been baad sheegtay''.

Markaasuu Anas hadlay oo yiri:" Run buu sheegay amiirkii Mu'miniintoow!''.

Waxuu yiri Cumar:" Hooge! Anasoow! ma anigaa magan gelinayo qof dilay Al Baraa iyo Majtha'ata? Waxaad ii keeni doontaa jid looga baxo arrinkaas (yacni xujo cad waxa aad tiri) ama waan ku ciqaabi doonaa''.

Waxuu yiri Anas:" Waxaad ku tiri:" Wax dhiba dushaadu maanay ahaan jeer aad iiga warranto. Waxaad kaloo tiri:" Wax dhiba dushaadu maanay ahaan jeer aad kacabto".

Markaa bay dadkii meesha joogayna sidaa si lamid ah ku yiraahdeen".

Markaa buu Cumar dhankii Hurmuzaan u jeestay oo uu ku yiri:" Waad i qayaantay, igamana fakanaysid jeer aad Islaamtid". Markaasuu Islaamay, waxuuna Cumar u qoray 2 000 oo lacag ah, waxuuna dejiyey magaalladii Madiina.

Waxaa la yiraahdaa:" Turjumaankii u kala turjumayey Cumar iyo Hurmuzaan waxuu ahaa Muqiirah bin Shucbah. Mar kalase waxaa u kala turjumay Zayd bin Thaabit Allaha ka raalli noqdee.

Intaa kadib Cumar bin Al Khaddaab waxuu aad u necbaa ama uu kasoo hor jeeday inay Muslimiintu kusii fogaadaan dhulalka cajamta ah ee aysan awoodin inay wado

maamulaan. Hase ahaatee Axnaf bin Qeys baa u tilmaamay in boqortooyadii Furus ay jirto oo aysan ka suuleynin inay weerarro iyo dagaallo kusoo qaaddo Muslimiinta oo ay damaacida dhulalka ay Muslimiinta haystaan. Markaa bay arrintaasi Cumar aad ugu qurxanaatay oo uu u riyaaqay, waxuuna go'aansaday in dhulalka Furus oo idil lawada furto.

Aanu u laabanno furashadii Suus iyo Jundiisaabuur..

Abuu Sabrah bin Abuu Raham iyo ciidamadiisii markii ay ka faaruqeen Tustar waxay aadeen dhanka Suus sidaynu horeyba usoo xusnay, waxayna dul dageen Suus oo ay isweer ku qabteen. Kadib waxaa dhex maray dhowr dagaal oo labada dhinacba looga dilay dad aad utiro badan waqtigiina wuu ku dheeraaday. Markaasay ashraaftii baladkaasi la hadleen Muslimiintii oo ay ku yiraahdeen:" Kulanka Muslimiintoow! ha sii raacina inaad isweer kusii haysaan dhulkaan, waayo waxaanu raad haynaa sida aan ka soo werinnay dadkayagii hore ee dhulkan in dhulkani aysan furan doonin cid

aanahayn Dijaal ama ciidan uu Dijaal la socdo".

Waxay Culamaayi siirah isku waafaqeen in ciidamadaasi Muslimiinta ah uu la socday Saaf bin Sayaad. Markaasuu Abii Muusal Ashcari kusoo daray dadkii xisaarka ku hayey meeshan, markaasuu Saaf inta yimid albaabkii baladka ayuu lugta ku gargaaraacay, dabeetana qufulladii baa jajabeen oo silsiladihiina way daateen. Markaasay Muslimiintii galeen baladkii oo ay laayeen wixii ay helaanba jeer ay dadkii meesha deganaa ku dhawaaqeen magangalyo, oo ay dalbadeen heshiis oo ay Muslimiintiina markaa ka yeeleen. Suus waxaa masuul ka ahaa Shahrayaar oo la dhashay Hurmuzaan. Waxuuna dhulkaasi ahaa dhul aad u taariikh fog. Waxaaba la sheegaa inuu ahaa baladkii ugu horreeyay ee arlada la dhigo, wallaahu aclam.

Sida uu Ibnu Jariir xusay waxaa meeshaasi laga helay qabrigii Daanyeel. Markii uu Abuu Muusa iyo Abuu Sabrah yimideen Suus, buu Abuu Sabrah usii gudbay Jundisaabuur, Suusna waxuu kusii dhaafay

Abuu Muusal Ashcari, markaasay ka heleen qabrigii Daanyeel CS. Waxaa la sheegaa qofkii ugu horeeyay ee arko qabrigaasi inuu ahaa Xurquus, markaa buuna Abii Muusa warqad u qoray Cumar bin Khaddaab isagoo xaallada la socodsiinayo. Cumarna waxuu soo amray in la qodo dhowr iyo toban qabri oo mid kamid ah goor habeen ah lagu aaso si aysan dadka u ogaanin halka lagu aasay. Sidii ayuuna Abii Muusal Ashcari sameeyay oo lagu aasay Daanyeel CS.

Daanyeel waxuu ahaa Nebi kamid ahaa Nebiyadii reer banii Israa'iil. Waxuuna Rabbi ka baryey inay aasto ummadda umadaha ugu kheyir badan waa ummadda Nebi Muxammede SCW. Taariikhdiisa oo kaamil ah waxaa laga akhrisan karaa kutubbada Qisooyinka Nebiyada, sida kitaabka Ibnu Kathiir ee qisooyinkii Nebiyada.

Magaalladii Jundisaabuurna waala furtay waxaana furtay Zir bin C/llaahi bin Kuleyb, dhulkaasi oo idilna waxuu hoos yimid Islaamka iyo ehelkiisa. Iyadoo Yazdajridna uu kujiro carar iyo fiig oo magaalooyinka



dhulka Furus uu midbo mid kaga sii  
gudbayo illaa uu aakhirii tegay magaallada  
Asbahaan oo uu salka dhigtay.

Qaar kamid ah ashraaftii dadkiisa oo  
lasocday ayaa kasoo laabteen kadib markii  
ay arkeen in la furtay Tustar, waxaana ay  
dhamaayeen 3000 oo uu madax u ahaa nin  
la oran jiray Siyaah. Ragani waxay ku  
jireen fiig iyo carar iyagoo la socday  
boqorkoodii Yazdajrid jeer markii dambe  
Muslimiintii ay furteen magaalooyinka  
Isdhakhar iyo Tustar. Markaas buu  
Islaamku galay qalbiga Siyaah oo uu  
asxaabtiisa u ishaaray inaysan jirin cid hor  
istaagi karto nimankan Muslimiinta ah,  
waxa ay kusocdaanna uu yahay wax xaq ah  
oo aanan baadil ahayn. Markaasay raggiisii  
oo idil ku ayideen fikirkiisa. Dabeeta waxaa  
loo diray Camaar bin Yaasir si uu xagga  
Alle ugu yeero kadib markay Muslimiintu  
maqleen arrinkooda, dhammaantooduna  
way Islaameen. Kadib Abii Muusal Ashcari  
ayay warqad u direen, taasoo ay  
Islaamnimadooda kula socodsiinayaan,  
markaasuu Abuu Muusana warqad u qoray  
Cumar isagoo u sheegayo Islaamnimadooda.

Kadib waxuu Cumar soo amray in loo qoro min 2000 oo Dirham. Lix iyaga kamid ahina waxuu uqoray 2500 Dirham in la siiyo.

Waxaa sanadkan dadka xajiyey amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab Allaha ka raalli noqdee, madaxdii goballaduna waxay ahaayeen sidii sanadkii hore marka laga reebo Basra oo Abii Muusal Ashcari uu sanadkan Masuul ka ahaa kadib markii laga casilay Muqiirah bin Shucbah.

## SANADKII 18AAD

Waxaa jira aqwaal aad u faro badan oo ay culimadu qaarkood ka yiraahdeen dhacdooyinka sanadkan.

Qaarkood waxay xuseen dhacdooyin aan kusoo xusnay sanadkii hore inay dhaceen sanadkan, qaar kalena dhacdooyin inoogu iman doono sanadka 19aad ee hijiriga ayay sheegeen inay iyaguna dhaceen sanadkan. Aqwaashaasi oo idil waxaan doorbidnay sida rajaxsan inaynu ka qaadanno hadduu Alle idmo. Sidaa darteed baanan markaa usoo qaadan doonin dhacdooyin ama

dagaallo ka dhacay dhulalka Furus iyo Shaam sanadkan, maadaama aan badi soo sheegnay inay dhaceen sanadkii 17aad ee kan ka horeeyay sidoo kalena aan sheegi doonno sanadka 19aad ee kan ka dambeeyo inagoo tixraaceyno aqwaasha rajaxsan hadduu Alle idmo.

Waa sidaase waxaa sanadkan dhulka Xijaas ka dhacay abaartii loo yaqiinnay. .

Abaartii Rammaadah

Waxay ahayd abaar aad iyo aad u saameysay carrigii Xijaas, waxayna ka jirtay muddo 9 bilood ah oo ay samadii noqotay qiiq madoow oo laga waayey wax roob ah. Sababta magacan Rammaadah loogu magac daray ayaa ah sidaa darteeda yacni in samadii ay madoobaato oo ay noqoto sida qiiq oo kale.

Qabaa'ilkii deganaa hareeraha magaallada Madiina dhammaantood waxay soo wada galeen magaallada oo ay naf kasoo dooneen, markaasuu Cumarna u qeybiyey wixii hanti ahaa ee beytul maalka yaallay illaa uu beytul

maalkii dhammaaday. Naf ahaantiisu Cumar wuxuu iska xarrimay inuu cuno wax dufan leh jeer uu Alle ka qaado Muslimiinta abaartaas. Horey waxuu cuni jiray kibis iyo saliid, hase ahaatee markii la gaaray abaartan Rammaadah waxuu go'aansaday inuusanba cunin wax dufan leh, waxuuna cuni jiray oo quud u ahayd kibis angagan iyo milix isagoon weliba ka dhargi jirin.

Waxuuna gaaray heer midibkiisii uu madoobaaday oo jirkiisii baddelmay illaa looga yaabay itaal darri.

Heerkii ay abaartu gaadhay darteed waxuushtii baa soo muhatay dadkii magaallada deganaa. Waxaa dhacaday iyadoo abaartan lagu jiro in nin uu qashay neef ari ah oo u joogay, hase ahaatee waxaa fajaciso kunoqotay markii uu neefkii ka waayeey wax dhiig iyo dhecaan toona ah. Waxuuna arkay neefkii oo lafo gaduudan oo kaliya ah.

Habeen habeenada kamid ah iyadoo lagu jiro abaartan Rammaada buu Cumar ku wareegay magaalladii Madiina sidii horeyba caadada ugu ahayd si uu u ogaado

raciyadiisa iyo xaaladda ay kusuganyahiin.  
Waxuu arki waayey qof qosalaya iyo dad kusheekeysanayo guryahooda sidii caadada u ahaan jirtay. Ma uusanna arag qof qof kale wax su'aalayo, ama labo isla hadleysa. Markaasuu dadka wax ka weydiiyey arrintaasi. Waxaana lagu yiri:" Ammiirkii Mu'miniintoow! Su'aashu way waydiiyeen, markaasay dadka waxba helin, say iska daayeen su'aasha, dadkuna waxay kusuganyahiin hammi iyo ciriiri oo ma awoodi karayaan inay sheekeystaan oo ay qoslaan".

Intaa kadib Bilaal bin Al Xaarith Al Muzani baa Cumar u yimid oo ka idin dalbaday dabeetana waxuu usheegay inuu yahay ergaygii Rasuulka Alle SCW, waxuuna ku yiri:" Rasuulku SCW waxuu ku leeyahay:" Waxaan kugula ballamay kiis, maadanna gaarin arrintaas ee maxaa ku helay?

Waxuu yiri Cumar:" Oo goormaad aragtay Rasuulku SCW?

Waxuu yiri:" Xalay (riyo ahaan)"



Markaa buu Cumar dadkii u khudbeeyay oo arrintii usheegay. Kadibna waxuu warqad u qoray Abii Muusa Al Ashcari oo Basra masuul ka ahaa isagoo ku amraya in ummadda Nebi Muxammed SCW la badbaadiyo. Sidoo kale sidaasi si lamid ah ayuu Camr bin Al Caasna warqad u qoray. Markaasay labaduba soo direen raashiin aad u tiro badan.

Hantidii iyo safarkii uu Camr bin Al Caas soo diray waxay kasoo gudubtay badda oo ay kasoo degtay Jiddah, dabeetana waxay ugudubtay Makka oo misna Madiina ay uga sii gudubtay. Tanna waa aathaar sixadeedu iyo senedkeedub aad usuganyahay.

Culimadi badankoodi waxay qabaan in Masar la furtay sanadkii 20aad ee Hijriyada. Caamu Ramaadana waxay dhacday baala yiraahdaa 18kii hijiriyada. Marka sidee la isku waafajinayaa Caamu Ramaadah oo dhacday sanadkii 18aad iyo Masar oo la furtay sanadkii 20aad ee Hijriyada inuu Camr bin Al Caas kasoo diro raashin iyo awr?

Abuu Macshar, Waaqidiyu iyo Ibnu Isxaaq waxay xuseen in Masar la furtay 20kii Hijriyada. Seyf bin Cumarna waxuu yiri:" Masar iyo Alaskandariya waxaa la furtay sanadkii 16aad ee Hijriyada bishii Rabiicul Awal. Sidaasi waxaa rajaxay Abul Xasan ibnu Athiir oo ku xusay kitaabka Al Kaamil. Waxuuna ku rajaxay qisadan oo uu usoo qaatay. Wallaahu aclam. Gadaal ayaanse ka xusi doonnaa furashii Masar hadduu Alle idmo.

Kadib waxaa magaalladii Madiina yimid Abuu Cubeydah bin Jarraax oo sida 4000 oo rakuub oo raashiin ah, markaasuu Cumar amray in la dajiyo oo loo qeybiyo qabaa'ilka dego Madiina iyo hareeraheeda. Kadib buu Cumar amray in Abuu Cubeydah beytul maalka laga siiyo 4000 oo Dirham, hase ahaatee wuu diiday inuu qaato, dabeetana Cumar ayaa ku qasbay jeer uu markii dambe aqblay.

Intaa kadib Cumar waxuu kaxeeyay dadkii oo dhan oo uu roob doonay isagoo kutawasulayo Nebiga SCW adeerkiis Cabbaas. Kadibna samadii baa roobeysay oo

raxmad Alle baa soo degtay abaartii  
Rammaadana sidaa ayaa looga baxay kadib  
markii lagu jiray muddo sagaal bilood ah.  
Falillaahil xamdu wal manna.

## Daacuunkii Camwaas

Daacuunkani lamagac baxay Camwaas waa  
daacuun ka dhacay dhulka Shaam oo ay  
kugeeriyooddeen khalqi aad u tiro badan oo  
lagu sheegay 25 000 oo qofood. Waxaa  
daacuunkan loogu magac daray qaryo yar oo  
la oran jiray Camwaas oo ku tiillay dhulka  
Shaam oo u dhaxayso Qudus iyo Ramallah,  
waana halkii ugu horeysay ee uu ka  
dallaaco.

Sida uu Seyf bin Cumar kasoo weriyey  
Shuyuukhdiisa: Daacuunkan Camwaas  
waxuu dhacay labo jeer oo uu u dhacay si  
aanan weligeed horey loo arag, wuuna  
raagay oo uu laayey khalqi aad u tiro badan.  
Markaasay cadawgii soo damaaciyeen (inay  
Muslimiinta kusoo duulaan), quluubtii  
Muslimiintuna taasi waxay kureebtay cabsi  
aad u daran.

Sanadkii 17aad dhammadkiisa ayuu daacuunkani ka qarxay Shaam, hase ahaatee isla sanadkas dhammadkiisiiba wuu dhammaaday sida ay qaar kamid ah Mu'arrikhiinta siirada xusaan. Sidaa darteed buu Cumar gabagabadii daacuunkan u aaday Shaam isagoo ay la socdaan rag karmeedyadii saxaabada Nebiga SCW, si uu ugu qeybiyo dhaxalka dadkii ay ehelladooda ka dhinteen, oo madaxduna uu ulasoo kulmo oo ciidamada Muslimiintuna quluubta ugu soo dhiso cadaawguna rucbi iyo ar gagax ugu dhaco..

Markii uu gaaray Shaam buu la kulmay qaar kamid ah madaxdii ciidamada Muslimiinta oo ay kamid ahaayeen Abuu Cubeydah iyo Yaziid iyo rag kale oo badan. Qaar kamid ah saxaabadii akhyaarta ahayd baa Cumar kula talisay inuusan dhulka daacuunka ka dallaacay ee Shaam uusan gelinin saxaabadii Nebiga SCW. Markaa buu Cumar amray in la laabto.

Markiina uu damcay Cumar inuu laabto ayuu Abuu Cubeydah ku yiri Cumar:" Oo ma waxaad ka carareysaa qadarta Alle?

Waxuu yiri:" Haah!, waxaan ka cararayaa qadarta Alle oo aan u cararayaa qadarta Alle. Bal ka warran haddii aad xoolahaadu keentid tog dhinacna ka angagan dhinacna leh naq iyo daaq wanaagsan, haddii aad dhanka daaqa wanaagsan daajiso waxaad ku daajiday qadarta Alle, haddii aad dhanka angagan daajisana waxaad ku daajiday qadarta Alle" C/raxmaan bin Cowf oo meesha markaa howlo gaar ah kaga maqnaa ayaa yimid oo markii uu maqlay arrintaasi yiri:" Arrintaasi agteyda waxaa ka yaal cilmi, waxaan maqlay Rasuulka Alle SCW oo leh:" Haddii aad maqashaan dhul uu ka dhacay (daacuunka) ha gelina. Haddii uu ka dhaco dhul aad kusugantahiina ha ka bixina adinkoo ka cararaya". Markaa buu Cumar aad ugu farxay iswaafaqidda ra'yigiisii iyo hadalkii Rasuulka SCW.

Misna mar kale ayuu daacuunku isagoo aan si saani ah u dhamaanin sanadkan dhexdiisa si daran u dillaacay, waana markii ay ku geeriyooddeen Abuu Cubeydah bin Al Jarraax iyo rag kale oo badan oo kamid ah saadaaddii Muslimiinta.



Markii xanuunkani uu darnaaday oo arrintaasi ay gaartay Cumar bin Khaddab, buu warqad u qoray Abuu Cubeydah bin Al Jarraax isagoo doonayo inuu ka soo saaro meesha, waayo Abuu Cubeydah martabad aad u sarreyso ayuu Islaamka u joogay, waxuuna Cumar yiri:" Nabadi ha ahaato dushaada, intaa dabadeed arrin baa igala soo kaa gudboonaatay oo danbaan kaa leeyahay. Waxaana doonayaa inaad iga shaafido oo aan kaala hadlo ee haddii ay warqaddeydan kuu timaaddo ha ka dhigin gacantaada jeer aad xaggeyga usoo boqaasho".

Markii ay Abuu Cubaydah warqaddaasi u tegtay waxuu gartay ulajeedada Cumar iyo inuu doonayo inuu ka dhex saaro xanuunka. Markaasuu yiri:" Allaha u dembi dhaafo amiirka Mu'miniinta". Kadibna warqad ayuu u qoray isagoo ku oranayo:" Amiirkii Mu'miniintoow! waan gartay danta aad iga leedahay, waxaana ku dhex jiraa ciidamadii Muslimiinta oo aanan ka tegi karin, mana doonayo inaan ka tego jeer uu Alle aniga iyo iyaguba arrinkiisa nagu xukmiyo ee iga daa

go'aankaada amiirkii Mu'miniintoow! oo ii daa ciidankeyga (inaan dhex joogo). Markii ay warqaddii Abuu Cubeydah gaartay Cumar oo uu akhristay buu ooyey, markaasay dadkii ku yiraahdeen:- Amiirkii Mu'miniintoow! ma Abuu Cubeydah baa geeriyooday?

Waxuu ku yiri:- Mayee waxaad mooddaa inuu u dhawaaday.

Kadib warqad ayuu u qorey isagoo ku oranayo:- Nabadi ha ahaato dushaada. Intaa kadib, dadkii waxaad dejisay dhul aanan wanaagsaneen, ee u raadi dhul wanaagsan oo dhaama kaas.

Waxuu yiri Abuu Muusal Ashcari:" Markii warqaddu u timid Abuu Cubeydah buu iiyeeray oo uu igu yiri:- Abuu Muusoow! waa tan warqaddii amiirka Mu'miniinta oo ii timid sida aad u jeeddo, ee orodoo u sahmi dadka dhul ay degaan si aan kuula raro". Markaasaan laabtay oo aan gurigeygii aaday, saa waxaan u tegay xaaskeygii oo geeriyootay. Markaasaan xaggiisii ku laabtay oo aan ku iri:" Illaah ban ku

dhaartaye reerkeygii bay arrini lasoo gudboonaatay".

Waxuu yiri:" Waxay udhowdahay inay xaaskaadii geeriyootay?

Markaasaan ku dhahay:" Haah!".

Markaasuu dalbaday in awrkiisa loo diyaariyo. Markii uu lugta dul saaray si uu u fuulo baa isagiina la asiibay. Markaasuu yiri:" Illaah baan ku dhaartaye waala i asiibay".

Waxaa la yiraahdaa:- Markii uu xanuunkii ku darraaday buu Abuu Cubeydah dadkii ka dhex kacay oo u khudbeeyay waxuuna yiri:" Dadoow! xanuunka kan waa raxmadda Rabbigiina iyo ducadii Nebigiina SCW iyo geeridii dadkii suubanaa ee idinka horreeyay, Abuu Cubeydana wuxuu weydiisanayaa Allaah in uu Abuu Cubeydah kasiyo saamigiisa". Markaasuu xanuunkii duray oo uu dhintay Allaha u naxariisto'e.

Masuuliyaddii Shaam wuxuu ku dhaafay Mucaad bin Jabal. Markaasuu Mucaadna

dadkii ka dhex kacay oo uu ugu khudbeeyey  
sidii Abuu Cubeydah oo kale waxuuna yiri:"  
Mucaadna waxuu Allaah weydiisanayaa  
inuu reer Mucaad ka siiyo saamigooda".  
Markaasaa la asiibay wiilkiisa C/raxmaan.  
Misna mar kale buu khudbeeyay oo uu yiri:"  
Mucaadna waxuu Allaah weeydiisanayaa  
inuu saamigiisa kasiyo". Markaasaa  
isagiina la asiibay oo uu geeriyooday.

Masuuliyaddii Shaamna wuxuu Mucaad  
kusii dhaafay Camr bin Al Caas bin Waa'il.

Daacuunkani waxaa ku geeriyooday khalqi  
aad u tiro badan oo saadaaddii saxaabada  
kamid ah. Waxaa ku geeriyooday qaar  
kamid ah madaxdii goballada Shaam, sida  
Abuu Cubeydah oo ahaa amiirkii guud ee  
Shaam, Yaziid bin Abii Sufyaan oo Dimishiq  
masuul ka ahaa, Mucaad bin Jabal oo  
isaguna kamid ahaa madaxdii Shaam iyo  
Fadal bin Cabbaas iyo qaar kale.

Fa innaa lillaah wa innaa illeyhi raajicuun.

Markii ay Abuu Cubeydah iyo Yaziid  
geeriyooden buu Cumar booskii Yaziid  
masuul uga dhigay walaalkiis Mucaawiyah

bin Abii Sufyaan oo isagu madax ka ahaa illaa waa dambe.

Sanadkan dhexdiisa buu sida uu Al Waaqidi xusay Cumar u dhiibay qaaddinnimadii Kuufa Shureyx Al Qaadi, Basrana waxuu u dhiibay Kacab bin Suur. Waxaana sanadkani dadka xajiyey Cumar bin Al Khaddaab, masuuliyiintiisii goballaduna waxay ahaayeen sidii sanadkii hore, marka laga reebo Dimashiq.

## SANADKII 19AAD

Al-Waaqidi iyo rag kaloo eynigiisa ah waxay yiraahdeen:- Sanadkan baala furtay Madaa'in, Jolowlaa iyo Xulwaan. Hase ahaatee sida rajaxsan horey ayaanu usoo xusnay in waqtigaan ka hor la furtay, falillaahil Xamdu.

Muxammed bin Isxaaq wuxuu yiri:- Furashadii Jaziiradda iyo Ruha, Xowraan, Ra'su Caynul wardah iyo Nusaybiin waxay ahayd sanadkan. Hase ahaatee jamaaca badan baa ku khilaaftay sidaasi, waxaanna soo xusnay in Jaziiradda la furtay sanadkan



waqti ka horeeyay oo sidaas ayaana rajaxsan. Wallaahu Aclam.

Abuu Macshar, Khaliifah iyo Ibnu Kalbi waxay yiraahdeen:- Furashadii Qeysaariyah waxay ahayd sanadkan, waxaana amiir ka ahaa Mucaawiyah. Waxaa kaloo la sheegaa inuu amiir ka ahaa Yaziid, hase ahaatee horey ayaan usoo xusnay inuu Mucaawiyah furtay sanadkan ka hor labo sano. Wallaahu aclam.

Majirto dhacdo aan sanadkan soo qaadan karno aan ka ahayn aqwaasha culimada siirada sida ay ka yiraahdeen, waayo dhacdooyinkii aan sanadkan kusoo qaadan lahayn sida ay culimadaasi qaarkood kusheegeen ayaa aan dhammaantood horey usoo xusnay inagoo raacnay sida rajaxsan.

Waxaa jira dhacdooyin badan oo ay culimadaasi qaarkood kusheegeen in sanadkan ay dhaceen hase ahaatee aan soo xusnay, waxaana kamid ah, Madaa'in, Jolowlaa, Xulwaan, Qeysaariyah, Jaziiradda, Ra'sul Ceyn, Nuseybiin iyo kuwa kaloo lamid ah. Sidaa darteed maadaama aan raacnay qowl kamid ah aqwaasha

culimadaasi weliba kuwoodii rajaxsanaa ayaan door bideynaa inaanan soo celinin oo aanan sanadkanna ku xusin, waayo waan soo xusnay oo sidaas ayaan uga gudbeynaa idinka Alle.

## SANADKII 20AAD

Ibnu Isxaaq waxuu xusay in sanadkan la furtay Masar, Al Waaqidina waxuu ku raacay in lafurtay sanadkan, waxuu kaloo yiri Aleskandariyana waxaa la furtay sanadkan. Abuu Macshar-se waxuu yiri:- Masar waxaa la furtay sanadkii 20aad, Alaskandariyana waxaa la furtay sanadkii 25aad..

Seyf bin Cumar waxuu yiri:- Masar waxaa la furtay sanadkii 16aad bishii Rabiicul-awal. Sidaasi waxaa rajaxay Abul Xasan ibnu Athiir oo ku xusay kitaabka Al Kaamil Fit- taariikh, markii uu ka hadlayey awrtii Camr bin Al Caas uu Masar kasoo diray sanadka abaartii Caamu Rammaadah. Waana mid u dhaw oo suuro gal ah siduu rajaxay Allaha u naxariisto;e. Wallaahu Aclam.

Maadama aanan horey usoo xusin furashadii  
Masar baa innagoo raaceyna qowlka Ibnu  
Isxaaq, Al Waaqidi iyo Abuu Macshar ayaan  
sanadkan soo qaadan doonnaa furashadii  
Masar iyo siday udhacday hadduu Alle  
idmo.

Waana tan

Furashadii Masar

Markii Cumar bin Al Khaddaab ay u taam  
noqotay furashii dhulka Shaam buu Camr  
bin Al Caas u diray Masar, waxuuna Seyf  
bin Cumar xusay in Camr la diray kadib  
markii la furtay Beytul Maqdis.

Waxuu Cumar kasoo daba diray Zubayr bin  
Al Cawwaam oo ay la socdaan Busr bin  
Ardhaah, Khaarijah bin Xudaafa iyo  
Cumeyr bin Wahab Al jumaxi. Waxay kula  
kulmeen Camr bin Al Caas albaabkii Masar.  
Halkaasina waxay ugu tegeen laba nin oo uu  
soo diray Moqowqas boqorkii Askandariya si  
ay Muslimiinta uga hor istaagaan inay  
dhulkiisa soo galaan. Labadaasi nin waxaa

la kala oran jiray Abuu Maryam Jaathaliq iyo Asqaf Abuu Miryaam, waxayna ahaayeen reer Thaabaat. Markaa buu Camr bin Al Caas asxaabtiisii ku yiri:- Ha ku deg degina jeer aan cududaar siinno si ay inoogu soo baxaan Abuu Maryam Jaathaliq iyo Asqaf Abuu Miryaam oo ah culimadii dhulkaan. Markaasay u yimaadeen.

Markaa buu Camr bin Al Caas ku yiri labadii nin:- Waxaad tihiin labadiinnu culimadii dhulkan ee dhageysto. Alle baa Muxammed SCW la soo diray xaq, oo uu amray. Markaasuu Muxammedna SCW innaga na amray wixii la amray, wuuna inoo gudey wixii la amray kadibna wuu tegay. Waxuuna inooga tegay arrin cad. Waxyaabahii uu ina amrayna waxaa kamid ah inaan dadka cududaar siinno. Haddaba inagu waxaan idiinkugu yeereynaa Islaamka. Kii naga yeelo innaga ayuu nala mid yahay, kii aanan naga yeelinna waxaan u bandhigeynaa jizyo, waxaana taas u idinkugu badalaynaa inaan idin ilaalinno. Waxuu inoo sheegay (Rasuulkayaga SCW) inaanu idin furan doonno, waxuuna inoo kiin dardaarmay inaan idinku dhowrno riximka.

Haddii aad taasii naga yeeshaan waanu idin magan gelineynaa. Waxyaabahii uu amiirkayaga nagula ballamayna waxaa kamid ah ( inuu yiri ):- U dardaarmo Qidbiyiinta wanaagga, waayo waxay leeyahiin rixim iyo magane.

Markii ay labadii nin dhageysteen hadalkii Camr bin Al Caas baa waxay yiraahdeen:- Taasi waa qaraabo fog oo aysan xiriirinin cidaanan ahayn anbiyada layaqaan ee sharafta badan. Waxay ahayd (Haajar) gabadhii boqorkayaga, waxayna kasoo jeeday reer Manf, oo boqortooyaduna dhexdooda ayay ahayd. Reer Caynu Shams baa markaasi ka adkaatay oo laayey, boqortooyadoodiina ka qaatey. Sidaa darteed bayna ku noqotay afadii Ibrahiim CS. Soo dhawaado adinkoo ehel ah. Inoo qabo muddo jeer aan kuusoo laabanno.

Waxuu yiri Camr bin Al Caas:- Anigoo kale lama khiyaano, hase ahaatee waxaan idiin qaban muddo saddex casho ah si aad u eegtaan oo qoomkiinuna ay u eegaan (arrinka). Haddayan dhicin sidaa waanu idin soo weerarin.



Waxay yiraahdeen:- Inoogu dar?

Markaasuu maalin kale ugu daray. Misna waxay yiraahdeen:- Inoogu dar?

Markaasuu maalin kale ugu daray. Markaas bay laabteen oo ay u tegeen Moqowqas oo uu markaasi la joogay Ardhaabuun. Markii ay boqorkii u sheegeen arrintii, baa Ardhaabuun oo la fadhiyey boqorka ayaa wuxuu u tilmaamay in la iska celiyo ciidamada Muslimiinta oo lala dagaallaamo. Sidaas ayuuna boqorkii ku raacay oo taladaasi ayay qaateen. Labadii nin madaxdoodii ayay taasi ku raaceen waxayna yiraahdeen:" Innaguna waanu idinka difaaceynaa oo kulaaban meyno". Rag kamid ah madaxyaweyntoodii baa waxay yiraahdeen:- Oo sideed ula dagaallameysaan qoom dilay Kisraa iyo Qaysar oo dhulalkoodiina kaga adkaaday? Qab weynahii Ardhaabuun ayaa taasi ku gacan seyray madaxdii oo ku qasbay in Muslimiinta weerar lagu qaado intaysan dhammaan muddadii ay usoo qabteen labada nin. Sidii bay sameeyeen oo ay Muslimiintii weerar ku qaadeen hase ahaatee kumaysan guuleysan oo jab iyo hoog ayey ka dheefeen

iyadoo laga laayey tiro aad u badan oo uu kujiray Ardhaabuun qudhiisa.

Zubayr bin Al Cawwaam waxuu maalintaasi kasoo dul booday deyrka weyn oo uu baladkii soo dhex galay isagoo laynayey wixii uu helo. Markii ay taasi ka war heleen bay albaabkii Camr bin Al Caas u ordeen oo ay ka dalbadeen in uu la heshiiyo. Zubayrna dhankiisa seyf ayuu kusoo maray jeer uu yimid albaabkii Camr bin Al Caas, halkaasoo lagu qoray heshiiskii uu Camr u qoray Qidbiyiinta.

Waxuu Camr bin Al Caas u qoray reer Masar warqad magan galyo ah isagoo u qoray in nafahooda, diintooda, maalkooda kaniisadahooda iyo saliibkooda baddooda iyo berrigooduba u ballan qaaday inaanan lagu xad gudbin. Waxuuna taasi baddalkeeda kula heshiiyey inay bixiyaan jizyo. Sidoo kale dadkii Nuubiyiinta iyo Ruumaanka ee Masar wax ka deganaa waxuu u qoray heshiis lamid ah kan reer Masar. Intaasi kadib fardooleydii Muslimiinta iyo Camr ibnu Al Caas ayaa waxay degeen goobtaa iyada ah ee uu

heshiiska ka dhacay, markaasuu Camr ka dhistay teendhadiisii halkaas, ciidankii oo idilna hareerahiisa ayay ka dhiste. Waana halka maanta ah caasimadda Masar ee Al Qaahira. Camr bin Al Caas waxuu halkaasi kadhishay jaamic weyn oo lagu tukado, kaasoo markii dambe isaga loogu magac daray. Waana jaamica weyn ee kuyaal magaallada Al Qaahira ee loo yaqaan Masjid Camr bin Al Caas.

Markii Camr bin Al Caas uu halkaa degay ayaa waxaa u yimideen labadii nin oo ay kala hadleen in loosii daayo dumarkii iyo carruurtii lagaga qafaashay macrikada. Markaasuu Camarna ka diiday inuu uceliyo waxuuna amray in la eryo oo hortiisa laga kaxeeyo labadaasi nin. Arrintaasi markay gaartay Cumar bin Al Khaddaab buu soo amray in loosii daayo wixii lagaga qafaashay muddadii shanta maalmood ee uu u qabtay, iyo kuwii aanan la dagaalin. Kuwii la dagaallamayse waxuu soo amray inuusan sii deynin oo uusan u celinin. Waxaa la yiraahdaa Cumar bin Al Khaddaab waxuu kaloo soo amray in lakala dooransiyo wixii qafaal ah ee gacantiisa ( Camr bin Al Caas )

kujiro Islaamka iyo in loo celiyo dadkooda. Qofkii doorto Islaamka, waxuu soo amray inaan la celinin, kii doortase in ehelladiisii loo celiyo waxuu amray in laga qaado jizyo. Markaasay qaarkood doorteen Islaamka qaar kalena ay ehalladoodii ku laabteen oo ay bixiyeen jizyo.

Kadib Camr bin Al Caas ciidamo ayuu u diray dhanka Aleskandariya oo uu madax ka ahaa Moqowqas. Moqowqas waxuu dhulkaasi masuul uga ahaa boqortooyadii Ruumaanka ee la boqno gooyey. Markiina uu Camr bin Al Caas gaaray halkaas buu Moqowqas ka war helay warkaas. Markaasuu isu soo aruuriyey waxgaradkiisii oo ku yiri:" Carabtani waxay ka adkaadeen Kisra iyo Qaysar oo ay suuliyeen boqortooyadoodii. Tabarna uma hayno ee ra'yiga agteyda ahi waxuu yahay inaan siinno jizyo". Markaa buu Moqowqas u qoray warqad Camr bin Al Caas isagoo ku oranayo:" Waxaan jizyo siin jiray dad aan adinku idinka necbahay (Ruum iyo Firus)". Kadibna waxuu kula heshiiyey inuu bixiyo jizyo, waxaana la sheegaa in uu 12 000 Dirham kula heshiiyey. Camr bin Al Caas

waa uu ka guddoomay heshiiskii oo warqad magan gelyo ahina uqoray. Intaa kadib Camr guushii furashada iyo khumuskaa qaniimada ayuu u diray dhankii amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab iyo magaalladii Madiina.

Waxaa la sheegaa in intaas kadib Camr bin Al Caas iyo Zubayr ay aadeen Caynu Shams oo ay go'doomin ku qabteen. Markaasuu Camr bin Al Caas u diray Abraha bin Sibaax dhanka Al Farmaa. Waxaa la sheegaa Aleskanderiya inuu u diray Cowf bin Maalik, oo markaasi furtay. Wallaahu aclam.

Intaasi kadib ciidamadii Muslimiinta waxay kusii duuleen dhulka Nuubah, halkaasoo ay kala kulmeen dhaawacyo aad u badan oo ay kuwaayeen indho badan, Nuubiyiinta oo si aad ah ugu dheereesey ganida gamuunka darteeda.

Waxaa la isku khilaafaa Masar ma waxaa lagu furtay heshiis ama xoog?

Waxaa la yiraahdaa: Waxaa lagu furtay



heshiis, waana qowlka Yaziid bin Abii Xabiib. Waxaa kaloo layiraahdaa: Waxaa lagu furtay xoog. Waana qowlka Ibnu Cumar iyo jamaaco kale oo qeyrkiisa ah. Wallaahu aclam.

## Qisadii Webiga Niil

Markii la furtay Masar ayay reer Masar u yimaadeen Camr bin Al Caas kadib markii la gaaray bil kamid ah bilihii ay tirsan jireen Cajamta. Waxayna ku yiraahdeen:" Amiiryahow! waxaan lahayn caado sanadkan haddii aanan sameynin uusan webiga soconeynin".

Waxuu ku yiri:" Oo maxay ahayd?

Waxay yiraahdeen:" Markay labo iyo toban casho ka tegto bishan baan gabar qurux badan oo bikro ah kasoo kaxayn jirnay waalidkeeda oo aan waalidkuna siin jirnay wax ay ku raalli noqdaan. Markaasan dusheeda saari jirnay (yacni u xiri jirnay) xuliyad iyo dhar aad u qurux badan oo ah wax la xirto waxa ugu wanaagsan, saan webiga ku tuuri jirnay.

Waxuu yiri Camr bin Al Caas:- Tani waa mid aanan ku habbooneyn diinta Islaamka ah. Waayo Islaamku waxuu tiraa wixii ka horeeyay. Markaa bay iska laabteen, webigiinna sidii ay sugayeen ma iman oo waxyar iyo wax badanba midna ma dhaqaaqin. Markii ay xaaladdii ku darraatay buu Camr bin Al Caas warqad u qoray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab isagoo kula socodsiinayo arrintaasi. Markaasuu Cumar warqad usoo diray dhankii Camr bin Al Caas isagoo ku oranayo:- Waad asiibtay sidaad sameysay, waxaana kuusoo diray warqad ay kudhex jirto warqad kale ee ku dhex tuur webiga. Markii ay warqaddii soo gaartay Camr bin Al Caas oo uu furay si uu u akhriyo waxuu ka akhriyey sida tan:

Ka socoto Addoonkii Alle

Cumar Amiirkii Mu'miniinta.

Kusocoto webiga Niil ee reer Masar.

Intaa dabadeed: Haddii aad ahayd mid

kusocda amarkiisa iyo rabitaankiisa haddaba ha socon kuumana baahinine. Haddiise aad ahayd mid kusocday amarka Allaha kaliga ah ee awoodda badan isaga ayaa kusocodsiin doono. Waxaana Alle Sarreeye weydiisaneynaa inuu kusocodsiiyo''.

Markii uu Camr bin Al Caas warqaddii akhriyey buu inta qaaday kutuurey webigii Niil. Markaasay reer Masar waabariisteen aroor Sabti ah webigii oo socdo oo biyuhu qulqulayaan. Halkaas bay ku dabar go'day caadadii foosha xumeyd ee ay reer Masar haysteen, illaa maantadanna wuu socdaa webigii Niil oo muusan istaagin. Falillaahil Xamdu..

Waxuu yiri Ibnu Jariir:" Sanadkan ayuu ku duulay Abuu Baxriyah C/llaahi bin Qeys Al Cabadiyu dhulkii Ruum. Waxuuna ahaa qofkii ugu horeeyay ee ku duulo. Wuxuu soo laabtay isagoo bad qabo soona qaniimeystay''. Waxaa kaloo la sheegaa inuu ahaa qofkii ugu horeeyay ee galo dhulka Ruum Maysarah bin Masruuq Al Cabasiy. Wallaahu aclam.

Al Waaqidi wuxuu xusay in sanadkan uu Cumar bin Al Khaddaab madax uga dhigay Yamaamah iyo Baxreyn Abuu Hureyrah Ad-Dowsi Allaha ka raalli noqdee.

Sanadkan dhexdiisa buu Cumar bin Al Khaddaab u diray Xabashi soo weerartay Jiddah Calqamah bin Al Mujazir Al Mudjali. Waxuuna amray inuu uga duulo dhanka badda, hase ahaatee muusan soo laaban oo halkaas ayaa lagu asiibay. Fa innaa lillaah wa innaa illeyhi raajicuun. Arrintaasi Cumar aad buu uga murugooday oo uu u dhibsaday. Sidaa darteed buuna dhaar kumaray inuusan ciidama Muslimiin ah dib dambe ugu dirin badda.

Waxuu Cumar sanadkan guursaday Faadimah bint Al Waliid bin Muqiirah, taasoo uu horey kaga geeriyooday Al Xarith bin Hishaam Allaha ka raalli noqdee. Sanadkan waxaa dadka xajiyey amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab, masuuliyiintiisii goballaduna waxay ahaayeen sidoodii marka laga reebo Abuu Hureyrah oo uu sanadkan masuul uga dhigay Yamaama iyo Baxreen.

## SANADKII 21AAD

Waa sanadkii ay dhacday dhacdadii

Nahaawunda

Dagaalkan Nahaawunda wuxuu ahaa dagaal weyn oo dhex maray ciidamadii Muslimiinta iyo majuustii Furus, waxuuna lahaa sha'ni weyn iyo war cajiib ah, waxayna Muslimiinta ugu magac dareen Fatxul fatuux (Furashadii furashooyinka).

Waxay yiraahdeen Ibnu Isxaaq iyo Al Waaqidi:" Waxuu dhacay dagaalkii Nahaawunda sanadkii 21aad ee Hijriyada".

Sayf bin Cumarse wuxuu yiri:" Waxuu dhacay sanadkii 17aad ee Hijriyada".

Waxaa kaloo la sheegaa inuu dhacay 19-kii Hijriyada, sida rajaxsanse waa inuu dhacay sanadkan. Wallaahu aclam.

Sababtu waxay ahayd goor ciidamadii Muslimiinta ay wada furteen gobalkii Ahwaas iyo magaalooyin kale oo waaweyn



ee kamidka ahaa magaalooyinkii Majuusta  
ayaa amiirkii Mu'miniinta Cumar bin  
Khadaab wuxuu amray asxaabtiisa inaanay  
ciidamada Muslimiinta kusii fogaanin  
dhulalka Furus ee fog fog, is gaarsiintii oo  
fogaatay awgeed iyo dhulkii uu Islamka ka  
talinaayey oo noqday dhul aad u ballaaran,  
waxuuna markaas Cumar is tusaayey  
inaysan u wada talin karin dhulalkaas fog  
fog. Hase ahaate waxaa arrintan kaga hor  
yimid Cumar koox saadaaddii Muslimiinta  
kamid ah oo uu kamid ahaa Axnaf bin  
Qays .

Waxuu Axnaf bin Qeys ku yiri Cumar:"  
Amiirkii Mu'miniintoow! laba qolo dhul  
kama wada talin karaan, kana joogi  
mahayaan Majuusta inay nagu soo  
weeraraan goobahayaga ee inoo ogolaaw  
inaan ka saarna majuusta dhulka Furus oo  
dhan". Markaas buu Cumar ku qancay in la  
wada furta dhulka Furus.

Goor ay doodahaasi socdeen ayaa waxaa  
Cumar bin Khadaab u timid warqad  
kasocotay dhanka amiirkii ciidamadii  
Muslimiinta ee ka dagaallamayey Ciraaq

Sacad bin Abii Waqaas, waxayna warqadaasi tilmaameysay in Faarisiinta ay soo uruuriyeen ciidan aysan horey mid lamid ah usoo uruurin, oo ay soo degeen goobta Nahaawunda ayna weerar kusoo yahiin dhanka Muslimiinta.

Markaa buu Cumar garwaaqsaday hadalladii uu Axnaf bin Qeys horey kula taliyey, Sacadna mar waliba waa uu la socodsiinayey xaalada halka ay mareysa oo warqado ayuu u diri jiray.

Markii dambe ayaa waxaa Sacad kasoo eed sheegtay koox kamid ahaa ciidamadii Musliinta waxayna u tegeen Cumar oo ay uga dacwoodeen Sacad, waxaana kamid ahaa waxyaabahii ay kaga soo dacwoodeen inuusanba Sacad hagaajin karin xitaa salaadda iyo inuusan si caddaalad ah wax ugu qeybinin oo uusan u xukminin.

Nin la oran jiray Al Jarraax bin Sinaan Al Usdi ayuu ahaa ninkii u hadlaayey kooxdaas arrimahaas kusoo eedeysay Sacad, waxuuse Cumar ku yiri Al Jarraax iyo qolooyinkiisii:" Waxaa u daliil ah waxa aad

sheegeysaan inay been iyo shar yahiin  
xaaladda imminka lagu jira iyo iyadoo uu  
Sacad isku diyaariyey inuu la dagaallama  
acdaada Allaah, mase jirta arrin diideysa  
inaan dhex galo arrinkiina oo aan baaro  
wixii ka run ah".

Intaas kadib buu Cumar soo diray Maxamed  
bin Maslama oo aallaaba isaga arrimahaas  
dacwada iyo is qab qabsiga loo diri jiray,  
markii uu Maxamed magaaladii Kuufa  
yimidna waxuu masjidkii isugu soo kulmiyey  
dadkii oo uu weydiyey inay jirta cid dacwa  
ka qabta Sacad bin Abii Waqaas? Balse  
lama uusan kulmin waxaanan kheyrrahayn  
cid ka sheegta Sacad bin Abii Waqaas,  
marka laga reebo kooxdii Al Jarraax bin  
Sinaan oo iyagu iska aamusay.

Dabeeto waxaa kacay nin la oran jiray Abuu  
Sacdah Usaama bin Qataadah oo yiri"  
Haddii aad Maxammadow!! ina dhaarisay,  
Sacad si isla eg oo caddaalad ah wax uma  
qeybiya, raciyaduna uma caddaalad falo  
mana raaco sirriyada". Markaa buu Sacad  
Allaah baryey oo habaaray ninkaasi isagoo  
leh:" Allahayoow! haddii uu u yiri

kalmaddaas istus tus iyo been iyo halagu maqla, Allahayoow! indhaha tir oo kayeel faqiir, carruurtiisana badi, kuna imtixaan fidno''.

Markaa buu ninkii indha beelay waxuuna mar dambe dhalay 10 gabdhood, mar waliboo uu maqla cod haweeneyna xaggeeda ayuu ku ordi jiray, markii la weydiiyana waxuu oran jiray'' Waxaa igu dhacday inkaartii ninkii barakeysnaa ee Sacad''.

Waxaa kaloo uu Sacad habaaray Al jarraax bin Sinaan oo jirkii googo'ay maalkiina masiiba uga dhacday, sidaa si lamidna waxuu wada inkaaray dhammaan intii falkaas iyo dacwada beenta ah ka dambaysay. Illaahayna wuu ku wada riday wixii uu Sacad ku inkaaray, waayo Sacad waxuu ahaa nin Mustajaabu duca ah, Rasuulka SCW ayaana sidaa ugu duceyay.

Dabeeta waxay Sacad, Maxamed bin Maslama, Al Jarraax bin Sinaan iyo kooxdiiisii tegeen magaaladii Madiina, markii ay la kulmeen Cumarna waxuu weydiiyey sida ay kusoo eedeeyeen Sacad ee uu

salaadda u tukada? Waxayna yiraahdeen:"  
Waxuu dheereeyaa labada rakaco ee hora  
halka kuwa dambana uu gaabiya".

Waxuu yiri Sacad" Dhab ahaantii anigu  
waxaan ahaa qofkii saddexaad ee  
Islaama,waxaana ahaa ninkii ugu horeeyay  
ee gamuun u ganay dar Alle, waxuuna  
Rasuulkii Alle SCW igu kulmiyey aabahiis  
iyo hooyadiis isagoo igu furtay ( maalintii  
Uxud asagoo leh:- Tuur Sacadoow! kugu  
furtay aabahay iyo hooyadeyba ), horeyna  
ugumuusan kulmin Rasuulka SCW  
hooyadiis iyo aabahiis oo kumuusan furan  
axad aniga iga horeeyay, markaas bay banii  
Asad yiraahdeen Sacad salaadda ma  
haggaajin karo".

Waxuu yiri Cumar:" Yaad uga soo tegtay  
Kuufa?

Waxuuna ku jawaabay:" C/llaahi bin C/  
llaahi bin Citbaan".

Markaa buu Cumar u daayey C/llaahi bin  
C/llaahi bin Citbaan masuul ahaan  
magaaladii Kuufa, waxuuna ahaa Ibnu C/



llaahi bin Citbaan nin oday ah oo kamid  
ahaa akhyaartii saxaabada waxuuna xulufa  
la ahaa banii Xabliy oo Ansaarta kamid  
ahayd.

Sacad isaga waalaga casilay imaaradda  
dambi la 'aan isagoo beri ka noqday  
waxyaabahii ay kusoo eedeeyeen wax  
makastii banii Asad. Dhanka Faarisiintii  
iyagu meel waliboo fog bay isaga yimaadeen  
oo ciidama tira badan oo uu hoggaaminayo  
Feyruzaan oo dhan 150 000 bay isu  
keeneen. Waxaa kaloo la sheegaa inuu  
hoggaaminayey Bandaraan ama Dul Xaajib,  
waxaase xaqiiqda udhaw inuu  
hoggaaminayey ciidamadaas Feyruzaan.

Iyagoo isdhaarsanayo Majuusta ayaa waxay  
isku yiraahdeen:" Maxammed kii Carab u  
yimid ma uusan soo haweysan  
boqortooyadeenna, Abuu Bakarkii ku  
xigayna lamid, markaa baa markii  
Cumarkan waqtigiisii uu dheeraaday ayuu  
kusoo duulay boqortooyadeennii oo uu  
banneystay xurmadayadii, oo uu qaatay  
maalkayagii, intaana kumuusan ekaane  
waxuu inoogu yimid oo uu inagu soo

weeraray guryahayagii oo uu qaatay hantidii aqalka boqortooyadeenna, kuna joogsan mahayo intaas jeer uu idinka wada saara dhulkiina".

Waxay isku dhaarsadeen Majuusta inaysan cararin oo waxay ku ballameen in lagu duullo Kuufa iyo Basra, Cumarna lagu mashquuliya dhulkiisa, waxayna isku dhaaranshahaas iyo ballantaas ay ku qoreen warqad si ay u adkeeyaan.

Sacad bin Abii Waqaas markii uu tegay magaaladii Madiina ayuu uga warramay amiirkii Mu'miniinta arrimihii markaas jiray oo si fiican uga shaafiyey xaalkii Majuusta iyo inay weerar culus soo wadaan .

Dhanka kale waxaa Cumar warqad usoo diray amiirkii cusbaa ee Kuufa C/laahi bin C/llaahi bin Citbaan waxuuna warqadaas usoo dhiibay Qariib bin Dhafar Al Cabadiyu, wuxuuna uga warramay halka uu xaalku maraya iyo in ciidama tira badan oo majuus ah ay isku urursadeen la dagaalanka Muslimiinta iyo inay weerar kusoo qaadaan oo ay baabi'iyaan Islaamka iyo ehelkiisa,

waxuuna C/llaahi ibnu C/llaahi bin Citbaan ka dalbaday amiirka Mu'miniinta inuu u ogalaado inay ku deg degaan oo ay ka hortegaan Majuusta.

Waxuu Cumar su'aalay ergaygii warqadda siday:" Magacaa?

Waxuu yiri:" Qariib".

Waxuu yiri:" Ina ayo?

Waxuu yiri:" Ina Dhafar". Markaa buu Cumar isagoo macneysanaya magacaasi yiri:" Dhafrun Qariib". Oo la macna ah guul baa soo dhaw, intuu labadii magac isdaba mariyey. Markaa buu Cumar amray in la naadiyo dadka oo reer Madiina oo idil ay masjidka isugu wada yimaadaan.

Markaas buu Muslimiintii oo idil kusoo kulmiyey masjidka. Waxaa la yiraahdaa qofkii ugu horeeyay ee masjidka maalintaa soo gala waxuu ahaa Sacad bin Abii Waqaas. Markaa buu Cumar dadkii u khudbeeyay isagoo usheegay halka ay arrintu mareysa iyo in loo baahanyahay

ciidan, waxuuna wada tashi la qaatay  
saadaaddii saxaabada oo ay ka mid  
ahaayeen Sacad bin Abii Waqaas, C/  
raxmaan bin Cowf, Cuthmaan bin Cafaan,  
Cali bin Abii Dhaalib, Dhalxa bin  
Cubeydillaah iyo rag kale oo ahlu ra'yiga  
kamid ahaa. Dhammaan waxay isla garteen  
inuusan amiirka Mu'miniinta bixin,  
Madiinana aan ciidan laga dirin, hase  
ahaatee waxay isla fahmeen oo ay hal ra'yi  
kanoqdeen in la diro ciidamo gurmada ah oo  
ka baxa goballada.

Cuthmaan bin Cafaan baa isagu wuxuu  
keenay fikrada ah in ciidama laga dira Shaam  
iyo Yeman loona dira Ciraaq, hase ahaatee  
Cali bin Abii Dhaalib baa isagana fikrada kale  
oo Cumar qancisay keenay, waxuuna  
tilmaamay in ciidama aanan laga dirin  
Yeman iyadoo looga baqaya in ay Xabashida  
soo weerarta Yeman, dhanka Shaamna  
aanan ciidan laga dirin, waayo waxaa  
macquul ah buu yiri inay ciidamada  
Roomaniska soo weeraraan Shaam, sidaa  
darteed waxuu ishaaray in Kuufa iyo Basra  
laga kala dira ciidama gurmada ah si ay uga  
hor tegaan Majuustaas isasoo bahaysatay.

Cumar bin Khaddaab waxaa cajib geliyey ra'yigii Cali oo uu qaatay, waxuuna Cumar la tashan jiray mar waliba oo uu arrin goosta Al Cabbaas bin Cabdmudallib, markaa buu Al Cabbaas utegay oo uu usheegay arrinta uu goostay isagana wuu ku taageeray.

Markii uu goostay arrintaas Cumar ayaa waxuu yiri'' Ii tilmaama yaan u doortaa ciidamadaas oo aan masuul uga dhigaa?

Waxaana loogu jawaabay:" Adigaa u aqoon badan amiirkii Mu'miniintoow!!".

Markaa buu yiri '' Waxaan u magacaabi doonaa Nucmaan bin Muqarrin''.

Waxuu Nucmaan markaasi ku sugnaa Kaskar oo uu masuul ka ahaa.

Dabeeta waxuu Cumar warqad u diray amiirkii Kuufa C/llaahi bin C/llaahi bin Citbaan taasoo uu ku amrayey in uu dira ciidan uu madax uyahay Xudeyfah bin Yamaan, Basrana waxuu amray inay kasoo



baxaan ciidan uu wata Abii Muusa Al  
ashcari, kadibana dhammaan ciidamadaas  
iyo ciidama uu watay Nucmaan bin  
Muqarrin oo iyagu Kaskar kasoo bixi doona  
ayuu amray Cumar inay ku kulmaan Maah  
oo uu ciidankaas dhami madax u noqda  
Nucmaan bin Muqarrin, haddii Nucmaan la  
dilana waxuu amray inuu amiir noqda  
Xudeyfah bin Yamaan, haddii Xudeyfa la  
dilana waxuu amray inuu amiir unoqodo  
Jariir bin C/llaahi Al Bujali, haddii Jariir la  
dilana wuxuu soo amray inuu amiir noqdo  
Qeys bin Makshuux, haddii Qeys la dilana  
waxa amiir ah hebal, iyo hebal jeer uu  
magacaabay 7 nin oo isaga kala  
dambeyneeyso haddii mid la dila si uu  
midkale u qabta, waxaana kamid ahaa  
raggaas toddobada ahi Muqiirah bin  
Shucbah. Waxuu Cumar qeybinta  
qaniimada usoo xilsaaray As-Saa'ib bin Al  
aqrac.

Markaa buu Xudeyfah ka dhaqaaqay  
magaalladii Kuufa isaga iyo ciidama uu  
hoggaaminayo si ay ugu biiraan ciidamada  
Nucmaan bin Muqarrin oo ay markaa  
kuballameen inay ku kulmaan goobta Maah.

Markii uu Xudeyfah u tegay Nucmaan buu u dhiibay warqaddii amiirka Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khddaab, taasoo caddeyneysay qaabkii ciidankan loo dhisi lahaa.

Markii ay isu tegeen ciidamadaas is aruursaday ee Muslimiinta waxay tiradoodu noqotay 30 000 sida uu weriyey Sayf bin Cumar oo isagu kasoo weriyey Shicbi, waxaana ku jiray saadaaddii saxaabada iyo akhyaartii Carbeed. Waxaa kamid ahaa ciidamadaas C/llaahi bin Cumar bin Khadaab, Jariir bin C/laahi Al Bujali, Xudeyfah bin Yamaan, Muqiirah bin Shucbah, Nucmaan bin Muqarrin (amiirkii ciidankaas), Camr bin Macdiyakrib, Dhuleyxa bin Khuweylid Al Usdi, Suweyd bin Muqarrin, Nucaym bin Muqarrin, Qeys bin Makshuux Al Muraadi, Abii Muusa Al Ashcari, Camr bin Abii Salama iyo halyeeygii Al qacqaac bin Camr At Tamiimi oo maalintaa kamid ahaa hoggaamiyaasha ciidanka Muslimiinta.

Intaa kadib ciidamadii Muslimiinta waa ay dhaqaaqeen waxayna abbaareen dhankii

Nahaawunda, waxuuna Nucmaan hortiiisa diray saddex nin oo wardoonno ah. Kuwaasoo kala ahaa Dhuleyxa bin Khuweylid, Camr bin Macdiyakrib iyo Camr bin Thubayi, oo loo yaqiinnay Camr bin Abii Salama, si ay usoo ogaadaan warka qoomka iyo waxa ay ku suganyahiin. Camr bin Abii Salama iyo Camr bin Macdiyakrib way soolaabteen, hase ahaatee Dhuleyxa wuxuu tegay Nahaawunda oo uu qoomka dhex galay oo wax kasoo dhageystay, dabeetana Nucmaan buu usoo laabtay oo uu usheegay arrinta. Waxuuna usheegay in Nahaawunda iyo isaga aysan dhexdoodu ahayn wax uu dhibsado.

Waxuu Nucmaan diyaariyey ciidankiisii waxuuna ciidanka hore madax uga dhigay walaalkiis Nucaym bin Muqarrin, labada dhinacna (bidax iyo midig) waxuu u kala dhiibay Xudayfah bin Al Yamaan iyo Suweyd bin Muqarrin, ciidanka lugtana waxuu madax uga dhigay halyeygii Al qacqaac bin Camr, halka gaadada damba ee ciidankana uu u dhiibay Majaashac bin Mascuud.

Dabeeta ciidamadii Muslimiinta way dhaqaaqeen jeer ay markii dambe ka hor tegeen ciidamadii Furus oo uu hoggaaminayey nin la oran jiray Fayruzaan, waxayna ahaayeen ciidan aad u tira badan oo 150 000 ah. Kadib wuxuu Nucmaan ciidankii amray inay culeyska iska fududeeyaan oo ay teendhooyinkooda ka dhistaan Nahaawunda dusheeda, isagiina waxaa loo dhisay teendho aad uweyn oo ay u dhiseen 14 nin oo kamid ah rag karmeedyadii ciidanka, waxayna raggaasi kala ahaayeen Xudeyfah bin Al Yamaan, Cutbah bin Camr, Muqiirah bin Shucbah, Bashiir bin Khasaasiyah, Xandhalah Al Kaatib bin Al Huwbar, Ribciyi bin Caamir, Caamir bin Mudar, Jariir bin C/llaahi Al Ximyari, Jariir bin C/llaahi Al Bujali, Al Aqrac bin C/llaahi Al Ximyari, Al Ashcat bin Qeys Al Kindi, Saciid bin Qeys Al Hamdaani iyo Waa'il bin Xijir. Ma jirin teendho ka weyn markaa carrigaasi Ciraaq teendhadaas iyada ah.

Markii ay labada qolo isasoo hor fadhiisteen, waxaa huray dagaalkii, markaasuu Nucmaanna ciidamadiisii amray inay weerar

ku qaadaan. Waxayna ahayd maalin Arbaco ah, oo maalintaas iyo tii ku xigtay buu dagaalku socday. Markii lagaaray maalintii Jumcada bay kufaartii qalcadahoodii ku carareen. Markaasay Muslimiintiina go'doomin ku qabteen. Markay rabaan bay soo baxayeen Majuusta oo misna ay si deg deg ah qalcadahooda ugu cararayeen.

Taa kahor markii ay isasoo hor degeen labadii ciidan oo ay indhaha isku dhufteen, ayuu Nucmaan amiirkii ciidamada Muslimiinta takbiirsaday saddex goor, markaa baa majuustii dab caabbudka ahayd dhulka la gil gishay oo rucbi iyo argagax darran qalbiga Illaahay kaga tuuray, kadibna ciidamadii Muslimiinta way kor degeen oo xisaar (isweer) ayay ka qabteen. Amiirkii ciidamada Majuusta ayaa waxuu Muslimiinta ka dalbaday in loo diro nin kamid ah Muslimiinta si uu ula hadlo. Markaasaa loodiray Muqiirah bin Shucbah oo lasoo dooday. Markii uu kasoo tegay buu Feyruzaan dadkiisii ku yiri:" Illaah baan ku dhaartaye acwarku wixii naftiisa kujiray buu idinka runsheegay". Markiina in muddo ah la kor daganaa oo iyagiina ay dhufeysyo



waaweyn ka qoteen hareerahooda  
xaaladdiina ay ku darraatay Muslimiinta,  
waxay ahayd waqti qabooba ah, markaa  
ayay Nucmaan bin Muqarrin iyo madaxdii  
kalee ciidanka qabteen shir looga tashanaya  
sidii lagu wajihi lahaa xaaladdan,  
maadaama Majuusta ay ka caajiseen oo ay  
ka gaabiyeen inay Muslimiinta dagaal la  
galaan weliba goob barxad ah.

Waxaa kacay markii hore Camr bin Abii  
Salama oo ciidamada halkaa kusugnaa oo  
idil waaga u da' weynaa, oo hadalkii dhigay  
si wacanna u suubiyey. Misna waxaa kacay  
Camr bin Macdiyakrib oo isaguna meel  
wacan taabtay. Kadib waxaa hadlay  
Dhuleyxah bin Khuweylid Al Asdi, waxuuna  
yiri:" Waxaan qabaa in la diro sirriyad  
(ciidan yar) oo dul dego godkooda kuna  
huriya dagaal. Markay usoo baxaanna haka  
soo cararaan oo xaggeenna ha usoo rooraan.  
Markay iyana soo raacdeystaan oo ay  
innagu ina soo gaaraan, markaa waa inaan  
innaguna cararnaa dhammaanteen sidoo  
kale. Markaa iyada ahi kama ay  
shakinayaan jabka oo dhammaantoodba way  
kasoo baxayaan qalcadahooda. Markii ay

kasoo wada baxaan qalcadahooda baan ku laabaneynaa oo aan la diriyeena jeer uu Alle ka xukmiyo dhaxdeenna".

Dadkii oo idil ra'yiga Dhuleyxa baa aad ula qurxanaaday, isagii ayayna Muslimiintii qaateen, waxuu markaa Nucmaan bin Muqarrin amray ciidamadii Al qacqaac si ay u fuliyaan howshaas iyada ah. Markaa buu Al qacqaac ciidamadiisii la dhaqaaqay oo uu dul degay qalcadahoodii, dabeetana uu dagaal ku huriyey, kadibna way soo carareen markii ay kusoo baxeen. Majuustii markay arrintaas arkeen bay yiraahdeen:" Waa iyadii waa iyadii".

Macnaha waxay dhowrayeen in loosoo sheego sanadkaas geerida Cumar bin Khaddaab, oo waxay sugayeen in xilligaas isaga ahi uu Abuu Lu'lu'ah uu dilo Cumar. Sidaa darteed baa markay arkeen ciidamada Al qacqaac oo hal mar firxaday bay umaleeyeen in loosoo sheegay geerida Cumar oo ay Muslimiintu niyad jabeen, markaasay Majuustu yiraahdeen:" Waa iyadii waa iyadii".

Kama aysan shakinin jabka iyo dib  
ugurashada Muslimiinta, waayo waxay  
dhowrayeen arrin kale. Siduu horey  
Dhulxeyah u sheegay ayayna noqotay oo  
way soo daba galeen. Ciidamadii Al  
qacqaac markay soo gaareen ciidankii  
weynaa ee Muslimiinta buu Nucmaanna  
ciidamadiisii la sii cararay, oo ay dib  
ugurasho sameeyeen. Majuustii indhaha  
la'ayd waa ay sii daba ordeen oo  
dhammaantood waa ay kasoo baxeen  
qalcadahoodii iyagoonan ku dhaafin wax  
dagaalyahanno ah oo albaabada u ilaaliyo.  
Waqtigu waxuu ahaa bartamaha maalinta  
oo cadceeddu ay kalabaraha samadu  
taagneed. Sidaa darteed buu Nucmaan  
jecleystay inuusan weerar ku qaadin jeer ay  
cadceeddu ka weecato oo nasriga Allena  
usoo dego siduuba sameyn jiray Rasuulka  
Alle SCW.

Marar badan bay Muslimiintu ku qasbeen  
Nucmaan inuu weerar ku qaado cadawga,  
hase ahaatee ma uusan falin, waayo waxuu  
Nucmaan ahaa nin sugnaan og. Kadib  
markay cadceeddu weecatay buu Nucmaan  
ciidankii tujiyey, dabeetana intuu raayad

kasta hoos tegay buu u khudbeeyay ciidanka oo ku booriyey sabar iyo sugnaan iyo inay ka run sheegaan goobta fara saarka. Waxuu Nucmaan usheegay Muslimiintu inuu takbiirsan doono takbiirta kowaad, waxuuna amray in markaa la noqdo diyaar, waxuu misna usheegay inuu takbiirsan doono takbiirta labaad, waxuuna amray inaysan jirin cid aanan diyaar ahayn. Waxuu usheegay in takbiirta saddexaadna ay noqon doonto weerarka ka run sheegidda. Kadib waxuu Nucmaan u laabtay goobtiisii oo uu saddex jeer takbiirsaday markaasuu bilawday dagaalku, oo seefuhuna ay is dhaafeen. Waxaana dhacay dagaal aanan horey loogu arag mid lamid ah mawaaqicdii hore oo aysan maqal kuwa wax maqlaayi mid lamida. Waxaa laga laayey Mushrikiinta teer iyo markay weecatay cadceedda illaa uu gabbalku ka dhacay oo laga gaaray gudcurka habeennaad maqtalo aad u tiro badan oo dhulkii dhan ka dhigtay dhiig lagu silqado. Heer ay daabaduhu ku silqanayeen oo waxay gaartay heer la yiri:- Amiirkii ciidanka baa faraskiisu dhiiggaasi kula silqaday oo markaasina uu kudhacay gamuun duulayo oo sidaa ku geeriyooday.

Ma jirin cid garatay geerida amiirkii ciidanka marka laga reebo walaalkiis Suweyd bin Muqarrin, waxaa kaloo la yiraahdaa walaalkiis Nuceym bin Muqarrin, markaasuu calankii u dhiibay ninkii ku xigay waa Xudeyfah bin Al Yamaane. Markaasuu Xudeyfana booskiisii ku wareejiyey walaalkiis Nuceym bin Muqarrin si uu u qariyo geerida walaalkii ku timid jeer uu arrinka dagaalka ka dhammaanayo iyo si aysanna Muslimiintu u niyad jebin.

Markii la gaaray gudcurkii habeenaad bay Mushrikiintii jaanta rogteen oo ay jabeen, Muslimiintiina waa ay sii eryadeen.

Waxayna Mushrikiintu silsilado kusoo dabreen 30 000, hareerahooduna waxay ka qodeen godad. Markii ay jabeen bay godadkii iyo waaddiyadii halkaa ahaa ku daateen oo bashar badan oo kudhaw 100 000 ama in kabadan ay kaga halaagsameen marka laga reebo tirada kuwii macrikada looga laayey markay cadceeddu weecatay jeer laga gaaray gudcurkii habeenaad.

Feyruzaan oo ahaa amiirkii ciidamada



Mushrikiintu isagu waxuu ka cararay goobtii macrikada oo uu dhexda ka galay jabkii kuwii la cararay. Markaa buu Nuceym daba kacay, waxuuna markii dambe hortiisa diray Alqacqaac bin Camr. Feyruzaan waxuu abbaaray dhanka Hamdaan, saa waxaa ka daba tegay Al qacqaac oo ku helay goobta Thaniyatul Hamdaan (karinta Hamdaan). Waxuu Feyruzaan dhexda kula kulmay safar bakhlo iyo dameero tiro badan ku sido malab, wayna usuuroobi weyday inuu horey usii fuulo, markaasuu lugtiisa ciirsaday oo uu buuraha korey. Al qacqaac baa inta ka daba tegay ku qoor gooyey halkaas. Maalintaas ayayna Muslimiintii yiraahdeen: "Alle waxuu leeyahay junuud malab ah". Waxay Muslimiintii qaniimeysteen malabkii ay bakhlaahaasi iyo dameeruhu sideen. Waxaana meeshaa iyada ahi loo bixiyey Thaniyatul Casal (Karintii Malabka). Intaa dabadeed Al qacqaac waxuu sii eryaday jabkii kuwii cararay jeer ay orad ku galeed Hamdaan, markaasuu dul degay oo uu go'doomin kuqabtay. Dabeeto ninkii masuulka ka ahaa oo la oran jiray Khushrushanuum baa usoo degay oo ka dalbaday heshiis, halkaas ayuuna kula

heshiiyey. Kadibna Al qacqaac bin Camr waxuu ulaabtay dhankii Xudeyfah bin Yamaan oo uu u tegay iyagoo galay Nahaawunda kadib dhacdada oo ay xoog ku furteen. Waxay ciidamadii Muslimiintu soo uruuriyeen hantidii halkaa laga helay hub iyo maalba, waxayna u dhiibeen ninkii masuulka ka ahaa qaniimada As- Saa'ib bin Al Aqrac. Markii ay reer Maah maqleen warka reer Hamdaan bay iyana usoo cid dirsadeen dhankii Xudeyfa bin Yamaan si ay ula heshiiyaan oo ay magan galyo uga qaataan.

Waxaa Xudeyfah u yimid nin la oran jiray Hirnad ama Hirbad oo Majuusta u qaabilsanaa dhanka dab hurinta maadaama ay ahaayeen kuwa dab caabbud ah. Waxuu ninkani keenay keyd aad ufara badan oo uu lahaa Kisraa, waxuuna ka dalbaday Xudeyfah inuu siiyo magan galyo oo uu la heshiiyo. Markaa buu Xudeyfah siiyey magangalyo iyo heshiis, markaasuu ninkii keenay sanduuq ay ka buuxdo jowharad aad u qaali ah oo tiro badan. Muslimiintii waxay isla garteen in loo diro dhanka Cumar bin Al Khaddaab si uu isagu u meel mariyo

sanduuqaasi jowharadda ah. Waxaana loo dhiibay ninkii masuulka ka ahaa qaniimada.

Taa kahor waxuu Xudeyfa diray Dhariif bin Saham oo uu u dhiibay bishaaradii guusha si uu ugaarsiyo amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab. Kadib Xudeyfah waxuu qeybiyey qaniimadii oo uu ciidankii oo idil u qeybiyey.

Ammaa amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab isagu har iyo habeenba waxuu usoo jeeday duco iyo salaad isagoo u duceynayey ciidamada Muslimiinta inuu Illaahay ka siiyo guul cadaawgooda oo uu uga hiiliyo. Waxaa sugnaaday in nin Muslimiinta kamid ah uu maalin ka baxay magaallada Madiina, markaasuu waxuu arkay nin raakib ah oo meel shisha kasoo bidhaamay. Ninkii ayuu ka hor tegay oo uu weydiiyey:" Xaggee baad ka timid?

Waxuu Raakibkii ku jawaabay:" Waxaan ka imid Nahaawunda".

Waxuu ninkii yiri:" Bal ka warran dadkii?

Waxuu yiri:" Alle baa u furay, amiirkiina

waala dilay, Muslimiintiina waxay qaniimeysteen qaniimo aad u farabadan oo kii faras watay uu helay 6000, ka lugtana uu helay 2000".

Kadib wuu iska tegay, kii reer Madiinana waxuu aaday magaalladiisii oo uu dadkii uga warramay arrinkaas. Warkii baa faafay jeer uu markii dambe gaaray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab. Markaasuu Cumar ninkii weydiyey cidda uga warrantay warkaas?

Waxuu ninkii yiri:" Nin raakib ah baa iiga warramay".

Waxuu yiri:" Iimuusan iman, wax kale maahee ninkaasu waa jin, la yiraahdo Cutheym".

Kadib waxaa yimid Dhariif bin Saham oo layimid bishaaradii guusha, wax kale oo bishaarada guusha ahaynna ma uusan sidin.

Markaasuu Cumar su'aalay dadka Muslimiinta laga dilay. Hase ahaatee Dhariif arrintaasi wax ogaansho ah umuusan haynin. Kadib waxaa yimid kooxdii sidday

khumuska qaniimada iyo dumarkii iyo carruurtii qafaalka ahayd, kuwaasoo uu hoggaaminayey Assaa'ib bin Al Aqrac.

Markaa buu Cumar wax ka weydiiyey dadkii laga dilay ciidanka Muslimiinta. Markii loo sheegay geerida Nucmaan bin Muqarrin buu amiirkii Mu'miniinta ooyey. Waxuu weydiiyey cidda lala dilay Nucmaan, markaasuu Assaa'ib yiri:" Waxaa lala dilay hebal iyo hebal iyo hebal". Isagoo magacaabada raggii caanka ahaa ee ka tirsanaa geesiyaasha Muslimiinta. Markii amiirkii Mu'miniinta loo sheego nin kamid ah dadkii ku shahiiday dagaalka Nahaawunda, kaasoo uusan garaneyn buu gudagaleyay inuu ooyo isagoo leh:" Maxay ka tareysaa inuusan garaneyn amiirka Mu'miniinta? Hase ahaatee Alle baa garanayo oo ku sharfay shahaado. Maxay ku falayaan garashada Cumar? Kadib waxuu Cumar amray qaybinta khumuskaa qaniimada sidiiba caadada u ahayd. Sanduuqii jowharadda ahaa waxaa loo qaaday gurigii Cumar. Ergadii siddayna way iska laabteen. Markii uu waabariistay Cumar oo uu sanduuqa arkay buu amray in loo yeero ergadii sidday. Hase ahaatee kal



hore ayay baxeen. Markaa buu bariid ka daba diray si loo soo celiyo. Ergaygii bariidka siday muusan gaarin jeer ergadii ay ka galaan magaalladii Kuufa. Markii Assaa'ib uu arrumiyey awrkiisa magaalladii Kuufa buu ninkii bariidka siday ka daba tegey oo ku yiri:" Amiirka Mu'miniinta baa kuu yeerayo".

Waxuu Assaa'ib yiri:" Oo maxaa jira?

Waxuu yiri:" Garan maayo". Markaa buu Assaa'ib iyo ninkiiba ay dib ugu laabteen magaalladii Madiina. Markii uu Assaa'ib utegay Cumar buu Cumar yiri:" Oo maxaa ina kala haysto aniga iyo ina Umu Assaa'ib? Bal'ee maxaa Ina Umu Assaa'ib iyo aniga na kala haysta?

Waxuu yiri:" Assaa'ib:" Oo waa maxay taasi amiirkii Mu'miniintoow!!?

Waxuu Cumar u sheegay in uu qaado sanduuqa oo uu iibiyo kadibna uu u qeybiyo Muslimiinta, isagoo weliba ku canaantay keenidda uu keenay guriga amiirka Mu'miniinta. Intaa dabadeed Assaa'ib

sanduuqii buu qaaday waxuuna geeyay magaalladii Kuufa, markaasay tujaartii oo idil kusoo heenteen. Waxaana ka iibsaday Camr bin Al Xureyth Al Makhzuumi oo ka siistay 2 000 000. Kadibna Muslimiintii ayaa loo qeybiyey. Camr bin Al Xureyth intuu qaaday buu la aaday dhulalka Cajamta oo uu soo siistay 4 000 000. Reer Kuufa waxay markaa kadib noqdeen dadkii ugu hantida badnaa Muslimiintii goballada.

Waxaa la soo weriyaa Abuu Lu'lu'ah Feyruuz oo adeega u ahaa Muqiirah bin Shucbah baa markii dumarkii iyo carruurtii laga soo qafaashay Nahaawunda la keenay magaallada Madiina oo uu Abuu Lu'lu'ah la kulmo kuray yar oo kamid ah carruurta lasoo qafaashay buu inta madaxa u salaaxo oranayey:" Cumar waxuu cunay beerkeygii".

Waxay cullimadda siirada yiraahdaan:" Dhacdo dambe oo tan lamid ah kama aysan dhicin carrigii Majuusto, Cumarna waxuu amray in halyeeyadii Muslimiinta ee dagaalkan wacdarada kamuujiyey la siiyo min 2000 Dirham.

# Furashadii Asbahaan

Sidoo kale sanadkan dhexdiisa bay Muslimiintii furteen markii ay Nahaawunda furteen ka gadaal kadib magaallada Jay' oo ah magaallada Asbahaan kadib markii uu ka dhacay dagaal aad u daran iyo amuur aad udheer. Markaa bay Muslimiintu kula heshiiyeen magaallada. Markaasuu C/llaahi bin C/llaahi ibn Citbaan warqad magan galyo iyo heshiis ah u qoray. 30 kamid ah dadkii magaallada baa ka carareen Muslimiinta oo u carareen dhanka Karmaan, kuwaasoo aanan la heshiin Muslimiinta.

Waxaa la yiraahdaa ninkii furtay Asbahaan waxuu ahaa Nucmaan bin Muqarrin, ayada ayaana lagu dilay, amiirka majuustuna waxuu ahaa Dul Xaajib. Waxuu ka dhacay faraskiisa markaasay calooshu dallaacday, sidaa ayuuna ku geeriyooday, markaasay asxaabtiisii jabeen.

Sida saxda ah oo xaqiiqda u dhaw culamaayi siirana ay rajaxeen ayaa waxay tahay in ninkii Asbahaan furtay uu ahaa C/llaahi bin

C/llaahi ibn Citbaan. Masuulkii magaallada Kuufa.

Sanadkan dhexdiisa buu Abuu Muusal Ashcari furtay Qum iyo Qaashaan. Suheyil bin Cadiyina uu furtay magaallada Karmaan.

Ibnu Jariir iyo Waaqidina waxay xuseen in Camr bin Al Caas iyo ciidama uu hoggaaminayo ay sanadkaan aadeen dhanka Dharaabulis, halkaasoo uu Camr ku furtay heshiis 13 000 Diinaar sanad waliba.

Sanadkan dhexdiisa buuna Camr bin Al Caas u diray Cuqbah bin Naafic dhanka Zuweylah oo uu heshiis ku furtay. Barqa iyo Zuweylah inta u dhaxeysana waxay noqotay dhul nabad gelyo ah oo Musliimta gacantooda kujira.

Sanadkan dhexdiisa buu Cumar masuul uga dhigay magaallada Kuufa Cammaar bin Yaasir kadib markuu ka casilay Ziyaad bin Xandhalah, kaasoo uu usii dhiibay C/llaahi bin C/llaahi ibnu Citbaan kadib markii laga casilay. Waxuuna Cumar qaadinnimada

Kuufa u dhiibay C/llaahi ibn Mascuud.

Markaa bay reer Kuufa kasoo eed sheegteey Cammaar, markaasuu isagiina Cammaar ka dalbaday Cumar inuu ka casilo howsha, saa laga casilay. Waxuuna Cumar udhiibay magaallada Kuufa Jubeyr bin Mudcin. Isla durba sanadkan dhexdiisa buu Jubeyr ka qaaday oo uu u dhiibay Muqiirah bin Shucbah oo masuul ka ahaa illaa uu Cumar ka geeriyooday. Waxaa sanadkan dadka xajiyey amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab, magaallada Madiinana waxuu kusii dhaafay Zayd bin Thaabit. Madaxdiisii goballadu waxay ahaayeen sidii sanadkii hore marka laga reebo magaallada Kuufa.

## SANADKII 22AAD

Waxaa dhacay fatuuxaad dhowr ah sanadkan dhexdiisa, waxaana kamid ah furashadii Hamdaan mar kale, furashadii Rayi iyo wixii ka dambeeyay iyo kadib furashadii Adarbiijaan.

Waaqidi iyo Abuu Macshar waxay yiraahdeen:" Waxay ahayd (Adarbiijaan)



xilligii la furtay sanadkii 22aad ee hijriyada''.

Muslimiintii markii ay ka faaruqeen Nahaawunda oo ay dhaceen dagaalladii aynu soo xusnay, la furtayna Xulwaan iyo Hamdaan bay reer Hamdaan intaa dabadeed buriyeen ballantii ay heshiiska kula galeen Al qacqaac bin Camr. Markaa buu Cumar warqad u qorey Nuceym bin Muqarrin, taasoo uu ku amrayo inuu aado dhanka Hamdaan iyo in ciidamadiisa hore uu madax uga dhigo walaalkiis Suweyd bin Muqarrin, labada dhinacna uu ukala dhiibo Ribciyi bin Caamir Al Daa'iyu iyo Muhallahal bin Zayd Al Tamiimi.

Markaa buu Nucaym dhaqaaqay jeer uu dul degay Thaniyatul Casal. Dabeeto waxuu go'doomin ku qabtay dhulkii Hamdaan, markaasay dalbadeen heshiis oo uu la heshiiyey oo uu magaalladiina galay. Goor uu kusuganyahay baladka oo ay la joogaan 12 000 oo ciidankiisii ah bay Ruumaankii, Deylamiyiintii iyo reer Rayi iyo reer Adarbiijaan warqado isu qorteen, waxayna isku raaceen la dagaallanka Nucaym bin

Muqarrin iyagoo aad u tiro badan. Daylam waxaa madax u ahaa boqorkooda oo la oran jiray Mowtaa, reer Rayi-na waxaa madax u ahaa Abuu Farrukhaan, reer Aderbiijaanna waxaa madax u ahaa Isfandiyaad oo la dhashay Rustum.

Markaa buu Nucaym markuu ka war helay kula dhaqaaqay xaggooda ciidamadii Muslimiinta, waxayna ku kulmeen goob la yiraahdo Waaj Al Ruud, waxaana ka dhacay meeshaasi dagaal aad iyo aad u daran oo kudhaw kii Nahaawunda. Waxaa Mushrikiinta maalintaa laga dilay jamac aad u tiro badan oo aanan lasoo koobi karin, boqorkii Daylam-na ee Mowtaa goobtaas baa isana lagu dilay. Markay bay cududdii cadawga jabtay oo ay kala fiigeen. Waxuu ahaa Nucaym bin Muqarrin qofkii ugu horreeyay ee asagoo hoggaaminaya Muslimiinta la dagaallamo Daylam.

Intaa dabadeed waxuu Nucaym diray khumuskii qaniimada oo uu udhiibay saddex kamid ah imaraadii ciidanka, kuwaasoo la sheegay inay kala ahaayeen Simmaak bin Kharash, Simmaak bin Cubayd iyo Simmaak

bin Makhramah. Markii ay Cumar u tegeen ayuu su'aalay magacooda? Markaasay iyana usheegeen. Suu Cumar yiri:" Allaahuma amsik bihim Al Islaam, (Yacni Alloow Islaamka ku adkee)". Kadib buu Cumar warqad u qoray Nucaym isagoo ku amrayo in uu Hamdaan masuul ku dhaafo oo isaguna uu aado dhanka Rayi.

## Furashadii Rayi

Waxuu Nucaym ku dhaafay Hamdaan Yaziid bin Qeys Al Hamdaani, isagiina waxuu aaday dhanka Rayi isagoo fulinayo amarkii amiirka Mu'miniinta Allaha ka raalli noqdee, waxuuna halkaa kula kulmay ciidama Mushrikiin ah oo aad u tiro badan. Waxaana ku dhexmaray dagaal daran goobta buurta Rayi adgeeda, halkaasoo ciidamadii Muslimiinta ay maalintaa muujiyeen adkeysii iyo sugnaan aad xad dhaaf u ah. Kadib waa ay jabeen cadawgii, waxuuna Nucaym ka laayey maqtalo aad utiro badan, isagoo ka furtay hanti farabadan qaniimo ahaan, taasoo kudhaw tii ay Muslimiintu ka heleen Madaa'in. Kadib buu Nucaym heshiis kula galay Rayi ninkii

masuulka ka ahaa oo la oran jiray Abuu Farkhaan, waxuuna taasi ugu qoray warqad magan galyo ah. Kadibna Nucaym bishaaradii guusha iyo khumuskaa buu udiray dhanka amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab.

## Furashadii Quumus

Markay bishaaradii guusha iyo khumuska qaniimadii ee Rayi ay gaareen amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab Illaahay haka raalli noqdee, buu warqad u qorey Nucaym bin Muqarrin, taasoo uu ku amrayo in uu diro walaalkiis Suweyd bin Muqarrin oo uu u diro dhanka Quumus. Markaa buu Suweyd ku dhaqaaqay dhanka Quumus oo uu si nabad galyo ah ku furtay isagoo aysan wax dhib ahi ka hor iman, halkaa ayuuna ciidamadiisii dejiyey.

Waxuuna dadkii halkaa deganaa u qoray warqad magangalyo iyo heshiis ah.

## Furashadii Jurjaan

Markii uu Suweyd ciidamadiisii dejiyey Quumus, baa dadkii agagaarkaasi deganaa oo ay kamid ahaayeen reer Jurjaan, Dhabaristaan iyo kuwa kaloo qeyrkooda ah ay usoo cid dirsadeen iyagoo ka dalbanayo inuu kula heshiiyo inay bixiyaan jizyo oo uu magangalyo iyo hishiis u qoro. Markaasuu dhammaan u qoray warqad magan galyo iyo heshiis ah oo uu sidaa kula heshiiyey inay jizyo bixiyaan.

Waxuu Xusay Madaa'ini in Jurjaan la furtay sanadkii 30aad ee hijriyada, waqtigii Cusmaan bin Caffaan. Wallaahu aclam.

## Furashadii Aderbijaan

Markii uu Nucaym furtay Hamdaan, baa intuusan Rayi u dhaqaaqin waxuu diray Bukeyr bin Cabdillaahi Al Leythi oo uu ka diray Hamdaan, waxuuna u diray dhanka Aderbiijaan. Waxuu kadaba diray Simmaak bin Kharash.

Waxay Bukeyr iyo asxaabtiisii la kulmeen Isfandiyaad ibnu Farakhzaad oo ahaa ninkii madaxda ka ahaa Aderbiijaan ka hor



intuusan soo gaarin Simmaak. Markaasaa waxaa dhex maray dagaal uu Alle ku jebiyey Mushrikiintii, Bukeyrna uu kusoo qafaashay Isfandiyaad.

Markaasuu ku yiri:" Ma waxaad jeceshay heshiis ama dagaal?

Waxuu yiri:" Bal'ee heshiis".

Markaasuu ku yiri:" Haddaba iga gunnud". Markaasuu ka guntay. Markaa buu Bukeyr guda galay inuu dhulkaasi qeyb qeyb u furto, Cutbah bin Farqad qudhiisu dhanka kale ayuu qeyb qeyb uga soo furanayey dhulalkaas oo uu dhul furashadu ka waday.

Kadib waxaa timid warqaddii Cumar. Taasoo uu ku amrayo in Bukeyr uu aado dhanka Baab, booskiisuna uu ku sii dhaafo Simmaak si uu masuul uga sii ahaado Cutbah oo dhulka Aderbiijaan oo idil uu markaa Cumar madax uga soo dhigay. Markaa buu Bukayr Isfandiyaad u dhiibay Cutbah, suu isagiina kudhaqaaqay dhanka Baab siduuba soo amray amiirkii Mu'miniinta.

Markay u taam noqotay furashadii dhulka  
Aderbiijaan bay Cutbah iyo Bukeyr,  
bishaaradii guusha iyo khumuskii u direen  
dhankii amiirka Mu'miniinta, dadkii dhulkaa  
deganaana ay warqad magangalyo iyo  
heshiis ah u qoreen.

## Furashadii Baab

Sanadkan dhexdiisa buu Cumar warqad u  
qoray Suraafa bin Camr oo lagu laqibo Din  
Nuur, si uu ugu duulo dhanka Baab,  
waxuuna soo amray in ciidankiisa hore uu  
madax uga dhigo C/Raxmaan bin Rabiicah  
oo isaguna laqabkiisu yahay Din Nuur,  
waxaa kaloo la yiraahdaa Din Nuun. Labada  
dhinac ee ciidankaasi mid kamid ah waxuu  
soo amray in madax looga dhigo Xudeyfah  
bin Usayd, halka dhinaca kalena uu soo  
amray in madax looga dhigo Bukeyr bin C/  
laahi Al leythi oo isagu meesha kusii  
horeeyay. Qeybinta qaniimada waxaa loo  
xilsaaray Salmaan bin Rabiicah.

Markaa bay dhaqaaqeen siduuba soo amray  
amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin  
Khaddaab. Markii ciidamadii hore ee uu

hoggaaminayey C/Raxmaan bin Rabiica ay gaareen boqorkii halkaa oo la oran jiray Shaharbaraaz boqorkii Armeeniya, baa C/Raxmaan warqad usoo qorey, waxuuna ka dalbaday magan galyo, markaasuu siiyey magan. Markaa buu boqorkii u yimid C/Raxmaan oo uu ka codsaday inuu la heshiiyo oo heshiis uu uga gunto Muslimiinta. Markaasuu C/Raxmaan ku yiri:" Waxaa jiro nin aniga iga sarreeyo ee uteg". Markaasuu u tegay Suraqa bin Camr oo uu weydiistay magan galyo iyo heshiis. Markaasuu Suraqana ka yeelay oo siiyey magan iyo heshiis. Kadib buu arrintaasi u qorey amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab, Cumarna wuu kaga raalli noqday wixii magan iyo heshiis ah ee uu la galay. Kadib waxuu Suraqa diray Bukeyr bin C/llaahi, Xabiib bin Maslam, Xudeyfah bin Usayd iyo Salmaan bin Rabiicah, oo uu u diray dadkii deganaa buuraha ku hareereysan Armeeniya, buuraha kala ah Al- Laan, Tafliis iyo Mowqaan. Bukeyr waxuu furtay Mowqaan, waxuuna u qorey warqad magan galyo ah dadkii halkaasi deganaa. Amiirkii ciidamada Muslimiinta ee Suraqa bin Camr-na goobtaas ayuu ku

geeriyooday, waxaana dabadii xilkiisii qabtay C/Raxmaan bin Rabiicah. Cumar bin Al Khaddaab markay gaartay geerida Suraqa wuu ka murugooday wuuna u duceeyay, una raxmad dalbay. Markii uu maqlay in dabadii uu xilkii qabtay C/Raxmaan bin Rabiica buu kaga raalli noqday, waxuuna amray inuu ku duulo dhulka Turkiga.

Duullaaankii Ugu Horreeyay Ee Turkiga

Markay C/Raxmaan u timid warqaddii amiirka Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab, taasoo uu ku amrayey inuu ku duullo Turkiga buu ku dhaqaaqay dhankii Turkiga jeer uu gooyey Baab isagoo fulinayo amarkii amiirka Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab. Dabeeto waxaa la kulmay Shaharbaraaz oo ku yiri:" Xaggee baad ku jeeddaa?

Waxuu yiri:" Waxaan doonayaa boqorka Turkiga ee kusugan Balanjar". Markaasuu Shaharbaraaz usheegay inaysan jirin wax dhanka Baab ka dambeeyo. Hase ahaatee C/Raxmaan ayaa ugu jawaabay:" Illaahay baa

xaggayaga usoo diray Rasuul, waxuuna nalagu ballamay carrabkiisa guul iyo gacansarreyn, innaguna kamaanan suulin inaanu ahaanno kuwa guuleysto''. Markaa buu dhulkii Turkiga ku duullay oo uu gaaray dhulka Balanjar. Intaa kadib waxay dhacdooyinkii waa weynaa ee Turkigu dhaceen waqtigii Cuthmaan bin Caffaan Allaha ka raalli noqdee.

## Qisadii Yazdajrid Bin Shahrayaar

Markii uu Sacad kala wareegay wixii gacantiisa ku jiray iyo magaalladii boqortooyadiisa, iyo saldhiggii saldanadiisa, waatuu Xulwaan u cararay, kadibna ay Muslimiintii kadaba yimideen, markaasuu Xulwaan uga sii wareegay Rayi. Markaa waxaa dhacday in Xulwaanna ay kala wareegeen ciidamadii Muslimiinta. Dabeeta waxaa looga daba tegay Rayi, markaasuu u wareegay Asbahaan, oo Rayi-na ay la wareegeen Muslimiinta. Kadib waxay uga daba tegeen Asbahaan, markaasuu usii cararay Karmaan. Dabeeto Muslimiintii baa ka daba tegtay oo Asbahaan iyo Karmaanba ka furteen. Markaasuu u guuray dhulka



Khuraazaan oo uu degay, Sidooy tahay dabkii uu caabbudi jiray kamuusan harin oo wuu la socday, meel ama goob iyo waa' uu degaba waa ay u hurinayeen oo uu caabbudayey. Waxuu saarnaa awr loo dul dhigay howdaj uu dhex jiifanayey. Waxaa dhacday goor uu dhex jiifo howdajkiisa bay toosiyeen, markaasuu aad uga carooday oo uu caayey. Waxuuna ku yiri:" Waxaad ii diiddeen inaan ogaado muddada u hartay kuwan ee ay ku sugnaanayaan dhulkan iyo dhulalka kalee qeyrkiis ah. Waxaan riyo ku arkay Muxammed (SCW) oo kan ah oo jooga agta Rabbigiisa, markaasuu (Rabbi) ku yiri:" Boqortooyaddiinnu waa 100 sano".

Waxuu yiri:" Iigu dar".

Markaasuu ugu daray oo uu) ku yiri:" Waa 110 sano".

Markaasuu yiri:" Iigu dar".

Markaasuu (ugu daray oo uu) ku yiri:" Waa 120 sano".

Waxuu yiri:" Iigu dar".

Markaasuu ku yiri:" Adigaa leh".

Waxuu yiri Yazdajrid isagoo sii hadlayo:" Markaas baad i toosideen, haddii aad iska kaydeyn lahaydeenna waxaan ogaan lahaa muddada umaddan".

Waqtigii khilaafadii Cuthmaan ayaa la dilay boqorkii, oo khaatuma xumo ayuu ku dhintay. ayadoo nin reer miyi ah uu kurka ka jaray.

Duullaankii Khuraasaan

Taasu waxay ahayd in Axnaf bin Qeys uu u ishaaray Cumar in Muslimiintu ay isku waasiciyaan dhulalka oo ay furtaan dhulalka Cajamta, oo ay ciriiri geliyaan Yazdajrid. Waaba tii uu markaa Yazdajrid gudo galay inuu dadkiisa ku booriyo la dagaallanka Muslimiinta sidaynu soo xusnay.

Markaa buu Cumar u ogolaaday inay ciidamada Muslimiinta isku waasiciyaan arlada, waxuuna amray in Axnaf bin Qeys

uu ku duulo dhulka Khuraazaan oo uu kula dagaallamo Yazdajrid. Markaa buu Axnaf galay Khuraazaan oo uu ka furtay Harraah isagoo ku furtay xoog, waxuuna ku dhaafay Suxaar bin Filaan Al Cabdiyu, dabeetana waxuu aaday dhanka Marwi Shahjaan oo uu markaa kusugnaa Yazdajrid. Waxuu markaa Axnaf diray hortiisa Madhrif bin C/llaahi bin Shukheyr oo uu udiray dhanka Naysaabuur, Xaarith bin Xasaanna waxuu u diray dhanka Sarkhas.

Markii uu Axnaf u dhawaaday Marwi Shahjaan buu Yazdajrid ka guuray oo uu u wareegay dhanka Marwi Ruud, markaasuu Axnaf furtay Marwi Shahjaan oo uu degay.

Markii uu Yazdajrid degay Marwi Ruud oo ahayd caasimaddii Khuraazaan buu warqad u dirsaday boqorkii Turkiga ee Khaakhaan isagoo gurmada weydiisanayo. Sidoo kale waxuu warqad u dirsaday boqorkii Safad isagoo ka dalbanayo inuu gurmada usoo diro. Waxuu kaloo warqad u dirsaday boqorkii Shiinaha isagoo ka kaalmo ka dalbanayo.

Markaa buu Axnaf bin Qeys-na ku dhaqaaqay dhanka Marwi Ruud, oo Marwi

Shahjaanna waxuu kusii dhaafay Xaaritha bin Nucmaan. Markaa iyada ahi waxaa Axnaf uga yimid magaallooyinka Kuufa iyo Basra ciidama gurmada oo ah afar qeyb. Markii ciidamadii bidaxda ee Axnaf ay gaareen Yazdajrid buu u guuray Balakh, markaasay isku heleen goobta Balakh, halkaasoo uu Alle ku jebiyey cadaawga iyo ciidamadii Yazdajrid. Markaasay carareen isaga iyo intii la baxsatay oo kamid ah asxaabtiisii, waxayna gooyeen webigii oo ay galeen dhulka Turkiga.

Intaa kadib dhulkii Khuraasaan oo idil waxuu hoos yimid Axnaf bin Qeys, markaasuu magaallo kasto u sameeyay masuul gaar ah, markaa buu isagiina ku laabtay Marwi Ruud oo uu caga dhigtay, xarunna uu ka yeeshay. Kadib buu Axnaf bin Qeys dhankii Cumar u qorey warqad uu kula socodsiinayo qaabkii iyo dhulalkii uu ka furtay Khuraasaan guud ahaan. Kadib Cumar waxuu warqad u qorey Axnaf bin Qeys, taasoo uu ku amrayo inuusan gudbin webiga oo uu kusugnaado inta gacantiisa kujirto oo dhul ah.

Kadib Yazdajrid iyo Khaakhaan Al Akbar boqorkii Turkiga iyo Junuud aad u tiro badan ayaa dib usoo laabtay oo webiga soo gooyey, waxuuna Yazdajrid lasoo laabtay ciidamo aad u tiro badan, waxayna soo gaareen Balakh, markaasay masuuliyiintii Axnaf bin Qeys u wada carareen magaalladii uu Axnaf kusugnaa ee Marwi Ruud. Yazdajrid iyo Turkidiina waxay kasoo dhaqaaqeen Balakh oo ay dul degeen Marwi Ruud oo uu markaa kusugnaa Axnaf bin Qeys. Markaasuu Axnaf bin Qeys lasoo dhaqaaqay ciidamadiisii Kuufiyiinta iyo Basriyiinta dhammaan oo markaa ay tiradoodu ahayd 20 000.

Axnaf bin Qeys waxuu ahaa nin ku xeel dheer arrimaha militerinnimada oo waxuu ahaa mid kamid ah ragga qorshahaasi looga dambeeyo, waxuu diyaariyey ciidamadiisii oo uu tiro yaridii kamuuqatay uu ku kaabay isagoo ciidanka si qurux badan udhisay, kadib ciidamadii buu ka dhex istaagay oo uu u khudbeeyay waxuuna ku yiri:" Waad yartihiin, cadawgiinnuna waa ay badan yahiin". Waxuu markaa akhriyey qowlka Alle kor ahaaye:"Immiso ayay koox yari ka



adkaatay koox badan Alle idinkiisa,  
Illaahayna wuxuu la jiraaa kuwa sabra''  
Al Baqrah aayadda 249aad.

Turkidu waa ay soo baxayeen maalinta oo  
ay dagaallamayeen, muusanna garaneynin  
Al axnaf bin Qeys halka ay habeenkii  
qabtaan ee ay ku xaroodaan.

Goor habeen ah bay isaga iyo xayn kamid ah  
ciidamadiisii geesiyaasha ay isasoo raaceen  
oo ay raadiyeen halka ay galaan Khaakhaan  
iyo ciidamadiisa, waxayna goor subax ah oo  
waa' beri ah arkeen rugtii Turkida.

Markaasuu arkay Axnaf nin meel kasoo  
baxayo, suu xaggiisii u dhaqaaqay oo dilay,  
dabeeto mid kale baa soo baxay, markaasuu  
kiina dilay, misna waxyar kadib mid  
saddexaad baa soo baxay suu isagiina dilay.  
Markaasuu Axnaf si dhaqsi ah ugu laabtay  
goobtiisii. Markii ay ciidankii weynaa ee  
Turkida soo baxeen, waxay arkeen  
saddexdoodii nin oo mayd ah, wayna  
baaseeysteen arrinkaas. Turkida waxaa  
caado u ahayd inaysan soo bixin aroorta  
hore jeer ay marka hore soo diraan saddex  
nin oo akhyaartooda kamid ah. Markay tani

ku dhacday way ka xumaadeen, wayna baaseeysteen. Markaasuu boqorkoodii Khaakhaan ku yiri:" In badan baynu halkaan joognay, waxayna kuwani inagu asiibeen goob aanan horey naloogu asiibin. Wax faa'iido ah oo aanu ka heleyno majirto la dagaallanka qoomka kan ee inaga celiya".

Markaa bay dhulkoodii u laabteen. Muslimiintu maalintaa way sugayeen inay usoo baxaan oo ay is helaan, hase ahaatee wax usoo baxo maysan arag. Illeen waa dad dhanka kale ka dusay oo dhulkoodii ku laabtaye.

Kisraa isagu doqonnimadiisii iyo darxumadiisii iyo daciifnimadii caqligiisa ayuu la laabtay isagoo khasaaray oo dulloobay oo aanan helin wax faa'iido ah haba yaraatee. "Cidduu Alle lumiyo ma u heleysid jid". Suuratu An Nissaa aayadda 88aad.

Arrintii waxay ku noqotay Maxaad sameysaa? iyo halkee baad ciirsataa? Qaar kamid ah dadkiisii oo kamid ahaa kuwii

caqliga u saaxiibka ahaa ee kamidka ahaa garaadyadii garashada fogaa baa markuu ku yiri:" Waxaan goostay inaan aado dhulka Shiinaha ama aan iska ag fadhiyo boqor Khaakhaan". Waxay ku yiraahdeen " Waxaanu aragnaa inaanu la heshiinno qoomkan, waayo waa dad diin ay ulaabtaan leh, oo aan degno bar kamid ah dhulkan, oo aan la derisno, iyaga ayaa inooga kheyr badan kuwa kalee?

Kisraa Yazdajrid wuu ka diiday fikraddaasi quruxda badan ee saliimka ahi, ee indheergaradyadii tolkiisa ay usoo jeediyeen, wuxuuna ka doortay gunnimo iyo khaatumo xumo, wax aanan indho la'aantiisii ahaynna ma uusan aqbalin.

Kadib waxuu u cid dirsaday boqorkii Shiinaha, isagoo ka gurmada iyo kaalmo dalbanayo, markaasuu boqorkii Shiinaha weydiiyay ergaygii Yazdajrid sifada qoomkan (Muslimiinta ah) iyo sidey ku furteen dhulkan oo ay kaga adkaadeen? Markaasuu ergaygii uga warramay sifadooda iyo sida ay faradaha iyo awrta u fuulaan iyo waxa ay sameeyaan iyo sida ay u

tukadaan dhammaanba.

Markii uu boqorkii Shiinaha dhageystay dhammaan sifooyinkii looga sheegay Muslimiinta buu warqad u qoray Yazdajrid isagoo ku leh:" Ma jirto arrin ii diideyso inaan kuusoo diro ciidan horraantiisu ay tahay Marwa aakhirkiisuna ay tahay dhulka Shiinaha. Hase ahaatee qoomkan uu ii sifeeyay ergaygaadu sifadooda, hadday buuruhu damcaan waa ay duminayaan, haddii aan kuu imaado si aan kuugu gargaarana waa ay i baaba'inayaan inta ay kusuganyahiin waxa uu iiga sifeeyay ergaygaadu ee kula heshii dhulka".

Yazdajrid isagu waa looga adkaaday dhulkiisii isaga iyo ehelkiisiiba, muddo yar kadib geeridii Cumar ayuu khaatumo xumi ku dhintay isagoo nin reer miyi ah uu bireeyay.

Markii Cumar bin Khaddaab ay gaartay bishaaradii guusha ee dhulka Khuraasaan buu Muslimiintii u khudbeeyay oo uu ku booriyey cabsida Allaah iyo sugaanan iyo toosnaan iyo Alle ka cabsi. waxuu

xasuusiiyey in uu Alle dhaxalsiiyey  
boqortooyadii Kisraa ee iyadu adduunka  
boqollaalka sanadood ka talin jirtay iyo  
guryahoodii iyo hantidoodii iyo carruurtoodii  
si uu Alle u eego waxa ay falaan.

Iimaam Dahabi wuxuu leeyahay:- Sanadkan  
ayaa la furtay Aderbiijaan, waxaana furtay  
Muqiirah bin Shucbah. Waxaa la sheegaa  
inuu kula heshiiyey 800 000 oo Dirham.  
Wallaahu aclam. Waxaa kaloo la sheegaa  
inuu furtay Xabiib bin Maslama oo wata  
ciidamada badan oo Shaam ka yimid, sidoo  
kalena ay la socdeen qaar kamid ah  
ciidamadii Kuufa, waxaana la socday oo  
kamid ahaa Xudeyfa bin Yamaan. Waxaa la  
sheegaa inuu xoog ku furtay Xabiib,  
wallaahu aclam.

Sidoo kale sanadkan ayuu Xudeyfa bin  
Yamaan Maahsandaan ku furtay xoog, kadib  
markii ay buriyeen heshiis ay horey ula  
galeen Sacad bin Abii Waqaas. Waxaana  
Xudayfa la socday ciidama badan oo ka  
yimid Basra waxaa kaloo u tegay ciidama ka  
socday magaallada Kuufa, markaasay  
labada qolo isku khilaafeen qaniimada,



dabeeto Xudayfa wuxuu warqad u qoray amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab, asagoo ogeysiinaya xaallada ay isku qabsadeen ee ah qaniimada. Cumarna wuxuu soo amray inuu siiyo dadkii ka qeyb qaatay dagaalka oo kaliya.

Khaliifah bin Khayaad wuxuu xusay in sanadkan uu Camr bin Al Caas furtay Daraabulis.

## SANADKII 23AAD

Sayf bin Cumar wuxuu xusay in sanadkan la furtay Towj oo uu furtay Majaashac bin Mascuud ka gadaala markii uu Faarisiinta kaga laayay dagaal maqtala aad u badan, kana qaniimeystay qaniima aad u badan. Markaas buu ku waajibiyey inay jizyo bixiyaan dadkii halkaa deganaa.

Sidoo kale Cuthmaan bin Abul Caas Al Thaqafi ayaa isaguna furtay Jowr dagaal daran ka dib. Dabeeto mar kale ayay furteen Isdhakhar, ka gadaal markii ay buriyeen ballantii uu Calaa bin Al Xadrami horey ula galay. Kadib Shahrak ayaa ballantii uu

horey Muslimiinta ula galay buriyey, oo  
Faarisiintiina kiciyey si ay Muslimiinta ula  
dagaallamaan. Arrintaasi markuu Cuthmaan  
ka war helay wuxuu udiray walaalkii Xakam  
bin Abul Caas. Markaas bay is heleen  
labadii qolo oo dagaal dhex maray,  
dabeetana Xakam wuxuu dilay Shahrak iyo  
wiilkiisii. Sidaa ayayna kaga guuleysteen.

## Furashadii Fasaa iyo Daar-Abjarad

Sanadkan ayuu Jaariyah bin Zaniim aaday  
dhanka Fasaa iyo Daar- Abjarad, halkaasi  
waxaa ugu aruuray jamac Faarisiin ah iyo  
Kurdi oo weliba aad u badan. Markaas ayuu  
Cumar habeen seexday oo arkay riyo  
muujineyso dagaalkaasi, wuxuu arkay  
Muslimiintii iyo cadawga oo is helay iyagoo  
isku helay goob saxara ah iyo buur weyn oo  
daanta dambe ee Muslimiinta tiillay, oo  
haddii ay Muslimiintu gabbaad ka dhigtaan  
aanan dhinac kale looga iman karin. Subaxii  
ayuu Cumar amray in Muslimiintu masjidka  
isugu yimaadaan salaadda jamaacada,  
markiina la gaaray waqtigii uu riyada ku  
arkay ayuu mimbarkii fuulay oo u  
khudbeeyey oo uga warramay wixii uu

arkay, asagoo khudbaddii wado, ayuu mar qura yiri:- Saariyoow!! buurta buurta!!.

Waxay ahayd xilli ay ciidamada halkaasi ka dagaallamaya ku jireen halis xun oo cadaawgu dhabar jebin darani la maagganaa. Sidaa daraaddeed Saariyah wuxuu maqlay dhawaqii Cumar, inkastoo uu joogay meel aad uga fog magaallada Madiina ee uu xilligaasi Cumar kusugnaa. Markii uu maqlay Saariyah dhawaqaasi, wuxuu owday halkii halista, oo dabeetana cadawgii ka guuleystay. Halkaasi Muslimiintii waxaa ay ka qaniimeysteen maal badan, waxaana kamid ahaa maalkaasi sanduuq jawharad ah. Sanduuqii iyo khumuskaa qaniimada iyo bishaaradii guusha ayuu u diray Saariyah dhankii amiirka Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab.

## Duullaankii Kurdida

Kadib ciidama badan oo Kurdi ah ayaa waxay isu aruursadeen inay Muslimiinta la dagaallamaan, dabeetana Abii Muusa Al Ashcari ayay isku heleen Nahru Tayr. Kadibna Abii Muusa Al Ashcari wuu ka leexday oo wuxuu aaday dhanka Asbahaan,

iyagiina wuxuu kusii dhaafay ciidama culus oo uu hoggaaminaya Al Rabiic bin Ziyaad, ka gadaal markii la dilay walaalkiis Muhaajir bin Ziyaad. Kadib Al Rabiic bin Ziyaad iyo Mushrikiintii waxaa dhex maray dagaal aad u daran oo uu durba ku jebiyey cadawga kagana adkaaday. Waa ayna jabeen, oo firxadkoodii baa kala fiigay. Wuxuuna halkaasi ka qaniimeystay qaniimo aad u badan. Kadibna khumuskaa qaniimada iyo bishaaradii guusha ayuu u diray dhankii Cumar bin Khaddaab Illaahay haka raalli noqdee.

Isla sanadkaas ayuu Dibbah bin Muxsin Al Canasi u tegey Cumar bin Khaddaab isagoo kaga eed sheeganaya Abii Muusa Al Ashcari, dabeeta Cumar wuxuu u yeeray Abii Muusa Al Ashcari, isagiina waxyaaba badan ayuu ka cududaartay, Cumarna wuu u cududaaray, sidoo kale Dibbana wuu u cududaaray, dabeeta Abii Muusa Al Ashcari, wuu laabtay wuxuuna aaday magaalladii Basra, oo uu salaad tujinta madax ka ahaa.

Qaar Kamid Ah Wax Qabadkii Cumar

Ma aynu wada xusi karno wax qabadkii  
Cumar, waxaase laga dhugan karaa  
siiradiisii iyo dhulfurashooyinkiisii. Cumar  
bin Khaddaab wuxuu ahaa khaliifadii labaad  
ee Khulufaa'u Raashidiinka, wuxuuna ahaa  
afarta Khaliif kii ugu dhul furasha badnaa.

Wuxuu furtay buurahii Furus iyo  
beeraheedii iyo qalcadahoodii, sidoo kale  
wuxuu furtay guud ahaan dhulka Shaam,  
Jaziiradda, Muusal, Armiiniya, Masar iyo  
Aleskandariya. Wuxuu geeriyooday  
askartiisii oo joogta Bilaadu Rayi, wuxuuna  
Shaam ka furtay, Busra, Dimishiq,  
Yarmuuk, Urdun, Bayzaan, Dabariyah,  
Jaabiyah, Falastin, Ramallah, Iiliyaa,  
Casqalaan, Ghaza, Xeebaha, Qudus, ,  
Baclabak, Ximsa, Qinnasriin, Qeysaariyah,  
Xalab iyo Andaakiyah iyo qeyrkooda. Masar  
wuxuu ka furtay Aleskandariya, Darabulis  
Al Qarb iyo Barqa iyo kuwa kale. Dhanka  
Furus wuxuu ka furtay Qaadisiyah, Xiirah,  
NaharShiir, Saabaadh, Madaa'in, Xulwaan,  
Dajla iyo Furaat, Ablah, Basra, Ahwaas,  
Hamdaan, Nahaawunda, Baabil, Quumas,  
Dhulka Khuraazaan, Isdhakhar, Asbahaan,



Suus, Marwi, Naysaabuur, Maasabadaan,  
Maah, Jurjaan iyo Aderbijaan iyo  
qeyrkooda. Askartiisu markaasi waxay  
goosheen webiga la yiraahda Nahru  
Maraar, ayagoo horey usii socdo.

Cumar wuxuu ahaa mid ay cabsidiisu  
darantahay, oo Alle ka cabsi badan, aqriyo  
Quraanka in badan. Indhihiisu waxaa  
madoobeyey ilmada siduu u oynayay Alle  
dartii. Hurdadiisu waa ay yareyd,  
cunnadiisuna sidoo kale, wuxuu ahaa mid  
raaca oo ogaada xaallada raciyadiisa.  
Habeenkii waa uu wareegi jiray si uu u  
ogaada xaallada ay raciyaddiisu ku  
sugantahay. Ma uuna lahayn wax waardiya  
ah, masjidka ayuu iska seexan jiray  
asagoonan waxba ka cabsi qabin. Qofkii ka  
yimaada goballada oo aanan horey Cumar u  
arag kama uuna dhex garan karayn dadka,  
waayo wuxuu fali jiray inuu lamid noqdo  
bulshadiissa. Asagoo ay awooddiisu  
gaadhay Furus iyo Shaam iyo Khuraasaan,  
ayuu haddana ceeshkiisu ahaa muufo  
qalalan iyo milix iyo saliid. Sidaa oo ay  
tahay ma uuna badsan jiray fawaakihda iyo  
macmacaanka adduunka. Wuxuu ahaa mid

ka saahiday dunida iyo dhalanteedkeeda.

Dhanka kale wuxuu ahaa mid ku ad adag amarka Alle. Wuxuu ahaa mid ku ad adag masuuliyiintiisa goballada oo daba gal kusameeyo, wuxuuna ka codsan jiray qofkii uu masuul ka dhigaya, inuuna dhisan guri weyn oo qurux badan iyo inuuna badsan cunooyinka dufanta leh sida hilibka iyo inuuna sidoo kale badsan macmacaanka adduunka. Wuxuu kaloo amri jiray in albaabadoodu ay iska furnaadaan. Haddii arrimahaasi mid kamid ah ay kudhacaan, wuxuu oran jiray:- Waxaa idinku waajibbeyso ciqaabteyda. Khaatimka uu wato waxaa ku naqshadeysnaa (kafaa bil mowt waacidan yaa Cumar!!).

Wuxuu ku seexan jiray firaash ka sameysan liif, wuxuuna gaadiid ahaan u isticmaali jiray dameer gaaban, iskama uu weyneyn jirin dadka, inta badan masjidka ayuu kusugnaan jiray. Qosalkiisu aad buu u yaraa, aayadaha Quraanka ayuu ku tadaburi jiray, wuuna ooyi jiray markuu maqla qowlka Alle. Wejigiisu waxaa ku yiillay laba xariiq oo madow ah oo ay ilmadu sameysay.

Wuxuu aad ugu wanaagsanaa caddaaladda, waxaana caddaaladdiisu ay gaartay xitaa inaanan la dulmin gaalladii ku hoos nooleyd Islaamka. Taariikhdiisii ayaynu ka bogan karnaa heerkii ay gaadhay caddaaladdiisii.

Arrimahaasi oo idil waa kuwa u suuro geliyey inuu noqdo amiir la jecelyahay oo geygigoo idil laga heybeysto, wanaaggii iyo waxyaabahii uu Islaamka u qabtayna waa midaanan lasoo koobi kareyn, waa halka ay saxaabadu ka yiraahdaan:- Islaammiddiisu waxay ahayd guul, imaaraddiisiina (xukunkiisii) waxay ahayd dhul furasho. Caddaaladdiisii & Alle ka Cabsigiisii

Caddaaladdii Cumar waa midaanan la soo koobi karin, waxayna noqotay mid taniyo maanta tusaale loosoo qaato. Wuxuu ahaa masuul umaddiisa u caddaalad fali jiray, kuna caan baxay caddaaladda, oo ay geyigii oo idil camirtay cadligiisii. Haddaba waxaanu soo qaadaan doonnaa dhowr qiso oo ina tusinaya caddaaladdii Cumar Illaahay haka raalli noqdee.

1. Cabdiraxmaan bin Cumar bin Khaddaab iyo Abuu Surcah Cuqbah bin Al Xaarith ayaa waxay maalin cabbeen khamri jeer ay sakraameen, ayagoo markaasi kusugnaa dhulka Masar. Markaas buu C/Raxmaan u tegey amiirkii dhulkaas oo ahaa Camr bin Al Caas, oo ka dalbaday inuu xadka ka oofiyo bacdamaa uu sakraamay. Saa C/Ilaahi bin Cumar oo asaguna dhulka Masar markaasi kusugnaa ayaa walaalkiis madaxa ka xiiray, kadibna Camr bin Al Caas baa jeedalay oo ka oofiyey xadkii. Arrintaasi waxay gaadhay amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab, markaasuu warqad usoo diray dhanka Camr bin Al Caas asagoo ku oranaya:- Iisoo dir C/Raxmaan bin Cumar, adiguna Alle u toobad keen. Markaasi buu Camr bin Al Caas sidii falay oo u diray dhankii Cumar. Markii C/Raxmaan uu u tegey aabahiis, ayuu jeedalay oo ciqaabay ciqaad ka weyn middii loogu tala galay xadka cabbidda khamriga. Dabeetana wuu xabbisay. Markaas buu wilkii xanuunsaday, kadibna wuu geeriyooday. Al Faaruuq uma kala soocneen dadka, kan xad ku dhaco ha noqdo mid uu dhalay ama uu jecelyahay, ama ha noqdo mid kamid ah bulshada,

wuxuu marsiin jiray mudnaantiisa. Siiba ehelladiisa wuu u labanlaabi jiray ciqaabta.

C/llaahi bin Cumar wuxuu yiri:- Haddii uu Cumar bulshada arrin ka reebo, wuxuu kulmin jiray ehelkiisa, oo ku oran jiray:-

Waxaas iyo waxaas ayaan dadka ka reebay, dadkuna adinka ayay idin fiirsanayaan sida shimbirtu ay hilibka u fiirsato oo kale.

Haddii aad ku dhacdaan, iyana way ku dhacayaan. Haddiina aad ka dhowrsataan, iyana way ka dhowrsanayaan. Illaahay baan kudhaartaye, ninkii idinka mid ah ee ku dhaca wax aan reebay, waan u laban laabi doonaa ciqaabta, halka uu iga joogo darteeda (maxabbada aan u hayo darteed, si ay dadka u arkaan inaan qof kasto ku ciqaabi doono arrinkaasi). Haddaba qofkii doono ha ka gaabsada kii doonana ha falo.

2. Al Muwadda'a Imaam Maalik waxaa ku sugan oo laga soo weriyey Saciid bin Musayb in Cumar ay u tegeen laba nin oo doodeyso oo wax isku haysto, oo midi Muslim yahay ka kalena uu Yahuudi yahay. Markaas baa waxaa Cumar u caddaatay in xaqu uu leeyahay ninka Yahuudiga, suu u



guday xaqiisii. Markaas buu Yahuudigii yiri:- Dhab ahaan Illaahay baan ku dhaartaye, si xaq ah baad ku xukuntaa. Markaasuu Cumar weydiiyey:- Maxaad ku ogaatay? Markaasuu Yahuudigii ku yiri:- Waxaan kutubtayada ka heleynaa inuuna jirin qaaddi wax ku xukminaya si xaq ah, illaa waxaa labadiisa dhinac ka xiga labo malag midig iyo bidix. Kuwaasoo ku toosinaya xaqa inuu falo mar waliboo uu xaq lasocdo. Markii uu ka tego xaq, bay labadaasi malagna ka tagayaan.

3. Dhalxa bin Cubaydillaah wuxuu yiri:- Cumar baa habeen mugdiga kusoo baxay wuxuuna galay guri. Markii aan waabariistay ayaan gurigaasi aaday, oo waxaaba kudhex sugan haweeney duq ah oo indho la'. Markaasaan ku dhahay:- Waa maxay ninkaan kuu yimaada xaalkiisa? Markaasay tiri:- Wuxuu ii imanayay taniyo muddada sidaa iyo sidaas ah, wuu ii yimaadaa oo howsha ii qabtaa, oo guriga ii haggajiyaa.

4. Aslam Mowlaa Cumar waxaa uu yiri:- Habeen baan u la baxay Cumar duleedka

magaallada Madiina, markaasaanu aragnay iftiin bidhaamaya oo aanu aadnay xaggiisii. Markaan u tagnay waaba haweeney fooli hayso oo ooyeyso. Markaasuu Cumar weydiiyey xaaladdeeda? Say ku tiri:- Waxaan ahay haweeney Carab reer miyi ah, wax aan haystana ma jirta. Markaas buu Cumar ooyey, oo soo dhaqaaqay asagoo deg degaya oo galay gurigiisa, markaasuu xaaskiisii Ummu Kalthuum bint Cali bin Abii Daalib ku yiri:- Ma dooneysaa ajar uu Alle ku haleeshiiyo? Wuxuuna uga warramay qisadii. Markaasay tiri:- Haaheey!! oo ay soo raacday. Wuxuu Cumar dhabarka kusoo qaaday daqiiq iyo shaxmad, Ummu Kalthuumna waxay soo qaadatay qalab dhalmada fududeynaya. Markaasay u tegeen, saa Ummu Kalthuum ay u gashay haweeneydii. Cumarna waxaa uu la fadhiistay ninkeedii isagoo ninku) uuna aqoon (inuu Cumar yahay amiirkii Mu'miniinta) oo way sheekeysaneyee. Haweeneydii waa ay dhashay oo waxay dhashay wiil. Markaas bay Ummu Kalthuum inta Cumar u timid ku tiri:- Amiirkii Mu'miniintoow!! ugu bishaareey ninkeeda in wiil loo dhalay.

Ninkii markuu maqlay hadalka Ummu Kalthuum ee ah amiirkii Mu'miniintoow!!, waa ay la weynaatay arrintaasi, wuuna ka cududaartay inuu aqoonsan waayay amiirkii Mu'miniinta. Cumarna wuu u cududaaray, wuxuuna yiri:- Wax dhiba malahan. Dabeetana wuxuu siiyey daqiiqdii iyo raashiinkii oo idil, wuuna ka ka tegey.

5. Aslam baa mar kale sheekeeyey oo wuxuu yiri:- Habeen baa aniga iyo Cumar aanu u baxnay Xarrah waaqim. Markii aanu marayna Suraar baa waxaan aragnay dab. Markaasuu Cumar igu yiri:- Aslamooow!! halkaasi, waxaa joogto rukuubleey uu habeenku kusoo gaabtay, ee inoo kaxeey xaggooda. Markaasaanu u tagnay oo waaba haweeney ay ag joogaan ilmo yaryar iyo dheri dabka saaran. iyadoo carruurtuna ay markaasi oohnayaan. Markaas buu Cumar yiri:- Asalaamu caleykum asxaabta iftiimeysaay?

Markaasay haweeneydii tiri:- Wacaleykuma salaam.

Wuxuu yiri:- Miyaan soo dhawaadaa?

Waxay tiri:- Soo dhawaaw.

Wuxuu weydiiyey:- Maxaa idin helay?

Waxay tiri:- Habeenkii baa nasoo gaabiyey iyo qaboow.

Wuxuu weydiiyey:- Maxaa helay ilmaha yar ee oohnaya?

Waxay tiri:- Baahi bay la oohnayaan.

Wuxuu weydiiyey:- Waa maxay waxa dabka saaran?

Waxay tiri:- Waa biyo aan ku sasabaya jeer ay ka seexdaan, Alle ayaana dhexdayada ahaaday annaga iyo Cumar.

Markaasi haweeneydani ma dareensana inuu ninkani yahay Cumar, waxayse ogtahay in amiirka Mu'miniinta la yiraahdo Cumar.

Markaas buu Cumar ooyey, oo laabtay asagoo degdegaya, wuxuuna galay

baqaasiinkii oo kasoo saaray daqiiq iyo  
saliid, markaasuu Aslam ku yiri:-  
Aslamooow!! ii saari dhabarka.

Wuxuu yiri Aslam:- Anigaa kaa qaadaya.

Wuxuu yiri Cumar:- Oo ma adigaa iga  
qaadeysid dembigeyga maalinta Qiyaama?

Dabadeed daqiiqdii iyo saliiddii ayuu  
dhabarka kusoo qaaday oo u geeyey  
haweeneydii. Markaas buu daqiiqdii  
dhabarkiisa ka dejiyey oo inta in xoogaa ah  
kasoo qaaday ku shubay dherigi, saliiddiina  
uu ku daray, oo dabadeed dabkii afuufay  
muddo, ayadoo qiiquna uu buuxiyey  
gadhkiisa. Kadib waa uu kasoo dejiyey.

Dabadeed wuxuu dalbaday weel, oo ugu  
riday, suu hor dhigay ilmahii yaraa, oo ka  
hoos leexday, wuxuuna ku yiri:- Cunaya!!.

Markaasay cuneen jeer ay dhargeen.

Haweeneydiina way u duceyneysay  
ayadoonan ogeyn inuu yahay amiirkii  
Mu'miniinta. Cumar kamuuna tegin jeer ay  
carruurtii seexdeen. Markaas buu raashiinkii  
u reebay oo ka tegey. Markaas buu inta  
xaggeyga usoo jeestay buu igu yiri:-  
Aslamooow!! waxa soo jeediyey ee ka



oohinayay waa baahida.

6. Cali bin Abii Daalib ayaa Cumar kula kulmay duleedka magaallada Madiina xilli uu hanfi kululi dhacaya. Markaasuu weydiiyey:- Halkee baad kusocotaa amiirkii Mu'miniintoow!!?

Wuxuu yiri:- Awr kamid ah geelii saddaqada oo lumay ayaan raadinayaa, oo aan dalabkiisa kujiraa.

Markaasuu Cali yiri:- Dhab ahaan, waa aad daalisay khaliifada kaa dambeyso.

Caddaaladdiisii waxay ahayd mid aanan la soo koobin karin xusiddeeda, wuxuuna ahaa mid ay mashriq iyo maqrib gaadhay caddaaladiisii Illaahay haka raalli noqdee. Sidoo kale wuxuu ahaa mid ay Alle ka cabsigu ku weyntahay.

Alla ka cabsigiisii wuxuu gaaray heer aanan la miithaali karin. Anas bin Maalik, wuxuu sheegay in Cumar markii uu salaadda Cisha dadka tujiyo kadib uu aadi jiray gurigiisa oo uu ilaa fajarka salaad u taagnaan jiray.

Siduu usoomi jiray baa midibkiisii doorsoomay oo uu noqday madow weyti ah. Markii ay dhacday abaartii Rammaadah, wuxuu iska xarrimay oo ka fogaaday cunidda wax dufan leh, asagoo markii horeba ku noolaa kibis iyo milix iyo saliid, taasoo uu weli ka dhergi jirin. Taasuna waxay gaarsiiyey in midibkiisii uu doorsoomay oo si aad ah u dhuubtay, awooddiisuna daciiftay. Wuxuu gaaray heer ay Muslimiintii u naxeen naftiisa. Wuxuuna asagu oran jiray:- Waali (masuul) baas baan ahay haddii aan dhergo Muslimiintoo baahan.

Sanadkasi ay dhacday abaartii loo yaqaanay Rammaadah, xaaladdu markay darraatay, oo umaddii baahi daray aafeysay, baa Cubaydillaah bin Cumar wuxuu qashay neef ri' ah oo u joogtay, wuxuuna amray xaaskiisii inay u sameyso si ay u quutaan maadaama aanay muddo dhadhamin quud dufan leh. Cumar bin Khaddaab baa markii uu arrintaasi ogaaday yimid gurigii Cubeydilalah oo inta aad u carooday ku canaantay falka uu sameyey xilli ay

Muslimiintu baahanyahiin oo abaar darani ku habsatay. Markaas buu Cumar amray in markii hilibka iyo kibista la diyaariyo asaga loo keeno. Wuxuuna amray oo loo yeeray saxaabadii waa weyneed ee Muhaajiriin iyo Ansaar. Ayagii ayuuna amray inay cunaan hilibkii iyo kibistii.

Wejiga Cumar waxaa ku yiillay labo xariiq oo madmadow ah, kuwaasoo ay sameysay ilmadii ka quban jirtay siduu Alle u caabbudi jiray darteeda oo u ooyi jiray markii uu akhrinaya Quraanka. Wuxuuna ahaa mid cabsida Alle darteed la ooyo. Mararka qaar wuu miyir beeli jiray marka uu akhriyo Quraanka kariimka, oo marar dambe soo miyirsan jiray. Taasu waxay sababi jirtay in maalmo gurigiisa lagu soo booqdo isagoo aanay jirin wax cudur ah oo haya marka laga reebo cabsida Alle oo uu la sakaraadi jiray.

Asagoo khaliifa ah, oo xukunkiisa uu gaaray bari iyo galbeed, ayaa wuxuu ku lebisaa jiray maro suuf ah oo dhammaad ah, oo aanan ishu qabaneyn. Lagama dhex garanayn Muslimiinta. Qofkii aanan horey u

aqoon Cumar, haddii uu masjidka soo galo  
ayadoo Cumar uu asxaabtiisa la fadhiyo,  
waxaa qofkaasi dhib ku noqoneysay inuu  
ogaado qofka Cumar ah. Ma uusan lahayn  
waardiyo, masjidka ayuuna iska seexan  
jiray intuu go'iisa huwado, ayadoo carruurta  
yaryari ay ku cayaarayaan, dushiisa ayuu  
iska gam'i jiray.

Mar la geeyey Hurmuzaan magaalladii  
Madiina, oo masjidkii la geeyey si uu Cumar  
halkaasi kula kulmo, wuxuu arkay Cumar oo  
go' yar huwan oo masjidka dhex jiifa,  
iyadoonay jirin cid waardiyeeyneyso. Waxay  
Hurmuzaan taasi ku noqotay fajaciso,  
waayo wuxuu qaadan waayay ninka  
boqortooyada Furus iyo ta Ruum ay ka  
fadhin waayeen ee la wareegay, adduunkii  
xilligaasi jirayna intiisa badan ay asaga  
hoos timaaddo inuu meel cidlo ah oo misna  
dhulka masjidka iska jiifo waxay kunoqotay  
wax maskaxdiisa ka weyn. Sidaa darteed  
buu Hurmuzaan ku celceliyey:- Meeyey  
waardiyaashiisii?

Dharkiisa ayuu meydhan jiray, maradiisuna  
waxaa laga heli jiray dhowr karan oo uu

asagu gacantiisa ku tolan jiray, kabahiisuna sidoo kale.

Anas bin Maalik wuxuu yiri:- Waxaan la joogay Cumar. Markaasuu galay beer, waxaana inoo dhaxeeyey deyrka beerta, suu yiri (asagoo isla hadlaya):- Cumar bin Khaddaab, amiirkii Mu'miniinta. Bakh!! bakh!!. Illaahay baan ku dhaartaye, waad Alle ka cabsataa ina Khaddaaboow!! ama lagu cadaabyay. Markaasaa la weydiyey arrinkaas. Suu yiri:- Nafteyda baa i cajibisay. Markaasaan damcay inaan liido.

Khaatumkiisa (fargashigiisa) waxaa ku naqshadeysnaa weedhan Kafaa bil Mowti Wacidan Yaa Cumar!!. Oo la macno ah, geerida ayaa waano kuugu filan Cumarroow!!.

Dilkii Amiirka Mu'miniinta ee Cumar bin Al Khaddaab

Markii uu ka faaruqay sanadkii 23aad Xajka wuxuu degay Al Abdhax, halkaasoo uu Alle ku baryay, asagoo uga ashkatoonaya in cimrigiisii weynaaday, raciyadiisuna



badatay, dhulalkiina uu kusii fogaaday oo meelo badan uu furtay, quwaddiisiina ay daciiftay. Wuxuu markaasi Illaahay ka baryay inuu oofsado oo kumanneysto shahaado, kuna oofsado magaalladii Nebiga SCW ee Madiinah.

Labadaasi arrimood ee ah shahaadada iyo inuu ku dhinto baladkii Rasuulka Alle SCW, Illaahay wuu u qadaray, wuuna ka aqbalay addoonkiisii ducada, waxaana dilay gaal Majuusi ah oo la oran jiray Abuu Lu'lu'ah Fayruuz bin Rustum Al Majuusi. Kaasoo dilay goor salaad subax ah, asagoo dadka tujinaya oo istaagay mixraabka, subax Arbaco ah dhammaadkii bishii Dil Xajjah, wuxuuna la helay qinjir (middi) labo afood leh, oo uu ku dhuftay saddex dhufasho, waxaa kaloo la sheegaa inuu ku dhuftay lix darbo oo halis ah. Markaas buu Cumar dhacay oo inta gacanta qabtay C/Raxmaan bin Cowf amray inuu dadka salaadda ka bixiya. Ninkii Majuusiga ahaa wuxuu mindidii khinjirka ahayd lasii maray wixii uu arko, wuxuuna sidaa ku dhaawacay 13 ruux, oo lix kamidi ay dhinteen. Dabeetana C/llaahi bin Cowf ayaa go'iisii ku qabtay.

Markiina uu arkay inuu gacan galay ayuu is dilay gaalkii Majuusiga ahaa, lacnadi dushiisu ha ahaatee. Markaas baa Cumar gurigiisii loo qaaday. Marna wuu miyirbeelayay, marna wuu soo miyirsanayay. Markuu soo miyirsaday wuxuu dadkii weydiiyey in salaaddii la tukaday? Markaasay usheegeen in la tukaday, markaasuu yiri:- Nasiib malahan qofkii ay ka taga. Dabeetana wuxuu dalbaday weysa oo tukaday. Waqtigaasina wuxuu ahaa ka hor intaanay qorraxdu soo bixin. Dabadeed wuxuu weydiiyey qofka dilay? Waxaa lagu yiri:- Abuu Lu'lu'ah adeegahii Muqiirah bin Shucbah. Markaasi buu Cumar farxay oo Alle mahadiyey inuu dilkiisa ku sababay qof aanan weligiis Alle u sujuudin. Misna wuxuu yiri:- Illaahay ha dulleeyo'ee waxaanu amarnay wanaag.

Ninkan wuxuu adeega u ahaa Muqiirah bin Shucbah. Wuxuuna ahaa farsama yaqaan tumaal iyo fuundi ah, markaasuu Muqiirah u qoray malin waliba 2 Dirham. Dabeeta Cumar baa amray inuu u siyaadiyo maadaama uu yahay nin sanca yaqaan ah. Cumar ma uu ogolaan jirin in magaalladu ay

soo gasho cidaanana laga aqoon, sidoo kalena  
ma ogoleyn in idin la'aan laga baxa  
magaallada Madiina. Sifada uu ninkani  
kusoo galay magaalladu waxay ahayd,  
Muqiirah bin Shucbah baa gobalka warqad  
uga soo diray Cumar, asagoo ka codsanaya  
inuu usoo diro nin Majuusi ah oo farsama  
yaqaan ah, si uu reer Madiina uga caawiya  
dhanka farsamada gurya dhisidda iwm.  
Markaas buu Cumar ka yeelay oo kusoo  
dhaweeyey. Sidaa darteed baa wuxuu markii  
dambe Cumar amray Muqiirah inuu u  
kordhiyo intuu horey ugu tala galay  
mishahar ahaan.

Intaas dabadeed Markii Cumar la duray  
wuxuu dhibsaday inuu khaliif sameeyo,  
wuxuuna jecleystay inuu khaliif la'aan ka  
tego umadda, oo haddii Alle kheyr  
waafajiyo uu asaga haleeshiiyo koodii ugu  
kheyr badan. Saxaabo badan iyo dadkii  
Muslimiinta ayaa arrintaasi ay u cuntami  
weyday, waxayna ku taliyeen inuu Cumar  
sameeyo khaliif asaga bacdigiisa ah. Qaar  
uu Muqiirah ku jiro ayaa waxay u  
tilmaameen inuu C/llaahi bin Cumar u  
dardaarmo khilaafada, balse arrintaasi

Cumar aad buu uga xanaaqay, kuna canaantay dadkii fikraddaasi usoo jeediyey. Runtii C/llaahi wuxuu ahaa nin u qalmay booskaasi, oo taqwa iyo suhdi badan, balse Cumar wuxuu dhibsanayay in arrintu ay dhaxaltooyo u ekaato. Wuxuu markuu ka fursan waayay arrinkan masuliyadda ahi u dardaarmay lix nin oo kamid ah kuwii uu Rasuulka SCW ka geeriyooday asagoo ka raalli ah, kana mid ah tobankii jannada loogu bishaareeyey. Waxayna kala ahaayeen Cuthmaan bin Cafaan, Cali bin Abii Daalib, C/Raxmaan bin Cowf, Dalxa bin Cubaydillaah Zubayr bin Al Cawaam iyo Sacad bin Abii Waqaas. Wuxuu ka reebay Saciid bin Zayd oo kamid ahaa 10-kii Jannada loogu bishaareeyey. Sababtuna waxay ahayd inay qaraabo soke ahaayeen. Wuxuuna Cumar oran jiray:- Arrinkii Muslimiinta halaga weydiiyo reer Khaddaab nin qura (yacni asaga Cumar oo kaliya halaga weydiiyo maalinta Qiyaama). Wuxuu sidoo kale dhibsaday Cumar inuu sameeyo khaliif, siduu u sameeyey Abuu Bakar oo kale. Dadkiina waa ay ku adkeeyeen arrinkaas, markaas buuna amray in lixdaasi nin ay mid iska doortaan. Wuxuuna ku

daray C/llaahi bin Cumar si uu goob joog ula ahaado marka ay shirayaan oo uu u waaniyo. Wuxuuna amray inuusan C/llaahi arrinka waxba ku lahayn oo aanan la dooran kareyn. Dhanka kale wuxuu yiri:- Haddii ay Cali doortaan dhabbada toosan ayuu qaadsiin. Markaas buu wiilkiisa C/llaahi weydiiyey sababta uuna u magacaabeyn Cali. Wuxuuse markaasi sheegay inuu dhibsanaya in masuuliyadaasi ay sii saarnaato xitaa markuu dhinta ka dib. Misna mar kale wuxuu yiri:- Umaleyn mahayo in dadku ay ku doorsan doonaan Cuthmaan iyo Cali qof kale. Misna asagoo lixdii nin la hadlaya wuxuu amray hadday saddex iyo saddex noqdaan, in la raaco saddexda uu kujiro C/Raxmaan bin Cowf. Sidoo kale wuxuu yiri:- Haddii Sacad la doorto waa haggag, haddiina la dooran, kiinnii la doorto hala tashado Sacad, waayo ugama aanan casilin magaallada Kuufo khayaano ama inuu kasoo bixi waayey. Dabeeta wuxuu u yeeray Abuu Dalxa Al Ansaari iyo Al Miqdaad bin Camr oo amray inay soo kaxaystaan 50 nin oo markaasi albaabka u fadhiistaan nimanka ahlu shuuraha ahi, oo dadka ka waardiyeeyaan.



Wuxuuna amray haddii ay saddex casho gudahooda amiir ku dooran waayaan dhimashada Cumar kadib inuu lixda ninba unuunka u dheereeyo, yacni qoorta jaro. Wuxuu sidoo kale amray haddii amiir la doorto oo mid kale ka daba kaca in qoorta la jaro.

Dabeeta wuxuu Cumar diray wiilkiisii C/llaahi oo uu u diray dhanka Caa'isha si uu uga soo idmo in lagu aaso labadiisii Rafiq agtooda Rasuulka SCW iyo Abuu Bakar. Markaas bay Caa'isha ayadoo ooyeysa u ogolaatay (waxay ka murugeysneed dhimashada amiirka Muäminiinta).

Waxayna marki hore halkaasi ugu talo gashay in ayada naf ahaanteeda lagu aaso.

Waxayna u sheegtay C/llaahi bin Cumar in amiirka uu kamudanyahay ayada, oo ay u hibeysay booskeedii. Sidaa darteed buu C/llaahi u laabtay Cumar oo u sheegay.

Wuxuu intaasi kadib Cumar amray in markii uu dhinta loo qaado gurigii Caa'isha oo mar kale laweydiiya oo haddii ay u ogolaato markaasi lagu aaso haddii aanay ogolaanna loo qaado qabuuraha Baqiic. Wuxuuna sheegay in laga yaabo inay ka xishootay

markii uu weydiistay.

Wuxuu sii amray salaad tujinta muddada ay ahlu shuuraha shirayaan inuu tujiya Suheyb bin Sinaan Al Ruumi. Horraantii bishii Muxarram maalin Axad ah ayaana lagu ag aasay labadiisii rafiiq, goobta gurigii Caa'isha.

Wiilkiisii Cubeydillaah bin Cumar ayaa wuxuu dilay Hurmuzaan, iyo nin Ruumaan ah oo la oran jiray Jufaynah Al Ruumi iyo gabar uu dhalay Abuu Lu'lu'ah, si uu ugu aaro aabahiis. Nimankaasina waxaa la sheegaa inay ka dambeyeen dilkii Cumar. Markaas buu Cumar amray in la soo qabta Cubaydillaah oo markii ahlu shuuraha ay amiir iska dhex doortaan uu hadhowta amiirkaasi xukmiyo haddii xukun qisaas ah lagu fulin doona iyo haddii kaleba.

Illaahay ha u nuuriyo qabrigiisa amiirkii Mu'miniinta ee Cumar bin Khaddaab.  
Aamiin Aaamiin Aamiin.